SAHAN

RECONNAISSANCE



WO1 Abdullahi Noor Hassan (SHIINO)

SCANSOM PUBLISHERS

RECONNAISSANCE

SAHAN

W/Q: Abdullahi Noor Hassan (SHIINO)

SCANSOM PUBLISHERS

Published by: SCANSOM PUBLISHERS

BOX 6118, 175 06 JÄRFÄLLA

STOCKHOLM, SWEDEN

www.scansom.com

scansom@scansom.com

scansom@hotmail.com

ISBN : 978-91-85945-53-5

First Edition, 2015

© SAHAN- All Rights Reserved

Buugta kale iyo Sheekooyinka uu qoraagu horey ugu soo bandhigay bulshada waxaa ka mid ahaa:

1. Dabin Caashaq Darxumaa Udambeyso

2. Ubixii Jaceylka Iil Maa Lagu Aasay ?

3. Indho Jaceyl Ilmo Kama Dhamaato

4. Kaan Doortaba Muxuu Iidayacaa ?

5. Arxanlaay Aduunyooy Maxaa Iigu Kaa Laaban

6. Dal-dalaadii Gacaliyaheyga Maxaa Iiga Dambeeyey

7. Eed An Malaheen Adoogey Waaye

8. Dag Dagsiimo Darteedaan Dooqeyga Ku Daayacay

9. Aan Tanaadnee Tubteenu Ha Ahaato Tacliinta

10. Waa Jiraa Jaceylkee Jihadee Loogu Toosaa

11. Sahan iyo Sifo Aduun iyo Ka Dur Duro Nabsiga

Intaa uun kuma ekee wuxuu bulshada u soo bandhigay Ruwaayado ay kamid yihiin AQOON LA'AANI WAA AQAL MUGDI AH), ISAGAADAN HUREYNINE KUSOO HIRO HIDAHAADA), QOYS BUR BURKA QURBAHA YAA U QOWLAN)

Filasho ... Qoraaga Da'da Yar Abdullahi Noor Hassan (SHIINO) Wuxuu u balan qaadayaa Akhristayaasha Xiiseeya Sheekooyinka, ee ku Sugan dalka Gudihiisa iyo Dibadiisaba, inuu dhawaan Soo saari doono Sheekooyinka kala ah:-

• Tusmo Waalid (Oo aad kaga bogan doontaan Sida ugu Wanaagsan Bar Baarinta Caruurta oo ku Saleysan, Diinteena Suuban, Dhaqankeena Saafiga ah iyo Surimada Cilmiga.

• Daryeel Caashaq (Oo aad kaga bogan doontaan Qiimaha iyo Macaanta uu Jaceylka Leeyahay, marka si dhab ah Lamaaha uu ka dhaxeeyo ay Ugu Heelanyihiin, Wax walabana ugu Hurayaan.).

• Hidde Raac (Oo aad kaga bogan doontaan Sheekooyinka kala duwan ee Caruurta, kuwaasoo Xambaarsan Dhaqankeena Suuban iyo Hidaheena Saafiga ah.)

• Yaa Dulmay Dalkeenii Hooyo (Oo aad kaga bogan doontaan cid kasta oo Abaal & Adimaba u geysatey dalkeena, dadkeena iyo diinteenaba).

• Diinta Islaamka & Dunida Maanta (Oo aad kaga bogan doontaan marxaladihii ay soo martey & mida ay maanta ku sugantahay diinteena Suuban).

• Afrika Maxaa Aafada Baday (Oo aad kaga bogan doontaan waxa dib u dhigay Afrika Asaageedna ka reebay).

• Gayaankeena Maxaa Garoobada Ku Badiyey (Oo aad kaga bogan doontaan, waxa Guur Fashilka ku badiyey Bulshadeena & Xalka waxa uu yahay)

SAHAN

Waa subaxnimo salaasaa oo ay samadu sancantahey, sayaan yaroo saa u sii badneyne ay la salan saleyso, saaruxii geedihiyo sactarkoodu wada sareedeysan yihiin, oo dhulku wada sayaxanyahey oo saadaal barwaaqiyo lagu wada sugan yahey sidii noole ku qanci lahaa saadirna lagu mahadin lahaa. Sidey taheyba ma soo koobi karo sida dhulka Soomaalaay saahaa ahaa saa xiligu waa gu' loo wada riyaaqey roobkiisuna gaarey gees walbaa. Si gaar ahaaneedna reer NAFTAA QUUR ay u aheyd saah aanan waligood soo marin oo kaalay arag udgoonka gaf ka soo leh markii ay isku dhaceen ciidii nadiifka aheyd iyo roobkii loo riyaaqey mana ahan mid la qiyaasi karo quruxda dhulka wada cagaaran, Waxaaba intaa dheer nadaafada iyo labiska qurxoon ee lawada ilanyahay oo odayaasha macaawiisaha aliindiga, shaalalka kala nooca ah iyo shaatiyada gacma gaabka ah. Bakooradaha iyo tusbaxyada abuu 99-ka wada ah, suumanka bal balaaran ee cagaarka u badan iyo bilaawayaasha bartanka ugu xiran ee la muujiyey ee kawada baxayo oo kaalay arag kuna indho doogso.

Hooyooyinka ayaan iyana ka yareysan oo maryaha aliindiga, shaa shashka kala nooca ah iyo cunaabiga qoorta ugu wada xiran. Wiilasha dhalinyarada qudhooda haka reebin macawisyaha Atlaska ah, funaanadaha kala nooca ah, suumanka dhaxda ugu xiran ee bilaawuhuna ka dhex babanayo xarago uma harin. Sidoo kale gabdhaha dhalinyarada ayaan iyaguna ka liidan oo kaalay arag gareesyada far soomaaligu ku qoran yahay ee u wada xiran, dhaga dhagaha bir birqayo iyo cunaabiga qoortooda ka lulanayo. Caruurta yar yar ayaa iyana dhankooda ka xarakoonayo, oo Kaalay arag macawisyaha yar yar ee aliindiga ah iyo funaanadaha garbaha xariijimaha kuwada leh oo kala nooca ah

ee ka baxaayo.Waxaana jirey wax ay giddi ka sinaayeen ama ay badi wada wateen oo ah kabaha watar baruufka loo yaqaan oo ay wada ilanaayeen.

Guud ahaan waxaa la oran karaa waa bilic leysku jaangooyey, oo habeenkii waxaa u bilig lahaa kaaraa bidhaanka oo beeshoo idil ifinayey oo kaalay arag gabdhaha iyo wiilasha dhalinyarada habeenkii isku ugaarsanayo marka loo soo banbaxo caweyska. Magaca degaanka loogu yeero ee NAFTAA QUUR waxaa loogu bixiyey bahaladeeda oo badnaa inta badana dadka habeenkii waxyeelo u geysan jirey. In xeyn xeyn loo wada socdo mooyee ma jirin cid habeenkii kaligeed u babac dhigi kartey qofkii la sheego inuu u babac dhigana waxaa la oran jirey naftaa quuraa tahey alley lehe, in kastoo beeshu ku sugnaayeen reyn reyn iyo si loo bogey.

Ha yeeshee subaxaa isaga ah beesha reer NAFTAA QUUR waxay ku sugnaayeen xaalad murugo badan oo laga wada dheehan karey ka gadaale markii ay ifka ka hijrootey hooyo Dhuuxo oo aheyd haweeney beesha oo idil ay mudnaanta koowaad siin jireen, Waxay aheyd qof inta badan howlaha beesha u heelan garta beeshana gurigeeda ayaa lagu gali jirey maadaama uu odeygeedu ahaa odey ay beeshu ku kalsoonaayeen. Wixii gar ahna loo geysan jirey, inkastoo odey Dhangaag howlihiisu u badnaayeen Magaalada KISMAAYO haddana ma moogaan jirin NAFTAA QUUR oo bahweynta ayaa daganeyd.

Hooyo Dhuuxo waxey ifka kaga tagtey gabar 11-Sano jir oo idha la' iyo wiil 9-Sano jira, waxaana subaxaas lagu soo wada xoomey hoygaa isaga ah oo beeshu subaxaa cidi kama maqneyn. Sidii caadada aheydna samirsiin iyo talo saarasho rabi ayaa la farayey odeyga walow ay caruurtu yar yaraayeen

haddana dhankooda ayaa laga sabarsiinayey. Waxaana loo wada heeladey sidii meydka loo soo asturi lahaa howlihii tacsidana loo gudan lahaa, kooxibana meel baa loo xilsaarey lafareyna iney kasoo baxdo, Waxaana dhowr saacadood dabadeed la qaadey meydkii oo sidii loogu talagaley loo soo aasey waana laga soo gadoomey sidii caadada aheydba. Waxaana lagu soo laabtey hoygii oo haweenkii ku diyaariyeen wixii cuno ahaa ee dadka loogu tala galay maadaama goobta lagu gowracey dhowr neef, Waxaana maalinti oo idil socdey howlihii tacsida, iyadoo galabnimadiina lagu kala caraabey, waxaana hoygii kusoo harey dhowr ruux oo ka timid tuulooyinka u dhow iyo dagmooyinka sida BILAQALAAN SHUUNLE, DEEMO , JAMAAME, JILIB, iyo KISMAAYO, iyo reerkii laga dhintey, Waxaana Odeyga iyo caruurta wehliyey, habar Bulxan iyo gabadheeda yar waa minyarada odey Dhangaage oo loo keeney iney caruurta u buuxiso booskii hooyadood Macaan Baneysay.

Hooyo Dhuuxo oo aheyd qof aan la heli karin badalkeeda, ayaa tacsideedu socotey mudo todobaad ah, iyadoo ay beeshu u guteen waajibkii ka saarnaa qof heerkaa qiimo iyo qadarin ugu dhex lahaa. Howlihii tacsida markii ay dhamaadeen buu odey Dhangaag go'aansadey inuu iibiyo xoogaaga xoolaha ah iyo beerta uu ku leeyahay deegaanka NAFTAA QUUR, caruurtana u raro KISMAAYO si ay halkaa ugula noolaadaan maadaama howlihiisu u badnaayeen Magaalada KISMAAYO.

Wuxuuna bilaabey sidii uu ku fulin lahaa howshaa iyada ah, dhinaca kale habar Bulxan waxey maalmihii ugu horeeyey muujineysey wanaagii hooyonimo lagu yiqiin. Inkastoo ay qarineysey ciilka iyo carada ay u heyso caruurtan oo ay dooneyso iney ka cad goosato, iyadoo ka duuleyso khilaaf soo jireen ahaa oo kala dhaxeeyey ilmaha hooyadood ayse u taag

iyo tabar weysey iney ka cad goosato habartii ilmaha dhashey oo gaariyad aan loo gali karin aheyd. Waxeyna maanta fursad ku heshey ilmaheedii oo ay rabtaa iney kaga cad iyo ciil goosato, waxeyna iyadana dhankeeda ka bilowdey caburintii iyo ciqaabtii ay ugu tala gashey iney caruurtan baas kaga cad goosato, Nasiib darase cid ka celineysa ma jirin oo kaalay arag marka odeygu joogo sida ay u kool koolineyso iyo jaceylka hooyonimo ee ka muuqda, oo ruuxii arkaaba wuxuu oran lahaa hooyadoodba uga roon. Odeyguna arintaas ayaa umuuqatey oo wuxuu iska dhaa dhiciyey in aysan jirin wax ka maqan caruurta oo ay heleen hooyo aan hooyadood ka liidan oo si aad ah ujecel. Wuxuuna gaarey heer uu yiraa naa caruurta suuraha badan kadaa yeynan fardo baxsanin ee canaano, iyana waa intey rabtaye waxey oran jirtey naga dhex bax odayahow aniga iyo caruurteyda.

Markuu maqanyaheyna baqdaas ayey ku heysaa masaakiinta oo badey heer ay dunidiiba nacaan, waase tii horey loo yiri "khaa'in afkuu kugu dhunkaduu kugu qaniinaa" waana mida maanta heysato caruurta Nasiibdarana meel ay oga baxaan ma haystaan. Cid ay oga dacwoodaana majirin oo aabahood waxuu wax ka maqlayey oo kaliya habar baastan uu qabo ee cid kale uma dhaga daloolin, iyagana taa wey ka dharagsanaayeen. Waxaana sekenba kan xiga kusii kordhayey cadaadis iyo ciqaab tii ugu sareysey, waxaana ilmaha cuqdad kusii beerey markii ay xaaladu gaartey heer ay dhankeeda ka tatoonyeeyso gabadhii yareyd ee kinsi aheyd ee ay habartu dhashey nin kalena u soo dhashay odeyga hortii.

Habartiina waxey ku guuleysatey iney odeygeeda hagato sidey doontana danteeda uga fushato, ujeedka habarta ma yareyn oo waxeyba diidaneyd in ilmahaan la sii noolaadaan taasoo ah mida uu odeygu damacsanyahay. Waxeyna ku dadaaleysey

sidii ay ilmahaas isaga reebi laheyd wada kastaa ha u martee, waxeyna bilowdey iney odeyga dareensiiso in ilmuhu aysan iyagu jecleen oo ay dib uga guranayaan markey istiraah u dhawaaw oo u buuxi booskii hooyadood macaan, ileyn waa gardaro garab oge. Wuxuuna odeygii bilaabey in uu caruurtii canaanto si ay uga danbeeyaan hooyadood isagoo ula jeedo habar baastan ilmaha badey ciilka iyo caloolyowga ilmihiina waxey noqdeen dharigii labada dhan ka gubtay cid ay u garsheegtaana ma jirin, oo Waa tii la yiri "GARTU HADEY QORAXOOTO GUURTIDEY HARSATAA HADEY HARAADANA MARQAATIGEY KA CABTAA HADEY DAASHANA RUNTEY KU NASATAA,".

Nasiib darase ilmuhu uma muuqan cid wax ka aqrisaneyso oo mar qura xitaa wax ka dhageysaneyso habartii iyada aheydne dagaalkeedii siyaasadeed ayey sii laba laabtey oo waxba uma reeban masaakiinta Agoonta ah Waxaana dhacdey maalin maalmaha ka mid ah habartii oo si naxariis la'aan ah u garaaceyso canugii yaraa ee Dhaqane ahaa iney qeylidiisii iyo cabaadkiisiiba ku soo carartey walaashii Sahan, Inkastoo ay Sahan indhoole ahayd haddana waxey soo abaartey halkii ay qaylada ka yeereysey, waxeyna iyadoon u jeedin dusha kaga dhacdey habartii oo ku sii jeedey canuga.

Habartii oo aan fileyn wabtan gadaal kaga timid baa markiiba dhulka ku dhacdey oo madaxa la heshey bahal dhagax ah oo weyn, waxaana durba ka soo qul quley dhiig fara badan, habartii oo argagaxdey markii ay aragtey dhiigii baa aflabadii yeertey. Waxaana durba ku soo cararey odeygeedii Dhangaag ahaa oo markaa soo socdey meel aan aqalka ka fogeyn, waxuuna goobtii ugu yimid habartii oo dhiig ka buluq leh iyo labadii canug oo meel halkan ah isku dhagan oo ku ooynaya, Habartii oo miirkeedu joogey baa durbaba bilowdey

hagardaamooyinkeedii iyadoo midani u aragto fursad qaali ah oo aan leyska qasaarin karin. Waxeyna ku catowdey, "Alla tolbeelayey oo anigoo xitaa ka jeclaa mida aan dhaley miyay sidan ii dilayaan ma oga miyaa in aan aniga tolaayo kab tooda iyana ma waxey ii tolaayaan kar fanteyda.

Maxaad ii dileysaan ilmaheygiyow waadba ogtihiin inaan idiin jeclahey hada hadii aan dhinto yaa hooyo idiin ah, ma heleysaan hooyo anigoo kale ah, oo sidaan idiin jeclahay idiin jecel.Waa warey oo ma hadey dadku ku sheekeysanaayaan ilmihii odey Dhangaag waxey dileen hooyadood, War wadaado iigu yeera ha i yaasiimiyeen,".

Ma yareyn wixii caatow ahaa ee ka burqanayey afka habar Bulxan mana jirin wax ay ka tagtey oo ay is laheyd ilmaha iyo aabahood waad ku kala geyn kartaa, odeygii oo anfariirsan baa. Markiiba inta cimaamad uu sitey madaxii uga xirey soo xambaartey oo dhigey geed weynaa oo guriga ugu dhex yiiley, markaasuu inta soo ordey buu hadana dhiisha ka soo shubey ganuun caano qabow oo dhaay ah afkana ugu qabtey Habartii oo wali caataabeyso. Bulxan oo isa sakaraadineyso baa bilowdey iney caanihii qeyb liqdo qeybna soo hunqaacdo, waase iska yeel yeel iyo aduun ha qaribmo, odeygii oo xaalada ay haweeneydiisu ku sugan tahey aad uga xanuunsanaya.

Baa inta barkin u dhigey kubeertana ku dadey buu cagaha wax ka dayey si uu dhagta u soo qabto odey Bakaari oo ahaa ninka beeshu u ictiraafsan tahey inuu yahey diktoorkooda oo daawo soomaliga wax ku dabiibi jirey. Odey Bakaari oo soo saarsadey boorsadiisa baa la soo hubuq hubuqleeyey odey Dhangaag durbana waxey yimaadeen aqalkii oo wali habartii ka aadaareyso, Wuxuuna Bakaari bilaabey daaweyntii loo keeney isagoo dhiigii ka masaxey mariyeyna meeshii madaxa

ka dilaacsaneyd dhowr caleemood oo kala nooc ah oo tuman, wuxuuna ku guuleystey inuu joojiyo dhiigii habarta ka buruq lahaa.

Isagoo is atooreynayana wuxuu u reebey dhowr dhalo oo ay ku jireen caleemo la cajiimiyey, isagoo farey in maalintii saddex jeer meesha bugta laga mariyo. Odey Dhangaag oo u riyaaqsan hadalada Dr. Bakaari kasoo yeerayo baa u laabey dhakhtarkii xoogaa sanuud ah, waxaana goobtii ka tagey Bakaari oo ku faraxsan sunuuda faraha badan oo uusan fileyn ee la siiyey. Wuxuuna odeygii Dhangaag ahaa in xoogaa ah kool koolinayey haweeneydiisa bukta isagoo ka dhageysanaayey wixii ay kartey oo uu ilmihiisa ku cardaadiqin lahaa, wuxuuna odeygii si haaneedsan ugu gogley habartii geedkii hoostiisa.

Halkaasoo ay habartii in cabaara dabadeed iska dhigtey iney hurudey iyadoo ujeedkeedu ugu weyn ahaa in odeyga inta aysan ka bixin carada iyo ciilka balaaran ee uu u qabo caruurta uu howshiisa qabsado ama caruurta soo cardaadiqsho, Waxeyba odeygu u aheyd jaanis uu sugi la'aa oo wuxuu is lahaa hadaad intey soo jeedo caruurta canaano maagto iyadaa kaa celineyso ileyn aad bey u jeceshahay ilmaha, waase sida uu isaga aaminsanaa yaase runta u sheega oo wax ogeysiiya, Odeygii oo aan laheyn dheg la qabto misna faruurya qaniinaayo baa soo abaarey mudulkii yaraa ee ay caruurtu ku jireen, wuxuuna soo furtey intii uu soo socdey suunkii weynaa ee uu xirnaa.

Markii uu mudulkii madaxa soo giliyeyna wuxuu ka dhex kacey caruurtii isagoo aan u dayeynin halkani waa madax iyo halkani waa majin, meeshuu ka soo gaarana caruurtii ka garaacey, Waxaana markiiba mudulkii yaraa ka soo yeeray

qeylo iyo cabaad gaarey xaafadii oo idil taasoo keentey in ay dariskii ku soo xoomaan hoyga qeylidu ka yeereyso, Waxeyna u yimaadeen odeygii oo caruurtii dhulka la dhigey garaacistiisii aan naxariista laheyn wali ku sii wado, intase ka qabteen bey dibada u soo bixiyeen isagoo wali u sii faruuryo qaniinaayo. Caruurtii oo ay indhihii casaadeen jirkoodiina meel ka fiyow aysan jirin oo ay meel waliba dilaacsantahey dhiigna ka soo tis tis leeyahay baa dajin lagu bilaabey.

Maxeyse u tari habar baastii oo niyada goos dambeydka kaga qosleyso baa dhankeeda kasoo hadaaqdey iyadoo iska dhigeyso ineysan kici karin balse karto baa halkeedii ka soo tiri," War sow kuma dhihin ilmaha ha iga dilin aniga ha idilaano hadey doonaan anaa sidooda ku jecel maxaa sidan ka wadaa odey Dhangaag sidey kaa noqotey war ilmaha mar dambe ha iga taaban,", Erayadaa iyo kuwo kaloo fara badan ayey Bulxan isdaba dhigtey iyadoo aysan ka aheyn sida ay u leedahey, balse ka ah dadka yimid ha u arkaano in ilmuhu yihiin caasiwaalid cir iyo dhul gubey oo yeysan ilmuhu dariska xitaa ka helin garab iyo hiilo toona. Marka xigana waxey ka aheyd odeygu ha sii kululaado oo yuusan ka dabcin erayada ka soo yeerayo dadka ku soo xoomey gurigooda, oo habartu dhagarteeda maahan mid la soo koobi karo.

In cabaar ah ayaa goobtii lagu xoomsanaa iyadoo odeyga la wada farayey inuusan ilmaha gacan dambe u qaadin isna waa yahey baa ka soo yeereysey. Waxeyna xoogaa kadib dadkii ku kala laabteen guryahoodii iyagoo u arkey in xaaladu dagtey, caruurtii oo meelihii dhiiga lahaa laga tir tirey baa mudulkoodii yaraa dhex yuurarsadey, Iyagoo wali oohintu ka socoto ciil iyo caloolyow intii duni jirteyna dushooda la soo saarey cid ay gar gaar ka filayaan oo aan Alle aheyna ma jirin halkoodii ayeyna ku fiq fiqleynayeen. Habartii oo la kool

koolinaayo oo meel halkan ah u barxan tahey iyada iyo gabadheeda yar, odeygiina u soo adeegayo oo maxaa dhiman leeyahay, masaakiintii agoonta aheydna meel halkan ah lagu iloobey oo cid xagey xaaladiinu mareysaa leh ma jirin.

Iyadoo sidaa lagu sugan yahay buu gabalkii dhacey habartii iyo odeygeedii iyo gabadhii yareydna ku xaroodeen aqalkoodii, iyagoo halkaasi ku ruugayo cad iyo caano waliba odeygu jiirta mideeda jilicsan uu u xulayo habarta, isagoo leh ma ruugi kartid kan adag oo madaxaa kuugu xanuunayo. Waxaana lagu afar afareystey in masaakiinta yar yar ciqaab looga dhigo inaan caawa cad hiliba afka loo saarin si ay edeb u yeeshaan, talaabadaa foosha xunna mar dambe ku dhaqaaqin, Waxeyna masaakiintii iska dhex yuurareen aqalkii yaraa iyagoo iska ooynayo baahina dareemayo, ileen wax ay dhuuntooda mariyaan waxaa ugu dambeysey saakey oo ay isla cuneen qarsin cambuulo ah oo waliba aan goosaar laheyn.

Waxeyna Sahan oo aheyd gabar caqligeeda iyo da'deeda uu caqligeedu weyn yahay bilowdey fikir dheer oo ay ku baadi goobeyso sidii ay mushkiladaan kaga bixi lahaayeen iyada iyo walaalkeed, inkastoo uu albaab waliba iska soo xirayey marka ay maciin bido, Waxeyna ugu dambeyntii xal u aragtey iney isaga tagaan dhibkaan aan dhamaashaha laheyn ee lagu hayo, iskana aadaan islaan habaryar ugu aadaneyd oo daganeyd tuulada BILA QALAANSHUUNLE oo ka mid ah tuulooyinka u dhow deegaankooda. Waxeyna u arkeysey in habaryartaa tahey mida kaliya ee ay uga bixi karaan dhibaatadan heysata, Waxeyna u aheyd rajada kaliya ee markaa u muuqatay misna ay maciin bidi kareen.

Dhibka jirase wuxuu ahaa iyagoo aan aqoon meel loo maro, nasiibdarane cid ka saacida oo ay la kaashadaan uma muuqan,

waxeyna guntii iyo gaba gabadii iska dhaa dhicisey Sahan iney wadada cagta saaraan oo ay baxsadaan. Sidii ay u socdaana ay dad socoto ah heli doonaan kuwaasoo sida usoo baxday ku gacan iyo garab siin doona dhabaha saxda ah ee loo maro halkuu ujeedkooduyahay amaba ay geyn doonaan BILAQALAANSHUUNLE, Waxeyna go'aamisay Sahan iney si dhaqso ah, fadhiga ay uga kacaan maadaama aysan wax ku imaaneyn, misna ay qaadaan talaabo deg deg ah oo ay ku fulinayaan Go;aankaa isaga ah. Go'aankii isaga ahaa bey ka Dhaa dhicisey walaalkeedii yaraa, isna hadal kama soo celin, waxaana leysla meel dhigey in la baxo marka saantu dagto ee saqda dhexe habeenkii.

Inkastoo meeshu NAFTAA QUUR tahey ciyda yeyda iyo libaaxuna dhagahooda soo gaareyso cid habeen u babac dhigi kartana aysan jirin ay og yihiin, Haddana waxey iska dhaa dhiciyeen in dhimasho aysan dhaamin dhimasho tan ay hada ku sugan yihiina ayba dhimashada ka roon tahey., Waxaase la yiri:- "ILI WAXEY ARAG U UUR ADAG" oo hadey arki lahaayeen yeyda iyo libaxaba uma quuri laheyn naftooda iney xiligaa u babac dhigaan. Si kastaba ha ahaatee markii ay saantii dagtey saqdii dhaxana la marayo bey istaabteen, walow ay gabadhu indho la'dahey, haddana waxaa hogaanka hayey wiilka yar. Waa la soo baxsadey oo banaankii weynaana baa la yimid, waxaana leyska qabsadey wadadii markaa uu ugu soo horeysay, walow aysan ogeyn halka ay ku dhamaan doonto.

Orod baase la is dhigey oo cagahaa wax laga dayey, waxaase in cabaar ah markii ay cararayeen cirku soo daayey kii roob ahaa ee waayadanba da'ayey maadaama xiligu ahaa go' oo sita qabow ilmuhuna uma xirneyn dhar qabowga ka xijiyo. Mana soo qaadan xitaa wax ay roobka kaga onkortaan, loo mase jixin jixine cagahaa wax laga sii dayey mar ay isla kufaan mar

ay ooduhu maryaha kala haraanba sidii ay u cararayeen baa mar ay tabartii sii liiceyso waagii kor kooda ku dilaacey. Waxaana salka la dhigtey geed qurac ah hoostiisa si loogu yara nasto, waxaase la dareemey baahi saa qarsinkii shaley subax baa afkoodu wax cuno la yiraah ugu dambeeyey, waxaana u dheer qabow badan iyo roob aan kala go'laheyn.

Iyagoo qar qarayo oo laba arimoodba ka qar qarsiineyso oo waa maree qabow dartii bey la qar qarayaan, marka xigtana cabsi darteed bey la jareynayaan, Gees walibana Yey baa ka ciyeyso in cabaar ah markii meeshii la fadhiyey buu yarkii yaraa haab haabtey oo raadiyey miro ay nafta ku sii ceshadaan. In cabaar ah markii uu sii maqnaa bey Sahan shanqar ka dareentey meel dhanka bari kaga beegneyd waxey is tiri waa kii Dhaqane ahaa oo soo cararaya wey u qeylisey oo tiri, 'Dhaqanow,….. Dhaqanow, maxaa ku soo ceeyrsanaayo" cid u jawaabtana waa weydey, waxaa wada istaagey xaadeeda oo idil waxey dareentey baqdin weyn, waxeyna maqli jirtey hadii libaaxu soo galo goobta waxaa ku istaagayo xaada.

Waxey is tusidey in waxa ku soo socdo yihiin libaax uuna ka soo taqalusey walaalkeed hadana u soo socdo inuu iyana daba dhigo mar qura ayey boodey oo cagaha wax ka deydey. Waxeyse madaxa dartey geedkii ay hoos fadhidey oo nasiib daro ma ahan qof wax aragto inta dhulka sidii qare oo kale ugu qaraxdey baa hadana geed meesha ka soo taagnaa lugta dilaaciyey oo dhiig ka soo buq buqleeyey.

Umase istaagine Sahan cararkeedii bey sii wadey ileyn naftu orod bey kugu aamintaaye, sidii ay marna geed madaxa ula galeysey marna dhulka ugu dilaaceysey, geed walibana marba uu cad kala harayey calaladii ay xirneyd, bey markii dambe tabari ciishey ileyn waa ruux dhiig baxaayee. Waxeyna afka

dartey dhiiqo halkan ah inkastoo uu miirkeedu joogey hadana ma awoodeyn iney sameyso wax dhaq dhaqaaq ah, waxeyna ka fursan weydey baahi heysey darteed iney carabkeeda soo laad laadiso oo dhiiqada intey carabka ku qaadi karto cantuugsato, Oo naf ka raadiso, waxaana daqiiqadba tan xigta isa soo jarayey xawaarihii tabarteeda oo aad bey usii laciifeysay waxeyna kusoo siqeysay miir beel iyo ineyba naf baxdo.

Iyadoo xaaladaa murugada badan ku sugan baa waxaa is keeney kii libaax ahaa oo afka kala hayo, baahi darteedna dhareerku ka daadanayo. Inta kor yimid buu ur ursadey oo marba dhan ka marey sekanadaa iyada ah Sahan waxey door bideysey in libaaxu cuno oo ay isaga tagto ifkan dhibka badan ee ay ku cidleeyeen hooyadeed macaan iyo walaalkeed.

Waxeyna maqli jirtey in libaaxu cunin meydka iyana ay xiligaa aheyd sidii meydka oo kale oo aysan dhaq dhaqaaq laheyn, waxey isku daydey iney is nuux nuuxiso si libaaxu u cuno, ifkana uga tagto weyse awoodi wedey, iyadoo niyada ka faruuryo qaniineyso buu bahalkii iska dhaqaajiyey sidii uu u dul meer meerayey. Dhanka kale markii uu waagii dilaacey waxaa laga war helay in caruurtii baxsadeen, waxaana lagu soo wada xoomey gurigan masiibadu ka taagan tahey ee reer Dhangaag.

Waxaana markiiba loo xir xirtey in la baadi goobo raqdii caruurta, madaama aan la soo heleyn iyagoo nool sida dadku badi aaminsanaayeen, maxaa yeeley bahaladu xaley ayay ugu ciy badnaayeen oo waxey arkaan macafineyn, Odey Dhangaag oo murugeysan ileyn waa beer wax dhalee kana shalaaynayo sidii naxariista darneyd ee uu ubadkiisa shalay u garaacay baa hogaanka u soo qabtey koox u diyaar aheyd iney baadi goodkaasi ka qeyb galaan, Inkastoo dadka si aad ah uga wada

murugeysnaayeen arintaa naxdinta badan ee taagan, haddana waxaa jirtey qof iyada ka qosleysey gooska dambe si qarsoodi ah oo arintaan aad ugu faraxsaneyd. Waadna garan kartaan oo waa habarbaastii Bulxan aheyd, oo u arkeysay inuu qorshaheedu u hagaagay oo meel ka fudud meeshii ay rabtey uu uga hirgalay.

Dhanka kale kooxdii baadi goobka soo aadey baa is qeybisey oo qolaba aag ama jiho loo direy, markii uu baadi goobkii socdey dhowr saacadood, oo xitaa kooxihii jihooyinka kala duwan loo kala direy ay isa sii qeybiyeen, dadaal iyo baadi goobna aan waxba loola harin, Baa mar qura war hayaay ka yeertey qeyb dhanka koofureed la aadiyey waana lagu soo kala yaacay, waxaana loogu yimid wiilkii Dhaqane ahaa oo uu cadba meel yaalo bahaladuna ka dhargeen oo isaga tageen.

Odey Dhangaag oo ilmo kulul indhihiisu kasoo qubteen baa goobtii lagu samirsiiyey, Waxaana meydkii canuga yaraa ee Dhaqana ahaa jirkiisa cadba meeshuu yiiley laga soo qaadey oo jawaan la isugu geeyey. Howshoodana fari kama qodnee, waxaa loo xeetey baadigoobka raqda gabadha, oo iyadana la qiyaasayey ineysan goobta ka fogeyn, hadana sidii hore ayaa la isku qeybiyey, Waxaana in cabaar ah dabadeed dhanka woqooyi ka yeertey war hayaay kale waana soo wada yaacey, waxaana goobta loogu yimid gabadhii Sahan aheyd oo markii hore la moodey iney dhimatey balse la ogaadey iney wali nafi ku jirto.

Inta biyo afka loogu qabtey oo la cabsiiyey baa haddana lagu bil biley lana saarey faraskii uu odeygu watay, waxaana leysku qeybiyey labo qeybood oo qeyb uu odey Dhangaag hogaaminayo waxey la carareen gabadhii nafta yar ku jirtey, waxayna la beegsadeen dhanka JAMAAME oo uu isbitaalka

ugu dhow ku yiiley, Wuxuuna ujeedkoodu ahaa iney gaari ka sii raacaan tuulooyinka ay sii marayaan, qeybta kalena waxey qaadeen meydkii canuga oo ay la beegsadeen beeshii oo markii la geeyey aad looga sii naxay lagana xumaadey sida foosha xun ee bahaladu canuga u cuneen.

Dhanka kale nasiib wanaag Kooxdii Gabadha waday ee uu horkacayey Odey Dhangaag waxey gaari ka sii heleen tuulada DEEMO oo aan sidaa uga fogeyn, waxaana afka loo saarey xaga Magaalada KISMAAYO oo leys lahaa wuu ka heer sareeyaa isbitaalkeeda kuwan kale, Waxaana saacado kadib oo gaariga lagu wadayey heerkii ugu sareeyey la soo caga dhigtay magaaladii KISMAAYO aheyd iyo isbitaalkii loo socdey, waxeyna halkaasi kula kulmeen la tacaalid iyo gar gaar deg deg ah kii ugu sareeyey, si heersareyso ayaana gabadhii yareyd ee Sahan aheyd loola tacaaley looguna gar gaarey.

Waxaana lagu guuleystey iney soo naaxdo dhowr saacadood dabadeed oo ay wax kala garato miirkeediina usoo laabto, inkastoo wali ay tabar darantahay, waxaana ugu horeeyey eray afkeeda kasoo baxo "Aaway walaalkey Dhaqane ma noolyahey?.. Waxaana loogu wada jawaabey Haa wuu fiicanyahey, iyadoo la dhowrayo xaalada ba'an ee ay gabadhu ku sugantahey, odeygii Dhangaag ahaa oo howlo badani sugayaan, meydna guriga u yaalo baa gabadhii uga soo tagey habar Taako oo aheyd islaan ay ilmo adeer yihiin Magaalada Kismaayana daganeyd.

Wuxuuna isla habeenkii soo abaarey dhankii deegaanka NAFTAA QUUR oo ay soo galeen waabarigii, mase nasanine waxey durba soo Aaseen saqiirkii Dhaqane ahaa, halkiina loogu tacsiyadeeyey reerkii canuga ka tagay, odeygii iyo habrtiisiina la farey samir iyo iimaan. Gabadhana loogu

duceeyey inuu ilaah ka qaado dhibka habartii oo aad yaabto ilmada ka qubaneyso, hoosna ka faruuryo qaniineyso oo iska leh baladan baas naf adagaa mey iska dhimato oo walaalkeed daba kacdo, oo ka xun nolasha gabadha yar ay wali nooshahey baa si aad ah loogu tacsiyeeyey.

Maadaama ay muuq ahaan u ekeyd hooyo canug ka dhintey, sidii caadada aheydna waxaa gurigii isugu soo harey habartii, odeygeeda iyo gabadheeda Kinsi, wuxuuna odeygu go'aansadey in maalinta bari ahba uu reerka u raro gurigooda KISMAAYO. Howsha iibinta beerta iyo xoolahana ku wareejiyo odey Makaraan oo ay xigto ahaayeen, wuxuuna isla habeenkii arintii ula tagey odey Makaraan oo xabadka u tuntay. Habeenkaa hurdo ma gam 'in odeyga, habartuna lamid bey aheyd weyse mataleysey oo daacadnimo murugo uma qabin, waxeyse ka xumeyd oo iyada murugo u aheyd in wali gabadhii Sahan aheyd nooshahay.

Waagii markii uu dushooda ka dilaacey baa la galey xir xirasho iyo diyaar garow, waxaana intii ay diyaar garowgaasi ku jireen soo caga dhigtey gaarigii ay la balansanaayeen, lamaba sii daahine durba dhakada ayey uga dhaceen. Iyagoo macsalaameeyey beeshii waxaana horey u sii raacey dhowr odey oo beeshu mataleysey xaalada gabadhana iney war uga keenaan loo xilsaarey, Wuxuu gaarigii oo xawaaro heerkiisu sareeyo ku soo guuxayey ugu dambeyntii soo xero galay halkii ujeedku ahaa amaba hoygii reer Dhangaag ee magaalada Kismaayo. Alaabadii un baa leyska dhigay oo laguma sii daahine, waxaa durba loo jiheystey xagii isbitaalka si xaalka gabadha laga murugeysanyahey loo soo ogaado.

Markii ay isbitaalkii yimaadeen waxey la kulmeen habar Taako iyo gabadheeda oo la joogey Sahan sheekana u wada socoto,

arintaa iyada ah aad buu ugu farxey odeyga hase yeeshee waxaa ka naxdey habartii Bulxan aheyd oo dhimasho u raajicineysey gabadha, Hase yeeshee habartu waxey durbaba bilowdey hagardaamadeedii iyadoo u quuri la' gabadha xaalada ay ku sugan tahey, inta gabadhii oo sariirta jiifto isku duubtey bey baroor aflabadii yeertey oo ku caatowdey alla ma ii caafimaad qabtaa xabiibtii, Alxamdulilaahi hadaadan marin jidkii uu walaalkaa marey oo aysan bahaladu kuu cunin sidii foosha xumeyd ee ay u cuneen walaalkaa, oo cadba meel hilbihiisa laga soo gurbiyey, allow adaa mahad leh oo ii bad baadiyey gabadheyda alxamdulilaahi.

Erayadaa iyo kuwo kaloo fara badan baa ka soo burqanayey afka habarta, waxaase durba miirbeeshey Sahan yariisey oo aad uga naxdey dhimashada walaalkeed oo loo sheegayey inuu nool yahey oo uu badqabo, waxeyna bilowdey hinqasho, waxaana markiiba qolkii ka yeerey qeylo iyo na soo gaaraay. Kalkaaliyaashii baa markiiba ku soo xoomey oo ula cararey gabadhii qolkii imarjansiga ama xaalada deg dega ah, dhammaana intii qolka kula jirtey waa la soo daba yaacey.

Habartii oo baroortii sii laba jibaartey arinta ku talagalka ah ay sameysayna ku faraxsan oo ka qosleyso goos dambeedka si hoose, isna leh bes wey ku deysey tii dhimo laga waayey, Baa odeygii ku canaantey "war sow kuma oran gabadha inta ay xaaladeeda ka dageyso arintaa ha u sheegin maxaa sameysey hadda waataa gabadhii ladneyd xaaladeedii cirka ku shareertaye, orodoo iska bax oo guriga aad buuq dambe hanagu furine," . Habartii oo oohin darteed indhuhu casaadeen baase la soo boodey "Aniga hooyo ilmaheeda baa ba'een baan ahay, waxey ku hadleyso iyo wax kalena kala garaneyn. Erey kastoo aan ku iri gabadhana waxaa iga keeney

beer jileeca hooyonimo, oo miyaanan xaq u laheyn inaan ilmaheyga dartood u gubto sida hooyooyinka kale.

Sideese iska bax ii leedahey sowtan gabadheydii nolol iyo geeri u dhaxeyso oo ma sii noolaan doontaa mise wey dhimandoontaa sidii wiilkeyga xaalkeedu yahay, anigu inta ka dhaqaaqi maayo inta aan ka ogaado waxa ay gabadheydu ku dambeyso", Habar Taako oo war moog ah waxay ay masiibadan damacsantahayna aan ogeyn baa soo dhex gashey hadalkii oo tiri "odey Dhangaag waa runteeda ee daa ha joogto inta ay gabadha xaalkeedu ka ogaaneyso ileyn waa hooyo ilmaheeda jecele. Yaase u sheega habar Taako in Bulxan balaayo hoos ka wado oo ay alle ka baryeyso in gabadha aan nolol looga soo saarin qolka ay ku jirto oo la soo bixiyo meydkeeda.

Waase tii hore loo yiri QOFAAN WAX OGEYN ALLOW HA CADAABIN, oo habar Taako muuqa un bey wax ka cabirtey oo gudaheeda kama war heyso, odeygii oo wali u careysan xaaskiisa baa waxba ka oran hadalkii habar Taako soo jeedisey. In cabaar ah markii la hor dhoobnaa albaabkii qolka Emergency-ga baa la soo bixiyey gabadhii oo ay nafi ku jirto oo bad qabto, suuxdintiina ka soo reysey, walow wali dhowr faleebooyin ku xir xirnaayeen, waxaana loo soo celiyey qolkii ay ku jirtey.

Dhaqtarkiina wuxuu gooni ula faqey odey Dhangaag isagoo si hoose ugu sheegey inaanan gabadha loo sheegin wax ay dhibsaneyso ama wax ay ka naxeyso, buuqana laga yareeyo. Arintaa iyada ahna xabadka ayuu odeygu u garaacdey, wuxuuna soo galey qolkii ay gabadhu ku jirtey, isagoo haweeneydiisii farey iney guriga aado oo waxa is dhex daadsan sii kala habeyso, Sidoo kalane wuxuu fasaxay habar Taako iyo

gabadheeda Taliso oo iyagu la joogey Sahan arinteedana uu odeygu u xilsaarey markii uu beeshii ku noqonayey aad ayuuna ugu mahad celiyey, labadoodaba.

Waxaase arintaa odeyga qudhiisa ku gacan seyrey gabadhii iyo hooyadeed oo soo jeediyey in isagu soo nasto oo uu daalan yahey martina ay la socoto, inuu wax badan soo kala hagana laga doonayo. Sidaa dardeedna ay Taliso la joogeyso gabadha, sidii horana xaalku sii ahaanayo oo Sahan iyo Taliso is fahansanyihiin, Arintii baana la isku afgartey oo dhammaan waa leys daba kacey, waxaana goobtii la isaga tagey Taliso iyo Sahan yariisey, Run ahaantii Sahan waxey isbitaalkii kala kulantey daryeel kii ugu sareeyey oo seken walbaa lama faaruqeynin oo xaaladeeda waxaa si joogto ah ula socdey DR Cosoble oo mudnaan aad u balaaran gabadha u hayey.

Aadna Uga xumaa xaalada ay ku sugantahey, wuxuuna dhexda u xirtey sidii uu xaaladaa murugada badan oga saari lahaa miskiintaan indhaha la' ee uu dhankastaa dhibka ka heysto, Waxaana intaa u dheereyd nersisyada ama kal kaaliyayaasha oo aan sekena faaruqi jirin, wuuxuuna Sahan isbitaalkii u noqdey meel ay si aad ah ugu riyaaqdey kool koolin aysan waligeed aragna ka heshay, Waxaase mar walbaa soo hortaagnaa, iney meel u fadhido habar baastii aduunyada ku kar karisey cid ay ka magangaleysana uma muuqan oo waxey ka dharagsaneyd hagardaamada habarta iyo hayada odeyga Aabaheed ah.

Waxeyna mararka qaar isku hiifeysey Sahan maxuu tarey orodkiina waa tan waxaa sabab u noqotey dhimashada walaalkaa Dhaqane, habar baastiina ma hursanid cid ku hogaamineysana ma jirto oo waa adigan indhaha la' habartiina boholo dhaaxaa wey kugu rideysaa, hadeysan wax kale kugu

sameyn, Marka xaalada Sahan marnaba kama marneyn ciil iyo calool xumo , waxaana arinteeda iyo xaalkeeduba si joogto ah ula socdey reerka oo idil oo aan iyaguna faaruqi jirin, inkastoo Habar baastan Bulxan ah ay balaayadeeda wadatey oo marba dhan kaga soo afuufeysay, Haddana wax sidaa ah markan uma dhimi karin xaaladeediina si aad ah bey oga soo reysey oo waxeyba bilowdey iney soo raacdo Taliso oo ay yara soc socdaan isbitaalka beer yar oo ku dhex tiiley.

Oo wax ka qasini ma jirin Sahan, hadii loo eego muuqaal ahaan sidii hore kun jeer kaba bilic iyo qaabsan, diiftiina waxaa la dhihi karaa waa kasoo kabsatay, DR Cosoblane si gaar ahaaneed ayuu xaalkeeda isugu howlayey oo marnababa kama caajisin, dadaalna uma yareysan mana kala harin, wuxuuna baaritaano badan oo uu ku sameeyey Sahan dabadeed soo xaqiijiyey in Sahan indhaha loo fiiqi karo oo ay awoodo iney indhaheeda ku aragto dunidan ka dahsoon, Arintaa iyada ahna aad bey ugu farxeen Sahan iyo intii samaha la jecleydba, wuxuuna odeygii Aabaheed ahaa xabadka u garaacdey wixii howshaa ku bixi lahaa.

Waxaase jirtey qof ay arintaasi aad u gubeysey aadna uga xumeyd in ay gabadhu indhaheedu wax ku aragto, walow ay xeelado badneyd wax badana ka dhameysan jirtey odeygeeda, haddana markaan xeeladaheedii wax wey u fulin waayeen oo wey u bareeri weydey iney odeyga ka dhaadhiciso inuusan indhaha u fiiqin gabadha, Waxeyna ku noqotey falaar xanuun badan oo ay awoodi weydey iney iska siibto, waxeyna ka fursan weydey iney iyada un isla ganuunacdo, dhanka kale DR Cosoble wuxuu galey howshiisii wuxuuna ku guuleystey camaliyadii isagoo Sahan usoo celiyey arageedii oo ayan horey wax rajo ah uga qabin in loo soo celin karo.

Maadaama ay ku dhalatey arag la'ida si kastaba ha ahaatee Sahan waxey indhaheedii ku aragtey dunidii ka daahsooneyd, waxey aragtey odeygii aabaheed ahaa, Habarbaastii dunida ku ciishey, waxeyse mararka qaar hoos iska laheyd waxaa haboonaan laheyd inaad indhahaada ku aragto hooyadaa macaan iyo walaalkaa dhaqane, qadartuse ma saamixin oo xitaa lagama heynin wax sawir ah.

Arintan ku soo koradhey Sahan waxey u aheyd awood xoog badan oo ay kaga hortagi karto habarta iyada ah, inkastoo gacan qaad aysan ugu tageynin oo aysan ku tabar iyo taag aheyn haddana waxey awood u siinayeen arageeda iney ka gabbato tuuryada habarta, Waxayna Sahan kusii jirtey isbitaalkii ku dhawaad mudo Labo bilood ah, waxaana ugu dambeyntii la keeney gurigoodii iyo habrtii lama huraanka aheydee sugeysay.

Waxaana wali dhanka odeyga oga socdey kool koolintii mudooyinkaanba ay oga baratey Sahan, arintaa iyada ahna aad bey u kahsatey habartii iyada aheyd oo u aragtey in odeygu gabay kool koolintii uu kool koolin jirey iyada iyo gabadheeda, Waxey guntiga u xiratey sidii ay arintaa ku bur burin laheyd, kuna soo afjari laheyd, iyadoo bilowdey dagaalkeedii siyaasadeed ee lagu yiqiiney.

Kaaley arag marka odeygu joogo xabiibtida ka baxeyso iyo ineysan xitaa u ogoleyn gabadha Sahan ah iney odeyga usoo qabato bakeeri, oo haduu udirsadaba waxey lasoo boodaa war gabadha ha iga adeejin, waxeyna u dirtaa wixii uu u dirsadey gabadheeda, Maaha waxaan soo koobi karo waxyaabihii ay habartu sameyneysey markuu odeygu joogo, waxeyse gaarsiisey inuu odeygu ku canaanto iyada war

gabdhaha adeega kasin Sahanna ka dhaaf kool koolintaan xad dhaafka ah yeysan naga habaabin gabadhee.

Arintaa iyada ah waxey u aheyd Bulxan guul aad u balaaran oo ay ku gaartey dagaalkeedii siyaasadeed ee lugooyada ahaa, waxeyna ku guuleysatey iney odeyga kasii jeediso gabadha arinteedana uu ka seexdo, dhankey iyada doontana howsheeda u fushan karto, Waxeyna durbaba sii Boqol laabtey cadaadiskii ciqaabtii iyo caburintii ay gabadha ku heysey, oo kaaley arag sida bani'aadannimada kabaxsan ee ay gabadha yari ula dhaqmeyso, maaha midaad maskaxdaada ku soo koobi karto, hadii aad arki laheydna maxkamad xitaa lama sugteene adigaaba toogan lahaa.

Yaase ogeysiiya odeyga dhalay ee warmooga ah una heysto in gabadhiisu kool koolin tii ugu sareysey ku sugantahey, heysatana hooyo aan ka liidan hooyadii dhashey oo u jecel sidii hooyadeed oo kale, Abwaan Soomaaliyeed baase horey u yiri "'Eedo abaal laay ilmahaa lagu aaminaa aqalkey hurisaa , ibliisaa la adeegee uur jileec mataqaanee abras waaye ogaada".

Odeyguse waa iska warmoog howlihiisaana iska badan, Sahanna wey ka dharagsaneyd in odeygu dhagahiisu u daloolaan oo kaliya habarta, iyana cid war ka koobineysa aysan jirin. Waxeyna dantu badey iney dusha u ridato dhibkaan aduunyadu badey, waxeyna maskaxda iyo maanka ku heysay in goor uun ay ka bixi doonto.

Waxeyna Sahan aad iyo aad ugu faraxdey markii iyada iyo gabadha habarta ay dhashay uu odeygu geeyey dugsi quraan, waxeyna u arkeysey in dugsigu noqon doono meel ay oga gabbato ciqaabta badan ee habartu ku heyso. Mase u noqon Sahan Dugsigii sidii ay ka fileysey oo waxeyba kala kulantey dil iyo garaacis aan tii habarta ka yareysan, maxaa yeeley

maalin walba marka cashirka lasoo siiyo waxaa laga rabaa iney barito ka baxdo.

Maxeyse ka baxdaa marka ay guriga timaado howshi lagu bilaabo baa ku gaarto xili ay isla raadineyso madaxeeda iyo barkinta sariirta usaaran. Goormey wax aqrisaa kii macalin ahaana cashirkiisa in laga baxo un buu rabaa haddii laga bixi waayana ushiisa ayuu oga caana maalayaa qofkii ka bixi waayo, Waxeyna Sahan noqotey dharigii labada dhan si ba'an oga gubtey, waxeyna aad ula yaabaneyd sababta aduunyadu meeshey dugso istiraahba dabka oga dhigayso.

Awoodse ma jirin xageedoo waxey ku qasbaneyd iney dusha u dhigato oo xambaarato dhibka faraha badan ee ay aduunyadu dugso tiri, Waxaana intaa usii raacey gacanqaad kale oo uu odeygii ku bilaabey kadib markii macalinkii dugsiga soo sheegey iney gabadhu damiin tahey oo aan wax galeyn, Waxaana Sahan ku dhacdey inta aad wab xaga aad wab xagana aad wab, oo wareer iyo walaac beyba ku waalan gaartey, wuxuuse ilaah siiyey awood ay ku xamisho dhibkaa oo idil waxaana dhihi karaa waa yaryahay noole heerkaa dhib xamili karo.

Aduunyadu Cagtey wax ka deydaaye oo carari oge waxey minidba minid u dhiibto daqiiqadna midkale usii dhiibto saacadna tan xigta ku wareejiso maalinna tan xigta usii dhiibto isbuucna kiisa kale hoo yiraa bilina teeda kale ku xawisho sanadna kiisa kale amaah la'i iiga hoo yiraah.

Baa waxaa soo baxey Soona hana qaaday gabdhihii oo Sahan wax badan baa is badaley hagoog aysan hore u qaadan jirinna qaadatey, wax la moodo in gadaal laga soo riixayana horaadkeedii ka soo baxeen, Waxbadan oo kalane isku aragtey, garowsateyna iney baaluqdey oo da'dii qaangaarka bilo

raacsatay, Dhamaan astaamihii gabarnimo iyo umuurihii u gaarka ahaan isku wada aragtay.

Habar Baastii Bulxan aheyd iyo xaalkii isaga ahaase waxba iskama badalin, walow bugtii iyo bacdii hore laga yara hakiyey hadana howshii guriga iyadaa u xilsaarneyd, oo har iyo habeen u taagneyd, sida iyada iney guriga shaqaale u tahayna salkeeda dhulka loo diid. Suuq kasoo adeegid, Karin, diyaarin, alaab dhaqid iyo wixii howl ladhahayey dusheeda ayey ahaayeen, gabadha Kinsi ahna kaalay arag sida ay u xashaasheyso asxaabna u leedahey.

Waxaana qofkii arkaa usoo baxaya in Sahan shaqaale ka tahey guriga, oo kaalay arag amarka ka baxayo marka kinsi asxaabteeda soo booqdaan iyo sida dag dagsiimada leh ee ay ufulineyso Sahan amarka.Waxeyna Sahan wax asxaab la yiraahdaba ka laheyd Keyf oo ay isku xog warami jireen suuqana iskula qornaayeen maalin kasta, mana jirin asxaab kale oo ay isku sir qarsadaan ama isku dheeryihiin sida Keyf oo kale.

Arinta Sahan lagu haayana aadbey uga xumeyd Keyf oo xitaa waxey ku dhiirin jirtey kuna guubaabin jirtey iney isaga soo tagto oo ay iyaga la noolaato, taasoo aan macquul ula muuqan Sahan.Run ahaantiina Sahan waxey ku soo baxdey marka laga hadlayo qaab dhismeedkeeda iyo quruxda qaadir ku galadeystey qof hadii loogu yeero qalanjadii qarniga ayasan jirin cid ka daba hadli karto oo min ciribteeda hoosiyo ilaa caarada sare ee timaheeda cad la saluugo malaheyn.

Oo kaalay arag jooga dheer ee ilaahey u dhaliyey iyo qumanaanta socodkeeda qiyaasta lagu larey dhexdeeda qoran, horaadkeeda qamaamudo, qoorteeda qalowlehoo cabbaaryaha lagu qorey, bishimaheeda qadda ah sanqaroorka

dheer, Dhaayaheeda lagu qanco, dushana laga saarey, suniyaheeda quruxda badan, timaheeda qarada dheer, run ahaantii wax lagu qiyaasaan jirin.Mana jirin gabar u babacdhigi kartey Sahan iney wado kula laafyooto oo waxey dadka oo idilba uga dhex ifeysey sidii qorox arooraad, ama dayax shan iyo tobonaad, gabar walibana waxey iskula caataabi jirtey xageey kaa martey quruxdan Sahan marki la qeybinaaney.

Habar walibana waxey iyana si hoose isku laheyd maxay kugu dhalan weydey Sahan oo kale oo qurux, qaab iyo qof ahaan kaamil u ah oo dabeecad daganaan iyo dulqaadba loo dhameys tirey, waxeyna aheyd qof amaan mooyee aanan loo heynin wax dhaliil ah, dhibkii habar Bulxana dhaqankeeda suuban iyo aragti dheerideeda waxba uma dhimin. Kii ina Rag ahaana duqow iyo dhalin yaraba xitaa hadii uu leeyahay afar xaas, wuxuu niyada iska lahaa yaa qalanjadaan calaf kugu dara oo caruur qurux badan sideeda kaa siiyo, waxeyna Sahan noqotey qof meel walba la hadal hayo, ka sheekeynta quruxda ilaahey hibada u siiyey oo ay u dheertahay kartida iyo dadnimadeeda aan la heli karin.

Arintaasina dad badan bey guux iyo ganuunacba ku furtey haba ugu darnaato tii Kinsi aheyd ee isku boobeysey wixii cusbur iyo catar ahaa ee dunida jirey. Maalinkastana soo iibsan jirtey wax walboo dumar isku qurxiyo, qaab soo jiidashana u yeela, haddana weydey cid seken hadal heyso ama xitaa indhaha la raaceyso qaab daradeeda, quursigeeda iyo qof ahaan xumaanteedaba, Waxeyna aad uga guban jirtey dadka hadal hayo midaan aan cusbur iyo catar midna isku dhoo dhoobin sideeda, hadana sidii bil 15aad ka dhex ifeyso gabdhaha asaageed ah.

Waxaana meel walba oo la fariisto xaafada CALANLEY iyo xaafadaha kale ee Magaalada KISMAAYABA la hadal heyn jirey Sahan quruxdeeda iyo qof ahaan wanaageeda, Dhalinyaro badanina waxey soo dhooban jireen wadada ay soo marto markey suuqa ka soo adeegeyso si ay u daawadaan quruxdeeda, waxaana jirey rag fara badan oo hawada jaceyl lixaad leh uga qaadey Sahan. Waxaana ka mid ahaa raga sida dhabta ah jaceylka lixaadka leh hawada uga qaadey Sugule oo ahaa Keyf walaalkeed oo xitaa seg seegey wax barashadiisii maahsanaana kasoo hartey.

Wuxuuna raga kale la qabey awood darida ah inuusan jirin mid u babac dhigi karey inuu arintiisa ula tago Sahan, waxaana xaalada ba'an ee uu ku suganyahey dareentey walaashiis Keyf oo wareysatey, isna wixii jirey faraqa ayuu ugu shubey oo waxba uma hambeyn. Waxeyna ugu bishaareysey iney arintiisa ugu gudbineyso saaxiibteed Sahan, maadaama uu heerkaa darteed u il daranyahay, ayna u badantahey ineysan war kasoo celin, oo xaalada Sahan ayey xog ogaal u aheyd xushmada ay u heysana way la socotey, sidii ayeyna ku afar afreysteen iskuna afgarteen Sugule iyo walaashiis.

Keyf oo arintaa kalgacalka xambaarsan dhabarka u tuuratey, baa sidii caadada u aheydba subaxii soo martey saaxiibteed Sahan si ay suuqa isugu raacaan. Is bariidin dabadeedna gambar bey u dhigtey Keyf saaxiibteed, iyadoo ka codsatey iney wax yar sugto si ay u dhameystirto canjeero oo ay markaasi dubeysey, Iyana hadal kama soo celin waxaana jikadii lagu galey kaftan iyo sheeko, Keyfbaase u dhiibtey saaxiibteed iney maanta u heyso war muhiim ah, Sahan oo codsatey in loo sheego warkaa dhiilada leh ee ahmiyada badan, baa Keyf tiri u kaadi waa inaan gooni isula baxnaa.

Sahan oo dharareyso warka dhiilada leh ee loo hayo maanta baa in cabaar ah dabadeed waxey iskula sii saanqaadeen iyada iyo Keyf xagii qolkeeda ka xigay kagadaale markii ay dhameysey canjeeradiii ay dubeysay, Waxeyna soo laabteen albaabkii Keyf oo aheyd qofka warka laga sugayo baa hadalkeedii ku furtey sida aad ogtahey waxa loogu yeero jaceyl waa wax jira dhibaatana badan haddii aan leysla laba liseynin ama aan lagula wadin, Sahan oo u jiibineysa saaxiibteed baa tiri waa runtaa walow aysan uga baran iney kala hadasho amuuraha jaceylka, Keyf oo hadalkii sii wadata baa tiri marka kawaran hadii aan aniga damacsanahey inaan qof badweyntaa jaceylka kaligiis ku harqanayo aan ka soo saaro.Walibana qofkaasi uu yahey walaalkey Sugule adiga la'aantaana aysan ii suurtoobeyn inaan bohoshaa uu kalgaceylka kalinimo ku hubsaday ka soo bixiyo.

Sahan oo arini ku soo foorarsatey meel ay wax ka bilowdana garan la' baa tiri waa waajib lagu qasbanyahey in lagugu taageero, maxaa yeeley aniguba wey idhibayaan waxa dhibayo saaxiibtey. Walibana uma ogoli Sugule inuu dhib ku jiro, oo waa ruux aan u hayo qadarin iyo tuxgalin gaar ah, Waxaana walaalkaa la jeclahey wax walba oo wanaag ah. Keyf baa lasoo boodey hadaba qofta uu Sugule bohosha ugu jiro hadii aad adiga tahey maka raali noqoneysaa inaad kasoo saartid, oo aad wax kala qabatid jaceylka baaxada weyn ee uu kuu qabo ee harsad iyo hoyashaba u diidey la wadaagtid dhankaadana kala daa daheyso"?.

Sahan oo aduunyadii ku yaraatey sugulana mudnaan baaxad weyn u heysey una arkeysey inuu yahay wiil uu eebe ku maneystey wax walba oo wanaag ah, aqoona leh asluubna loogu darey, gabadhii heshaana nasiib leedahay baa aamusnaan dheer dabadeed ku jawaabtey.

Waa waajib isaaran inaan Sugule ka soo bad baadsado bohosha aan war la'ida ugu ridey ee uu darteey ugu jiro, Keyf oo si aad ah ugu faraxdey hadalada kasoo yeerey saaxiibteeda qaaliga ah ee Sahan. Baa kusoo boodey oo dhunkasho ku boobtey iyadoo qofkii arkaaba uu is oran lahaa qofka wax lala qabanayo waa Keyf, baa u sii raacisey waan kaa filaayey saaxiib, Waxeyna durba u qeylisey Sugule oo isagoo dhag la qabto laheyn qolkii dalaq soo yiri, isagoo in cabaar ahba dhowrayey in loo yeero oo meel halkan ah ayuu yuurarey sugayeyna natiijada masiirka jaceylkiisa, halka ay sal dhigan doonto, iyo in lala wadaagi doono ama lagu oran doono la dabaalo Caahaqa.

Waxeyna ugu bishaareysey Keyf in laga bilaabo maanta ay Sahan noqotey mataantii qalbigiisa loona baahanyahey inuu u ilaashado una dhowrto sidii ukunta oo kale. Taasina xabadka ayuu u garaacdey Sugule oo farxadu wada saaqdey, maadaama mataantii qalbigiisa noqotey midii uu ubukey maankiisana fasax la'aanta dagtey uu marxaba mowle kasoo yeersiiyey, Waxeyna Keyf barasho cusub isbartey Sugule iyo Sahan, sheekadoodii kalgacalka xambaarsaneydna albaabada u furtey, waxeyna Sahan ka qaaday lacagtii adeega, iyadoo u sheegtey iney maanta iyada soo wada adeegeyso. Sahanna faraqa ayey ugu shubtey lacagtii misna u kala dhig dhigtey wixii loo baahnaa oo adeeg ah, waxeyna Keyf isaga dhex baxdey lamaanihii jaceylkooda ugubka ahaa oo ay u bilaabantey sheeko aad u xiiso iyo xamaasad badan.

Waxaana badi hadalka hogaanka u hayey Sugule oo is fur furey juuq la'aantiina ka xuub siibtey, Sahanna hooriska ayey heysey, hayadana waa u raacineysay.

Wuxuuna Sugule kula hadlayey Sahan eray walbo oo uu islahaa wuu ugu macaanyahay, uguna fiicanyahay mucaashaqiintaana isku adeegsato. Sahan qudheeda kama liidan oo dhankeeda ayey erayadaa mac macaan ka dhiibaneysey, oo waxba leyskulama harin oo xabiibi iyo xayaatiga goobtaa ka dhaceysey haddii aad maqli laheyd xaadaa ku istaagi laheyd. Ha xuroobo jaceylkana waad oran laheyd, si kastoo aad u calool adag tahey, waxaana erayadii macaanta badnaa ee leys weydaarsanayey ka mid ahaa. Sugule oo lahaa, Macaaney gacaliso marti waa lasooraa magan waa la baxshaa ruux maqana waa lasaadaalshaa eraygii macaane waa loo mashxaradaa mahuraan caashaqoon cidi meyri karin baan macaan Sahan ey maanka kugu hayaa ee midigta iguqabo aanu meel wacaniyo reys iyo magoolleh dunidan ka milicsanee.

Sagal baa qudheeda ka yareysan oo erayo aysan waligeed is oran wey kaa soo bixi karaan baa kasoo burqadey cishqiguna durbaba barey, waxaana kamid ahaa erayadeedii macaanida badnaa oo aan malabka xitaa lagu doorsaneyn. Dhaguhu wey maqsuudeen oo maqleen arinkee jaceyl laabta meyraad ku masheysey qakbigee mowlaa mahada lehe macaanow sugulow midigta waa iga tane abid caashaqa ha igu madiyeen.

Markaa iyada ahna gacanteeda midig bey dhex gelineysey gacantiisa midig, waa la isku baroortey oo la isku duubmey oo marba dhan la isugula liic liicey. Iyadoo macaanta iyo macaanka meeshu ka maqneyn. macdana leysku hayo oo dhabanadii lagu meyrey Ilmo Laab hoose ka soo maaxeeysa. iyagoo xaaladaa aan la heli karin ku sugan baa waxaa soo caga

dhigatey Keyf oo adeegii sida, waxeyna usoo gashey lamaanihii oo indhahoodii oohin darteed casaadeen.

Waxeyna si kaftan ah ugu ridey, haa haa waxaasaa jaceyjl lagaa dhahaa, iyadoo kula dar daarantey erayada qiimaha badan Gud Guduhu Hilaac bixi abidkiin Gu' iyo deyrba Gacaltooyo laasima Guga xigana Guur wacan baan Guule idinka Tuugaa, Aamiin Aamiin baa loo hooriyey waxana laga wada dhunkaday labada dhaban, iyadoo looga mahadcelinayo wanaageeda aan lasoo koobi karin, Waxeyna in xoogaa ah meeshii ku galeen kaftan iyo sheeko goos goos ah, oo aan arimaha Jaceylka ka fogeyn, iyadoo dabadeedna Sahan u xeedatey sidii ay ugu kici timi laheyd hoygoodii ay saakey kasoo tagtey iyadoo kali ah. Haddana ay ku laabaneyso iyadoo laabta ruux kale ku sidato, waxaana lagu balamey aroorta bari ah in sheekada halkeeda laga sii daba liso oo liishaanta kalgacalka la isu dhii dhiibo.

Wixii maalintaa iyada ah ka dambeeyeyna waxaa lamaanihii ku sii siyaadayey kalgaceylka ay isku qabaan, oo kaaley arag kalsoonidooda sida ay samadaa isugu shareertey, balanta birta ah & axdiga lagama baxaanka ah ee lawada xirtey, iyo ha iga dhicin ha iga dheeraan ha iga dhuuman hana iga dhimanta u socoto, Maaha mid lasoo koobi karo qofna looga sheekeyn karo, waxaase dha dhamin karo oo dareemi karo ruux kasta oo mucaashaq dhab ah kalgaceylna soo dhex jibaaxay, iyadoo ay xaaladoodu halkaa heerka sareeyo mareyso bey haddana qalinka wada jir ugu duugeen in geedkii ay mudada beerayeen ee ay mirihiisu bislaadeen.

Udgoonka iyo macaantiisuna meel dheer laga dareemayo, waqtigiisii lagaarey, loona baahanyahey in wada jir afka la isugu gal galiyo, waxaana marxaba loo wada riyaaqsanyahey

oo maanka qalbiga iyo maskaxdaba ku diirsanayaan madaxa leyskula ruxey in Sugule usoo xero galo Sahan Reerkooda kana soo doonto. Wuxuuna Sugule arintii durbaba gaarsiiyey waalidiintiisii oo si aad ah usoo dhaweeyey arintaa iyada ah una riyaaqey, oo waxeyba waligood ku duceysan jireen in Sahan oo kale wiilkoodu calad ugu daro waxeyna aqoon buuxdo u leeyihiin Sahan oo ay yaqaanaan dadnimadeeda iyo dabeecadeeda suuban ee Soomaalinimadu u dheertahay.

Wuxuuna Odey Rooble oo ahaa Sugule Aabihii wiilkiisa ugu bishaareeyey in maalinta bari ahba ay arintaa u howlgalayaan isaga iyo odoyaal kale oo qaraabada ah, wuxuuna hambalyo sii yiri wiilkiisa, isagoo u muujinayey kalsoonida uu ku qabo reer Dhangaag oo ay mudo daris ahaayeen iskuna dheeraayeen, Wuxuuna habeenkaa isaga ah Sugule ku gam'ay reyn reyn iyo farxad aan la qiyaasi karin, waxaase la qabtey oo uu warkaa gaarey dha dhanka macaan gacalisadiisa Sahan, oo dhankeeda damaashaad iyo farxad kaga dakeyneysay, min dharareysay intuu waaga ka baryayo.

Markii uu waagii xuub dhacsadey ileyskii cad ceeduna soo muuqday buu odey Rooble bilaabey inuu sii diyaarsado duqeydii galabta raaci laheyd gabadhana la dooni laheyd , wuxuuna goor horeetaba lasoo balamey 4 odey oo ay qaraabo ahaayeen odayaasha xaafada CALANLEY laga qadariyana kamid ahaa. Sidii ay balantu aheydba waxaa la isa soo wada xaadiriyey 3dii galabnimo Xiliga magaalada Kismaayo, waxaana lagu casiriyeystey gurigii odey rooble, iyadoo markii ay gooreysatadu is dul taagtey 4tii galabnimana lawada abaarey hoygii reer Dhangaag oo aan sidaa uga fogeyn, Waxaana albaabkii reerka garaacey Odey Diiriye oo ahaa odeyga ugu da'weynaa oo odayaasha hor kacayey, waxaana ka furtey oo ay dhaguhu u Taagnaayeen shanqar kastana la

socotey gabadhii Sahan aheyd oo sugi la'ayd inta odayaashu ka imaanayaan.

Si diiran ayey usoo dhaweysey waxeyna usii gudbisey qolkii fadhiga ahaa oo uu markaasi Aabaheed xaadir ku ahaa, odey Dhangaag oo sugayey laguna soo wargaliyey booqashada odayaashan baa isna dhankiisa si heer sareysa u soo dhaweeyey, gabadhiina Sahan aheydna farey iney soo diyaariso wixii ay odayaashan sharafta lihi ku casiriyeysan lahaayeen. Waxeyna daqiiqado dabadeed Sahan oo horey wax ugu diyaar ahaayeen soo dhoobtey buskud, xalwo, shushumow, icun, iyo mac macaan kale oo ay la socdaan qaxwadii, shaahi iyo caanihiiba, waxeyna odayaashii is bariidin dabadeed galeen sheekooyin goos goos ah, iyo iska xog wareysi xaalada guud. Iyagoo marna koobka fiiqsanayo marna mac macaanka afka ku hayo, markii ay in cabaar ah sheekadii socotey, buu odey Buule oo kamid ahaa odayaasha soo xero galay furey hadalkii isagoo ka hadlaya ujeedka socodkooda.

Wuxuuna yiri "Odey Dhangaagow waxaan maanta kuugu soconey arin ahmiyadeeda leh oo hadana adiga naga kaa soo gashey waana arin nawada anfaceyso hadii ay noo suurowdo Inshaa'allaah, Odey Dhangaag oo aan fahmin wali ujeedka odeygu uu kawado erayadii kasoo yeerey baa yiri wixii wanaag ah ee odayadan sharafta lihi wadaan waa lagu qasbanyahey in wax laga qabto koleyna wixii aad anfac iyo wanaag u aragteen aniguna waa inaan u arkaa ee ii bayaaniya hadalka'. Odey Mooge oo markiisa hadalka qaadanaayo kana mid ahaa odayaasha soo xero galay ayaa yiri "Wax kale maahan ee waxaan kaaga soo gogol fadhiisaney kuuguna soo xero galney inaad nasiiso gabadhaada Sahan oo aan u soo doonay ina Rooble".

Odey Dhangaag oo aan fileyn warkan odeyga kasoo yeerey xaajadana maanta oo dhan meel kale ka filayey baa yiri" Run ahaantii arintaasi wax xun maahan waana arin wanaagsan sida aad xusteen, waxaana wanaagu ku jiraa in darafyada kale ee muhiimka ah oo ay gabadha ugu horeyso, hooyadeedna wehliso wax laga weydiiyo.

Maxaa yeeley waxey gabdhu raali ka aheyn laguma qasbi karo oo guryo badan baa horey ugu dumey ee waa inaan u yeeraa gabadha iyo hooyadeed, waxna ka weydiiyaa arintan. Odayadii oo aanan wax saa u buuran u arag waxa odeyga kasoo yeerey walow aysan ka fileynin baa waa sax lasoo boodey, iyagoo markaasi kalsooni ku qabey gabadha oo arinta wax ka ogeyd waxna ka wadey, Wuxuuna odeygii Dhangaag ahaa u yeerey habartii Bulxan aheyd iyo Sahan oo markiiba isa soo xaadiriyey habarta oo shoog weyni ku furnaa baa tiri haye odayaasheena waad salaamantihiin" salaantii baa si wada jir ah looga qaadey, Waxaana hadalkii qabsadey odeygii reerka oo yiri haye aabe Sahan waxey odayaashan u soo xero galeen waa adiga, waxeyna kuu soo dooneen ina Rooble ee ka waran." ?.

Sahan baa markiiba muujisey Astaamihii lagu yiqiin gabar lasoo doonto raalina ka ah cida soo doonatay, waxeyna muujisey xishood gabarnimo iyo aamusnaan iyo haye hoosaad ah madaxana ay la ruxeyso iyadoo dhoolacadeyneyso, Habartii buu ku jeestey kamase sugin hadalkee waxey lasoo boodey "Gabadhu wali magaarin heer ay maa musho reer oo waxbaa uga dhiman oo anaa hooyadeed ah idinkana aqaan, teeda kalena wiilka waa wiil ay wali wax barasho u socoto oo aan isna xitaa awoodin inuu reer madax u noqdo. Marka ilmaha waxeysan kasoo bixi karin yaan la gilinin, oo intaad isleedihiin wax dhisa wax ha bur burinina, gabadhuna wey idiin joogtaa,

wiilka hasoo dhameysto wax barashadiisa ha noqdo mid reer dhaqan kara. Maxaa yeelay gabadheyda kuma aamini karo wiil yar oo aan waxba gacan ku heyn oo raba in reerkiisa ay canjeerada la cunto, marka aniga waxaan qabaa in aan arintaan dib u dhigano oo aanan ku dag dagin'.

Odeygii Dhangaag ahaa oo aad ugu riyaaqey hadalada macquulka ah ee kasoo yeerey afadiisa baa yiri" waa sax waa arin macquul ah Caqli galna ah, marka waxaa anigu xitaa qabaa in arintaan dib aan u dhigano ilaa ilmuhu ay noogu muuqan doonaan kuwo reer dhaqankara "

Odayadii kale oo aan arintaa ku qanacsaneyn baa isku dayey iney si kale wax uga dhaa dhiciyaan reerka ay usoo xero galeen, iyagoo balan qaadayo iney iyagu reerka ay dhisayaan isku heyn doonaan. Inkastuu odey Dhangaag soo yara dabcey haddana tii habar Bulxan aheyd baa meel laga maro la waayey oo jid walbaa xiratey arinkastana cudur daar iyo ceebaal u yeeshey, Waxaana goobtii ka tagey odayadii oo gabadhii si dadban loogu diidey oo aan maqsuud aheyn, waxeyna intii ay wadada sii socdeen ka hadlayeen odeygan habartu ka hadal badantahey hogaankana u heyso. Qaarbaa lahaa oo habartu ma dheel dheel baad moodaan sow tan wadda walba naga goysey oo aan iska dhicin weynay, Ma Dhangaag bey u daaheysaa, Illaah tanoo kale calaf nooguma daro.

Mid kalaa yiri ma dumar baan la garowtami karnaa mise nagu caqli ah, odayadii oo sidii u doodayo baa tagey gurigii odey rooble oo laga sugayey, Sugulane uu sidii uu meherkiisa markaas dhacayo isaga daba noq noqonayey guriga dhexdiisa oo salkaba dhulka waa la heli waayey, Markii Odayaashii ay soo galeenba waxaa ku soo yaacey habartii Rooda aheyd, gabadhii Keyf aheyd, iyo sugulihii qudhiisa oo wada leh war

qeyr qaba sheega, odey rooble oo aad u careysan baa lasoo boodey "Intuu qeyr yaalaa waxaa noo dirteen reer habar u taliso. Wuxuuna wiilkiisii ku yiri Sugule gabadhaa waa laguu soo diidey ee mid kale oo kuu diyaar ah habarna gurigooda ka talinin iila imow anigaa kuu doonayee.

Wiilkii Sugule ahaa oo aad u qaracmey , dhulkiina uu la wareegayo baa aabihii hadal ku soo celin, maxaa yeelay wuxuu arkey in odeygu aad careysan yahey, Reerkii intiisa kale baa anfariir ku dhacey, habar baastana Bulxana wey ogaayeen balaayadeeda kumana xisaabtameynin iney aduunkii wanaagsanaa sidan fudud ku qaribi karto, Odayadii baa cabaar meeshii ku sheekeystey salaadii maqribna ku dukadey dabadeedna ku kala tagey, odey rooble oo wali careysan baa sartiirtiisii isku tuurey, Waxaana habeenkaa reerka ku furmey arin murugo ku abuurtey, jawigii farxada badnaa ee xalay lagu kala seexdayna caawa wuxuu isku badalay mid murugo iyo ciil uu qofba bustahiisa la hoos galo.

Dhanka kale markii ay odayaashii soo tageen waxey habartii cay iyo canaanba isugu dartey gabadhii Sahan aheyd iyadoo leh" haa hadaad qooqdey maahoo oo aad niman noo soo shirineysaa, Waliba isoo doonta leedahey, ma waxaad noo keeni nin wali reerkiisa canjeerida ka cunayo oo wali leh hooyo boqol gaari raac keen iyo aabe 50 shaah cabaal keen, Wallee waxaad soo wado iyo wabiga yaa weyn, wixii cay iyo canaan ahaa habartii uma yareysan Sahan oo ku dur durisay, odeygii Dhangaag ahaana wuxuu u riyaaqsanaa habarta mowqifkeeda oo gabadha lama rabin reer rooble oo dad liita ayuu u arkayey nasab ahaana kuma qanacsaneyn.

Gabadhii oo Oohinta ka socoto aad yaabeyso, aduun murugo iyo ciil intii jirteyna dusha loo wada saaray markaliya baa

qolkeedii isku soo xirtey. Iyadoo sida ay u fiqleyneyso aad yaabeyso, habartiina iyadoo odeygeeda kool koolineyso hadal macaana kula hadleyso bey inta dhexda qabsatey la abaartey qolkoodii jiifka.

Habeenkaa isaga ah ma jirin habeen uga murugo badnaa mucaashiqiinta oo geedkii ay mudada beerayeen oo u bislaadey iney cunaana isku diyaariyeen baa dab laga qabadsiiyey lagana baa bi' iyey, cid labadooduba indho isa saartey majirin oo fikir iyo walaac baa habeenkaa marti loo wada noqdey, Waagii oo korkooda ku dilaacey beyna ka war heleen iyo iftiinkii cad ceeda oo daaqadaha shabaqooda soo dhex jiirayo, waxeyna habartii baas go'aansatey iney gabadha dib dambe uga bixin guriga, maxbuusna ka dhigto si ay wiilka Sugule ah oo ay is doonayaan isku arag.

Arintan ay banadeyna dib dambe uga wada hadlin, waxeyna fulisey go'aankeeda oo cid ka hor isaagi karto majirin, iyadoo isla aroortii keensatey haweeney jaariyad ah ama shaqaale oo guriga uga adeegta suuqana wixii looga baahdo looga dirsado, Habar maano oo aheyd haweeneyda shaqaala ahaanta loo keensadey baa howshii guriga si fir fircooni ku dheehantahey uga soo baxdey, muujiseyna iney tahey qof kasoo bixi karta waajibkeeda, waxeyna cadeysay iney u dhago nugu shahay dhawaqa lagu adeejinayo.

Miskiintii Sahan aheyd ee guriga xabsiga looga dhigay waxey iyadiina isku sii maxbuustey qolkeedii marugo iyo ciilna kaligeed kula ciir ciireysey, qof ay ka sugeysay garabna ma jirin, kalgaceylkiina waa kusii laba kacleeyey heer aan laga sheekeyn karina wuu la gaarey. Kii Sugule ahaa baan ka yareysan oo isagiina dhankiisa ayuu guriga xabsi isaga dhigey oo banaankii

iska mamnuucey, wal wal iyo maxey noqon doontaana ku kali noqdey.

Si uu gabadhii Sahan aheydna kula kulmo garan waayey, oo talaa dhan waliba iska xirtey, jiho iyo jaahna waa beeshay, jaceylkiina waa kusii jibaaxiyey. Sahan xaalada xanuunka badan ee ay ku sugantahey, waxaa u adkeysan weydey Maano oo bilowdey iney la sheekeysato, waxna weydiiso arimaha heysta, Sahanna waxba kama qarsanine wixii jirey bey faraqa ugu shubtey.

Habartii Maano aheyd oo aad uga xumaatey rafaadka la badey gabadha baa xabadka ugaraacatey iney ukala dabqaadi doonto iyada iyo gacaliyaheeda Sugule, Arintaasina aad ayey ugu riyaaqdey Sahan, waxeyna u arkeysey guul weyn oo usoo hoyatey iyo iney heshay garab ay ku tiirsato maadaama ay u suurto galeyso iney xiriiraan gacaliyaheedii lakala xanibey xubigoodana xayiraada adag lagu soo rogay. Waxeyna Maama Maano u tilmaantey hoygii reer Rooble, iyadoo magaca Keyfna sii siisey fariin gaabana u fartey, habartii lama hakanine waxey durba is hor taagtey albaabkii reer Rooble.

Iyadoo leh Keyf Aaway, Sugule oo markaa albaabka ka furey baa markiiba Keyf ugu yeerey islaanta markii ay Keyf u timidna waxey ku gurtey wixii la soo farey, Waxeyna u sheegetay kaarto ama qorsho ay isla soo dajiyeen iyada iyo Sahan oo ah in 12-ka habeenimo marku saantu dagto dadkuna wada seexdaan uu Sugule isa soo taago dariishada ama daaqada geeska koonfureed ee guriga si ay u wada sheekeystaan isaga iyo gacalisadiisa la kala qariyey. Keyf oo arintaa aad ugu faraxday misna u riyaaqday baa durba u yeertey Walaalkeed Sugule warkii farxada lahaana ugu bishaareysay.

Isagiina aad iyo aad ugu farxey intii naf wax jecel oo naftey jecleyd lakala qariyey misna dib u heshay u farxi karto, wuxuuna sii farey habartii Maano aheyd fariin yar oo hor dhac ah heerka xiisahiisana xambaarsan, Waxaana maalintaa labada dhinacba la dhara rayey ama la sugi la'aa inta uu gabalku ka dhacayo 12-kii habeenimana laga gaarayo, waxeyna qof waliba la noqotey maalintii ugu dheereed ee soo marta nolasheeda xiisaha la isu qabo ayaana xoogiisu badnaa oo uu qof waliba xajin la'aa.

Waxey saacadii isa sii riixdo midba tii ku xigtey kusii xil wareejiso baa lasoo gaarey waqtigii la balamey dariishadii iyada aheydna la iska soo wada xaadiriyey, ileen xiisaa la isku qabaye dhunkasho gunta hoose kasoo go'day la isku boobey, Iyadoo birihii daaqadana maxda meel yar oo uusan kasoo wada bixi karin lagu qasbayo xanuunka wajiga biraha u geysanaayana aanba la dareemeynin, Waxaana Marna madaxa lala galayey mid kamid ah biraha daaqada yaase xanuunkooda dareemayo, waxaana u bilaabantey sheeko aad u xiiso badan oo sidii loogu tala galey la isugu laba lisey, si xikmadeysana looga hadlay wixii umuurtooda ku saabsan.

Saa kalsooni xoog badan baa labada dhan ka dhex jirto, oo shaki hore majirin ee see lagu kulmaa baa jirtey caawana la kulmay oo xaalku waa uu dhaamey sidii hore, Sidii ay sheekadii xiisaha iyo xamaasada badneyd ugu socotey baa misaajidadii Magaalada Kismaayo laga shan qariyey Aadaankii salaada subax, iyagu lama aheyn ineyba daqiiqad isla joogeen oo wada hadlayeen. Wali xiisihii baa jira oo in sheekada lasii wado ayaa la doonayaa, umase suuroobeyso oo waa xiligii uu odey Dhangaag salaada subax u toosi lahaa macsalaamo iyo waa inoo caawa baa lagu kala tagey iyadoo indhaha la isla raacayo inta laga kala mirqayo.

Wixii habeenkaa isaga ah ka dambeeyeyna waxaa lamaanihii badweynta kalgacalka isla dhex jibaaxayey u suuro gashey iney sheekadooda isaga laba lisaan daaqadaa iyada ah. Geedkoodii dabka la qabadsiiyeyna aan ka caajisin seken oo kalsooni kalgaceyl iyo karti beyba ka qaadeen oo uma jixin jixin wixii dhacey, waxeyna Maano ka qaadatey door aan la ilaabi karin xiriirka wacan ee mucaashiqiintan la caqabadeynayo.

Dhinaca kale habartii Bulxan aheyd waxey maalmahan bilowdey sheeko cusub oo la yaab ku noqotey Sahan iyo intii kaleba taasoo ah iney kool kooliso madaxana u salaaxdo, Maxaa kuu mac maxaaa kuu qaraarna tiraahdo, odeyga ha joogo ama ha maqnaadee wey garan la'ayd Sahan waxa habartu damacsantahey weyse ka dharagsaneyd in habartu ujeedo leedahey oo aysan arintaani daacad ka aheyn, Waxeyse u deysey waayaha isagaa u qeexi doono xilligeeda, oo waqti iney isaga lumiso maskaxdeedana ku daaliso uma diyaar aheyn.

Habar Bulxana maaha wax ay arintan ka damacsantahey wax yar, oo waxey rabtaa iney gabadha ku darto Odey Ganacsade ahaa oo la yiraah Warfaa oo aan Aabaheed inuu ka weynyahay mooyee ka yareyn. Odeyguna wuxuu maal ku shubaa habarta oo xabadka u garaacatey iney usoo xero gilneyso gabadhan Sahan ah ee quruxdeediyo iney tahay qalanjadii qarniga la isla qirey, Wuxuuna Warfaa bilaabey inuu guriga yimaado oo uu Sahan hadiyado u keeno, Sahan isma laheyn odeygaan ku dhali kara ayaa ku damacsan ama ku damci karo xitaa.

Oo inta hadiyada qadarin waalidnimo darteed uga qaadato bey la ku dhihi jirtey waad mahad santahey Adeer Warfaa, inkastoo aysan ogeyn in odaygu gubeyso adeerka kasoo yeerayo iyada. Oo uu ka doonayo iney ka soo yeerto Aboowe Macaane Gacaliye yaase oran kara oo waa odey tin iyo

ganfuurba ciroobeen oo hadeysan Awoowe dhihin beyba asxaan u sameysey.

Iyadoo aan howshu halka habartu u wado fahmin baa maalin maalmaha kamid ah reerkii aadeen aroos ka dhacayey Degmada JAMAAME, oo waxaa guursanayey wiil ay habartu eedo u aheyd, marka arinta Bulxan xageedu tahayna waa loo wada guntadaa oo looma kala haro.

Odeygii Dhangaag ahaa habartii Bulaxn iyo gabadhii kinsi aheyd waa lawada aadey arooskaa, Sahan oo in cabaar ah la isku dayey in la wado baase ka cudur daaratey oo iska dhigtey qof xanuunsan, oo aan awoodin iney meel u dhaqaaqdo, sidii baana looga tagey gurigiina ay ugu hareen iyada iyo Ay Maano. Sahanse ma jirana meel xanuuneysana ma jirtee, waxey fulineysey balan ay isku ogaayeen gacaliyaheeda Sugule oo arinta safarka reerka way sii ogaayeen.

Wuxuuna qorshahooda ahaa in marka reerku baxo ay iyaguna dhankey aadeen maahee dhanka kale magaalada uga baxaan iskuna soo meher xadaan ama isku soo masaafeystaan. Waxaana arintaa la ogaa ay Maano iyo Keyf, sidii lagu balamey ayeyna arintii u dhacdey oo lamaanihii isa soo mehersadeen noqdeena Nin iyo Afadii qarsooniba ha iska ahaatee, gabal dhiciina waxaa soo caga dhigtey reerkii oo ugu yimid halkii ay Sahan uga tageen iyadii oo jiifta.

Waxeyna u sheegtey in madaxa si ba'an looga qabtey kaniiniyana isticmaashey haddana yara roontahey, waase wax kama jiraan oo beentii iyo bara bagaandadii yaraanteeda lagu soo koriyey. Dhibka badana lagu soo marsiiyey bey dhibeysaa

oo dhankeeda oo ka hurgufeysaa habartiina qaadsiisey kuna qancisay, Waa tii la dhihi Jirey Laga Bartaa Laga Badiyaa.

Si kastaba arintu ha ahaatee wixii maalintaa ka dambeeyey lamaanihii iyaga ahaa howshooda ayey wateen, wax wal wal ahna ma qabin, fursaddii la isku arkana lama beerdareyneyn oo waa laga faa iideysanayey, Oo kaalay arag halkuu gaarey xiisahooda xubigooda xabiibi xayaatiga la isla laba lasayo iyo sida nolasha dhankeeda ugu macaanta badan la isaga haqab tirayo, lama soo koobi karo lagamana sheekeyn karo, Markii ay maalintaa iyada aheyd kasoo wareegatey mudo labo bilood baa Sugule helay fursad jaamacadeed oo dibada ah, maadaama iskuulkii darajo sare ka soo keenay, uuna kamid noqdey 10-ka arday ee ugu horeysa hogaankana u heysa dhibcaha lagu baaso. Arrinta ah inuu jaamacad u aado dalka Jarmalka aad ayuu ugu farxey markii lagu soo wargiliyey, gadaal ayey hadana kala xumaatay oo is yiri yaa uga tageysaa gacalisadaada aad aadka u jecelshahey xilahaagana si hoose ku ah, arin adag ayey ku noqotey. Wuxuuna la tashi kala yeeshey walaashiis Keyf iyo gacalisadiisa Sahan waxeyna labaduba ku dhiiri galiyeen inuu wax u soo barto oo uusan beer dareynin fursadaan qaaliga ah ee aan sida fudud lagu helin.

Waxeyna xal ahaan usoo bandhigeen in arintooda qarsoodiga ah loo gudbiyo Aabihiis Rooble iyo hooyadii si hadii ay wax usoo baxaan ay ula duubnaadaan Sahan, maadaama wiilku meesha ka maqanyahey. Arrintiina sidii loogu talagalay ayey u fuliyeen odey Rooble iyo habar Roodana wey soo dhaweeyeen, xabadkana u garaacdeen wax alle iyo wixii soo kordha iney wax ka qaban doonaan.

Si walbana u wajihi doonaan, waxaana la isla meel dhigay in arintu qarsoodi sii ahaato oo aan hada buuq la isku furin,

maadaama Wiilku Safar yahay. Iyadoo go'aan ka lagaarey daraf walba ku qanacsanyahey baa wiilkii safaroo salaama la yiri una kicitimey dalka Jarmalka oo uu deeq wax barasho ka heley, in kasta oo labaduba aysan jecleen iney kala fogaadaan., Haddana waxaa la yiri" SIDAAD RABTO HADAAD WEYDO SIDAAD KA FURSANWEYDAA LA SAMEEYAA," oo sidaan ayey ka fursan waayeen duruufaha dantuna bidey.

Inkastoo aysan Sahan wax qorin waxna aqrin, haddana dhambaalada uu gacaliyaheeda usoo diro waxaa u aqrin jirtey ay Maano iyana wax uma qori jirine cajalad bey ugu taag taagsan jirtey wax walbana ugu gudbinjirtey Gacaliyaheeda oo joogto iyo si aan kala go' laheyn baa loo wada xiriiri jirey misna la isaga war hayey, Dhinaca kale habartii kool koolinta wadatey baa arinteedii lasoo ban baxdey banaankana keentay, oo Sahan si hooyonimo iyadoo ula hadleyso iskana dhigeyso iney aayatiinkeeda ka fakireyso bey isku deydey iney arinta Odeyga kala hadasho.

Sahanse miinka iyo Mayada ayey ka cuskatey odeygaa aabaheed oo kale ah, habartiina mar kale guntiga u xiratey ficiladeedii foosha xumaa ee ay gabadha kula kici jirtey, yaase u jixin jixay oo juuqba ka yiri misna wax kasoo qaaday, Habartii oo sidii uga careysan gabadha hadalkeedii diidey, odeygeedana kala baqeyso iney kala hortagto gabadhaada waxaan ku darayaa odeygan kaa weyn.

Baa talo ku cadaatey meel ay wax ka bilowdana garan weydey, odeygii ay xabadka usoo garaacatey oo ay qarashka xad dhaafka ah ka cunteyna jawaab buu ka dhowrayaa, aduunbaa habartii isaga dhex yaacey, talana waa ka jah wareertey, Iyadoo xaalkeedu sidaa marayo, Sahanna xiligii uu gacaliyaheeda

baxey ku dhawaad 3-bilood laga joogo, bey dareentey wax yaabo ku cusub oo ayan horey isugu arki jirin, mantag, laba labo joogta ah, madax wareer iyo wax yaalo kale oo aan halkan kusoo koobi karin.

Waxeyna arintii u sheegtey ay Maano oo ugu bishaareysey iney Uur leedahey calaamadaha ay sheegteyna ay dhamaantood yihiin calaamadihii Uurka lagu yaqiinay, Sahanse wiish baa ku yeerey oo meel ay wax ka bilowdo garan weydey, Falanqeyn dheer dabadeed oo ay xaajada marna dhan ka eegeen, waxey go'aamiyeen iyada iyo ay Maanaba iney maalinta bari ahba arintaa la socodsiiyaan reerka Sugule, sidii lagu balamay ayaana waagii markuu baryey la faley oo reer Rooble arintii lagula kalahyey. Iyaguna aad ayey ugu farxeen arintaa iyada ah, wuxuuna odey Rooble ka codsadey Sahan iney guriga u joogto, oo ay isaga iyo odayaal kale aadayaan reerkeeda, arintana kasoo dhaa dhiciyaan, taladaana hadal kama soo celin Sahan oo ok bey tiri. Odeygiina markiiba wuxuu raadsaday odayaal horey usii raaca isla subaxnimadiina waxey u tageen odeygii Dhangaag oo xaadir guriga ku ahaa, maadaama maalintu jimco tahey wax howl ahna aan badi daka la laheyn, maalin nasashana ay tahay.

Sidiiran ayuu Dhangaag odayadii u soo dhaweeyey, ay maanana shaahii bey goobta keentey, waxeyna odayaashii ka hadleen arintii ay ugu socdeen, iyagoo wax walba u faah faahiyey sheegeyna in ilmuhu qaldameen, iyaguna qaladanaayeen markii ay isku diidayeen, Haddana iyagii fushadeen arintooda markii leysku diiday, odayaashu waxey si dadban u dareensiinayeen in uu isaga qaldanaa Dhangaag natiijadeedana uu maanta heysto macaan iyo qaraar midkey u tahayba. Waxeyna intaa ugu dareen in gabadhu hadda guriga

ujoogto Uurna u leedahey, wixii xaal iyo xumeyn ahaana la diyaar yihiin oo aysan xeerka somalida dhinac mareyn.

Odeygii oo aad uga xanuunsadey khabarka ah gabadhaa noo diidey Uur bey nooleedahey inagaana kaa qabno, baa yiri ma xuma waana wax dhici jirey, waxaana waajib ah inaan arintaasi saxno, marka waad mahadsantihiin waxna iskuma diidanin ee gabadha iisoo dira aan iyadana wareystee".

Odayadii oo wanaag u arkey hadalada odeyga baa ok yiri, halkiina ku gacan qaadey, wixii Xaal ahaa ay ku soo talagaleena ka codsadey Dhangaag in galabta loo dhigo fursadna loo siiyo inuu gabadhiisa xogta ka ogaado, Odayadii oo si wacan u gacanqaadey baa goobtii ka tagey oo waa inoo galabtana ku yiri, iyagoo u sheegey in gabadha hadda u imaan doonto wixii dhacayna dhankeeda uga sharaxi doonto. Markii ay ku laabteen hoygii laga sugayey dhaguhuna ka wada taagnaa bey ugu bishaareeyeen in wax waliba ok yihiin, wanaagna ay ku dhamaanayaan, Waxeyna gabadhii Sahan aheyd fareen in ay Aabaheed u tagto oo iyana u soo waranto, odeyguna uusan wax yeeleynin oo uu caadi yahey, iyagana ay soo dajiyeen waxna kasoo dhaa dhiciyeen.

Gabadhii oo aan dhag laqabto laheyn baa gurigoodii soo abaartey, waxeyna iyadoo ordeyso dalaq soo tiri qolkii uu odeygu ku jirey, iyadoo albaabka guriga oo furnaa xuf kusoo gudubtey, Waxeyna hoos fadhiisatey Aabaheed oo ay markaasi shideysey habartii baastii Bulxan aheyd balaayoo idilna dhagaha uga buuxineysay, Odeyga markii ay gabadha jilbaha Aabaheed dhunkootey oo tiri Aabow i cafi inta uusan hadlin bey habartii lasoo boodey naa abkeen iyo isirkeen oo aan waligood wacal qaadin baad sharaftooda iyo karaamadooda ka qaadey oo wecelo xambaaro ka dhigtey

markaasaa leedahey aabow i cafi maxaa lagaa cafiyaa maxaase laguu cafiyaa.

Odeygii oo uu dhiig karkii uu qabey ku kacey caro darteedna jareynayo baa yiri Bulxan naga dhex bax aniga iyo gabadheyda albaabkana jug noo sii sii, habartii baa durba istaagtey oo sidii la farey fashey, iyadoo warna ku soo celin Odeygeeda.

Sahan oo cod karnimada Aabaheed maanta u riyaaqsan habartii iyada un hadli jirteyna amar kii la siiyey qaadatey, baa Aabo macaane I cafidii sii wadatey, Alla yaase xaqiiqada iyo wuxuu odeygu damacsanyahey ogeysiiya. Miskiinta Sahan aheyd odeygii oo aan la hadlin baa inta kacey albaabkii sakatuuro ku soo hubsadey bakooradiisiina dhab soo yiri ku bilaabey Sahan oo dhulka fadhido, Isagoo u aan meel dayeen sidii lagu yaqiinay oo intaa madax ah, intaa majo ah, intaa calool ah, laheyn buu bugta ka surey, qolkiina cabaad iyo qeylo markaliya is qabsatay.

Sidii uu u tumayey oo meel walba dhiigeeda uga soo burqanayey buu isagoo afka ka xumbenayo ku dul dhacey gabadhii oo dhiig baxeysa, labadoodii oo meesha yaal baa dariskii oo maantoo dhami albaabka ku garaacayey kusoo jibiyeen albaabkii, Waxaana durba labadoodii oo meesha sidii meyd kala yaala loola cararey isbitaalka, nasiibdarase intii wadada lasii socdey oo uu gaarigii sii gab gab lahaa bey odeygii Dhangaag ahaa naftu ka baxdey oo tii alle u timid ifkana ka hijrooday isagoo indhihiisu oo caro ka muuqdaan u qaloocaan dhankii Sahan.

Loomase hakanine gaarigii oo baroorta dhexdiisa ka baxeyso aad yaabeyso baa isbitaalkii la tagey oo gabadhii oo sakaraad ah la dhigey, si aad ah ayaana loola tacaaley Sahan oo ilmihii ku dhex bur burey laga soo xaaqay. Iyadiina si wanaagsan

loogu dadaaley, dhowr saacadood markii ay suuxsaneed bey soo naaxdey, oo caloosheedii sal salaaxdey, waxaase looga naxsaday in ilmihii ku dhex dhinteen oo laga soo xaaqey, Waxey weydiisey Aabaheed waxaa iyana loo sheegey inuu dhex ku soo dhintey, mar qura ayey maskaxdeedii is rogtey misna miir beeshay waawna tiri.

Oo bilowdey iney iska siib siibto faleebooyin ku surnaa, bood bood iyo dad indho fara ka galina bilowdey, waxaana kusoo cararey kalkaaliyayaashii iyo dhaqaatiirtii Isbitaalka oo isku dayey iney dajiyaan, Waxeyna markiiba dureen cirbad, si loogu maaro helo. Dhanka kale Odeygii geeridiisa ayaa meel waliba gaartey habar baastiina ehel iyo qaraabo wixii Sahan xigsan lahaaba balaayo iyo baas u dhoob dhoobtey, Kana dhaadhicisay iney magaca reerka ku dheeshay oo ay wacal xambaar noqotey, odeygiina geeridiisa u sabab noqotey oo ka fiijisey dadkii oo dhan Sahan, Waxaana la galey dadaal aan loo kala harin oo odeygii lagu soo aasayo, waxaana xigtey tacsi heerkeedu sareeyo oo loo dhigey maalmana socotey.

Maadaama uu Odeygu ahaa Nabad doonka beesha, meelo badana looga yimid oo safaro dhaa dheer iyo kuwo gaa gaabanba loosoo galay. Habartu kamaba qasna oo waxey durba bilowdey kuna mashquushay sidii ay u maareyn laheyd hantidan uu odeygu uga dhintey, oo cid ku heysataana jirin, oo kaalay arag sida ay u mushaaxeyso maba moodid Islaan Asaay sida oo Odeygeeda mar dhow ka geeriyooday.

Dhinaca kale miskiintii Sahan aheyd wax booqda waxaa laga arkaa oo kaliya reer Rooble iyo ay Maana, waxaana maalmo dabadeed la xaqiijiyey iney waalatey oo xaaladeedu uusan isbitaalku wax ka qaban karin maadaama waali aad u daran Sahan waalatey, Waxaana si deg deg ah loogu gudbiyey maana

koobiyo, ama xarunta ugu weyn ee lagu xanaaneeyo dadka waal waalan, waxaana si gaar ahaaneed loogu sii gudbiyey meelaha dadka daran loogu tala galey oo aan la booqan karin.

Waxaana Sahan u bilaabatey nolol aan la sifeyn karin, lagana sheekeyn karin oo aad u xun una xanuun badan una xakaar badan cid soo booqan karteyna majirin, Waxeyna taa keentey in Keyf iyo reerkooda oo idil ay sidii hore uga war heyn waayaan Sahan, aqbaarteedana loo gudbin waayo gacaliyaheedii Sugule maadaama booqashadiiba loo diidey oo meel aan loogu tagi karin la galiyey laguna karantiilay. Wuxuuna ku sigtey Sugule inuu dalka ku soo laabto, wax barashadiisiina soo af jaro, taasina waxey ku kaliftey reer Rooble iney been u gudbiyaan oo xaalad aan jirin uga sheegaan Sahanta uu ifka ugu jecelyahey, Si wiilkooda uusan dalka ugu soo laaban, waxeyna u sheegi jireen in Sahan aad uga soo reyneyso iyagoo aan waxba ka ogeyn xaalkeeda.

Dhanka kale habartii Bulxan aheyd waxey noqotey madax laga dambeeyo, oo waxey la wareegtey dhamaan hantidii odeyga uga dhintey oo kaalay arag baqaarada iyo gawaarida xamuulka ee hoos tagey oo ay lacagta ka guraneyso, Waxeyna is tiri aduun haduu isugu kaa toosey oo wax kuu dhiman malaha, oo kaaley arag sida ay u tamashleyneyso kibirka iyo islaweenida ka muuqata iyo sida uu ugu taaganyahey sanka. Iyadoo uu xaalkeedii sidaa marayo baa waxaa magaaladii KISMAAYO si xoogan usoo gaarey dagaaladii sokeeye ee wadanka oo idil ka qarxey.

Waxaana magaaladii ka dhacdey boob iyo bililiqo xoogan, dadkii magaalada daganaana waxaa ku dhacdey naftaada la baxso, oo meeshii aad ku bad baadin karto ula Qax.Waxeyna habarta iyo gabadheeda ka mid ahaayeen dad farabadan oo u

cararey xagaa iyo dalka KENYA, waxeyna horey usii qaadatey xoogaa sanuud ah, waxaase looga sii dhacey intii ay wadada ku sii jireen oo ma calfan.

Waxeyna ka mid noqdeen dad fara badan oo Soomaaliyeed oo iyagoo ka cararaya dagaalada sokeeye galay gudaha dalka KENYA, iyagoon wax wadan, halkaana ay dowladii wadankaa ka jirtey iyo hey' adihii gar gaarkuba u gacan fidiyeen.

Dhanka kale miskiintii Sahan aheyd waxey ka mid noqotey dad aan yareyn oo waalan oo magaaladii Kismaayo ku soo yaacey kana soo baxsaday xarumihii lagu xanaaneyn jirey, maadaama dadkii xanaaneyn jirey ay ka qaxeen meesha duur iyo darbi jiifna noqdey. Maxaa yeelay eheladoodii meesha waa ka qaxeen, inkastoo aysanba Sahan laheyn reer ay dugsato oo aan ka aheyn reer Rooble oo iyagaba magaalada goor hore isaga qaxay. Waxeyna Sahan oo aanan ehelba markii hore sugeynin misna dharkii tuuratey jawaan yarna hoos ku xiratey qashinka ka gurbineysey wadooyinka magaalada Kismaayo, waxeyna hoyaneysey meeshii ay markaasi wadada kaga sugantahey.

Waxey banaanka soo dhigtey jirkeedii bilicda quxoonaa haba ugu muuqdaane horaadadeedii indhaha soo jiidanayey, walow ay xirneyd jawaan yar. Inkastoo haweenka magaalada inta ku hartey oo aan wali ka qaxin marki ay arkaan u xirayeen calalo, haddana wey iska tuuri jirtey oo jawaanka ay wadato ayaa la haboonaa oo ay ku qanacsaneyd, Waxeyna intii magaalada ku hartey oo ina Rag ahaa, indhaha la wada raacayeen qalanjadaan quruxda badan ee qaawan, misna qofkii jirkeeda meel un ka arkaa uusan kasii jeesan karin.

Waxeyna taa keentey ragu waa damac badan yahay qaarkoodna damiir la'i u dheertahaye in loo dhuunto

miskiintii Sahan aheyd oo aan loo kala harin ragii damiirka la'aa duqow iyo dhalinyaraba, Oo kaalay arag odayaasha iyo dhalinyarada is daba yaaceyso habeenkii oo marba mid geed la hoos galayo miskiintaan Sahan ah oo aan miirkeedu joogin ee ka xaajo gudanayo.

Sidey doonaana ka yeelanayo, wax laga sheekeyn karo xumaanteeda ma aha runtii waxaana dhihi karaa waa damiir la'i tii u xumeyd oo damanaani lagu daray. Nasiib darana ma jirin cid u naxdo oo damiir leh oo miskiintaa wax u qabato, reer Rooblana waxey ka mid ahaayeen dadkii naftooda ula cararey xagaa iyo dalka KEENYA.

Iyadoo uu miskiintii Sahan aheyd xaalkeedu sidaa marayo, baa waxaa magaaladii soo gashey ay Maano oo intuusan dagaalka soo gaarin Magaalada KISMAAYO u guurtey Magaalada BEYDHABO, waxeyna u timid si ay u qaadato xoogaa alaabo ahaa oo meel u yiiley, Habar Maano oo ka war heysay Sahan oo miir la' misna waalatay kuna xareysneyd Qaybta Dhimirka ayaa nasiib wanaag maalintii ay soo gashay Magaalada waxey si lama filaan ah kula kulantay wadada miskiintii Sahan aheyd oo dhar la' oo jidadka wareegeyso, aad beyna uga naxday ugana xumaatay.

Markiiba masii sugine inta nin ay wada socdeen Caawinaad ka codsatey bey gabadhii qabteen gurigii ay u socdeena geeyeen, inta dhar u xirtey bey maalintii xigtayba lasoo abaartey xaga magaalada BEYDHABA, oo ay daganeyd markan maama Maano, Waxeyna Maamada oo dadaal intii ay kartay aan marna ka hagraneynin Sahan ku bilowdey daawo Somali iyo quraan, si aad ah ayeyna ugu dadaashey oo wixii ay kartey ayey u qabatey.

Waxuuna dadaalkii dheeraa ee ay Maano wadey keeney in Sahan maalinba tan xigta kasoo reyso, sidii horena soo dhaanto, oo xaaladeedii quusta laga joogay, rajo kasoo iftiinto, Waxaase nasiib daro kasoo reyntaa iyo ifafaaladaa caafimaad ee Sahan daba socdey Uur isna soo korayey maalinba tan xigto, waxeyna cajaa' ibtu aheyd iyadoon la aqoon Aabaha canugan cida uu yahay xiliga ay kulmeen.

Xitaa ma jirin cid si gaar ahaaneed loogu tuhmi karey in uu Uureeyey Sahan, wax lasameyn kareyna ma jirin oo ku qabatey iyo qadar alle waa la qaataa buu xaalku ahaa, waxeyna ku qasbanaayeen in ay xaaladan xanuunka badan qaabilaan, Waxaana nasiib wanaag dhacdey dadaal dheer oo aan kala joogsi laheyn kadib in ugu dambeyntii Sahan miirkeedii u soo noqdo, oo ay kusoo laabato xaaladeedii caadiga aheyd. Waxeyna mar waliba la yaabaneyd amakaagna ku ahaa Uurkaan soo weynaanayo oo aysan aqoon cida Uureysey, meel lagu Uureeyey iyo goor la Uureeyey intaba.

Si kastaba arintu ha u cakiranaatee waxaa nasiib daro magaaladii BEYDHABO ka dhacey abaartii ugu darneyd ee noole soo marto, oo kaaley arag dadka gaajo darteed wadooyinka u daadsan, waxaana gaajada u dheeraa cuduro daba socdey, Waxeyna abaartii saameysaay cid kasta, oo dad iyo duunyaba gaajo iyo haraad baa wadooyinka loo daadsanaa, oo maaha mid lasoo koobi karo xanuunkeeda.

Waxaana kamid ahaa dadkii ay saameysey ay Maano iyo Sahan oo go'aan sadey iney ka mid noqdaan dad farabadan oo magaaladii Baydhabo aheyd ka yaacayey naftoodana ula cararayey xagaa iyo Caasimadii daka ee MUQDISHO oo la maciin bidayey, in laga helo doono nolol dhaanta midan.Waxeyna isku soo dhigeen wadadii weyneyd cid sahay

sidataana majirin oo waxaa lagu sii tashanaayey in lasii cuno geedaha caleemahooda oo ahaa xiligaa cunada kaliya ee la heystey.

Rafaad badan bey dadkii mareen Sahanna wey ugu darneyd oo waa qof xaamilo ah oo labo nafley ah aad ayeyna u dhibaayeen geedaha la cunayo weyse ku qasbaneyd iney dhankeeda ka cunto oo nafta ugu been sheegto, Waxaana ugu macaanaa wixii lacunayey u guna qiimo badnaa qobabka mooska iyo qobabka qaraha lafeyntey oo maleeshiyada wadada gawaarida sida xooga badan ugu socdey usoo tuurayeen.

iyagoo ku jees jeesayo oo damiirkii bani'aadannimo uu ku dhex dhintey walaalnimo Muslinnimo iyo mid Soomaaliyeedna aysanba ka muuqan. Waxaana arin aysan ilaabi karin ku noqotey Sahan ka gadaale markii uu horteeda ku nafbaxey odey iyada siiyey qob moos ah si ay nafta ugu ceshato maadaama ay Uur leedahay, isagoo u baahan iyana nafbaa heysaye kama diidin wey laqdey oo daamanka ku boobtey.

Aah Aah Aah Alla Xanuun badanaa oo xakaar badanaa waxa ummadeena qabsaday oo Kaaley arag daqiiqad walbaaba inta wadada ku dhimaneyso, Waxeyna ka mid aheyd Sahan dad badan oo aaminsanaa ineysan nafta la gaareynin Magaalada MUQDISHO oo aan u soo dhaweyn, Horteedana mar labo iyo sedexba ay ku qurbaxayaan dadka wadadaa wada haya, rafaad fara badan oo aan laga sheekeyn karin oo xanuun iyo xakaar badan leh dabadeed ayey MUQDISHADII soo caga dhigteen Sahan iyo intii ay nafta kusii yareyd ee aan wada kusoo dhiman.

Waxeyna Sahan ay Maano iyo dhowr ruux oo kale, safar dheer oo qaatey 21 cesho oo socod lugeed ah, walow mararka qaarna gar gaar ay ka helayeen gawaari wadada socotey oo marba meel dhigayey, Waxeyse Su'aashu aheyd Waa layimid MUQDISHEE xagee laga bilaabaa, waxeyna is wareysi iyo xog uruursi kadib wada abaareen iyagoo su'aashaas is weydiinayo halka loo yaqaano TARABUUNKA, halkaasoo loogu sheegey iney daganyihiin dad sidooda oo kale ah, qaxna kusoo galay Caasimada.

Waxaana nasiib wanaag goobtii ku soo dhaweeyey dadkii lamidka ahaa ee uga soo horeeyey, oo siiyey calalo ay buush ay ku hoydaan ka dhistaan, waxaana loo soo gurey booc boocyo, tiirar looga dhigo cooshadaha ay dhisanayaan, Waxaana la siiyey xoogaa digirta nooca loo yaqaano ee xiligaa aadka u caan baxay ee BEEBEESHEE oo ay nafta ku ceshtaan, iyadoo looga faaloodey warbixina laga siiyey qaabka loogu noolyahay XAMAR iyagana sugeyso.

Wax kale maa hee waxaa dadka iyaga lamid ah ay ku noolaayeen tuugsi, in kastoo uu daal balaaran hayey Sahan iyo ay Maano haddana waagii markii uu baryey, waa la kaagiciyey oo la yiri calooshiina wax u raadsada caasimadana is celiya.Waxaana hogaanka u qabatey habar la yiraah Iisho oo magaalada Muqdisho mudo ka tuugsaneysey, maadaama aysan aqoon magaalada Sahan iyo ay Maano kana baqayeen iney ku dhex dhumaan.

Dhankooda ayeyna baco ka qaateen tuugsigiina bilaabeen oo qofba la yiri meeshaa ka qaraabo oo na kala dheereeya, waxaana layaab iyo cajaa'ib ku noqotey Sahan qofkii ay "ii kaalmey" tiraahdaba uu Alla hakuu sahlo leedahay, Kan ugu roon ee wax siiyana uu siinayo qob uu ka fiiqdey moos kana

cuney iyo qare uu feentey oo qolof ah iyo sacab digirta BEE BEESHEE ah oo ahaa waxa ugu qiimo badan. Xaaladii ayeyna la qabsadeen magaaladiina dhankooda marba xaafad uga tuugsi tageen oo kama qasneyn oo nafta wax ay ku ceshtaan waa kasoo saaran jireen haba yaraadeene.

Iyagoo xaaladaa liidata ku sugan baa waxaa wadankii soo galey ciidamadii ka socdey qaramada midoobey ee UNISOM oo uu Mareykanu hogaaminayey. Waxaana xoogaa la dareemey xaalad ka wanaagsan tii hore, dhaqaalo ayeyna dadkii heleen nolashii magaaladana ka soo reysey sidii hore.Inkastoo ay jirtey balaayo cusub oo aan horey loo maqal lana arag oo ay soo kor dhiyeen ciidamadii yimid dalkeena, waxaana ka mid ahaa iyadoo magaalooyinka qaar laga maqlayey rag la kufsadey, Waxeyna aheyd markii ugu horeysay oo ay taariikhda Somalidu dalkooda ka dhacdo dhacdo sidaa u fool xun, aad ayeyna arimahaa iyo kuwo kaloo fool soo kordhay dadku u dhibsanayeen.

Dhanka kale Sahan iyo ay Maano waxey kamid ahaayeen dadkii uu xaalkooda ka soo raayey, waxeyna furteen miis weyn oo ay ku iibinayeen looskii, shukulaatadii, iyo wax yaabihii kale ee qashinada Ciidamada Mareykanka iyo ciidamadii dalalka kale laga soo qaadayey, Waxeyna subax walba u kalihi jirtey Sahan siliga ama safaaradii Mareykanka oo aheyd xurunta ugu weyn ee ciidamadaa dalka soo galay si ay alaabadaa uga soo qaadato iyagoon qarash ugu fadhinin, misna usii iibiso oo nolol maal meedkeeda kasoo saarato.

Iyadoo Xaalkooda uu sidaa marayo ayey Sahan umushey oo dhashey Wiil Qurux badan, waxeyna u baxsatey DHIBANE dad badan ayuuna magacaa ka yaabiyey u jeedka ay ka leedahey Sahanna aan garan, Walow Sahan ula jeeday inuu

dhibkeeda faraha badan kiisa ka weynyahay oo aysan waligii u sheegi karin Aabihii meel ay ku kulmeen iyo qof uu yahayba. Umana hakanine subixii ay dhashey Sahan subixii xigey waxey hortaagneyd safaarada Mareykanka oo qashinkii ayey sugeysey, oo howl maal meedkeeda marna kama hab saamin, inkastoo ay tahay qof umul ah oo aan wali kabsan una baahan daryeel iyo xanaano.

Iyagoo howshoodu sidaa dar darta leh ugu socoto, ayaa waxaa dhacdey subax subxaha ka mid ah Sahan oo sidii caadada u aheydba taagan albaabkii siliga Ameerikaanka. Qashinkiina sugeyso in uu gaari ay wateen Ciidamada Mareykanka oo xowli ku socdey uu afka daro Sahan oo canugeedii xambaarsan labo darafna ukala tuurey iyadii iyo canugeeda oo dhulkii sidii qare ugu qarxey.

Durbadiina gar gaar deg deg ah ayaa loo fidiyey oo lagula cararey safaaradii gudaheeda isbitaal ku yiiley, nasiib darase waxey naftii deysey canugii yaraa ee Dhibane ahaa, habartii dhashey baase lala tacaaley oo lagu dadaaley, Waxaana arintii dhiilada laheyd soo maqshey ay Maano oo timid Isbitaalkii iyadoo aan dhag la qabto laheyn, magaca gabadha hooyadeedna ku hadleyso. Waa la dajiyey oo turjubaan Somali ah loo keeney, wax walbana laga dhaadhiciyey, sidoo kale Sahan oo soo miirsatey baa iyana xaaladii si dagan habartu uga dhaa dhicisey, samirsiiseyna. Waxaana loo soo aasay saqiirkii, oo si wacan arimihiisa loogu dadaalay, waxeyna Sahan isbitaalkii ku sugneyd mudo labo todobaad ah iyadoo ka soo baxdey markii ay bogsootey.

Waxaana markii ay kasoo baxeysay Isbitaalka faraqa loogu shubey dhowr Kun oo doolar oo ay wax ku qabsato loogana

dhigayey magdhow, iyagoo faraxsan beyna goobtii ka dhaqaajiyeen, oo abaareen halkii uu ka xigay Buushkooda yar.

Wax wax sheego lama waayo ee wax wax kusiiyaa lawaayaa, bey somali horey u tiraye, waxaa buushkii yaraa ee tarabuunka ugu yimid Sahan iyo ay Maano oo isla lafa gurayo sidii ay ka yeeli lahaayeen lacagtaa faraha badan ee gacantooda kusoo dhacdey, Baa waxaa goobtii soo caga dhigtey koox maleeshiyo ah oo hubeysan, Waxeyna toos u soo abaareen buushkii ay ku jireen Sahan iyo habartii qoryana ku qabteen oo amreen iney banaanka soo dhigaan doolarka ay duugayaan.

Sahan oo si u arga gaxsan baa maagtey iney isku dhajiso lacagtii oo af labadii yeertey loomase turine baas baa lugta looga harqaamey oo cabaadkeedii mid ka weyn kana xanuun badan loogu daray, Iyadoo raali ahna lacagtii laga qaatay, maleeshiyadii arxanka darneyd damiirka iyo dadnimadana ka maqneyd baa durba goobtii ka xaluulatey, Waxaana Sahan oo meesha kala taala, dhiig badana ka baxaya loola cararey isbitaal ay lahaayeen ciidamada Marookaanka oo kamid ahaa ciidamada wadanka joogay oo daaweyntiisu heer sareysey dadka masaakiintana lagu caawin jirey.

Halkii baana mar kale lagula tacaaley miskiintii Sahan aheyd ee uu waayuhu badey dariskana uga dhigey dhibaato aan dhamaasho laheyn, oo marba hadii ay mid ka soo talaabsato mid kasii daran kana xanuun badan u dhiibeyso, Waxaana mar walbaaba bar bar joogtey ay Maano oo marna faaruqin Sahan, waxeyna isbitaalkii Marookaanka, Sahan ku sugneyd ku dhawaad mudo bil ah, waxeyna kala kulantey daryeel bani'aadanimo ee heerkiisu sareeyo, mudana iney ka mahadceliso.

Waxayse aad u dhibsaneysay misna u kahsaneysay markii ay halkaa ku aragtey Dumar Soomaali ah oo kala da' ah, misina halkaa u imaanayey iney jirkooda ka ganacsadaan, Aad ayey arintaa uga yaq yaqsooneysay Sahan, waxeyna ugu muuqdeen kuwo meel ka dhac weyn u geystey sharaftii iyo karaamadii umada Soomaaliyeed lahaayeen, diintoodana meel weyn uga dhacay.

Nasiib darase waxey xaaladaa ka qaban kartey ama ka badali kartey ma jirin oo aan aheyn iney niyada ka nacdo, kuwaa damiirka beelay ee Somalinimada la wadaaga, misna magacooda iyo sharafkooda sii sanayo wax yar oo lacag ah.Dhanka kale markii Sahan xaaladeeda la hubiyey ayaa la soo fasaxey nasiib darase xidido iyo hilbo go'ay awgii waxey isbitaalkii kasoo baxdey iyadoo lug ka balaqsiineyso ama ka naafowdey, jiisna ka noqotey, Oo markaan maahan Sahantii hore ee waa Sahan jiiseysa, samirka iyo dulqaad Eebe ku galadeystey ayeyse ku qasbaneyd iney dugsato, wax walbana dusha ayey u tuuratey.

Howshii miiskooda ayeyna sii wateen oo uu illaah u barakeeyey, waxeyna gaareen heer ay guri ku yiiley degmada MADIINO gaar ahaan Xaafa Nuur Aduunyo qol ka ijaartaan oo mar kaliya kasoo jeestaan guri dadan oo dad ku noolaan karo, Howshoodana kama caajisin oo miiskii ayey labo ka dhigteen Labar Afar iyo Mac Macaankana la kala tageen, nolol maalmeed wanaagsan, guriga ijaarkiisa iyo calalyada huudheydana kasoo saarteen. Nololshooduna caadi noqotey, wax xoogaa sunuud ahna meel ka dhigteen, oo bari waxa dhici doona lagula xisaabtamey oo siduu xaal noqon doona allaa oge dadaal ayey wadeen.

Iyagoo sidaa xaalkoodu marayo baa waxaa wadankii isaga baxay ciidamadii UNISOM, waxaana la dareemey in xagii dhaqaaha reer walbaba ka sii liicayo oo hoos u dhac weyn baa la wada dareemay, badi dadkii, Sahan iyo ay Maanana dadka dareemey bey ugu horeeyeen, waxeyna fiiriyeen oo ay isla rog rogeen sida ay arintan uga samata bixi karaan, maxaa yeeley ma jecleysaneynin iney dib ugu laabtaan nolashii rafaadka badneyd ee tuugsiga.

Waxeyna isla falanqeyn dheer kaddib xal wanaagsan u arkeen iney dhankooda kaga biiraan dad farabadan oo Soomaaliyeed oo markaa wadanka isaga tagayey, si Tahriib ahna ugu jiheysnaa xagaa iyo dalka Sucuudiga, iyadoo la sii marayo Wadanka Yaman, Go'aan kaa bey qalinka ku duugteen oo isku tusiyeen in Sacuudiga hadii ay tagaan ka xamaalan karaan, oo aysan jirin cid ay wax uga baahanyihiin.

Yamana qarashkii lagu tagi lahaa waa la heystaa xoogaa kalena waa la heystaa, Wixii dhinnaadana Yaman ayaaba looga qadaameynayaa, lagana sii dhameystiranayaa, waxeyna bilaabeen fulinta go'aankaa isaga ah.

Maalinnimo Axad ah ayey aheyd markii ay Sahan iyo Maano soo beegsadeen subax hore halka laga raaco gawaarida u kicitinta magaalada GALKACYO ee xarunta Gobolka Mudug, Iyagoo ujeedkoodu yahey iney kaga sii amba baxaan halkaa dhanka magaalada BOOSAASO ee xarunta Gobolka Bari oo ah halka looga sii Tahriibo dalka YAMAN iyadoo dooman qar iska xoornimo ah laga sii raacayo. Sahan iyo habarta oo goor horeba soo diyaar garobey, liiskana maalin ka hor isku qorey, baa abaarihii 12-kii duhurnimo ee xiliga Magaalada caasimada ah ee Muqdisho gaari nooca Somalidu u taqaan

INTAREE oo kusii jeeday halka uu ujeedkoodu yahay dusha kaga dhaceen.

Gaariga oo sidey dad farabadan oo Tahriib ah iyo cuno aan yareyn, baa halkii boosteejada u aheyd ee wadada kasoo hoobata CARWO IIDKA ee loo yaqaan wadada AADAN CADE, ama JIDMAREEXAAN goobtii ka sharaacday. Wuxuuna afka usoo saarey wadihii gaariga halkii ay ka xigtey wadada loo maro Degmada AFGOOYE ee Gobolka Sh. Hoose, wuxuu in cabaar ahba soo xawaareeyaba, wuxuu soo gaarey halkii ugu horeysey ee sida caadada ah Gawaarida Safarka ah ay nastaan oo aheyd WAKAALADA BIYAHA.

Waxeyna goobtaasi ku sugnaayeen ku dhawaad Laba saacadood, dabadeedna Wadahii waa uu ka sii dhaqaajiyey Gaarigii isagoo ula jiheystey halka loo yaqaan MUKEYGA AFGOOYE oo ay markii ay gaareen ku sugnaayeen in ka badan 3-Saacadood oo nasiino ah, Waxeyna nasasho dheer kadib oo cuno, cabitaan iyo casireyeysiba leh qabsadeen wadadii u kicitimeysey Degmada WALALAWEYN ee Gobolka Sh. Hoose, halkaasoo ay Gaareen abaarihii 6-dii fiidnimo, iyaadoo ay qoraxdii sii liiceyso mugdigii habbeenimana guda galeyso.

Waxaana gaarigii looga wada daatey bartamaha degmada WANLA-WEYN iyadoo nasasho loo baahanyahay, maadaama dadka badi aysan kuraas ku fadhinin oo ay dul yuuraraan Alaabada ku raran gaariga, Iyadoo la wada beegsaday makhaayado meesha kuyaalo oo safareyda loogu talagaley iney wax ka cunaan kuna nastaan, intii cuno ay kusoo talagashey wadateyna halkooda ayey ku cuneen oo hawada macaan ayey ku raaxeysanayey, Qoraxda sii dhaceysana waa ku ildoogsanaayeen.

Sahan iyo Maano waxey ka mid ahaayeen dad fara badan oo cunadooda watey, halkooda ayeyna ku cuneen, dadka intiisa kalena makhaayadihii buushashka ahaa baa cuno laga soo wada cuney, oo iyadoo lasoo wada dhargay Istakiina afka lagu wada sito baa goobtii la isugu yimid. Run ahaantii ma yareyn wal-walka dadka ka muuqdey, maadaama maanta oo dhan isbaaradii la soo istaagaba qoryo lagu fiiqaayey, marna xabado kor loogu ridaayey.

Si gaariga looga qaado lacagaha baada ah oo ay qaataan burcada wadada jid gooyada u taalo, waxeyna in badan ka war qabeen in wali aysan isbaaro fari ka qodneen oo ay wax ka sii badan kuwii Alle soo dhaafiyey u sii har sanyihiin. Waxeyna rakaabka Gaariga saaran mar walba oo uu gaariga dhaqaaqayo is farayeen Afar 4-ta faataxo in la wada aqriyo, si Illaah balaayada mooryaanta meel walba daadsan uga bad baadiyo, una sama geeyo halkuu ujeedkoodu yahay.

Cunadii iyo Nasashadii dabadeed ayaa gaarigii dusha laga soo wada korey, oo leysku diyaariyey inuu socodkiisa sii wato, wuxuuna gaarigii goobtaa ka dhaqaajiyey abaarihii 11-kii fiidnimo ee xiliga degmada WANLAWEYN, halkaasoo uu wadihii gaariga kaga dagay wadadii laamiga aheyd oo ay in dhaweydba ku soo socdeen.

Waxuuna Afka u galiyey wado kale oo caro ama bacaad yara gaduudan ah, waxey sii guureeyaanba waxey soo gaareen Tuulo la yiraah QOBYAXAAS, kumase hakan oo sheelaraha unbaa gaarigii loo hayey, darawalkiina si wacan ayuu marshada ugu rogayey, Dadka gaariga saaran waxaa ku wada jirtey baqdin aad u xoogbadan, siiba habeenimadaa ay guureynayaan, maxaa yeeley Tuulo walbaaba waxaa tuban koox maleeshiyo

ah oo gawaarida baad ka qaadato, wixii ay doonaana sheegto, marka ay doonaana dadka furto oo dhaco.

Waxaana marar badan dhacdey is qab Qabsasho dhex martey ragii gaariga watey iyo maleeshiyadii, taasoo gaartey heer ay dadkii qaar ka mid ah lacago jeebkooda ka aruuriyaan mooryaantiina lagu dabaro, si balaayadooda looga nabad galo, Marka waa meel maalintii sidaa ahe habeenkii maxaad ka filaneysaan, baa dadka kuwada jirtey, si kastaba xaalku ha ahaadee waxey soo gaareen sidii ay wadnaha farta ugu hayeen Faataxadana u dur durinayeen Tuulo la yiraah DHARIYOW.

Sidoo kalena kuma hakan oo wey kasii socdeen, xawaarihii gaarigana in lasii kordhiyo mooyee lagama yareyneynin inta uu ku socdo, waxey soo guureeyaanba waxey soo gaareen tuulo la yiraah FIIDOW, halkaasoo ay markale ka qabsadeen wadadii laamiga aheyd, maadaama ay mudo soo dhex jibaaxayeen bacaad iyo wado jaay ah.

Waxaana in cabaar ah goobtaasi isku heystey maleeshiyo baad gawaarida ka qaadato iyo kuwii gaariga watey oo isku afgaran la'aa lacagta baadda ah ee lasiinayo mooryaanta isbaaradu u taalo deegaanka FIIDOW.

Waxeyna dalbanayeen lacag gaareysa 2-malyan oo Sh. Somali ah, halka kuwa gaariga watey ay 1-malyan Sh. Somali ah kabadan ineysan bixin karin ku doodayeen. Waxaana markii dambe darawalkii ay u sheegeen in arintaasi ay haboontahay inuu kala soo hadlo ninka mooryaanta meesha joogta madaxda u ah, ee meesha ugu areeya.

Darawalkii oo arintaa u riyaaqay is lahaane waad is afgarandoontaan ninka madaxda u ah kooxdaan midba meel ka qeylineyso, baa markiiba gaarigii ka soo dagtey oo abaarey

qol halkaan ahaa oo aad yaabeyso siduu u Ja jabanyahay oo ay ugu timlaameen inuu ku suganyahay ninka madaxda u ah. Markii uu qolkii soo galay Darawalkii, ayuu wuxuu ku arkey nin uu yaqaano oo darawal la ahaa, gaadiidka wadadaa ka shaqeeyana wadi jirey oo si xun loo diley meel walbaana ay meydkiisa xabad uga taalo oo baas la harqayiyey.

Darawalkii dib ayuu u soo laabtey, wuxuuna u yimid maleeshiyadii oo markiiba ku yiri haye ma isa soo aragteen madaxdeena, isna haa ayuu ku jawaabay. Maxaad isku soo af garateen inaad bixiso ayey ku yiraahdeen, wuxuu ugu jawaabay 3-malyan, inkastoo markiisii hore uuba diidanaa 2-milyan halkii ayuuna dood iyo buuq la'aan lagactii ugu tiriyey taasoo aad oga yaabisay ragii la socdey iyo dadkii rakaabka ahaa oo aan waxba ogeyn.

Waase tii horey loo yiri ALLOW QOF AAN WAX OGEYN HA CADAABIN oo hadii ay arki lahaayeen, wuxuu soo arkey lama yaabeen midkoodna.

Darawalkiina isagoo aan cidna la hadlin ayuu gaarigii sheelaraha u qabtey oo uu halkii ka dhaqaajiyey, wuxuuna qabsadey wadadii laamiga aheyd oo uu indhaweydba la'aa. Isagoo sii kordhiyey xawaarihii uu ku socdey, isagoo aad yaabeyso sida uu u jareynayo una arga gaxsanyahay, malaha wuxuu is lahaa armey kuwii kugu daba jiraan ee ka fagaarey.

Wuxuu soo xawaareeyaba wuxuu soo qotomiyey gaarigii markii uu waaga dilaacayey Degmada BUULO BURDE ee gobolka Hiiraan, waxaana dadka badi la yaab ku ahaa degmadaas oo caan ku aheyd gor gor aad u weyn oo ku sawirnaa bartamaha magaaladaas oo aad u cajibiyey. Waxaana la yaabku ahaa in darawalkii oo markaan dagan baqtintiina ka yara baxdey uu u shidey dadkii gaariga saarnaa oo sameecad

weyn gadaal ugu xirneyd heesta magaaladan lagu amaaney ee uu ku luuqeeyey fannaanka caanka ah ee C/llaahi Shariif BASTOW, Oo ay miraheedu ka mid ahaayeen "Dhulkoo wada barwaaqa ah bishu 15 tahey, Sowmaanan bixinoo baabuur maraacin, wuxuu ila busleeyaba balad aan layaaboo, caanaha sidi biyo, haamuhu ay ka buuxaan bar tankiisa waaxyaha Gor Gor baaladeystoo baxaananaayo maan arag".

Waxaana dadkii ka soo harey madax ruxid iyo iney heesta dhankooda ka jiibiyaan, waxeyna halkaa ku hakadeen in ku dhow 3- Saacadood, iyagoo halkaa ka quraacdey, kuna nastay oo jawi kii xalay oo dhan ay kusoo socdeen mid ka dagan galeen, Waxaana mar kale sheelaraha loo qabtey gaarigii, oo wuxuu soo guuxaba soo gaarey magaalada BALADWEYNE ee xarunta Gobolka Hiiraan, oo xiligaa aad yaabto barwaaqada ka muuqato iyo bilicda dhulkeeda iyo wabigeeda oo garka hayey. Waxeyna dadkii badi fanka wax ka yaqiiney soo xusuusteen una meeriyeen dadkii kale heestii uu ku luuqeeyey fanaankii weynaa rabi naxariis jano hasiiyee C/naasir Macalin Saciid.

Oo ay miraheedu ka mid ahaayeen," Dhul biyuhu maraanoo xareeduna ay baliga taal , wacan bey ku dhalatiyo , dhul baewaaqo ood garan" waxeyna intii aan miraha heestaa aqoonin ay kala hoorinaayeen marka la soo gaaro mirahan"Buurahan, buurahan jecleystiyo, barti muuqa dheereyd bartankeediyo, Baladweyneey ku nooshahee'. Waah Waah waxbaa ka dhacay. Kaalay arag sacabka sida la isula helaayo, halkaa ayeyna in cabaar ah ku nasteen, kuna yara damaashaadeen oo diifta safarka isku yara ilowsiiyeen, oo kaftanka sheekada iyo qosolka ka baxayo waad yaabeysaa. Waxeyna abaarihii 4-tii galabnimo ee xiliga magaalada Balad-weyn ka caraabeen goobtii ay magaalada kaga sugnaayeen,

Wadaha gaariga oo xawaaro xoogan ku ku waday. Kuna dadaalayey inuu waqtiga ugu yar wada uga baxo, ayaa meelo badan aan ku hakanin, oo aan marna dhimin xawaarihii uu gaariga ku waday.

Waxaana kamid ahaa meelaha aysan ku hakan Deegaanada JIIRTA QABNOOD, GURI CEEL, MATABAAN, DHUUSO MAREEB, CADAADO, iyo DAGAAR, wuxuuna ugu dambeyntii darawalkii ku qabtay gaarigii halkii loo wada socdey oo aheyd magaalada GAAL KACYO ee xarunta Gobolka Mudug.

Inkastoo intii uu soo guureynayey ay dadkii rabey meelihii lasoo dhaafey kusoo dageen, waxeyna dadku intii aan sahey wadanin lagu wargaliyey iney qaataan sahey, maadaama loo sheegay in uusan gaarigu meel dambe ku hakaneyn. Waxeyna magaaladii ujeedku ahaa soo caga dhigteen abaarihii 3-dii habeenimo ee saqda dhexe, inkasta oo ay saq dhaxe aheyd hadana wixii guryahooda meeshaa ka dhawaa wey abaareen, intii kalena gaarigii ayey dusha iyo hareeraha ka seexdeen.

Waagii markii uu u dilaaceyna waxaaba isa soo xaadiriyey gawaaridii u kicitimayey magaalada BOOSAASO, oo ahaa gawaarida loo yaqaan COSTER DISKOW, oo aad u wada bilic samaa, dadka badi oo dhankaa uwada socdey baa quraacdii dabadeed gawaaridii ku xoomey oo buuxiyey.

Gawaaridiina Durbadiiba waa ay dhaqaajiyeen oo waqti iskama dhumin, waxey sii guuxaanba waxey soo gaareen buur si aad ah looga baqo oo ay ku rogmadaan gawaarida intooda bada, caana ka ah deegaanadaa oo loo yaqaano buurta AL-XAMDULILAAH, oo aheyd buur dheer gaarigana inta koro ka sii daadagayo, Iyadoo la leeyahay Allow samo nagu mooti baa laga sii dhaadhacey, markii leysku hubsadey dhulkii baa

mar qura lagu wada hadaaqey ALXAMDULILAAH, gaarigiina sheelaraha ayaa loo sii haayey ilaa uu kasoo gaaro magaalada GAROWE.

Halkaas oo ay rakaabkii ka wada qadeeyeen in yarna ku nasteen, dabadeena waa laga soo dhaqaajiyey, wadayaashiina waxba ulama harin sheelaraha oo lugta ayeyba kusii xoojiyeen, xawaarihiina sii kor dhiyee. Waxey soo socdaanba waxey soo gaareen magaaladii loo socdey ee BOOSAASO aheyd, oo aad u kululeed xiligaas, heer kulkeeduna marayo 55 digrii, saacaduna waxey aheyd abaarihii 4-tii galanimo, Waxeyna dadkii u kala baxeen 3 qeybood oo qeyb magaalada daganeyd guryahooda ayey afka aadiyeen, qeybtii Tahriibka ahayd oo dad u daganaa magaaladana dadkoodii bey raadsadeen.

Qeybta sedexaad oo ay ka mid ahaayeen Sahan iyo Maano oo aan intaba aheyn, baa afka aadiyey halkii loogu tilmaamey in la dajiyo dadka Tahriibka ah, oo ahaa buushash ku yaaley xaafada CARAB ee Magaalada Boosaaso oo xeebta u dhawaa.

Halkii ayaana lagu soo dhaweeyey dadkii Tahriib doonka ahaa, waxaana gacmo furan ku soorey nin qaabilsanaa soo dhaweynta, qolada wax tahriibisana meesha u joogay. Wuxuuna durba lasoo baxey Buugweyn oo dad badani ugu qornaayeen, isagoo ku qorey dadkii cusbaa, qofwaliba ka qaatey 50 dolar siiyeyna bustayaal iyo darmo lagu seexdo, buushashkii buuna farta ugu fiiqey. Waxeyna ay Maana iyo gabadha Sahan ah la geeyey buush halkaan ah oo ay ku sugnaayeen gabdho kale oo somali ah, waxaana 2- maalmood kadib duhurnimo arbaco ah lagu gurey gawaarida somalidu u taqaan xaajiya khamsiin TOYOTA.

Waxaana dadkii Tahriib doonka ahaa la isugu geeyey meel magaalada banaankeeda ah, oo cidlo ah, xeeb ah hakaas ayaana dadkii inta 6 - 6 qof la isugu darey laashash laga saarey. Waxeyna laashashkii dadka ku gurayeen doon Alwaax ka sameysan oo kuwa kaluumeysiga loogu tala galey ah waliba aad duug u ah, dadkii oo wada anfariirsan baqtina gashey baa la isugu geeyey doonta, iyagoo tiro ahaan dhan 117 Ruux.

Durbadiiba doontii yareyd ee dadkaa turada badan la isugu geeyey ka bilaabatey Ba'aayaay iyo buuq fara badan, yaase is gaarey oo faanoole fari kama qodna, doontiina abaarihii 5-tii galabnimo bey goobtii ka amba baxdey, Waxaana u bilowday Guureyn aad u baqtin badan oo dadkii laba isla hadasho majirin, oo bisinka iyo burdaha ayaa afka lagu wada hayey, qof walbana intii uu quraanka ka yaqaano ayuu kor ka dureerinayey, inkastoo ay badu daganeyd gabal dhacaa oo xaalku caadi u ahaa.

Sidii Heebkii oo dhan Loo soo dhex maashaynayey Badweynta oo qof waliba booskiisa baqdin la jareynayey, baa waagii markii uu baryey sidii layaqiin loo wada baroortey oo badii kacdey, Ashahaatinka iyo Allow magantaada meesha ka baxeyso hadii aad maqli laheyd waad muraal qaracmi laheyd, dhankaadana kala barooran laheyd, waxeyna doontii bilowdey iney marba dhan u liicdo, oo jiho iyo jaah wareer ku dhacdo.

Waxaana markii ay xaaladaa bilaabatey soo baxey kuwii doonida hogaaminayey, oo dadkii inta soo dhex galay Eegmo hor leh u celiyey, waxeyna indhaha la raaceen dadka kuwoodii buur buurnaa, oo ay is lahaayeen waa kugu doonida culeysinayo, Markiibana waxey ku amreen intii ay u arkeen iney ugu buuranyihiin dadkii doonida saarnaa iney istaagaan,

iyana war kuma soo celin ee waa ay wada is taageen, Nasiib darase waxaa lagu Amrey iney Badweynta isku tuuraan.

Dadkii la farey fariintaa foosha xun iyo kuwoo kaleba aad bey uga naxeen wuxuushnimada ragan doonida hogaanka u hayo, waxeyna kuwii sida gaarka ah fariinta ugu socotey baa ka madax adeegey. Loomase turine inta tooreeyo afeysan loola soo baxey baa calooshii, wadnihii, kilyihii la dar darey oo iyagoo liicayo naftuna ka sii socoto dhiiga ka baxayana aad yaabeyso badii oo bahalaheedii muuqdaan lagu wada ridey.

AAAH AAAH AAAH Alla Xanuun badanaa. Markiibana nasiib daro waa la kala dafey oo bahalo baahan bey afka u galeen, dadkii oo badi dhiigii wada gaarey baa arintaa wax ka Oran qof walibana allow shartooda ku mooti bey ku jirtey iyo Allow iga sii jeedi kuwan masiibada ah, Waxaa wax aad looga xumaado loogana naxo ah in ruux soomaali ah uu falkaa kula kaco ruux kale oo soomaali ah, walibana caawimaad walaalnimo xiligaa uga baahan., Waxaana dhacdey xitaa in dadka qaar inta qoryo iyo bastoolado lagu qabtey la xir xirey oo bada lagu daadiyey, iyadoo aysan jirin wax ay galabsadeen ama cid ay wax u dhimeen. waase xaalada Tahriib ee xanuunka badan.

Waxaase wax taariikhdu xuseyso ah mar uun in lagula xisaabtami doono, kuwaa arxanka daran, qof waliba oo ka mid ah dadkii doonidaa saarnaana ifka waa uuba ka quustey, oo wuxuuba ku shalaaynayey maxaa ku soo wadey oo balaayadaan u soo doonatey naftaadana u soo halaagtey oo hoogaan isu baday, Iyadoo xaaladaa murugada badan lagu wada suganyahey Sahanna ayba ku sigatey iney mar kale miir doorsoonto oo waalideedii ku noqoto, baa badii kacsaneyd yara dagtey galabnimadii markii ay qoraxda sii liiceysay,

Dadkiise ma hakin ducadii iyo allow magantaadii meesha ka socotey, oo cid ka caajistaa lama arag, saa dadka bada waxaaba uga darnaadey kuwan baas ee somalinimada sheeganayo, masaakiintana xasuuqayo oo aan naxariista laheyn Sahan iyo habartaba macayilaneyn, weyse baqayeen.

Oo kuwa howsha wada wax walba waa ka suuroobaa cidii ay doonaana way xasuuqayaan, wax kadaba hadli karaana ma lahan, iyadoo sidii wardiga loo hayo ayuu gabalkii dhacey, badiina kasoo reysey sidii hore. Waxey sii guureeyaan oo aan quraan aqriskii la hakin, jugta iyo jagta ay ku hayaan kuwan baas ee doonida watana aad yaabeyso, qofkii ay Jugsiiyaana uu leeyahay mahad sanid walaal, ileen awood baan jirin xagoodee, baa waagii ku dilaacey dushooda.

Waxaana u muuqdey buuro dhaa dheer oo loogu sheegayey iney yihiin kuwii Yamaneed, waxay soo socdaanba abaarihii 10-kii subaxnimo, bey usoo dhawaadeen meel xoogaa xeebta u yara dhow, oo ay ka arkayaan Buuraha iyo dhulka ka sokeeyaba. Waxaana dadkii la wada Amrey iney ka wada daataan Doonta Badana isku shubaan, dadka qaar baa saluugey oo waa mool lagu mirqayo meesha barigana sidaa ugma dhawo, qof aan dabaal aqoone kama bixi karo.

Waxeyna maageen iney ka codsadaan in inyar bariga loo sii dhaweeyo, hayeeshee tooreeyadii baa loola soo baxey, bostoolado iyo qoryo ay ku hubeysnaayeena loo cabeystey. Dadkiina is yara adkeynayeyna iyagoo raali ah bey kuwada daateen badii, oo kaaley arag Baroorta iyo Ashahaatinka ka baxayo goobta, dadka quusayo ee hadana madaxa soo taagayo iyagoo cabaadayo, yaase qof kale wax u qaban karo oo xaalku wuxuu marayaa, Niboow Naftaa Nabiyow Ummadaa.

Iyadoo la wada biyo cabey intii yareyd ee dabaasha tiqiineyna ay banaankii soo istaageen, baa iyadoo wali baroortu socoto qof walibana intuu biyo cabi karey cabey oo calooshu buux dhaaftey, bey banaankii isku soo tuurtey, habartii Maano aheydna iyadoo naf la caari ah bey kamid noqotey dadkii ugu soo hormarey. Dad badan ayaana meeshaa ku nafwaayey oo uu meydkooda bada dul heehaabayey, miskiintii Sahan aheyd oo lugtii ka balaf siineyso misna caag yaroo 3-le ah oo saliid ka dhamaatay ku dhagan. Baa waxaa si xoog ah uga qaatey nin ay xaaskiisa la socotey, markaasuu u dhiibay Xaaskii caagii yaraa ee ay miskiinta Sahan ah ku dabaalaneysay.

Waxaa meel halkan kasoo qeyliyey will dhalinyaro ah oo ku yiri ninkii war gabadha waa jiis ee sii caageeda, markaasaa ninkii ka xoogay caaga ugu jawaabey war xaaskeyga lixaadkeeda waa u dhanyihiin. Marka midaan lixaadka kala dhiman ha iska dhimato, maxey nolol ka rabtaa waa taa lug la'e, kuwii lixaadka qabey baaba dhimanayee, naga aamus, Arrintaa foosha xun iyo hadalkaa kasii xanuunka badnba aad ayey ayuu u niyad jabiyey Sahan gaarsiiyeyna heer ay mar kale jecleysato iney dhimato oo ifkan cadaadbta badan isaga hijrooto, ku noolaashadiisana uusan qiimo u laheyn.

Waxaase Nasiib wanaag caawiyey wiilkii oo soo gaarsiiyey ilaa xeebta, iyadoo uu miirka ku daba yar yahey, biyana intii lacabi karey dhankeeda ka cabtey, markii banaankii lagu soo ganey baa habartii oo indho cadeyneysa agteeda lagu soo xoorey, Wax isla hadlo ma jirin in cabaar ah markii la wada aamusnaa bey bilaabeen intii ugu rooneyd ee ka nuuxsan kartey iney dadkii ka matajiyaan biyihii ay cabeen oo ay caawiyaan.

Waxaana meeshii lagu nastey in cabaar ah, iyadoo dabadeed loo luudey tuuladii lagu daadiyey halka ay is leeyhiin dad baa

ku nool, tuulada oo lagu magacaabo BEER CALI, Bey iyagoo luudayo ku haleeleen Rag iyaga ku soo wajahnaa waxeyna moodeen Police, mase noqone waxey noqdeen tuugo dadka tahriibka ah dhacdo.

Waxaana nasiib daro markiiba dadkii oo wada tacbaan ah baa lagu bilaabey baarasho, qof walbana kistii uu isku haleynayey baa daf laga yiri. Sahan iyo habarta oo 200 oo doolar xil iyo xoolaba ka watey cid ay maciin ka sugayaan oo aan alle aheyna jirin, baa laga xayuubsadey lacagtii oo ay aad u qarsadeen hadana waa laga soo saarey.

Oo waxaa heley tuugo arintaa ku xeel dheer, iyagoo dadkii wada yaaban yihiin wax ay sameeyaana garan la'yihiin baa booliskii kusoo xoomey. Waxeyna Booliiskii In cabaar ah dabadeed dadkii ku daad gureeyeen gawaarida ay Somalidu u taqaan Siiblaha ee Toyotada ah, waxaana lageeyey magaalo la yiraahdo MEYFAC, oo uu ku yiiley Kaam tarensed ah ama kumeel gaar ah.

Waxaana la hoos dajiyey teendhooyin, iyagoo markaasi xoogaa raashin ah oo aan dharjin lagu siiyey, waxeyna xeradii ku sugnaayeen 2-maalmood, oo la is dhihi karo diiftii bada kasoo gaartey, iyo cabsidii balaaya qabayaasha waa ka yara nasteen, Waxaana maalintii sedexaad aroornimadii hore lagu daad gureeyey gawaari halkaas looga yaqaan Daimo, Somaaliduna u naqaan Sitey Ma Noogto, waxaana la keeney Tuuladii Qaxootiga ee JAXIIM, Waxaana lagu daadiyey qaxootigii xaruntii ay xerada booliska ku lahaayeen si loo baaro, waxaana jirtey arin anshax xumo ah oo ay boliskii kula dhaqmeen dadkii masaakiinta ahaa.

Waxeyna aheyd in boliskii bilaabey inuu reebto gabdhihii ugu muuqdey meesha si ay u fara xumeeyaan, arintaasina buuq

ayey ka kiciyeen, Nasiib wanaagna ku kalifeen inuu boliskii soo daayo gabdhihii ay reebteen oo ay Sahan ka mid aheyd, Waxaana goobtii lagu gudoonsiiyey Qaxootigii kubeertooyin iyo kaarar ay ku qaataan bur iyo saliid isbuuciiba mar meesha laga bixiyo, waxaana la farey iney somalidoodaa meel ay seexdaan weydiistaan, maadaama la yiri waxaad teendhooyin aad leedihiin heli doontaan bil kadib, Waxaana dhacdey in qolo waliba is meeleyso, nasiib wanaag Sahan iyo habartii Maano aheyd waxaa qaabishey haweeney Soomaaliyeed oo gabar yar heysatey oo ay ladageen teendhadeeda, raashina siisey maadaama aan maalintaa la siinin iyaga raashin ah.

Xerada magaca ay wadato ee Jaxiim, waxaa loogu bixiyey ku noolaashaheeda oo aad u adag, waxaana lagala kulmaa dhibaatooyin aad u fara badan, sida dhac jirdil kufsi loo geysto hablaha masaakiinta ah ee meeshaa soo maciin biday. Waxaana nasiib daro arimahaa xitaa mararka qaar ku kacayey kuwo magaca Soomaaliyeed wata oo Yamaniyiintiiba kaga naxariis darnaadey dadkii masaakiinta ahaa, ee xeryahaa maganta ku ahaa. Waxaana sidoo kale jirey kuwo isku sheega Muwalad oo ay ula jeedeen waxaa iska keen dhalay Somali iyo Yaman, kuwaasoo si aad u naxariis daran dadkii ula dhaqmayey, iyagoo iska laheysiinayo dalka la joogo ee Yaman, misna Inkirayo Somalinimadii.

Waxeyna qaarkood xitaa kula soo jireen Tahriibkii bada oo loo soo gar gaarayey, lana soo caawiyey, hadana waa kuwan waji cusub oo naxariis daran la soo baxay. Oo Soomaalinimadii meel uga dhacaya, isna xijinaya dadkaa carbeed, in kastoo ay jireen dad sidaa u qaab daran hadana kama maqneen dad wanaagsan oo isla iyagaa ah.

Dhanka kale waxaa Sahan iyo inta la socoteyba ku cusub dalkan Yaman, oo ah dal dagan oo nidaam iyo kala dambeyn ka jirto, dadka reer Yaman waxa ay u dhaqmaan qaab qabiil, Waxeyna ku dhagan yhiin dhaqamadii hore, waxaana jirta in beel walbaa deegaanka ay dagantahay ay ku hubeysantahay, sidaasna ay nidaam iyo kala dambeyn ku heystaan.

Waa dal inta badan laga yaqaan balwada Jaadka ama Qaadka, oo xiliyada duhurida aad arkeysid dad fara badan oo wada wata qaadka, una hayaamaya guryahooda, hab dhaqan ahaan waa dad fur furan marka la eego, misna dadka si fudud ku dhex gali kara, oo la jaan qaadi karo.

Inta badan dadkiisuna ay ku labistaan dharka dhaqan ahaan ay u leeyihiin, sida qamiis, cimaamad madaxa lagu xirto, toorey qaloocan oo dhexda lagu xirto, lana muujiyo, Dhismaha magaalooyinkooda dalka Yaman waxaad ku arkeysaa dhismooyin qadiimi ah, dadkuna waa dadyoow inta badan xiiseeya ciyaaraha hiddaha ay u leeyihiin misna ciyaara, waa dal buuro badan leh meelo badan oo indhaha soo jiidaneysa leh Dhanka kale dadka badi kuma daaheyn Xerada Qaxootiga, oo waxaa ku harayey oo kaliya kuwa duruuftu heysato, sida Sahan iyo Maano oo kale, oo dadka badi waxey sii dhameysanaayeen safarkooda ku wajaha Sucuudiga,

Si kastaba ha ahaatee Sahan iyo habartii, waxey goobtii ku sugnaayeen mudo 2-bilood ah, iyagoo iibsanayey qaar ka mid ah xoogaaga lasiiyo, markii dambane iibsadey teendhadii ay daganaayeen. Waxeyna qarashkii ay ka heleen ugu soo kicitimeen xagaa iyo magaalada SANCA ee caasimada dalka Yaman, si ay uga xamaashaan, misna usoo saartaan dhaqaalihii ay safarkooda kusii dhameysan lahaayeen.

Waxaana qarashkii kaqaatey oo soo kaxeeyey wiilal muwalad Somali ah oo howshaa hayey, waxeyna sidii ay gaarigoodii Languruselka ahaa ugu soo wadeen. Soo dhigeen dhex bartamihii magaalada SANCA halka loo yaqaan TAXRIIRKA uuna ku yaaley Hotel caan ka ah magaalada oo la yiraah HOTEL TATJEVA, Waxeyna keeneen maqaayad goobtaas ku tiiley oo ay Somali laheyd, waxeyna markiiba Maano oo islaan ay isyaqaanaan ogeyd iney ku nooshahay Sanca weydiisey Somalidii ay goobtaa kula kulantey. Sidii leyskugu gud gud binaayeyna, Nasiib wanaag ugu dambeyntii waxaa la helay wiil yaqaano oo markiiba la abaarey xaafadaii ay daganeyd habar Shumeey oo aheyd SAAFIYA JOWLA.

Si heer sare ah ayeyna habartii u soo dhaweysey saaxiibadeeda ay mudada is moogaayeen ee ay Maano, waxeyna ku soortey wixii qof sharaf leh lagu soori lahaa ee ay daruuftu saamaxeysey, Habartii Maano iyo gabadhii la socteyna, waxaa loo sheegey inuu guriga gurigoodu yahey cid ka xigtana ayasan jirin, si xur ah oo ay ku xashaashayaana ugu dhex noolaadaan. Waxeyna reerkii ka heleen qadarin iyo qiimeyn balaaran, Maanana saaxiibteed waxey ka codsatey iney magaalada shaqo uga raadiso iyada iyo gabadhaba, arintaasna qalinka ayey habartii ku duugtey.

Dhowr cesho dabadeedna nasiib wanaag labadoodii waxey u keentey shaqooyin qadaamanimo ah ama shaqaale guriyeed ah, aad ayeyna uga mahad celiyeen Uguna farxeen, una soo dhaweeyeen. Waxeyna u tafa xeeteen shaqadoodii oo uu ilaah mid kheyr qabto uga dhigey, maadaama dad badan oo aad u xun oo loo shaqeeyo mararka qaar dhib badana lagala kulmo, Haddana dadkaa iyaga nasiibkooda ayaa karooneysiiyey, waxeyna u shaqeynayeen mudo lix bilood ah, iyagoo inta badan soo booqan jirey reer Shumeey maadaama ay

shaqadoodu aheyd mid ay la joogayeen deegaane ku lahaayeen reeraha ay u shaqeynayeen.

Lix bilood ka dib markii ay is dhaheen Sahan iyo Ay Maano intaan waad kusii Tahriibi kartaan Sucuudigana ku gali kartaan, bey arintii u bandhigteen islaantii Shumeey aheyd oo arintaa u balanqaadey iney gacan balaaran ka geysan doonto, kuna garab siin doonto. Waxeyna Shumeey markiiba la xiriirtey dadkii howlahaa ku xeel dheeraa oo ay taqiiney, waxeyna arintooda la xiriirisey Odey Somaliyeed oo howlahaa wadey aaminna ahaa, maadaama uu jirey nin Somalida badanaa dhici jirey oo Yamani ahaa. Odeyga Somaliga ah baa arintii la xil wareegey, wax walbana u balan qaadey iney guul ugu dhamaan doonaan, qof walibana waxey gacanta ka saartey lacag dhan 4000-kun oo Riyaalka Yaman ah.

Waxey aheyd duhurnimo Talaada ah markii ay ka caraabeen magaalada SANCA ee caasimada dalka Yemen Sahan iyo Maano, iyagoo ku wajahan xagaa iyo magaalada XUDEYDAH, halkaasoo uu uga bilaabanayey wajigii dhabta ahaa ee Tahriibkooda ku wajahan dalka Sacuudiga. Sahan iyo dadkii la socdey wuxuu lasoo Xawaareeyo gaarigii languruselka ahaa ee ay saarnaayeen, wuxuu fiidnimadii keeney magaaladii XUDEYDAH, gaar ahaan xaafadda XARAD, halkaasoo laga dajiyey guri uu lahaa ninka wax Tahriibiyo.

Waxaana halkaa lagu kala soocey dumarkii iyo ragii, oo qolaba koox wax Tahriibisa lagu wareejiyey, waxaana dumarkii lagu war galiyey in la geyn doono ilaa Tuulada MAJANE oo ah gudaha dalka SUCUDIGA, arintaasina aad bey ugu wada riyaaqeen una farxad galisay hadiiba Tahriibkii loo sheegay uu sidaa u sahlanyahay. Waxaana la soo

guureysiiyey dhamaan dadkii Tahriibayaasha ahaa isla habeennimadii, iyadoo cagta la maalayo ama la lugeynayo, waxeyna kooxdii Tahriibineysey oo gaareysey ilaa 5 rag ah, bilaabeen dhowr saacadood markii ay dumarkii soo lugeysiiyeen baarasho ay dumarkii baaranayaan.

Iyagoo ula soo baxey bostolado iyo tooriyo, intaase uguma ekeyne waxey bilaabeen iney kufsadaan dumarkii, kuwii markaa ugu qaabka samaa Qurux iyo soo jiidashana lahaa, Sahan oo ka mid aheyd dumarka kuwooda muuqda baa arintaasi markey aragtey jiro aysan qabin isku ridey oo iska dhigtey sidii ruux qalal qaba oo kale.

Afkii ayeyna xumbo ka keentey habar Maano oo aan gabadha ku ogeyn cudurkan baa aad uga naxdey oo moodey iney si dhab ah u dhibantahey, kuna calaacashey ragii ku soo wajahnaa, ragii oo is yiri yeysan midaan idinku dhimanin baa ka sii jeestey. Waxeyna Nasiib daro howshoodii Kufsiga aheyd ka fushadeen gabdhihii kale ee Soomaaliyeed oo qeyladooda baxeyso aad yaabeyso, yaase usoo gurman karo saa waa howd aysan bani'aadankuba ka dhaweyn, bahalada mooyee, Gabdhihii Soomaaliyeed ee masaakiinta ahaa oo si xun loo galey mustaqbalkoodiina si naxariis daro ah loogu ciyaarey, loona galay si aad u foolxun baa cabaar goobtii lagu hayey.

Tii Sahan aheyd oo wali qof miir la' iska dhigeyso baa garbaha lasoo qabtey, intii kalana cagahiina maasha la yiri, iyadoo aan il naxariis ah lagu eegeynin oo lugtii baa halkeedii laga sii wadey. Iyadoo ay gabdhaha qaar daqaro ka muuqdaan dhiig yarna ka baxayo, kadib markii ay diidmo maageen si xoog ahna wax looga qaatey oo aan loo turin.

Si kastaba ha ahaatee waxey soo guureeyaan oo boholo, buuro, waadiyo lasoo jiirsiiyo, oo la lugeynayey in ku dhow 11 saacadood bey barqanimadii soo galeen Tuuladii MAJANE aheyd ee dalka Sacuudiga ka tirsaneyd. Halkii magaalada ka xigtey baa farta loogu soo fiiqey dadkii Tahriibayaasha ahaa, waa idiin kaligiin beyna ku yiraahdeen, kuwii arxanka daranaa ee sida naxariis darada ah gabdhaha u galay ulana dhaqmay dibna ugu laabtay dalkii ay wax kasoo Tahriibiyeen ee Yemen.

Xaalkii baa mar kaliya isbadaley meel wax laga bilaabana lagaran waa, waana aroor hore oo leysku muuqdo Askarta Sacuudigana laga baqayo, baahi darrana wey jirtaa. Iyadoo lawada anfariirsanyahey bey qabteen halkii farta loogu fiiqey, looguna sheegay iney ka xigta deegaanka dadku ku noolyihiin, maadaama meesha looga dhaqaaqay ay howd aheyd. Waxey soo luudaanba waxey nasiib wanaag heleen wiilal Somali ah, oo iyagana Tahriibaya, howdkana sidooda oo kale ku lugeynayo, wiilashii ayaana hogaanka u qabtey gabdhihii oo dhibkii loo geystey ka muuqdo, oo cid is wareysatey majirin.

Dhamaantoodna rafaadka iyo gaajada ka muuqato waad yaabeysaa, warna lagama gaaro oo waddo dheer baa sugeysa, weyna ku qasbanyihiin iney howdka dhex jibaaxaan, Maxaa yeeley askarta Sacudiga, ayaa laga gambanayaa oo xiligaa xeyn xeyn u socda, dadka Tahriibayana si gaar ah u ugaarsanayo, oo baadi goob ugu jiro.Waxey soo wada luudaan marna qof loo soo jiido, waxey soo gaareen halkii sida qarsoodiga ah ay gawaarida dadka Tahriibka qaado ka baxayeen.

Kamana dhumin meesha oo kuma jaha wareerin, maxaa yeelay waxaa hogaanka u hayey wiil horey u soo marey wadada si aad ahna u xafidsan wadada. Hakii ayaana lagu gor

gortamey intii lacag isku haleyneysayna gawaaridii bey dhakada kaga dhaceen, intii aan cidna ku tashaneynin waxna heysan baa isku soo hartey, xoogaa timir iyo ceesh loo reebeyna cantuubsi ku bilaabey, iyagoo dib ugu noqdey howdkii si ay u sii lugeeyaan, Waxeyne ku sii jeedeen magaalada AL- AXAD, halkaasoo laga helo gawaari ay Somali leeyihiin dadka Tahriibka ahna qaada, Somali ka shaqeyso magaaladana ay jirto oo ay daganyihiin, kuwaasoo ay ugu yaraan caawinaad ka heli karaan.

Waxey soo qarddaJeexaanba waxey naf liidata ku soo gaareen magaaladii AL-AXAD iyadoo taaha iyo aadaarka ka baxaya gabdhahana aad yaabeyso. Gabalkiina uu sii dhacayo, waxaana badi lagu reebey howdka iyagoo sahan ahaan u dirsaday 3 wiil oo Somalida meesha dagan gacan u soo weydiiso.

Mid ka mid ah oo Tahriibe hore ahaa baa hogaanka hayey, wuxuuna soo hor istaajiyey hoy ay daganaayeen wiilal Somali ah oo darawalo ka ah magaaladaas, waxeyna la socodsiiyeen xaalkooda, sidii ay filaayeena gacan ayey ka heleen. Waxeyna markiiba lasoo gaareen cuno iyo cabitaan wada jira dadkii meesha joogay dhamaan, waxeyna ugu bishaareeyeen iney caawa siinayaan dumarka meel ay ku hoydaan, barina ay ku darayaan odey Soomaaliyeed oo magaalada JIDDAH dadka geeya.

Wiilashiina waxaa loo keeney bustayaal, halkiina raganimo isugu dabara ayaa la yiri, maalinta bari xigtana gaari kale ayaan idiin qal qaalineynaa xaalkuna aad buu ugu samaa habeenkaa, Waana lagu wada qanacsanaa halka uu marayo, cid dood ka qabteyna majirin oo alxamdu lilaahida ayaa la hayey, oo waxaa qof kastaa usii muuqday dhacdooyinkii xanuunka badnaa ee lasoo marey.

Waagii markii uu baryey bey wiilashii soo diyaariyeen safarkii dumarka, waxeyna 10kii subaxnimano xiliga dalka Sacuudiga gaari langurusel ah ka saareen goobtii iyagoo ku wajahan magaalada JIDDAH ee caasimada labaad ee dalka Boqortooyada Sa'udi Arabia. Wuxuu gaarigii la soo xooma Wuxuu fiidnimadii soo dhex dhigey magaaladii JIDDAH washida aheyd, dumarkii oo ay neefi kasoo go'dey.

Wadada intii lagu soo jireyna uu wal wal ah armaa la idiin qabtaa oo idinkoo meelba gaarin dalkii la idiin tarxiilaa is lahaa baa lagu daadiyey qaxwa ku tiiley xaafadda KIILOO SABCA, ee magaalada Jiddah oo Somali leedahay. Waxeyna Somalidii markaa ku sugneyd weydiisteen reerihii ay qolo walbaaba doonayeen Sahan iyo habarta oo wata taleefan lasoo siiyey oo laga helo haweeney ay Maano isku dheeryihiin baadigoobaya, baa markiiba nin da' dhaxaad ah oo gartey reerka ay raadinayaa hogaanka u qabtey oo qaxwadii ka wadey.

Isagoo u sheegey iney daganyihiin reerka ay doonayaan meel aan meesha ka fogeyn, wuxuuna keeney xaafadda SHAARAC BINLAADIN, oo ay daganaayeen reerka ay doonayeen isagoo soo hor istaajiyey albaabkii Reerka. Hooyada reerka oo aheyd ay Dhaahiro baa markiiba aqoonsatey Maano oo rafaad badan ka muuqdey, si heer sare ahna usoo dhaweysey.

Iyada iyo gabadhii wehlisey ee Sahan aheyd, markiibana qubeys bay galeen, waxaana loo keenay dhar ay isaga badalaan kuwa ku wasakhoobey ee ay wataan, oo lagu yiri iska soo meera dhiiqada iyo diifta Tahriibka, Nasasho iyo Istareexna isu diyaariya, Maama Dhaahiro oo ay la noolaayeen labadeeda gabdhood oo daganeyd Laba qol, baa qolkii gabadhaha ku biirisay Sahan, qolkeediina ku kordhisatey habartii Maano aheyd ee ay saaxiibada ahaayeen, Waxaana labadoodiiba la

farey ineysan marti iska dhigin oo uu guriga gurigooda yahey, iyadoo intaa loo raaciyey iney dhowr bilood iska nastaan, diifta iyo dhibka Tahriibkana kasoo kabsadaan.

Dabadeedna shaqo loo raadin doono, taasina ma ogolaan oo waxey codsadeen in sida ugu dhaqsiyaha badan hadiiba shaqo loogu heli karo shaqo loogu soo raadiyo, Arintaana Dhaahiro waa ka ogolaatay oo kuma diidin, walow ay jecleysaneysey iney iska nastaan mudo oo ay kasoo kabsadaan diifta ka muuqato, sidoo kalena jawiga guud ee magaalada Jidah iyo dadkeedaba la qabsadaan, iyagoo la saan qaadi karan shaqa galaan. Waxaana nasiib wanaag laba todobaad kadib loo soo wada helay shaqooyin isbuuciiba mar laga soo tagayo, ama jimca kastaa laga soo dagayo, weyna ku farxeen shaqadiina halkooda ka bilaabeen.

Waxaana nasiib wanaag loo geeyey Reero carbeed oo ay Dhaahiro macruuf ahaayeen, maadaama habarta iyo gabdhaheedaba ahaayeen dad aaminsan shaqo oo waxey ku soo dhididaan cuna, macaariif badan ku leh carabta loo shaqeeyo, Waxeyna Sahan iyo ay Maana kasoo dagayeen shaqada jimca walba, Waxeyna markii ay sal dhigteen Jawiga Jiddana la qabsadeen, xoogaa qarash ahna mushaarkoodii meel ka dhigteen, soo jeediyeen iney dhankooda Ijaarka ama Kirada Guriga iyo biilkaba ka kabaan Reer Dhaahiro.

Inkasta oo aan looga baahneyn, oo reerku isku filnaa, iyagana ay Jimco kaliyaa u soo hoydaan, Hadana wey ku adkeysteen Sahan iyo Maano oo dhankooda ayey biilka ka bixinayeen, Sahan iyo ay Maanaba waxey soo jabaan oo jid dheer soo maraan, waxey maanta joogaan jidadii ay u soo jihaadeen, jiq badana u soo mareen, marka la eego muuq ahaan iyo luqad

ahaan maahan kuwo sidaa u kala duwan Yamantii ay soo mareen iyo Sucuudigan ay hada joogan.

Dadka Sacuudiga waa dad marka la eego dagan, oo aan buuq iyo qas jecleyn, waa dad wada xirta ragooda qamiis, camaamad iyo cigaal, halka dumarkana ay kawada sitaan shukooyin madow u badan, oo indhaha un kasoo muuqdaan.

Waxaana caado u ah xitaa marka uu guursanayo Wiil inuusan gabadha uu guursanayo muuqeeda arkin ilaa habeenka uu la aqalgalayo. Waa dal dhisan oo daaro qurux badani ku yaalaan, xasiloon nidaam iyo kala dambeyna leh, waa dal uu Eebe ku maneystey aqalkii ugu horeeyey ee Islaamka loo taagey ee MAKAH AL MUKARAMA ah, waxaa ku nool dad aad u kala duwan oo ka kala yimid dalalka dunida oo idil oo la dhihi karo inta badan waa Muslimiin, Waxaa jirto oo ay caan ku yihiin waxa loo yaqaan TARXIILKA kaasoo ah in dadka sharci darada ku jooga dalkooda la soo qab qabto oo lagu soo celiyo dalalkooda, maadaama ay ku noolyihiin dad fara badan oo aan heysan sharciga ama dal ku jooga Sacuudiga.

Askarta Sacuudiga meel kastaa waa ay ku qabtaan dadka, umana kala reebaan waa dumar iyo waa rag, inkastoo ay dumarka qadariyaan, hadana qudhooda waa la soo tarxiilaa oo leyskama daayo. Cimilo ahaan waa dal inta badan kuleylka xiga, waxaana guri kastaa iyo gaari walbaaba ku xiran muKeyf ama qaboojiye, waa dal inta badan ay kala xiran yihiin ragooda iyo dumarkooda oo aan si toos ah isku arkin.

Waxaana u dhaqan ah in marka wiil gabar loo doonayo ay u doonaan hooyadii iyo walaashii, oo guurkaba la dhameeyo iyagoon aan xitaa hal mar is arkin laba is guursaneyso misna aan iska helin, waxaana xiliyada qaar dhacda in habeenka Arooskaba la is furo marka wajiyadii la isu guurinayey ay is

arkaan iskana heli waayaan. Dhanka kale waxey reerkii noqdeen qoys kaliya, oo waliba aad isku jecel oo kaalay arag sida ay isku fahmeen Sahan, Idil, Istar iyo ay Dhaahiro, Maanana kaalay arag hooyada laga daba wado iyo sida loo qadarinayo ma ahan mid la qiyaasi karo ama la soo koobi karo.

Xiriirkii wacnaa misna qotada dheeraa ee dhex marey reerkaa isaga ah, cidii aragtaa waa ay la tacajubayeen is fahamkooda iyo is qadarintooda qiimaha badan ee is jaceylka lagu qurxiyey. Iyadoo uu xaalku sidaa marayo shaqooyinkiina ay sidoodii u socdaan lacag xoogaa ahna meel laga dhigtey, bey dowladii SUCUDIGA amar adag ka soo saartey dadka sharci darada ku jooga wadankeeda. Waxeyna fartey iney deg adeg uga baxaan, hadii kalena ay la kulmi doonaan ciqaabo adag, oo isugu jira ganaax maaliyadeed iyo xabsi.

Waxaana magaaladii Jidda aheyd oo dhan ka bilowdey olole baaxadweyn oo dadka lagu Tarxiilayo guryaha xitaa leyskuma deyneyn oo waa leyskugu soo galayey, dadkana laga gurayey. Mootooyinka jawaazaadka, maareeyada ama gawaarida Booliiska ee magaalada xeyn xeyn u yaacayo hadaad arki laheyd waad yaabi laheyd, waxayna Maama Dhaahiro. Maano iyo gabdhahooduba ka mid ahaayeen dad fara badan oo arintaa aad ay u dhibtey, walow ay Sahan iyo ay Maano joogeen 3 Sano hadana waxey jeclaayeen iney Sucuudiga iskaga noolaadaan inta dalku ka dagayo, yaase taa u ogolaadey.

Waxeyna qoys ahaan go'aansadeen iney ka mid noqdaan dadka faraha badan ee dalkooda ku noqonaya, waxeyna fiidnimo jimca ah is keeneen xabsiga weyn ee BANIIMAAL, Oo ah xarunta ugu weyn ee lagu xareeyo maxaabiista iyo dadka Tarxiilka ee dalalkooda lagu celinayo, iyagoo sita Go'home yadooda, isuna soo diyaariyey iney dalkooda Hooyo

ee lama Huraanka ah ku laabtaan, Waxeyna dhankooda ka gogosha ka dhigteen goob Somali badan u barxaneed, halkii ayeyna habeenkii seexdeen, oo meel lagu xaroodaa majirin oo si aad ah ayuu u buuxey xabsigu, oo nooc walba oo ajnabi ah baa isa soo dhoobey.

Waagii baana sidii ugu baryey, halkii ayeyna quraac ay dibada xabsiga gabdhaha kasoo iibiyeen ku cuneen, iyagoo aan ogeyn goorta la wadi doono iyo siduu xaalku noqon doono. Baa abaarihii 11 barqanimo waxaa goobtii dagaal xoogan uu ku dhex marey Somalidii iyo Indonisian oo isku qabtey ka gadaale markii dhalinyaro Indonisian ah Odey Soomaaliyeed lacag ka xoogeen. Dhalinyaradii Somalida baa arintaa foosha xun ku duulaan tagey, waxaana dadkii galey kala carar, kadib markii la soo jibiyey Somalidii oo ay isugu tagayaan wixii Eeshiyaan ahaa, sida, India, Pakistan Malasia, Bangaladhesh, iyo kuwo kaloo badan.

Somalidii oo la soo riixey baa waxaa gacan buuxda soo siiyey dhamaanba wixii madow ahaa ee goobta ku sugnaa sida, Nayjiria, Kamaruun, Tashaad, Kenya, Ithaopia, iyo kuwo kaloo badan oo Afrikaan ah, Waxeyna taa keentey in kooxdii somalida soo riixeysey gabi ahaanba laga saaro xabsigii oo ay banaanka ku cararaan, iyadoo ay markii dambe sida badi Booliiska lagu yaqaan arintii soo kala dhex galeen, iyagoo dadkii kala dajiyey arintiina qaboojiyey xalna ka gaarey. Reer dhaahiro waxaa dagaalkaa aan waxba la iskula reeban ka soo gaarey qasaaro aan yareyn, oo miskiintii Sahan aheyd baa lagu tuntey oo la jiirey, iyadoo aan u ordi karin sidii dadka lixaadooda qabo, bey maagtey dhankaada ka carar maadaama la wada cararayey.

Hayeeshee nasiib daro dad aan miir laheyn baa ku tuntey misna dar daray oo jiirey urug badanna u qariyey, waxaase ugu darneyd oo ay ka murgacatey halkii lug ee u fiyoobeyd, Waxeyna kari weydey iney kutubto, waxaana garbaha galey gabdhihii iyo wiilal kale oo ku kaalmeeyey iney gaarto meel ay salka la heli karto. Waxaana durba loo keeney loogana daliigey masaajo, walow ay sidii hore dhaantey hadane waa qof horey lugey u aheyd oo midii kalane ka murgacatee, waxaa waa qasab ku noqotey miskiinta in garbaha laga galo markey socod damacdo, oo iyadoo taaheyso kutubto. Qasaaraha intaa uguma ekeyne, waxaa ka ja jabey dhowr boorso oo ay alaabo badan misna muhiim u ahaa uga buuxeen, waxaase u darneyd Sahan xaaladeeda murugsan iyo xanuunkan xad dhaafka ah ee ay la taaheyso.

Iyadoo labadii garab ee geesaha is darey ay wali kala baqayaan, baa gabalkii dhacey, waxaana abaarihii 12-kii habeennimo, u yimid koox Askar ah oo wadata dadka la Tarxiilayo liiskooda. Waxeyna yeeriyeen magacyadii meesha ugu qornaa oo ay nasiib wanaag kamid ahaayeen Dhaahiro, Maano, Sahan, Istar. Idil, Waxaana markiiba meesha isa soo taagay gaari Buss ah oo lagu gurey boorsooyinkii, dabadeedna iyagii baa bas kale la soo saarey, iyagoo ku soo wajahan MADIINATUL XUJAAJ. Oo ay habeenkaasi dhaxayeen, halkii ayaana la keeney goor dambe, oo ay ku sugnaayeen ilaa uu waagii ka baryo.

Markii uu baryey waagii oo ay quraac fudud goobtii ku cuneen, baa hogaankii loo qabtey dhamaan dadkii la Tarxiilayey, iyadoo lagu wargaliyey iney diyaaradii qaadi laheyd isa soo taagtey oo ay iyaga sugeyso, waxeyna goobtii kasoo shareecdeen abaarihii 1-dii Duhurnimo, Waxaana soo qaaday diyaarada DJABUUTI oo aheyd diyaarad duug ah oo naftu ayan aaminka ku qabi karin marka ay aragto muuqeeda, waxey

diyaaradii lasoo guuxdo oo hawada kula soo gab gableysaba, Waxey abaarihii 4-tii galabnimo soo caga dhigteen gegida diyaaradaha magaalada JABUUTI ee caasimada dalka aan walaalaha nahay ee Jabuuti.

Wxaana lagu war galiyey iney caawa halkaan dhaxayaan barina sii dhameysanayaan safarkooda oo laga dajin doono Gegida Dayuuradaha Aadan Cade oo diyaaradu kusii jeeday, waxeyna rakaabkii habeenkaa dhaxeen garoonkii diyaaradaha magaalada JABUUTI iyadoo halkaa loogu keeney rooti iyo kaluun aad u macaanaa.

Markii uu waagii dilaaceyna waa la xeeyd xeetey oo in safarkii lasii kaamilo leysku diyaariyey abaarihii 10-kii subaxnimana diyaaradii dhakada laga soo wada raacey, iyadiina cagahii laabatey oo hawada sare afka aadisey dhankuu ujeedkeeda ahaana soo abaartey, Waxeyna abaarihii 12-kii duhurnimo xiliga Magaalada Muqdisho ee caasimada dalkeena Hooyo soo caga dhigatey gegidii diyaaradaha Aadan Cade international, halkaasoo rakaabkii qof waliba qofkii sugayey uu kusoo dhaweeyey, lana abaarey halkii uu ka xigay guryahooda.

Dhaahiro oo ciidankeeda hogaamineyso baa afka la aadey xaafadda WAABARI oo uu gurigeeda ku yiiley, sida lagu soo balamayna tahey in halkaa lagu wada noolaado oo qoys lasii ahaado, maskiintii Sahan aheyd oo garbaha wali lahayana lasii kutubiyey, walow ay sidii hore yara dhaanto. Habarta oo horey ula soo hadashey eheladii u joogtey MUQDISHA farteyna in gurigeeda loo sii diyaariyo, baa tagtey gurigii oo diyaarsan wax walbana u dhanyihiin, halkiina la saldhigtey. Guriga oo ahaa Vilo bilicsan oo ubaxa ka baxayo aad

yaabeyso baa gabdhihii iyo habrihii u kala dageen sidii la qunneyd kuna istareexayeen.

Maadaama guriga kaligood daganyihiin, waxaana u wada bilaabatey nolol ay maqsuud ku yihiin, iyagoo cabayo hawada macaanta badan ee aan la heli karin ee dalkooda hooyo, waxeyna dareemayeen qiimaha wadanku leeyahay iyo qaayaha uu ku fadhiyo. Nasiib wanaag Sahan dhowr cesho dabadeed lugtii wey u bogsootey, oo Al xamdulilaahi kaligeed iney kutubto ayey bilowdey, xoogaagii qarashka ahaa ee Sacuudiga lagala yimidna waxaa lagu darsadey Odey bakhaar ku lahaa suuqa weyn ee Bakaaraha oo ay xigto ahaayeen Dhaahiro.

Biilkana sidii loogu baahnaa ayuu ugu soo dhacayey, lacagtoodana waa loogu shaqeynayey, oo meel aamin ah bey shirko ku ahaayeen, waxeyna ku noolaayeen nolol ku dhisan farxad iyo reyn reyn intii loo baahnaa, oo kaalay arag taleefanka guriga ka shanqarayo har iyo habeen iyo sheekada gabdhaha ka baxeyso. In kastoo Sahan qalanjonimadeeda soo noqotey Quruxdeediina sidii qorax iftiinkeed usoo muuqatay, hadana lugta ay ka balaqsiineyso ayaa wax aan la yaresan karin iyada ula muuqdey.

Oo gabdhaha ay walaalaha noqdeen, kaalay arag sida ay shukaansiga beenta iyo bara bagaandada ku dhisan ee muqdisha ka socda dhankooda uga jilayaan. Sahanse shukaansi uma jeedin, badaana kuma jirin, walow ay walaalaheed ku qal qaalin jireen iney beenta dhankeeda kala qufto, hadana wey ka diidi jirtey. Waxeyna yeesheen asxaab fara badan oo gabdho iyo wiilalba leh, oo booqashooyin is weydaarsan jireen taleefankana joogto ugu wada xiriiri jireen. Maalmaha Aduun midiba waaceyne, maalin walbana waxey maanka ku sidtey mulaasim ka dhigtaaye, waxaa dhacdey

maalin maalmaha kamid ah in Sahan oo taleefan u direysa saaxiibteed Bakiin uu lambarkii intii dambe ka qaldamo, oo reer kale oo ayan u warheyn kaga shanqarisey,

Waxaana markiiba ka qabtey Samatar oo taleefanka laga shanqariyey dhinac fadhiyey misna yiri " Halow, Sahan oo aanba war u heyn in nambarka ka qaldanyahay baa lasoo boodey " haa Bakiin ma joogtaa abowe". Wiilkii oo uu magacani ku cusubyahey gurigana aan ku ogeyn wax Bakiin la yiraah, baa ugu jawaabey" abaayo adigoo raali iga ah magaca aad sheegtey armuu kaa qaldanyahey mise nambarka ayaa kaa qaldamey".

Sahan oo hadalkeedii xamaasada badnaa oo ay rabtey iney saaxiibteed kula hadasho dib u laqdey baa tiri "abowe waa macquule lambarka aan soo wacay sow sidan maaha"? iyadoo u yeerisey lambarkii Bakiin oo ay markani saxdey. Wiilkii baa la soo boodey oo dareemey in gabadhu lambar kaliya ka qaldanyahey "maya abaayo macaan kan ugu dambeeyo ayaad iska qaladey " Sahan oo garowsatey iney wax qaladey baa tiri" abowe iga raali ahaada oo qof qaldama uguma horeeyo, kasna iyo ku talagalna igama aheyn'. Wiilkii oo la kaftamaya baa yiri isna "maya oo maaha inaad cudur daar bixisid Abaayo, maxaa yeeley codkaada macaan qofkii ay dhagahiisa soo gaaraan ayaaba nasiib leh, oo aniga waaba ku faraxsanahay inaad soo qaldanto'.

Sahan oo dhankeeda kaftanka ka qaadaneyso baa tiri" mahadsanid in kastoo aad igu amaantey cod macaan oo aanan laheyn" Samatar oo aan hadal kale ka sugin baa la soo boodey "waxaan qirayaa oon qeexayaa wuxuu qaadir kuu qorey qeybna aad u leedahay qureyshtii haweenkaay'. Sahan oo aad ugu qanacdey amaanta wiilka afkiisa kasoo burqaneyso

baa tiri" Wah waah waxaasaa amaan lagaa dhahaa, oo isma laheyn Abwaan baad wacatey, oo anigaaba Nin yahow kaa nasiib badan oo Abwaan qaali ah codkiisa maqlayo ma is tiri'. Samatar baa isna yiri "Walee anna kaama yareysto nasiib ahaan hadaan wali codkaada maqlayo, ee ma ii ogolaan kartaa oo kaliya maalintii 5 daqiiqo inaan maqlo codkaada halaasiga ah ee aan laxanka iyo muusiga u baahneyn?".

Sahan oo wali kaftankii sii wada baa tiri "Haa oo waayo hadiiba aan maalin walba nasiib u yeelanayo inaan maqlo erayo kasoo burqanayo Abwaan-kaadan weyn afkiisa" waa la isku dhii dhiibey sheekada.

Wxii kaftan ahaana wax leyskulama harin oo kaalay arag qosolka iyo Sheekada macaanaatey ee qadka ka socoto, hadii ay kuu suuro gali laheyd. Waxaadba qiri laheyd in labadani sanooyin badan aqoon ka dhaxeysey oo iskuma cusbo ayaad ku doodi laheyd, Kaftankii baa sii kordhey oo marba dhan baa leyskula liicey oo sheekada marba marka xigta wey sii macaanaaneysey. Waxeyna gaartey heer Sahantii kasoo horjeedey wax haasaawo la yiraah, oo xitaa diidaneyd mid baashaal iyo iska been ah qadka taleefanka iney ku jisho, baa waayahey oo mid dhab ah baan kula daa dihinayaa laga keeney, Dar daaranka iyo erayada macaanta badan ee labada dhinac ka burqanayo afkooda, qiyaas iyo qoraalba laguma soo koobi karo, waxeyna dareemeysey Sahan in awood ka sareysa oo aysan ka hor imaan karin wadato.

Inkastoo ay in cabaar ah is meer meerisey, oo is madax adkeysay, hadana ugu danbeyntii shabaqa ayaa lagu ritey oo dhankii ladoonayey lagula caraabey, Waxaana qadkii goor ay kasoo wareegatey 4 saacadood isku macsalaameeyey labadii lambarka qaldamay is badey, oo isku afgartey iney noqdaan

mucaashaqiin dhab ah oo Tusaale loo soo qaato, oo uu ka dhaxeeyo jaceyl dhab ah oo dhalanteedka iyo beenta ka fog, daacadnimo iyo is daryeelna halku dhig looga dhigey. Waxeyna ku balameen in barito xiligaan oo kale la isa soo waco, wuxuuna Samatar u sheegey in uusan guriga kooda aheyn, oo uu daganyahey saaxiibkiisa qaaliga ah ee ay nafta u dhaxeyso, xili kastaana laga helayo.

Wuxuu intaa u raaciyey in xaafadu tahey Degmada DHARKENLEY gaar ahaan Biyo Dageenka, iyana waxey u sheegtey in xaafadoodu tahey Degmada WAABARI gaar ahaan aga gaarka Suuqa, Waxaana la yaabku ahaa iney sameysteen hal hees sir u ah oo iyaga u gooni ah, kaasoo ay ka dhigteen NO. 333 oo ahaa sedexda lambar ee ugu dambeysey nabarkii isbadey ee kasoo qaldamay Sahan, iyagoo ku xusayo iskuna xusuusinayo markasta Jaceylkooda ugubka ah halka uu ka abuurmay, Samatar aad ayuu ugu riyaaqsanaa in uu maanta gacata ku dhigey mataantii qalbigiisa, oo dhinac walbaba ka qancisey, isagoon arag, wuxuuse ku qiyaasanaayey qurux xad dhaaf ah iyo iney tahey Sahan qalanjadii qarnigan, maadaama qalbigiisa dhex qotonsatey amar ala'aan.

Wuxuuse ceebaal u arkayey lugta ka go'an ee dagaaladii sokeeye ka salfadeen, wuxuuna is weydiinaayey sideed ku qaabili rabtaa Sahan waa adigan biraha ku boodayee, armey kaa didaa. Su'aalahaa iyo kuwo kale baa ku furnaa Samatar, wuxuuse ugu dambeyntii go'aansadey inuu waayaha u daayo dhowrana sida uu waqtiga ka yeelo arintiisa. Dhanka kale Sahan oo uusan horey go'aanku ugu jirin haasaawe, balse duul aysan u taag iyo tabar heyn ku jiideen baa dhankeeda maqsuud ka aheyd, kuna qanacsaneyd wiilkan qiimaha badan ee qalbigeeda xarfuhuu qorsheystey qaabkuu dooney ugu qortey, misna dhex qotonsadey.

Waxeyna dareemeysey iney heshay lamaane kool kooliya, oo ay nafteeda u hibeyn karto, wixii maalintaa iyada ah ka dambeeyey kaalay arag halowda la hayo sheekada saacadaha faraha badan qadka lagu qaadanayo iyo jaceylka sii lexaadsanayo oo gaarey heerkii ugu sareysey ee ay gaaraan lamaane dhab isku jecel.Waqtigu is gurid oge waxaa maalintii qadka lagu kulmey kasoo wareegatey mudo 6 bilood ah, oo aan wax kulan ah oo toos ah la yeelan, qadkase wax walba leysku lahaa in kastoo in la kulmo marar badan lagu dhawaaqey hadana ma jirin balan rasmi ah oo la wada dhigtey.

Waxaana labadoodaba ku jirtey cabsi oo ma jirin mid u babac dhigi karey inuu isa soo hor taago qofkuu dunida ugu jecelyahey, isagoo lug ka balaqsiinayo, ama biro ku boodayo, armaa lakala durkaa baa labada dhan ka jirtey.

Oo Sahan waxey awoodi la'ayd iney ka hortagto wiilka ay ifka ugu jeceshahay iyadoo lug' ka balaqsiineyso, oo wax aad ugu adag ku ahaa. Samatarna wuxuu kari la'aa inuu is hor taago gacalisadiisa uu ifka ugu jecelyahey isagoo biro ku boodayo, oo ma jirin qof qofka kale arintaa uga xog waramey oo daaha uga qaaday, oo labaduba qarsoodi ayey u aheyd oo markii loo baahnaa oo ay arintu bilow aheyd leyskuma sheegin, Markaan oo leysku beermayna laguma dhicin, oo baqdin iyo armaa jaceylka laguugu cidleeyaa ayaa labada dhan ka jirtey, waxii laga meer meertaba, waxaa ugu dambeyntii qalinka lagu wada duugtey in maalinta jimcaha ah la kulmo, laguna kulmo guriga Sahan oo halkaa la isku arko.

Labada dhanna waxaa la galay diyaar garow, maadaama labo maalmood oo jaanis ah la isa siiyey, oo Samatar wuxuu soo dajistey barnaamij ah in uu matalo saaxiibkii Cartan oo lexaadiisu dhamaa, Wax walbana sidey ahaayeen uga

dhaadhiciyo, si uu u tago isagoo wax walba ka dharagsan, arintii fulinteeda ayuuna ku dhaqaaqey saaxiibkiina ka dhaa dhiciyey. Dhanka kale baan ka yareysan oo Sahan qudheeda qorshahaa oo kale bey dagtey, oo diyaarsatey walaasheed Idil wax walbana ku shubtey, arintiina u diyaarisey si ay u matasho, Iyadoo labada dhanba sidaa xooga badan loo soo diyaar garoobey baa maalinnimadii jimcaha aheyd la isa Soo wajahay.

Cartan oo matalayey saaxiibkii Samatar baa isa soo taagey halkii lagu balamiyey oo ahey K.L.4 Agagaarka Iskuulka AL-CIMRA 1, wuxuuna goobtii ugu tagey Idil oo ku sugeysey, waa la is aqoon sadey oo dharkii lagu balansanaa baa lawada sitey, La is bariidi oo qof waliba si taxadar leh buu isagoo kan kale u dhakan erayo kaftan ah uga soo ganey, iyadoo uu mid walbaba aaminsan yahey inuu la socdo kii runta ahaa ee uu u matalayey, yaase isku sheego oo ogeysiiyo in labaduba ay Jilaa yaal qatar ah yihiin.

Iyadoo sidii loo kaftamayo taxadarkiina wali jiro baa hoygii la tagey, qolkii fadhigana loo sii wada gudbey, waxaana durba dalaq soo tiri Sahantii oo sugi la'ayd oo lugtii ka balaqsiineyso, cabitaana sidda. Waxaana goobtii la isku barey Sahan iyo Cartan oo sita magacii Samatar, waxaana is bareysa Idil oo sidata magaca Sahan, ahlan iyo barasho wanaagsanna meeshii la isku yiri oo madax la isugu ruxey. Sahantii runta aheydna isaga soo baxdey qolkii, iyadoo indhaha kasoo buuxsatey midka ay u heysato inuu yahay mataankii qalbigeeda. Labadii matalayaasha oo sheekada isku dhii dhiibayo baa qadadii loo keeney oo afka isku gil giliyey sidii kuwii dhabta ahaa oo kale iskuna muujiyey xiiso aad u balaaran iyo kalgaceyl la isu qabo.

Iyadoo la kala sheeko bogtey baa galabnimadii markii la casiriyeystey dabadeed, Samatarkii beenta isku diyaariyey inuu baxo isagoo ay soo sagootineyso Sahantii iyana beenta aheyd, Wuxuuna Cartan ku guuleystey inuu oofiyo dar daarankii saaxiibkii Samatar oo ahaa inuu sawir uga soo qaado gacalisadiisa, oo uu awoodi waayey inuu hor tago, wuxuuna soo qaatey sawirkii Idil isagoo u heysto Sahanta dhabta ah.

Wuxuuna fiidnimadii ku soo laabtey xaafadii oo uu Samatar dibada u fadhiyo dhararayana imaatinkiisa, markiibana gudoonsiiyey sawirkii uu u sidey oo uu Samatar dhunkasho ku bilaabey isagoo leh 'Waaba ogaa iney sidaan u qurux badan tahey Sahan' wuxuuna saaxiibkii Cartan ka dhurtey wixii xog ahaa ee uu ula shirtagi lahaa gacalisadiisa oo ay daqiiqado dabadeed qadka ku kulmayaan. Dhanka kale Sahan oo aad ugu qanacdey Samatarkeeda waa sida ay la tahaye, baa iyana wixii xog ahaa ka dhuratey walaasheedii mataleysey, dabadeedna taleefankii kasoo shanqarisey.

Durbana waxaa daf yiri Samatarkii oo sugi la'aa xabiibti iyo xabiibi baa meeshii ka bilaabatey, oo iska arag sida la isugu dhiibayo oo la isaga dhigayo ineyba yihiin kuwii maanta kulmey. Waxbaa ka dhacey oo hadii uu waayuhu kuu saamixi lahaa inaad aragto, waxaad qiri laheyd ineyba yihiin kuwii maantoo dhan wada joogey, oo shakiba kaama gali laheyn, lamaanaha isjecel ee hadana naafanimadooda la kala baqayo.

Sahan iyo Samatar Waa uu sii socdey xiriirkooda kalgacal oo cirkaa isku shareeryey, iyadoo markii kulan leysla gartana ay matalayaasha soo fulinayaan, sidii looga baahnaana ay howsha usoo gudanayaan. Maalin kastaaba waji bey leedahay waxaaba dhacdey in ay si dhab ah isaga heleen labadii wax mataleysey, oo mid waliba goonidii jaceylkiisa u qarsado, isagoo is leh ha

bur burinin jaceylka dhisan ee aad mataleyso, guusha iyo horumarkana aad la jeceshahay. Waa la adkeystey intii la karayey aadanena is celin karey, ha yeeshee xergihii ayaa la soo wada goostey, oo xaqiiqadii baa dhankooda ugu qaraxdey.

Runtana la isku dhii dhiibay, waxeyna is fahamsiiyeen iney labaduba matalaayaal yihiin, dadka ay matalaayaana faraha isugu fiiqeen. Waxeyna go'aansadeen in ay wataan xiriirkooda dhabta ah, oo isla sii laba lisaan, waayahana u daayaan lamaanayaasha ay matalayaan, ee Naafanimada u kala baqayo, Markey fursad u helaana ay xaqiiqada dhankooda ka ogeysiiyaan, arintoodana sir qarsoodi ah u ahaato oo ayan cidi ka ogaan, waxaana halkaa Cartan iyo Idil uga bilowday xiriir kalgacal oo xiisuhu hogaaminayo.

Waa balan iyo anaa igu ogtahey beyna qalinka isugu duugeen, waxeyna wateen kulamadooda joogtada ah, iyagoo kulmayey xiliga lamaanayaasha ay matalaan faraan iyo xiliyo iyaga u gooni ah oo ay ku kulmayeen meelo qaas ah, oo aan cid kale la ogeyn. Xiriirkii baa Afar geesood isku rogey, walow aysan warba u heynin kuwa la matalayo, oo arinta laga qarsadey fursadna lala sugayo, Wuxuuna xiriirkii isku shareerey samadaa oo hamuunta caashaq ee aan duugoobin ee leysku hayo lama soo koobi karo, har iyo habeen waa loo heelanaa oo heegan loogu jirey.

Maahan mid la soo koobi karo misna la cabiro karo Kalgaceylkooda, iyadoo uu xiriirkii sidaa u socdo, bey lamaanihii la matalayey ku heshiiyeen iney dalxiis u aadaan degmadii udgooneyd arligana qurxooneyd ee AFGOOYE, halkaana kusoo galaan sawiro taariikhi ah, kuna soo tamshleeyaan maalinnimada jimcaha ah ee fooda ku soo heyso. Sidii caadada aheydna waxey wada war galiyeen

lamaanihii kale oo sirtooda u qarsaneyd matalayeyna, iyagiina war kama soo celin oo wey soo dhaweeyeen waana wax ay u baahnaayeen.

Waxaana maalintii la balamey ee jimcaha aheyd, barqadiiba gacmaha is qabsadey lamaanihii Cartan iyo Idil ahaa oo ismatalayo, saaxiibadoodna matalayo. Waxeyna dhakada kaga dhaceen gawaarida caasiyada ah ee laga raro K.L.4 oo aado Degmada AFGOOYE, waxeyna tageen oo ay kusoo tamashleeyeen mucaashiqiintii beerihii bilicda loo dhameeyey ee deegaanka AFGOOYE caanka ku ahaa.

Sawirana leysku soo bash kaxleeyey, iyadoo aad yaabeysid kal gacalka baaxada weyn ee ay isku hayaan lamaanahaa iyaga ah, iyo heerka uu gaarey xiriirkooda kalgacal, ee samadaa ka babanayo. Waxeyna galabnimadii kasoo caraabeen dagmadii AFGOOYE, caasiyadii kusoo jeeday Muqdishana mid ka mid ahna kasoo raaceen.

Gaarigii caasiga ahaa baa lasoo xawaareeyey, oo si xowli ah ku xoomayey, sida caadada u ah darawalada aagaas ka shaqeysa, oo aan u aabo yeelin bur burka ka muuqda Wadada. Nasiib darase markii uu marayey agagaarka BAAR XARAF ee deegaanka GARASBAALEEY, buu afartiisii lugood cirka aadiyey oo iska daba rog rogmadey, Mar qura ayeyna Rakaabkii ka yeertey ba'ay balow iyo buuq, waxaana Gaariga masiibadu ka dhacday kusoo xoomey oo u soo gar gaarey gawaari kale oo wadada socotey iyo dadkii daganaa deegaanka GARASBAALEY, Waxeyna ka soo hoos bixiyeen gaarigii dad badan oo dhaawacmey iyo kuwo geeriyoodey, nasiib daro dadkii goobtaa ku nafwaayey waxaa ka mid ahaa Cartan iyo Idil oo ahaa mucaashiqiintii mustaqbalkooda u go-gol xaarayey.

Waxaana dadkii dhaawaca ahaa iyo kuwii geeriyoodeyba lagu daad gureeyey gawaari kale oo XAMAR la beegsatey, warkii dhiilada lahaa baa meel walbaba gaarey. Cid walba oo Afgooye looga maqnaana isbitaal MADIINO oo dhaawacii iyo meydadkiiba la keeney bey soo beegsatey, Ba'ayaayda isbitaalka ka baxeyso ma aheyn mid aad markaasi u adkeysan kartey iyo sida dadku u bur burey. Waxaana dadkii meydadkooda halkaa kala caraabey kamid ahaa reer Dhaahiro iyo reer Munasar oo kala qaatey meydadkii lamaanihii is jeclaa ee Cartan iyo Idil.

Arintaasi dad badan ayey murugo baaxad weyn ku reebtey, waxaase ugu darnaa Sahan iyo Samatar oo mid waliba aaminsanaa in jaceylkiisii ifka ku cidleeyey. Waxaana labadoodii kasoo harey aamusnaan, waxaana haleeshey jiro aan la garaneyn, oo raashinkii iyo cabitaankiiba u diidey. Waxeyna dadka bad ka aamin sanaayeen, labadooduba iney yihiin dad saaxiibadoodii geeriyoodey aad oga xun, misna uga tiiraayeysan. Sirta u qarsoona lama ogeyn oo xitaa Sahan arinta lama ogeyn reerka intiisa kale, waxaa lagu bilaabey dadaal lagu dajinayo yaase ku dagayo oo Sahan waxeyba huufeysaa dunidan iyada dhibka iyo rafaadka la daba taagan, oo ay garan la' dahey waxey ka haleysey.

Samatar qudhiisa kama liito oo wuxuu is weydiinaayey, gacalisadaada ma waxey dhimatey adigoo been u sheegayo oo aysan ku arkin, nasiib xumidaa hadana dambi badanidaa. Yaa hadda kuu saamaxaayo, beentii iyo barabagaandadii aad Sahan ku waday, erayadaa iyo kuwo kaloo badan buu isna iskula guuxayey, Dadaal dheer oo ay dhan waliba wadeen, waxaa suuro gashey iney xoogaa ka soo roonaadaan labadoodii is moogaa, yaase mid waliba u sheego inuu jaceylkiisii noolyahey, halkiisiina ka sii laba lisi karo, Si kastaba xaalku ha

u cakirnaadee, dhowr bilood kadib waxaa u suuro gashey Samatar inuu wadanka isaga tago ka gadaale markii uu wiil ay walaalo ahaayeen oo dalka SWEDEN ku noolaa uu soo dhameeyey Viso u ku tago SWEDEN, sidaana dalkii isaga tagey oo maciin biday qurbaha iyo qaxootinimada.

Dhanka kale Sahan waxaa maalinba maalinta xigta soo yaraanayey rajada ay ka qabto iney wadanka sii joogto, maadaama ay wehelkeedii labaad ku weysay, waxeyna ku fikireysey iney isaga tagto oo qurbaha maciin bido nasiibkeedana baroobeysato. Waxeyna arintii ay ku fikirtey u bandhigatey ay Dhaahiro iyo ay Maano oo ay si dagan misna xikmadeysan oo ay kasoo fikirtay kana soo baaraan dagtay ugu sharaxday, Iyagiina markii ay ka dhureen bey ku yiraahdeen ma xumo, iyadoo ay Maano u sheegtey ineysan kala harin labadooda, waxeyna fikir dheer iyo talo gorfeyn kadib arin ku gooyeen iney kista ay heystaan la abaaraan kana mid noqdaan dadkan Soomaaliyed ee u Tahriibayo dalka LIIBIYA.

Halkaana dalka TALYANIGA iyo Yurubta Janaad ka galayo, oo dhowr Sahan asxaabteeda ah oo wadadaana marey ay kala soo hadleen Talyaaniga, wax walbaana iney sahlanyihiin usoo sheegeen.

Markaan YURUB baa loo soo jiheystey, Dhaahiro iyo gabadheeda oo aan hami dibadeed qabin wax badana soo joogey qurbo baa yiri faataxadaan idiin soo mareynaaye garabkiina lexaata garoor, oo anaga safar iyo qurbo dambe naguma jiro, Waxeyna u sii balan qaadeen iney dhankooda gacan ka geysan doonaan safarkaa isaga ah, sunuudana ka taageeri doonaan hadii ay ka go'do, Waxey Sahan iyo habartii Maano aheyd ee aan ka harin galeen diyaar garow safar in

kastoo ay ogsoonyihiin xanuunkiisa, misna ay xasuustaan balaayadii bada ku qabsatay. Si kasta ha ahaato arintuye, waxey Sahan iyo Maanaba Aroor hore soo abaareen halka uu ka xigo suuqa weyn ee BAKAARAHA, halkaasoo ay ka baxaan gawaarida u gooshta magaalada LUUQ ee Gobolka Gedo oo ahayd halka ujeedkoodu ahaa, maxaa yeeley waxey damacsanaayeen iney uga sii talaabaan dalka Ethoepia.

Waxaana subaxaa soo sagootiyey reer kii oo idil, oo la joogey ilaa uu ka dhaqaajiyo gaarigii ay saarnaayeen oo ahaa nooca loo yaaqo Innataree, wuxuuna gaarigii dhaqaajiyey duhurnimadii isagoo safarkiisa bilaabanayo. Macsalaama iyo bye bye baa la islahaa ilaa uu gaarigooda ka mirqo, iyadoo amuuraha safarkooda si wanaagasan iskula meel dhigeen Dhaahiro. Gaarigii waxa uu wadihii sheelaraha u hayó oo ay soo gudbeen degmadii Afgooye bey wax xoogaa ku nasteen degmada WALAWEYN ee Gobolka Sh. Hoose, waxna ka cuneen, dabadeedna kasii dhaqaajiyeen, oo afka saareen dhinaca Degmada BUUR HAKABA ee Gobolka Baay.

Waxeyna dadkii gaariga saarnaa oo ay u aheyd intooda badan markii ugu horeysey ee ay wadadan soo maraan, si aad ah ugu riyaaqeen indhahana uga buuxsadeen bilicsamaanta BUUR HAKABA, oo markii ay meel dheer uga soo muuqatey ula ekeed kalarka guduudka iyo jaalaha oo indhaha u roonaa. Waxey badi soo xusuusteen intii fanka ku xeel dheereyd heestii uu ku luuqeynayey fanaanka caanka ah ee Xasan Aadan Samatar, oo miraheedu ka mid ahaayeen" Haakaba banaanshee buurtoo kitaaloo banoodaa balanteena haaytee' Waxeyna rakaabkii bilaabeen iney heestaa isla jiibiyaan, Sahanse sidaa kuma aheyn fanka, waxeyna la yaabka la wadaagtey dadka intiisa kale.

Walow ay horey ugu martey meesha iyadoo lugeyneyso oo caga bararan misna calool bararan, miir iyo indho ay wax ku aragtana laheyn, Waxey un indhaha la raaceysey buurtaan cajaa' ibta badan, dhanka midig oo ay buurtu kaga beegneyd beyna ku sii jeedey, waxeyna habeenkaa dhaxeen rakaabkii ay Sahan iyo Maano kamid ahaayeen degmada BUUR HAKABA.

Waxeyna aroornimadii markii uu waagu baryey qoraxdiina indhaha kala qaaday kasii dhaqaajiyeen halkii, iyagoo ka sii iibsadey Caano qiimahoodu aad u jabnaa, misna saafi ah oo ay wadada kusii cabaan, Waxey soo xawaareeyaan oo waduhu gaariga sheelaraha cagta ku xoojiyo, waxey soo galeen magaaladii BEYDHABA ee xarunta Gobolka Baay aheyd, oo xiligaa aad u barwaaqeysneyd.

Doogga wada cagaaran iyo biyaha isku gooshayo magaalada ee ka soo burqanyey ISHA BEYDHABO aad yaabeyso bilicdooda, Dad badan oo rakaabkii ka mid ah ayna ugu horeysey Sahan baa aad ugu riyaaqey, bilicdaan indhaha u roon, waxaana qaar ka mid ah rakaabka oo maqaayado halkaa ku yiiley wax ka cunayey, Dhagaha la raacayeen heestii uu ku luuqeynayey Al fanaan Xasan Aadan oo markaa ka shidneyd makhaayadii ay wax ka cunayeen.

Waxaana Miraheeda kamid ahaa "Bardihii kuyiil Isha Beydhabo intuu Gun iyo Baar baxey, Caleemuhu Balaarteen, Baxar Saar Lamoodeey'. Dhowr saacadood bey magaaladii Beydhabo Janaay aheyd ku nasteen Rakaabkii weyna kasii amba baxeen, iyagoo soo marey Degmada BARDAALE, iyo deegaano badan, oo aysan midkoodna ku hakan, waduhuna uu xawaaraha inuu sii kordhiyo mooyee uusan dhimeynin. Waxeyna ugu dambeyntii soo gaareen magaaladii ujeedku ahaa ee LUUQ GANAANE, oo iyana aan bilic ka yareysan

magaalooyinkii lasoo dhaafey, Wabiga weyn ee quruxda badan ee dhex mara magaalada ee u dgoonka kasoo baxayey.

Markii ay tafaha isku xaaqeen roobkii iyo ciidii udgooneyd baan laga sheekeyn karin, misna kaalay arag doogga wada cagaaran ee indhahaada deeqayo, waa mid aan la qiyaasi karin, inuu qudhiisa saaro qofka mooyee. Magaaladii LUUQ GANAANE baa gaarigii looga daatey, waxaana laga sii qabsadey gawaari kale oo yar yar, kuwaasoo kusii jeedey Degmada DOOLOW, oo ah halku uu rasmi ahaan Tahriibkooda qarda jeexa uga bilaaban doono.

Wuxuu lasoo guuxaba Gaarigii ay la socdeen Sahan iyo Maano, wuxuu goor dambe soo gaarey isagoo aan meelna ku hakan magaaladii DOOLOW aheyd. Oo markaa camirneyd, barwaaqadana laga dheehanayey, waxayna indhuhu qabanayeen wabiga ay caanka ku tahey ee weyn oo ay Biyaha ka dur durayaan. Dadkii baa halkii gaarigii uga daatey, waxaana fartana loogu fiiqay iney ka talaabaan wabigan oo ay uga sii gudbaan DOOLOW-da kale oo loogu yeerayey DOOLOW ITHOPIA loona sheegay iney markaa ku dhex jiraan xuduuda dalka ujeedkoodu ahaa ee Etheopia.

Sidii la farey ayeyna faleen Sahan iyo intii la socotey, waxeyna nasiib wanaag markii ay usoo talaabeen dhanka DOOLOW-da Etheopia waxey meeshii ka heleen gaari Dono ah ama Sitey oo ula soo dhaqaaqey xaga magaalada NAGEYLE ee dalka Etheopia. Gaarigiina wuxuu isna markiisa lasoo xoomo lana soo xawaareeyo, wuxuu ugu dambeyntii keenay magaaladii NAGEYLE aheyd, oo ay habeenkii Hotel ku yiilay ku hoydeen, si ay maalinta bari ah Safarkooda usii wataan.

Waxeyna Aroortii qaar kamid ah dadkii ay wada socdeen Sahan iyo Maano, kuwooda ugu fur furnaan arimahana ugu

xil saarnaa, usoo dhaqaaqeen dhankii magaalada si somalida meesha ku nool ee deegaanka ah uga raadsadaan caawinaad iyo iney ku hagaan halka hiig sigoodu yahay ee ADIS ABABA, Waxaana nasiib wanaag ay helen caawinaadii ay u baah naayeen, iyadoo loo habeeyey kaarar ay basaska dowlada ku raaci karaan, waqtina iskama luminne isla galabnimadiiba waxey soo raaceen baskii kusoo jeeday xaga magaalada ADIS ABABA ee caasimada dalka Etheopia.

Wadihii Baskana marshada ayuu u rogay oo wadadii buu cagta saarey, wuxuuna markii uu gabalku dhacay misna dhowr saacadood soo xiiminayey, bareega ku qabtey magaalada SHASHAMANE, isagoo rakaabkii ku wargaliyey iney Caawa halkan dhaxayaan kuna nasanayaan. Waxeyna habeenkaa dhamaan rakaabkii wada dhaxeen kuna hoydeen magaaladii SHASHAMANE aheyd Hoteelo ku yiilay, waagii markuu samo ugu baryeyna waqti iskama lumin oo waa ay ka soo dhaqaajiyeen, wadihiina gaarigii ayuu wadada kusoo dhigay, wixii galayeyna galiyey, si uu xawaaraha gaariga u xoojiyo, Markii uu lasoo bax bax lahaa dhowr saacadood oo aan kala go' laheyn misna aanan meelna lagu hakaneynin buu magaaladii ADIS ABABA aheyd madaxa lasoo galay, Rakaabkiina halkaas ku hoobta lagu yiri.

Qof walibana waxaa u yimid qofkii sugayey, oo meesha xaadir ugu ahaa, qofkaan la sugeynine wadada ayuu qabsadey, Sahan iyo habar Maano waxey nasiib wanaag ka mid ahaayeen dadkii goobtaa lagu sugayey, ileen howsha waxaa la wado Dhaahiro oo macaariifteedu badanyihiin. Si diiran baana goobtii loogu soo dhaweeyey, oo la geeyey guri magaalada ADIS ABABA bartamaheeda ku yiilay, oo balantu aheyd iney joogaan kuna nastaan inta howshooda safarka uga dhamaaneyso.

Dadka reer Etheopia waa dad dhaqankooda uu ka duwanyahay keena Soomaliga ah, mana ahan dad is caawiya sideena, oo waxay aaminsantihiin in qof kastaaba tiisa la kali noqdo, Waxaadna ku arkeysaa wiil iyo walaalkii kala ah faqri kan ugu liita iyo taajir kan ugu sareeya, oo aan wax caawimaad ah isa siineyn iskana sugeynin, Sidoo kale waa dad aan nadaafad badneyn, isagana dambeeya sida ay u kala xoog badanyihiin, oo waxaad meelaha qaar ku arkeysaa in xaafadaha badankood ay leedahay kaabe xoog ku faanaya, oo laga wada dambeeyo, Waa dad inta badan ku dagaalama dhagaxa, marka dhanka kale laga eego waa dal cimilo ahaan qabow u badan, waxaana ku nool Somali aad u fara badan, oo ku yaacay dagaaladii sokeeye kadib iyo kuwo deegaan ahaan daga oo ka tirsan dhulka Somalida laga heysto ee Etheopia.

Dhinaca kale waxaa durba la galay sidii loogu fududeyn lahaa safarkooda Tahriibka ah Sahan iyo Maano, waxaana u suura gashey in todobaad gudihii loogu soo dhameeyo baasabooradii Etheopia-ka ahaa, oo laaluush iyo is daba marin loogu soo saaro, si ay ugu safraan xuduudana uga talaabaan. Waxaana maalinnimo Khamiis ah aroor hore lasoo saarey Bas kusoo jeedey magaalada DABRAMARKOS ee dalkaasi Etheopia, wuxuuna baskii oo ku dhawaad 11 saacadood lasoo gab gab lahaa keeney magaaladii DABRAMARKOS, oo ay habeenkaa dhaxeen. Waxeyna aroortii kasii raaceen bas kale oo ku wajahnaa gobolka BAXARADAR ee Etheopia, halkaasoo markii ay tageen habeenkii labaad ku dhexeen. Sahan iyo Maano safarkan waa u yara dhaamay, kii hore oo dal nidaam iyo nabadgalyo ka jirto ayey ku dhex socdaan, meel kasta oo la dhaxayana si sharci ah ayey ku joogaan oo cabsi kuma jirin.Magaalada BAXARADAR oo aheyd mid bilicsan baa dadkii soo jiidatey, waana magaalada ay ka

bilaabato harada weyn ee TAANA, waxaana maro wabiga caanka ah ee NIILKA, kaasoo ay wadaagaan dalal dhowr ah sida Etheopian, Sudan, Masan Ugandha.

Waxeyna Magaalada BAXARADAR oo bilicdeeda soo jiidatay Sahan iyo intii la socoteyba isku diyaariyeen iney kasii socdaalaan oo ay safarkooda sii wataan, iyagoo Aroornimadiiba kasii raacay Buss kusii jeeday magaalada GONDHAR ee dalkaasi Etheopian, Baskiina wuxuu lasoo hab hableeyo buu isagoo meelna ku hakan halkii ay doonayeen iyo magaaladii GONDHAR aheyd keenay, waa dad la hagayo misna la hogaaminayee.

Waxaa loo sheegay in caawana ay dhixi doonaan magaalada GONDHAR, Barina ay uga kasii gudbi doonaan magaalada SHEERI ee dalkaasi Etheopia tikidhadoodana faraha ayaa laga sii saarey inta loo soo jaray. Sidii caadada u aheydna markii uu waaga samo ugu baryey bey Basaskii loo far muuqay dhakada kaga soo dhaceen una soo jiheysteen halkii ay ka xigtay magaalada SHEERI, oo wuxuu Baskii lasoo shab shableeyaba shukub kusoo dhex siiyey, sheekadana waa iga dhantahay ku yiri.

Iyagiina inta ka daateen bey u baratameen Bas kale oo markaa baxayey kuna sii jeeday magaalada ugu dambeysa dalka Etheopia ee MATAMMA.

Sahan iyo Maano aad bey ugu faraxsanaayeen sida uu illaa hada safarka ugu dhib yar yahay, waxeyna is tusinayeen sida fudud ee ay uga talaabayaa Xuduudii Etheopia uguna talaabayaa tii dalka Sudan, Magaalada ugu dambeysa dalka Etheopia dhanka Xuduuda Sudan ee MATAMMA, waa magaalo ku caan ah doox biyo mareen ah, oo labada dhan u kaga kala suranyahay Calamada dalalka Etheopia iyo Sudan,

waano magaalo xuduudeed bilic loo dhameeyey, Sahan iyo intii safarka ku wehlisay halkii ayey socod Cagta ah kaga soo talaabeen markii Baskii ay ka dageen, waxeyna usoo gudbeen dhinacii dalka Sudan gaar ahaan magaalada QALAABAAD, iyagoo sharciyadooda iyo Pasaporadoodaba gacmaha ku sita.

Markii ay gudaha dalka Sudan usoo galeena waxey durba raadsadeen halkii ay ka baxayeen Basaska ku sii jeeda magaalada QADAARIF ee dalka Sudan, oo ay ku tiilay xaruntii ay iska diiwaan galin lahaayeen, waxeyna soo qaateen Baskii oo keenay xaruntii oo laga diiwaan galiyey dhamaantood. Markii howlahooda is diiwan galinta loo soo dhameeyey, bey afka aadiyeen bartamihii magaalada QADAARIF ee dalka Sudan, si ay uga sii wataan safarkooda ugana sii raacaan Basaska kusii jeeda magaalada caasimada u ah dalka Sudan ee KHARTUUM.

Nasiib wanaagna kuma dhibtoon oo markiiba Bas ayaa kasoo qaaday oo lasoo beegsaday Magaalada KHARTUUM ee caasimada dalka Sudan. Wuxuuna Baskii siduu ula soo xiimayey, isagoo aad yaabeyso xawaaraha uu ku socdo buu magaaladii ujeedka ahaa ee KHARTUUM bartankeeda bareegii ugu qabtey, qof kastaana lagu yiri beegso halkuu ujeedkaadu ahaa.

Waxeyna Sahan, Maano iyo dadkii Tahriibayaasha ahaa ee la socday abaareen halkii ay ka xigeen Hoteelo ay lahaayeen dad Etheopian ah, oo ahaa kuwa ugu raqiisan ama ugu qiimo jaban magaalada KHARTUUM. Sahan iyo habartiina dadkii Hoteeladaa dagay ayey ka mid ahaayeen, waxeyna magaaladii KHARTUUM ku sugnaayeen mudo Labo Todobaad ah, oo ay xaalada u kuur galayeen, Wax walbana markii ay ka dhargeen, xog ku filana soo heleen, bey isku diyaariyeen iney

safarkoodii Tahriibka ahaa sii wataan. Dalka Suudan waa dal cimilo ahaan kulul, dadkiisana waa dad dagan soo dhweyn badan, in kastoo ay ku jiraan dad been badan, oo hadii aad daba gasho boholo aadan kasoo bixi karin kugu ridayo.

Dalka Sudan uma dhisno sida dalalka carabeed ee ay Sahan soo martey, sida Sacduudiga, maadaama u ka dhaqaala yar yahay, dadkiisana waa dad farsamooyin kala duwan ku shqeysta. Waa dad aqoonta xageeda hiigsada, waxaana u badan raashinka laga cuno ugu caansan FUULKA, waa dal Suugaanta aad looga qiimeeyo lagana jecelyahay.

Si kastaba ha ahaatee waxey Sahan iyo asxaabtii ay isla Tahriibayeen la xiriireen ragii howshaa Tahriibinta ah watey, oo durbadiiba qaabiley, waxaana la geeyey guryo ay dadka Tahriibka ah ugu talagaleen, iney isugu geeyaan si ay halkaa mar kaliya uga wadaan una Tahriibiyaan.

Sahan iyo Asxaabteeda Tahriibku is baday waxeyna meeshii lageeyey ku sugnaayeen mudo 3 cesho, oo aan xabsi dhaamin, waxaana maalintii Afaraad iyagoo gaarayo 70 ruux lagu daabuley gaari weyn, oo daboolan, Waxaana sidaa ugu bilowday Tahriibkii dhabta ahaa ee loo soo tafa xeetay. Gaarigii dadka sida xoolaha la isku dul saarey, baa dadkii oo qaar kamid ah neeftu dhibeyso meel ay hawo ka qaataana la', fariinka ku qabtey meel saxaro ah oo banaan, oo ay ku sugayeen labo Gaari oo Toyoto ama Nooca Somalida u taqaano C/Bile ah.

Tahriibayaashii baa halkii lagu daadiyey, waxaana Gawaarida dul saarnaa midkiiba 5 fuusto oo shidaal iyo biyo ah, raashinka la sitana u dheeryahey, wuxuna waa Tayoto yar dadkuna waa 70 Ruux. Labadii gaari baa min 35 loogu raseeyey dadkii sidii alaab la rarayana leysku ciriiriyey, iyagoo

yaaban, afkiina juuqda gabay baa goobtii lagala caraabey oo saxarihii afka loo saarey gawaaridii, Waxaana lagu wargaliyey in ay gawaarida socon daanaan maalintii oo dhan, habeenkiina hakan doonaan oo saxaraha lagu hoyan doono. Sidaa lagu wargaliyey ayeyna ku soo socdeen mudo 4-cesho ah, oo aan xaalka laga faaloon karin, waxaana gabaabsi ku noqdey biyihii iyo raashinkii.

Iyadoo la yaaban yahey buu hadana nasiib daro Labadii gaari mid kamid ah meel xun ka jabay maarana loo waayey, waxaana lagu suganyahay bartamaha Saxaraha oo meel dad ku noolyahay uma dhawa. Waxaana bilaabatey indho mirig mirig ka siin iyo murugo hor leh, waxaana dadkii la socdey gaariga jabey iyo kuwii kan badka qaba saarnaa lagu war giliyey in goobta looga wada tagi doono iyaga iyo Gaariga jaban, si gaarigaan kale uu ugu doono qalabka jabay Tuulada u dhow, xal aan kaa aheyna aan loo heynin.

Dadkii oo baqdin darteen wadnuhu xowli u garaacmayo, baa arintii la laqsiiyey, goobtiina looga dhaqaaqey, waxaana dadkii oo idil u bilowdey rafaad intiisii ugu xanuunka iyo xakaarka badneyd, AAAH, waa meel cidlo ah oo aan ciirsi laheyn, cunadii iyo cabitaankiina gabaabsi ku yahay.

Waxaa lasii marayaa maalintii Labaad, wax soo socdana majiraan, wixii raashin iyo biyo ahaa ee loo reebeyna dhamaadeen indho mirig kasiin iyo af juuqdii gabay baa dadkii kasoo harey.

Dadkii talo isugu jeestey, qaar baa go'aansadey iney iska sii luudaan oo eegaan halka naftu ku sinto, qaarna bartooda ayey go'aan sadeen iney ku sugaan kuwii waa idiin soo laabaneynaa ku yiri oo rajo ay ka qabaan iney usoo laabtaan, meeshan ka wadaan. Waxaa gadaal leyska mariyey 9 cesho oo cuno iyo

biyo aan midna laheysan, waxaa isbadaley dhogortii dadka oo idil, wax fadhiyana ma jirin. Oo dhul ku rafasho ayaa lagu wada jirey, cad ceeda kuleylkeedana lagama faaloon karo, oo waa halkii ugu sareysey saxrana u dheertahay meel looga gambadana ma jirto.

Ashahaatinka ka baxaya goobta waad yaabeysaa, qaarbaa inta kaadi iska raadiyey caagag ay wateen ku shubtey oo bilaabey iney dhuunta ku qoystaan kaadidoodii oo ay naftooda ku sasabaan. Waxaana meeshii ka dhacdey in waxa ugu qiimo badan ee dhuunta lagu qoysan karo ay noqoto Kaadidii Dadka, oo qofkii kaadi meel ugu jirtey laga baryo lagana codsado in uu un dhuunta u qooyo, naftana u bad baadiyo. Xaaladii baa sii cakirantey oo mar kaliya bey Afar Ruux oo 3 kamid ahi rag tahey midna dumar aheyd bilaabeen rafasho iyo Hinqasho Ashahaatin la socdo, intii nuuxsan kartey iyo intii dhulka bilqaneydba, war kaadida afka ugu qooya oo ku dhibciya naftaa ka socotee baa goobtii ka wada yeertey. Intii kartey baa kaadidii oo la masuugayo afkii ugu dhib dhibcisey, waxse uma tarine tii Allaa dadkii ku timid oo 4-toodii jiiteen, naftuna deysay, iyadoo kaadi nijaas ah afka loogu dhibcinayao lana doonayo in lagu bad baadiyo oo aan wax kale loo heyn.

Waxaana la garan waayey si meydkaan ku urayo hadhow leys kaaga fogeeyo, oo tabar dari jirtey awgeed lama awoodin in caadi loo Aaso, intii ugu rooneyd ee dhaqaaqi kareysey baa 4-tii ruux meydkoodii kasoo tuurey Bacaad sidii buur u sameysnaa oo ay dul saarnaayeen.

Waxeyna meeshan Sare markii horaba u koreen si hadii wax usoo gurman karo jiraan ay u arkaan, xaaladii meeshaa kuma ekaanine waxaa guud ahaan la wada noqdey mowd sugayaal. Miirku kusii wada yar yahay, qof walibana wuxuu maanka

galiyey in meeshan nafta uga baxeyso oo uu ku sugayo Malakul mowdka. Markii hore waxaa jirtey in la sii dar daarmee, hadda tii wey dhamaatey oo qof waliba anaa socdo oo ifka ka sii hijroonayo ayuu ku leeyahay ee iyaasiimiya.

Oo cid dar daaran kaa dhageysaneyso maba jirin, dadka qaarna xoogaa Enerjiga ceshta oo ha iska dhameynina hadlkana iska daaya baa ku jirtey. Wax usoo gurmada majirin, meeshuna dad iyo duunyaba kama dhaweyn oo waa saxaro banaan ah, waxaa la sii marayaa maalintii 25 aad, oo aan la heysan wax la cuno iyo wax la cabo toona xitaa kaadidii waa ka dhamaatay. Maalin kastana qof iyo labaa sii jiidanayo oo meydkii markii hore laga tuurayey meesha ma jirto, tabartaa deyrisey, meeshiisa ayuuna ku urayaa, yaase iskaba dareemi oo u miirba leh, waxna usoo urayaanba, Waa la socdaa oo cid ku fikireysey majirin, nolol baa kuu harsan oo waa leys wada jiheeyey, nololna laga wada quustay, nasiib daro dadkii faraha badnaa ee goobtaa ku nafwaayey.

Waxaa ka mid aheyd islaantii Maano aheyd ee ay Sahan ifka ugu jecleyd ehel iyo qaraabana u aheyd, aduunyadana ay ku weheshaneysay, marka Sahan waxaa la dhihi karaa Ifka waa ku Kali noqotey, Sahan Arintaa murugada u gaarka ah leh, aad ayey uga xanuunsatey misna uga xumaatey, waxey u tari karteyna ma jirin, oo xitaa ilintii ayey iska weydey, wax kale iska daaye, Waxeyna aheyd mid markeeda malakamowdka sugeyso, misna ku taameyso ineysan ka harin Maano, maadaama Wehel kale aysan dunida ku laheyn.

Waxaana wax walba Sahan uga xanuun badnaa, Hooyadii u soo rafaadey oo uu meydkeedii ku Agteeda ku urayo, misna ku dhinac bararayo, oo baqi rabo. Ayna xitaa u awoodin iney Aasto ama iska fogeyso, dunida wax walbaaba wax baa kasii

xanuun badan, xaalka meesha ka jirey iyo xanuunkiisana xad dhaaf buu ahaa, Iyadoo xaaladaa murugada iyo xanuunka badan lagu sugan yahay, lana marayo maalintii 28 aad, baa waxaa meesha ku soo marey gaari ay la socdaan dhowr ruux oo Tahriibiyayaal ah kana soo laabtay dhanka Liibiya oo ay dad u Tahriibiyeen.

Gaarigii ayaa ku soo leexdey oo dareemey urka meesha ka soo baxayo, oo cid u baaqdey ma jirin, saa waa la wada yiiley oo meydkaba waxba lama dhaamin. Markiibana kuwii watey gaariga waxey gar gaar deg deg ah u fidiyeen intii nafi ku jirtey, oo ay biyo iyo raashinba afka u giliyeen misna ku bil bileen biyihii, si ay usoo yara miirsadaan. Dadkii meydka ahaana goobtii ayey ku Aaseen, dadka u soo gurmadey oo ahaa kuwo aad u naxariis badan baa dadkii Tahriibayaasha ka bad baaday ula sii jihoodey xaga LIIBIYA oo uu ujeedkoodu ahaa Tahriibayaasha.

Inkastoo inta badan dadka aysan miir la heyn, hadana maskaxdooda waa joogtey waxeyna ku farax sanaayeen in iyagoo nafi kusii jirto la geynayo Liibiyadii ay u soo rafaadeen, Rafiiqyadoodii qaaliga ahaan darteed ku soo waayeen. Waxaana sidii loola soo jibaaxayey Bacaadka sidii Buuraha u sameysmay la soo gaarsiiyey, Tuulada KUFRA ee gudaha wadanka LIIBIYA, iyagoo markan soo naaxey oo sidii hore dhaama, Waxaana Kooxihii Tahriibiyayaasha oo is wada yaqaanay ay ku wareejiyeen Kooxdii markii hore soo tahriibisay ee saxaraha uga soo tagtey kuwii meesha u jooga, maadaama dadkan Qarashkooda ay iyaga qabaan, Nasiib wanaagna iyagiina wey la tacaaleen oo waxba ulama harin.

Markii ay mudo sedex cesho ah halkii ku gar gaareen, dadkiina kasoo yara wanaagsanaadeen intii hore bey lasoo

beegsadeen magaalada BAN QAASIM ee gudaha dalka Liibiya oo Somali joogtey, Soomaalidii magaalada BAN QAASIM joogtey baa dhankooda ka sii caawiyey dhibanayaashii, una sameeyey kaarar sharci ah oo ay kusii joogi kareen Wadanka kuwaasoo loogu yeerayey AL CARAB. Markii Kaararkooda gacanta loo galiyey baa halkii Bas laga saarey, iyagoo kusii jeedey magaalada caasimada ah ee TIREBULES, oo loo sheegay iney ka heli doonaan caawinaad buuxda iyo dad kusii haga wadada Tahriibka Bada ee ay wali damacsanyihiin, oo kuma quus qaadan Saxarihii ay barkood kusoo dhinteen.

Baskii siduu usoo waday ayuu keenay magaalada caasimada ah ee TIREBULES, Waxaana lagu sii hogaamiyey oo dadkii hagayey geeyeen kaamkii ay Soomaalidu kaga jirtey magaalada TIREBULES oo ahaa mid ruux waliba uu Jeebkiisa ku tashanayo, Jiifse ka helayo. Waxaana dadkii oo rafaad fara badan ka muuqdey soo dhaweeyey Soomaalidii meesha ku jirtey ee uga soo horeysey, Sahan oo miirsatey baa markan bilowdey murugo iyo ciil ay kaligeed u gaar tahey, waxey aad uga xumeyd geeridii naxdinta laheyd ku timid hooyadeed Maano. Waxeyna isku canaa naneysey iney wax walbaaba iyada u sabab tahay, masiibo kastaa oo dhacdayna ka mas'uul tahay iyada, waxey is tusiday iney yaraanteedii howdka kula Orodey walaalkeed Dhaqane bahalana siisey oo sababtey dhimashadiisa.

Hadana miskiintii Idil aheyd ee Walaashatay ay dhimashadeeda sabab u noqotey oo balaayo qoorta u gilisey, jaceylkaadiina geeridiisa iyada u sabab noqotey, Hooyadeed Maanana oo wax walba u hurteyna, iyadoo iska ladan soo wadey Saxarahana meydkeeda uga soo tagtay, Waxey si adag hoose isaga laheyd Wallee masiibaa tahey ismana ogid, waadse

is ogaateye bal horta waa su'aale, maxaa dhibaatada ku badey dadkana aad u badaa adigoon ugu dan laheyn Shaneey?"

Su'aalahaa iyo kuwo kale oo fara badan bey iskula doodeysey Sahan, wax jawaab waafi ah oo ay ku qanacdadana waa u la'ayd dhamaantood, oo mid waliba waxaa ka sii darneyd mida ku xigta oo kasii cusleyd.Murugadeeda joogtada ahna waxey dhibtey oo u adkeysan waayey kulmiye, oo bilaabey inuu u soo dhawaado, murugadana la wadaago, isagoo waano iyo wacyi galin wixii uu karey dhagaha ugu shubayo, dhanka wanaagsan ee nolashana wax ka tusinayo.

Wuxuuna Kulmiye oo ay isku safar ahaayeen tan iyo MUQDISHO ku guuleystey inuu xoogaa wax ka badalo xaaladii muragada badneyd ee ay Sahan ku sugneyd, dadaal dheer kadibna caadi uga dhigey jawiga.Wuxuuna kula dar daarmay iney sabrto, Alla dartiina wax walba ugu dulqaadato, aduunyadana ayba sideedaba tahay Imtixaan, ruuxa ku sabrana uu yahay ka ka guul keena. Waxeyna Sahan iyo kulmiye noqdeen labo ruux oo aanan wax kala qarsan, wax walbana iska dhaadhacsan karo iskuna niyad iyo Qalbi furan.

Dalka Liibiya waa dal dadkiisa aysan sidaa u Ilbxasaneyn, misna aan laga soo dhaweyn dadka madow, waxaana dhacda in mararka qaar wadooyinka loo istaago, lana faro in ay baad bixiyaan, sidaana loo garaaco dadka madow oo ay Somaliduba ka mid tahay. Waxeyna dadkooda badi aaminsan yihiin una arkaan ruuxa madow inuu yahay adoon, oo badi dadka madow waxey ugu yeeraan adonyahow, waxaana jirta dhiibatooyin fara badan oo ay la kulmaan dadwoyga madow, inkastoo dowlada aysan arinkaa la qabin dadkeeda, Dhanka kalena waa dal dhaqaale leh oo dadkiisa wax wada gaarsiiya, cimilo ahaana xiga kuleylka, mida kale waxey si gaar ah u

xushmeeyaan dumarka. Oo marka dhalinta raga wadooyinka ay ku wax yeeleynayaan kuma dag dagaan dumarka haba aheedeen kuwo Sahan oo kale madow.

Sahan qudheeda dhibka wax baa kasoo gaarey, oo dhowr jeer baa la soo jugeeyey willka ay isugu kalsoonida badanyihiin ee kulmiye ah, marna iyadoo la socoto ayaa la soo weerarey, dhagax isaga loo wadeyna lagu daqrey iyadii, Marka Sahan jugta dhankeeda ayey ka qabtey, dhinaca kale waxey goobtii ku sugnaayeen mudo bil ah, waxeyna Sahan masiibadii dhacdey la socodsiisey reer Dhaahiro oo aad uga naxay ugana xumaadey, waxeyna Sahan u soo direen Qarashkii ay Liibiya uga sii amba bixi laheyd.

Sahan, Kulmiye iyo qaar kamid ah Asxaabtooda oo uu qarashkooda soo gaarey baa lasoo heshiiyey muqalas Soomaali ah oo kaamka u joogey kuwa wax Tahriibiya, Waxaana lagu wargaliyey iney beegsadaan magaalada SILITON ee dalka Liibiya, waxaana hogaanka u qabtey mid kamid ah Qolyaha wax Tahriibiya.

Markii lasoo galay magaaladii SILITON aheyd buu inta meel isugu geeyey iyara suga yiri, isagoo soo abaarey goob ay ku balan sanaayeen Kooxdii qaabilsaneyd Tahriibinta. Waxaana durbo kusoo laabtey isagii oo ay la socdaan kooxdiisa, Dadkii Tahriibayaasha ahaana waxaa lagu wada xareeyey meel loosii qoondeeyey. Halkii ayeyna labo cesho ku sugnaayeen iyadoo maalintii sedexaadna gaari weyn laga saarey, fiidnimadii la isugu geeyey iyagoo dhan 160 ruux oo Tahriibayaal ah, xeebtii laga amba bixin lahaa, waxaana markiiba lagu daad gureeyey laashash oo marba koox doontii yareyd lagu geeynayey.

Markii dhamaan Tahriibayaashii lagu wada hubsaday Doontii, oo sidii xoolo la isugu raseeyey, bey Abaarihii 4-tii

habbeenimo xiliga dalka Liibiya doontii Xeebta ka shareecatey, iyadoo afka loo soo saarey halkii ay ka xigtey Xeebaha dalka Talyaaniga, Waxey Doonidii badweynta lasoo guureeysaba, oo dadkii is dul saarnaa sidii dhiil la ruxayo madaxyada isugu galiso, waxaa soo wajahey dabeylo iyo Hirar Xoog badan oo doontii marba dhan u liiciyey, waxaana ka dhex bilowday Ashahaatin iyo Allow magantaa.

Sahana waxey markiiba soo xasuusatay kuwi naxariista darnaa ee dadka kuwoo Buur Buuran bada ku daadinayey, waxaana gashay baqdin ah armey kuwaana kasii daranyihiin. Nasiib wanaagne Doonidii waxba uma dhimin Mowjadahii badnaa oo waa ay u babac dhigtey, cid bada lagu tuureyna ma jirin. Dadka hogaanka u haya Doontana waa dad ka mid ah Tahriibayaasha doonta saaran, waxna kama yaqaanaan badweynta, iyo jihada uu Talyaanigu ka xigo, waa un ha socoto, halkey na dhigtana aan aragno xaalka. Si kastaba xaajadu ha ahaatee, waxaa dhacdey in doonidii qadka ka lumo oo ay marba dhan u jeheysato, maadaama dad aan aqoon u laheyn bada ay hogaaminayaan, oo marba halkii la qumanaato ay ula jeesanayaan una jiheynayaan doonta. Maalin walba oo bada lagu sii jirana, waxaa sii yaraanayey wixii sahay ahaanta loo sitey, oo gabi ahaanba dhamaadey 7-cesho dabadeed, oo aan wali la kala garaneyn halka loo socdo iyo halka laga socdo midna.

Iyadoo uu xaalku sidaa ugu cakiranyahey, oo markale dadka qaar miirbeelid ku timid, qaarna sakaraad noqdeen oo naftii ku daba yaraatey, lana bilaabay in la yaasiimiyo, xaalkiina faraha ka baxay, meel loo jihoodana wali lama yaqaan, Waxaana habeenkii 8-daad lagu jiraa bad mugdi ah, oo meel walbaa bahaladeeda kaga rafanayaan, baqdin darteetna wadnahaa farta lagu wada hayaa, cid la maciin bidana ma jirin

xiligaa. Dadkii oo idil waxaa ku furmey wal-wal iyo argagax baaxad weyn, oo aan la soo koobi karin, waxeyna arintii ka sii dartey markii ay naftu deysay 5 ka mid ah Tahriibayaashii doonta la socdey.

Waxaana dubadiiba doonidii dhexdeeda ka bilowdey dagaal iyo gacan isula tagid, dhex marayey intii dhaqaaqi karety, kagadaale markii leysku qabsadey meydadka halagu tuuro bada iyo lagu tuuri maayo oo bahaladaa nagu soo daba galayo. Waxaa dadka qar ku doodayeen in inta noolna Bahalada bad waxyeeleynayaan hadii meydadka loo tuuro, taasina waxey keentey in dadkii labo koox u kala baxaaan, oo meesha leysku fara saaro, si kastaba xaalku ha ahaadee waxaa meesha ka dhacay dagaal ay dad wax ku noqdeen.

Waxeyna markii nafi u direysay, oo la tabar beelay ku qasbanaadeen iney is afgartaan xaaladana dajiyaan, maadaama ay dhamaan ku wada suganyihiin qatar geeri u wada horseedeyso, waxaana ugu dambeyntii la qaatey taladii ay qabeen kuwii lahaa hala tuuro meydka oo yuusan nagu urin. Waxeyna Sahan ay aad uga xumeyd gabar ay liibiya isku barteen, oo aad u da' yareyd misna meydkeeda bada lagu tuurayo, oo bahalada loo bilqayo, wayna is celin weysay oo baroor afka furatey, wax ay tari kartaana majirin.Kulmiye ayaa sidii lagu yaqiinay isku dayey inuu dajiyo Sahan, wuxuuna dhagaha ugu shubey, in dhamaantood ay xaaladooda qatar ku jirto, oo marba mid meydkiisa la laali doono. Hadii uusan Eebe jiha kale gar gaar uga keenin, waxuuna kula taliyey iney caloosha xirato, oo ad adeeg muujiso, oo aan meesha iyo waqtiganba loo baahneyn calool jileec, wax la yiraahdo.

Sahan waxey sameyn kartey ma jirine, madaxa ayey ruxdey, iyadoo muujineysa iney aqbashay hadalada kulmiye, waxaana

la isla gartey in doonida afka loo saaro halkii ay kasoo shareecatey. Inkastoo taas nafteeda ay keentey buuq iyo qeylo fara badan, dagaal kalena ka dhalan gaartey, maadaama ay kuwo ku doodayen war aan dhimano ama aan Yurub tagno yaan nalagu celin Liibiya iyo dhibkeeda, Haddana waxaa batey dadkii qabey war nafteena aan bad baadsano, oo aan wajahno halka aan ku bad baadeyno, yeynan is haligin intaan ka badan, doodaa dheer iyo is qab qabsigaa badan ka dib baa doonidii afka loo soo saarey xagii ay ka timid.

Waxeyna maalintii 13-aad ku soo xeratey goobtii ay ka dhaqaaqdey oo si nasiib iyo Alle kugu toosi lagu yimid, waxaana ku soo xoomey Ciidamadii ilaalada Xeebaha LIBIYA, oo dhamaan dadkiina intii bad qabtey xir xirey xabsiga geeyey. Intii ay nafta ku daba yareyd oo tacbaanka ahaana waxaa loolla cararay isbitaal ay dowladu laheyd oo lagu ilaalinaayey, maadaama iyaga qudhoodu xarig yihiin, markii ay soo yara bogsoodeena waxaa laga soo xaadiriyey isla xabsigii Asxaabtooda ay ku Xirnaayeen.

Sahan aad ayey u murugsaneyd una ciil qabtey, niyadana ka xanuunsaneysay, wax ay sameysana ma garaneynin, maxaa yeelay waxey soo carartaba oo ay Yurubey tiraah. Waa tan habartii miskiinta aheyd saxaraha uga soo tagtey meydkeeda, haddana dad asxaabteeda ah bay bada uga soo tagtey meydkooda. Addduun baa isugu soo aruurey Sahan, wax ay sameyso iyo meel ay talo ka bilowdana waa garan weyday, waana kanaa xabsigii oo wiilashii Soomaaliyeed markii la doono leyska garaacayo.

Cid u tureysana aan jirin, iyaga qudhoodana loo hanjabayo, mar marna leysku dayayo in la la kufsado, walow markey wada qeyliyaan laga tagayo. Waxeyna awooda ugu weyn ee ay

xabsiga ku heysteen noqotey Sahan iyo dumarkii la socdey in af labadii la yeero, hadii ay Askarta ku soo xoomaan oo ay isku dayaan in ay wax yeeleyaan, ama gacma gacmeeyaan. Si kastaba ha ahaatee xabsigii dhibka badnaa ayey mudo ku jureen Sahan iyo Asxaabteeda, waxaana maalintii dambe lagu soo wargaliyey war aysan fileyn oo aan caado u aheyn dadka Liibiya lagu xiro, oo waxaa caada ka aheyd in mudo markey xirnaadaan leyska sii daayo, magaaladoodana ay iska galaan, mar kalena iska Tahriibaan.

Markanse waxaa looga naxsaday in maalinta barito ah loo wada daad geeynayo dalkoodii Hooyo iyo Caasimadoodii muqdisho aheyd, dad badan ayaa aad uga naxay arintaa oo ay Sahan ka mid aheyd. Maxaa yeelay waxey is weydiineysay maxaad ka qabaneysaa Xamar hadii aad ku laabato oo kuu yaala, waa adigii Hooyadaa iska diley yaa kuu hooyo ah oo kuu waalid iyo walaal ah.

Maadaama Maanadii intaa booskooda u buuxin jirtey saxaraha iyadoo meyda ah uga soo tagtey, waxeyna nafteeda ku hiifeysay, war adiga Naf adkidaa maa iska dhimatid, ileen aduunkaan waxaan dhib iyo rafaad aheyn kuma heysatide. Alla Sahaney naf adkidaa, oo libaaxii walaalkaa cuney adoo indhoole ah, ayaa ka bad baadey, dadkii aad ogeyd ee markii loo Tahriibaayey Yaman ee sida naxariis darada ah loo leynayey, badana loogu tuurayey, ayaa adigoo laguugu tuurey, dabaalna aadan aqoon ka bad baadey. Intaad ogeydna wey ku naf waayeen, war saxarihii aad ogeyd oo saacadba qof ku dhimanaayey, waad ka soo bad baadey, baddii aad gashay ee sidaad ogeyd meydka, asxaabtaada loogu soo tuurey, waad ka soo bad baadey.

Waa yaabe maxaa kaa dhigay rafaad u joog, noloshaada dhan ma dhibkaan baad ku noolaaneysaa, waa adigan soo taagan oo dhib kastaa ka bad baadayo oo marqaati ka noqonayo, xagee ku socotaa maxaase kuu dhiban"? bey Sahan kaligeed iskula Yuutameysay, Waxaana waagii markuu dilaacey loo keenay Buss weyn, oo dhamaan tood lagu daad gureeyey, iyadoo lala beegsadey halkii uu Gagida diyaaradaha Magaalada Taribali ka xigay, oo ay ugu diyaar aheyd diyaaradii geyn laheyd Caasimadii Dalkoodii Hooyo ee Somalia.

Maalinimo Arbaca ah ayaa Sahan iyo Asxaabteeda Tahriibka kusoo fashilmay Waxaa laga soo dajiyey Gagida Diyaaradaha Caalamiga ah Aadan Cade ee Magaalada Muqdisho, oo Run ahaantii marka ka qurux iyo qaab samaa sidii hore, lana tartamayo Garoomada caalamiga ah ee Caalamka, Sahan iyo Kulmiyo oo dadka isaga dhawaa, baa isla soo beegsadey hooygii ay Sahan ka tagtey ee Degmada Waabari ku yiilay, waxaana si diiran ugu soo dhaweeyey Maama Dhaahiro iyo gabadheeda Istar, oo aad ula yaabay, lama filaana ay ku noqotey Sahantii ay Yurub ka sugayeen iney kala soo xiriirto, oo aan soo war galinin oo guriga u dhex taagan, Layaab iyo Amakaag baa halkii ka dhacay, Sahan iyo Wiilkii la socdayna Soo dhawaada ayaa lagu yiri, koley war waad inoo heysaane, nasta oo soo qubeysta Qadana waa la idiin diyaarinayaaye, in kastoo ay casir liiqad aheyd hadana waxey cunaan wey u baahnaayeen, oo halkii ayey ku qadeeyeen.

Markii ay goobtii wax ku cuneen, oo ay yara nasteen buu Kulmiye ka codsadey Sahan inuu sii baxo oo uu aado xaafadooda, oo aheyd Suuqa xoolaha, Sahanna war kama soo celin oo waxey la socotaa rafaadkii Kulmiye Xabsiga ku heystay.

Diifteedana waa ka muuqataa, oo markiiba waa sii sagootisay, Gurigana waa gurigaada ee kusoo dhawaaw ayey ku tiri, Waxeyna ku balameen in la iska war hayo, oo aan la is moogaan. Markii ay Sahan ku soo laabatey guriga baa labada dhan laga galay, oo wareysi dheer lagu bilaabey, iyadiina halkii ayey wax walbaa ugu sharaxdey uguna sheegtey habartii Dhaahiro aheyd iyo Istar, aad ayeyna uga xumaadeen ugana xanuunsadeen dhibka iyo rafaadka ay Sahan uga sheekeysay, ee ay soo martey, Waxeyna habartii ugu bishaareysay Sahan arin aad uga farxisay, maadama uu buufiskii Yurub wali ku xirnaa, hamigii mar un Yurub soo argna uu ku jiro, iyadoo u sheegetey in Istar uu ku dhacay markii ay baxdey buufis Yurub ah, markii ay meesha ku cidlootay.

Haddana ay u dalabtey Viso Ruushka ah si halkaas ay Yurub uga gasho, qaab Tahriib iyo qarda jeex ah, ayadana ay isla beri u dalbeyso oo ay u tageyso ninkii muqalaska arintaa ka ahaa, si ay labadooda isku sii weheshadaan. Waxeyna Dhaahiro Sahan u muujisay heerka ay Jeceshahay iyo iney ula simantahay gabadheeda Istar, waxeyna dhagaha ugu shubtey, Booskii ay baneysay Hooyadeed Maano, inuusan banaaneyn oo ay iyada u buuxisay, markastana cidlo iyo Ehel la'aan aysan dareemi doonin. Sahan arintaa aad ayey ugu riyaaqday una soo dhaweysay, waxaana ka dhacay culeys aad u weyn oo ay dareemeysay, kasoo ahaa iney kali cidlo soo istaagtay oo aysan ehel iyo walaal laheyn.

Waxeyna kusii faraxday leenka cusub ee Yurub oo ay la faruuryo qaniineysay, ineysan cagta dhigin, oo meel dhexe kaga soo laabatay, waxaana lagu wada seexdey habeenkaa si farxad leh. Sidii balantu iyo qorshuhu ahaaba waxey subaxdiiba Habartii Dhaahiro aheyd beegsatey ninkii isaga

ahaa oo ay labo Viso kula soo heshiisay, iskuna soo afgarteen, qorshaha iyo qaabka ay gabdhaha isku raacayaan.

Waxeyna ku soo laabtay guriga iyadoo howshii ay u baxday ka soo miro dhalisay, waxeyna ugu bishaareysay Sahan in iyadana howsheeda maanta la bilaabay. Oo ay ninkii isku soo afgarteen in labada gabdhood aan la kala reebin, oo ay hal diyaarad isla raacaan arintaana aad ayey Sahan xaaladeeda nafsiyad ahaaneed wax uga badashay, kuna abuurtay farxad iyo reyn reyn aan lasoo koobi karin. Maalmuhu is riixi oge, markii Sahan iyo Istar Loo dalbay Viisaha Ruushka ee ay Yurubta ay ku waasheen ku tagayaan ka soo wareegatey Labo bilood. Oo maalinba tan xigta uu buufiskii gabdhuhu kusii kordhayo, misna heblaayaa baxdeydaa magaalada la hayo, oo maskaxdooda iyo maankooda Yurub u soo jiheeyeen..

Xaaladoodana ay Maamada ka yaabantahay gabdhaha buufiska kaga dhacay, baa waxaa u soo baxay Visihii oo lagu wargaliyey iney baxayaan maalinta Sabtida ah oo ka harsaneyd mudo 3 maalmood oo kaliya, aad ayeyna arintaa ugu wada farxeen, una soo dhaweeyeen, Waxeyna isla maalintii loogu bishaareeyeyba galeen is diyaarin iyo u xir xirasho safar ku wajahan Yurubta madax martey, ee ay har iyo habeen hadal hayaan.

Aroornimo hore oo Sabti ah ayey Sahan iyo Istar oo ay wehliyaan Hooyo Dhaahiro iyo Odey Xuute oo muqalaska leenka usoo dhameeyey ahaa ku wada sugnaayeen Gadida Diraadaha Caalamiga ah e Aadan cade oo aad yaabeyso bilicdiisa, iyo Diyaaradaha is daba socda ee midna sii socoto midna soo dageyso, Waxaana saacad kadib markii ay Garoonka kusoo xaroodeen, loo yeeray rakaabkii ku qornaa Diyaaradii ay kamidka ahaayeen Sahan iyo Istar, halkii ayaana

is macsalaameyn iyo isu dar daaran lagu galay, Waxeyna gabdhihii ku xaroodeen halkii loo tilmaamay, iyagoo durba salka la helay Boosaskii ay ku lahaayeen Diyaarada, iyana ma sugine durba Cagaha ayey laabatay, oo halkii ujeedkeedu ahaa afka aadisay.

Gabdhihii oo aad u faraxsan, niyadana ku hayo iney maanta ku sii jeedaan Yurubta ay ku waasheen, diyaarada dhex deedana qosolkooda aad ka yaabeyso iyo sheekada u socoto. Bey diyaaradii soo caga dhigatey Gadida Diyaaradaha ee magaalada Dubia, oo ay saacado badan ku sugnaayeen Gabdhaha iyo intii ay isku jiho ahaayeen, Waxeyna dhowr saacadood kadib halkii kaga sii dhaceen Diyaard kale, oo markan si toos ah uga dajineyso Magaalada Mosko ee caasimada dalka Rushka, Waxeyna gabdhaha markii ay arkeen shaqaalaha diyaarada ee cadaanka ah, iskula kaftameen oo sidaan baaba Yurub ku joognaa maxaa inoo dhiman.

Diyaaradii oo dhow saacadood lasoo duuleysay baa Gabdhihii oo wali sheekada iyo qosolka ka baxaya, faraxada ka muuqatana aad yaabeyso, baa diyaaradii soo caga dhigatey Gagida diyaaradaha ee magaalada MOSKO ee caasimada dalka Rushka. Halkii ayaa rakaabkii kuwada dagteen, waxaana nasiib wanaag Sahan iyo Istar Gadida Diyaaradaha ku sugayey oo kusoo dhaweeyey, Wiil Soomaaliyeed oo meesha wax ku barta, leenkana u soo dhameeyey, oo ay wada shaqeystaan muqalaska howsha u soo dhameeyey gabdhaha.

Waxeyna gabdhihii kala kulmeen Kaahin soo dhaweyn heer sareysa, iyo walaalnimo Soomaalinimo, wuxuuna u sheegay inuu howshooda safarka u dhameynayo sida ugu dhaqsiyaha badan, Isagoo ku Wargaliyey Gabdhaha in uu sugayo Tahriib dhib badan oo dhulka ah, iyaguna xabadka ayey u garaacdeen,

ileen waa dad meeli u cadahaye, Wuxuuna Kaahin gabdhihii si wacan ugu sharxay qarashka laga doonayo iyo meelaha ay marayaan, isagoo faah faahin dheeri ah kasiiyey halka ay kuwa wax Tahriibiya ee maafiyada ku simi doonaan.

Iyagana si fiican ayey uga dhuuxeen, wax walbaana iney u diyaar yihiin oo kusoo talagaleen bey dhagaha ugu shubeen. Markani Sahan iyo Istar waxey soo dhex galeen dal aad uga duwan dalalkii ay horey u soo mareen, haba ugu dalmar sanaatee Sahan, oo inta badan dhulkii ay soo martey uu ahaa mid ay aad cimiladiisa u kululyihiin. Ha yeeshee markaan waxey soo dhax galeen cimilo taa ka duwan oo aad u qabow, barafkuna sidii ciida wadooyinka u daadsanyahay, dadkuna wada af duubanyihiin qabow dartii.

Ruux walbaana wuxuu wataa dharka kuwa ugu culus, oo uu aaminsanyahay inuu qabowgaa daran kaga bad baadi karo. Inkastoo Gabdhaha aysan fileyn qabowgan daran, misna aysan ku soo talagalin dharkii loo baahnaa, hadana jaakado iyo wax yaabaha afka leyskaga duubo, oo qabowga laga gabaadsado ayey magaaladii Mosko aheyd ka iibsadeen, sidaana dhankooda Qabowga uga gaashaanteen. Dhanka kale magaalada Mosko waa magaalo baaxadweyn weyn bilacdeedana aan laga sheekeyn karin, waxaana ku nool dad aad u fara badan, sida leysku dhex yaacayana wuu ku wareerayaa qofkii ka yimaada magaalo dadkiisu yar yihiin, maxaa yeelay waa magaalo ay ku noolyihiin in lagu qiyaaso 50 milyan oo ruux.

Dhinaca kale waa magaalo ay aad ugu badan yihiin Kooxaha maafiyada, kuwaasoo waxey doonaan ka fushada, xitaa mararka qaar waxaa dhaceysay in Booliiska uu dadka xoogaa baad ah ka qaado, hadii kalena uu xabsiga dhigo. Sahan iyo

Istar-na inta badan guriga kama aysan bixi jirin, oo cabsi baa ku jirtey, adeega ay u baahan yihiina waxaa u soo iibin jirey Kaahin, in kastoo mararka qaar marka ay doonayaan. Wax yaabo qaas u ah, uu u kaxeyn jirey magaalada, sidaana ay ku soo iibsan jireen wax walba oo ay doonayaan.

In kastoo markii hore ay aad u faraxsanayeen gabdhaha, haddana markan waxaa soo wajahdey cabsi balaaran, maadaama ay arkeen sida magaaladu tahay, qabowga ka sokow cabsida laga qabo kuwan maafiyada ah, ee sameeya wixii ay doonaan, Waxeyna aad uga sii wal walsanaayeen Gabdhaha maafiyada sidaan ay arkeen magaalada uga qeylineyso, loogana baqayo ay naftooda ku biimeyn doonaan, oo ay Tahriibin doonaan.

Haddana wal-walkoodaa waxaa kala weynaa wixii dhacayaaba ha dhacaanee mar un Yurubtaan la idiin amaanayo ee leydiinka soo waramayo xaqiiqda taalo iyo waxey tahay soo ogaada, Janadaan laga sheegayo iyo nolashaan barwaaqada ah dhankiina kasoo miista, lacagtaan darbiyada lagala baxayana, boorsooyinka kusoo gurta, waxeyna taa kaga dhigteen gabaad ay uga gaashaantaan mar walba oo uu laabtooda wa-walka maafiyada soo galo.Si kastaaba xaalku ha ahaadee, waxey magaaladii Mosko aheyd ku sugnaayeen mudo bil ah, oo ay ka war sugayeen maalinta ay maafiyada Tahriibineyso dhihi doonaan soo baxa, oo wadada cagta soo saara.

Waxey Maalmuhu is dabada guraanba, waxaa maalinnimo Axad ah, oo badi wadamada Galbeedka laga nasto, lagu soo wargaliyey iney caawa 12-ka habeenimo ka amba bixi doonaan magaalada Mosko, uuna u bilaaban doono Tahriibkii ay sugayeen, ee Buuro, Baraf iyo Boholo dhex jeexa ahaa. In kastoo gabdhaha markii lagu yiri arinka waa u diyaar sidii

loogu talagalay ay aad ula xumaatey, oo ay si aad ah u wal-waleen hadana waxey niyadoodu yara dagtey markii Kaahin ugu bishaareeyey in aysan kaligood Soomaali ka aheyn, oo ay la Tahriibi doonaan gabdho iyo wiilal badan oo Soomali ah.

Waxeyna Gabdhihii galeen diyaargarow ku wajahan safarkooda caawa saqda dhexe ku beegan, waxaana lagu war galiyey in aan boorsooyin la qaadan karin, oo wax badan la lugeyn doono, waxaana looga sii naxsaday in Maafiyadana wixii muhiim ah ay wadada kaga sii dhici doonaan. Talana waxaa loogu soo jeediyey iney qaataan kaliya inta ugu muhiimsan calaladooda, oo ay is leeyihiin dhaxantey idinka celinayaan. Waliba waxaa loo sii raaciyey iney dhar badan iska daba gashadaan, oo isku raraan halkii ay boorso kaga qaadi lahaayeen, maxaa yeelay qabowga sugayo qiyaas ma leh. Xoogaaga Dolarka ay wataana waxaa la farey iney isku miineeyaan, oo gashadaan meel kasta oo ay is leeyihiin wuu idinku bad baadayaa, sidii ayey sameeyeen oo taladii qaateen, calalyo badana isku rareen.

Waxeyna xirteen intii ay is lahaayeen, waad xamili kartaan, in kalena waxey ku qaateen bac yar, xoogaa raashin ahna horey u sii qaateen, oo u badan raashin fudud, maadaama aan la qaadan karin wax culus, Waxeyna gabdhihii baco yar yar ka buuxsadeen doolsho, Rooti iyo xoogaa Oodkac ahaa, oo ay Maamada u soo sameysay markii ay soo baxayeen, waxeyna diyaar sii noqdeen saacad ka hor waqtigii la balamiyey.

Markii la gaarey saacadii la balamay, ayuu gaari yar isa soo taagey ilinka gurigii ay daganaayeen hortiisa, waxaana durbadiiba ay soo waceen maafiyadii Kaahin oo ay ku war galiyeen in ay aqalka hootiisa ku sugayaan, Gabdhaha ay dhaqso u soo dagtaan, Kaahina gabdhihii ayuu fariintii u

gudbiyey, iyagiina horey diyaar u ahaayeene, durbadiiba way soo degteen, oo gaarigii ayaa la saarey, halkii ayeyna isku macsalaameeyeen kaahin.

Oo u sheegay inuu xaalkooda la socon doono, mar walbana uu ku dadaali doono inuu la soo xiriiro, si uu Uga war hayo, gaarigiina halkii ayuu ka dhaqaajiyey. Sahan iyo Istar waxaa ku bilowdey wal wal maadaama gaariga labadooda waxa ku wehliyaa ay yihiin labo kale oo maafiya ah, wax walbaana ay ka suurtoobaan, waxey is fareen in faataxada hoosta ka aqristaan, wardigana raaciyaan, Iyagoo xaaladaa ku sugan baa gaarigii oo ku dhawaad saacad la soo guureynayey lagu hor qabtey aqal meel howd ah ku yaalo hortiisa, waxaana la farey in ay mid mid u soo degtaan, Labadoodaba, iyagana war kama soo celin oo amarkii sidii Askari u qaateen.

In kastoo kuwan maafiyada ah ay ku hadlayeen afka Ruushka, gabdhuhuna ayba aqoon, hadana waa tii la yiri 5 faroodle isma fahmi waayee, wax walboo lagu lahaa sida iyagoo afka la yaqaan ayey madaxa u ruxayeen, misna fahmayeen, iyadoo fara ka hadal loo raacinaayey, Waxaana cabsi ku beertey markii lagu yiri midba mar ha soo degato, mana jirin wax ay sameyn kareen oo aan ka aheyn iney qaataan amarka la farey, waxaa soo hor dagatey tii Sahan aheyd oo lugtii ka balaqsiineysa.

Waxaana lagu amrey iney cararto oo ay orod ku gasho albaab loo tilmaayey, oo qiyaastii u jirey ilaa 200 miter, halkii ayey orod rucleys ah ka gashay, oo iyadoo neef tuureysa dalaq soo tiri labaabkii la farey iney gasho, Waxaana meesha ku sugeysay haweyney afrikan ah, oo maafiyada la shaqeysato, Sahan aad bey ugu faraxday una yara dagtey, markii ay aragtey haweyneydaan madow ee soo dhaweyneysa, Waxaana durba

ka soo daba gashay Istartii oo iyana cagaha wax ka dayeyso, neef tuurka ka baxayana aad yaabeyso, waxey haweyneydii soo dhaweneysay u soo galbisay labadii gabdhood Qolkii fadhiga ahaa.

Markii ay soo galeena waxay la kulmeen Somali badan oo rag iyo dumarba isugu jiro, oo meesha sidii qaxooti dhex daadsan, aad ayey ugu farxeen. Maadaama ay arkeen Somali badan, horey ayey indhaha ula sii raaceen, oo waxaaba gudaha ku sii jirto koox kale oo iyana madow ah, oo meesha looma kala maqno, Durbadiina waxaa gabdhihii soo dhaweeyey, kuwii Somalida ahaa ee meesha uga soo horeeyey, is wareysi iyo isu duceyn ayaana la galay, maadaama laga wada wal walsanaaa sida safarkaan adagi noqon doono, waxaana meeshii loogu keenay cabitaan kuleel ah oo qabowga iyo qar qaryada ka muuqato isaga qaadaan.

Markan Sahan iyo Istar aad ayey niyadooda u dagan tahay, maadaama ay ku dhex jiraan ku dhawaad 40 Ruux oo Somali ah, misna ay isku jiho wada yihiin, waxeyna Sahan aad ula yaabaneyd Odey Soomaaliyeed oo da' ahaan jirey ama ku dhawaa 80 sano misna ku jirey dadka Tahriibayo. Waxeyna hoosta iska laheyd war Odeygan maxaa barafkan iyo Buurahaan ku Tahriibinayo xiligan, wuxuuba ku jiraa da'dii uu Tusbaxa intuu qaato is-taaqfuruleysan lahaa, oo dalkiisa iska joogi lahaa bunkiisana loogu dubi lahaa, Waxaase Sahan uga sii yaab badeynd markii uu mid ka mid ah dhalinyaradii meesha joogtey ku yiri Adeer maxaa saacadaan ku soo wadey, anaga dhalin yaraaba nahay oo mustaqbal ayaan raadineynaaye ?.

Odeygii baa si kulul ugu jawaabay "War Adeer ha i dhihin aniga Hooyada ma qabiye, waana kaa dhalin yarahaye."... dad

badan oo meesha joogay ayaa hadalkaa ku qoslay kana yaabiyey indha adeega Odeyga iyo siduu beenta isaga dhaa dhiciyey. Waxaa abaarihii 3-dii habeenimo ee Xaliga Ruushka lagu soo war galiyey Tahriibayaashii iney 4-afar usoo baxaan, waxaana lagu gurey dhowr gaari oo yar yar, oo meesha loo soo dhigay, iyadoo leyskugu geeyey garaash weyn, oo meesha laga wadey u jiray ku dhawaad 30 daqiiqo. Halkii ayaa la iskugu geeyey oo lagu raseeyey sidii xoolo gaari weyn oo kuwa xamuulka qaada ah, oo ay horey u saarnaayeen kooxo kale oo isugu jiro Carab, Afganistan, China iyo Jinsiyado kale. Iyadoo dadka si naxariis daro ah leyskugu dul rasynayey oo aan loo aabayeeleynin Tanaa dumar ah, kanaa Odey ah kanaa Caruur ah iyo kanaa yar iyo kanaa weyn. Mana jirin cid arintaa dood ka keeni kartey, oo qofkii af kala furaaba waxaa u xigtey garaacis loo gaaraco si bani'aadannimada ka baxsan, wax ka celinayana ma jirin, oo dadka cid is waali kartey haba yaraatee ma jirin, maadaama rag hubeysan oo aan nixin meesha dhoobnaayeen.

Miskiintii Sahan aheyd nasiib wanaag, waxey dhexda ka gashay, iyada iyo Istartii la socoteyba dhalin yaro Soomaaliyeed, wax dhibana ma qabin, marka loo eego waxa meesha ka dhacayey, waxaana dadkii leysku raseynaayey sidii xoolaha oo kale ku dhawaad saacad iyo bar, Iyadoo markii howshaa lasoo afjaray, gaarigiina si la hubo loo dabooley, loona xir xirey buu meeshii ka sharaacdey abaarihii 4:30-kii habeenimo xiliga dalka Rushka, Waxaana dhamaan Tahriibayaashii lagu amrey in aysan af kala furin, dakiina marka ay rabaan iney wada hadlaan ama wax isweydiistaan, waxey isu adeegsanayeen indhaha iyo faraha.

Qof walbana waxaa ku furnaa maxaa la kulmi doontaa, siduu xaal noqon doonaa, Allow na mooti maafiyada iyo dhibkeeda,

safarkeenana noo sahal ayey dad badan wada la haayeen. Wuxuu gaarigii soo guureeyaba, waxaa dushooda ku dilaacey waagii, iyagoo sidii isku dul saaran, Gaargiine sheelaraha ayaa loo sii haayey, sidii uu u soo xiimayey, Wadnaha farta loogu hayey, ayuu markuu gabalkii dhacay dadkiina, isku kaduuteen, isa soo taagay meel duur ah, oo geedo dhaa dheer ay ku gadaamanyihiin, barafka da'ayana waad yaabeysaa iyo qabowga jiro, Waxaana dadkii dhamaan lagu Amrey iney ka soo wada dagaan gaariga, sidii ayeyna faleen, gees ayaana la isugu geeyey, waxaana loo fidsadey maro weyn oo dhamaantood la farey in qof walbaa wuxuu hayo halkaas uu kusoo rido. Qofkii diida ama qarsada ee marka la baaro laga helo loogu hanjabay dil toogasho ah, oo qoryo iyo bastoolado baa loo cabeystey.

Waxaana dhacday in dadkii badidood wax walba oo ay siteen ay meeshii kula carareen, Lacag, Dahab, Saacado iyo wax walba oo qiimo lahaa. Waxaase jirey dad iyaga is moogeysiiyey oo aan dhagba jalaq u siinin, iskana dhigayey ineyba waxba heysanin, aadna u wal walsanaa, oo hadii wax ay qarsanayaan lagu arko waa dil xaalkooda.

Waxaana ka mid ahaa dadkaa Sahan, oo kistii ay wateen iyada iyo Istarba isku soo kala miineeyeen, meeshoodana iska istaagey, gacmahana kor u tagey, iyagoo iska dhigaya ineyba waxba wadan, dad kale oo iyagana sidaa la sameeyey ayaa jirey, oo Somali u badan.In kastoo qof waliba uu aad uga naxsanaa waxa ku dhici doona, marka laga helo waxa uu qarsadey, hadana waxey is lahaayeen hadii kista aad wadataan la idinka reebto. Ma gaajaa wadooyinka ugu bakhtineysaan, ileen cid wax idiin siineysaa ma jirto, reerihiina waxaad kula xiriireysaan ma lahan, marka ma dhimashaa dhimasho idiin dhaanto, sidaa ayeyna ku afar afareysteen oo isku dhajiyeen kistoodii.

Kuwii Maafiyada ahaa markii ay xaabsadeen wixii meesha loogu wada shubey, ayey u soo jeesteen kuwii gacmaha u taagnaayeen oo lahaa inagu waxba ma heysano, Baaritaana ku bilaabeen, midkii ugu horeeyey oo aad u baqayey, ayaa intii aanba gacmaha lala galin inta qori AK-47 ah oo uu watey midkii baarayey beerka uga dhuftey baadkiisa ku yiri 'Indho dhiman rabo ayaad leedahay hadaan wax kaa helo'.

Kiiyoo xanuunsadey baa durbadiiba la soo boodey No...No.. aniga intan ayaan wataa ha i dilin, soona bixiyey dhowr boqol oo dolar oo ku miineysneyd. Halkii ayaana inta looga qaatey garaacis aan naxariis laheyn lagu bilaabay, oo feer, haraanti, qori baadkii, bastoolad madaxeed looguma Aabo yeelin, ilaa uu dhiig ka mantagey oo uu u ekaadey wax suuxey, jirkiisa oo idilna uu dhaawac hareeyey meel walbaana uu dhiig ka da'ayo. Maadaama uu Somali ahaa wiilkaa isaga ah, waxaa kuwada dhalatey Soomaalidii kale baqdin aan xad laheyn, waxeyna is tusiyeen qaarkood in maadaama midkan wax qarsaneyey ee is kashifey.

Isagoon wax laga helin in maafiyada iska dhaadhicineyso, dhamaan Somalida waa la mid, oo wax bey qarsanayaan sidaana ku keeni karto jir dil iyo dhibaato ka sii weyn. Haddana waxaa u muuqatey hadiiba ay sida ninkan la cardaadaqiyey ay sameeyaan, oo ay lacagaha soo bixiyaan, in sidiisa la jir dilayo, Waxeyna hoos iska lahaayeen, hadii la idinka helana sidoo kale ma dil baa dil idin dhaama, war sidiina ku adkeysta bey niyada isaga raaceen.

Midaas ayaana u soo baxdey dadkii ay Sahan kamid aheyd, xisaabaad badan oo ay isku dhufteen dabadeed kuna adkeysteen, dhamaan maafiyadiina safkii ayey ku soo socdeen, iyagoo hanjabaad iyo jug dadkii ku wada, Maadaama uu

iyagaba waqtiga ku yaraa oo ay doonayeen iney dib u laabtaan, uma suura galin iney dadkii ka baaraan dabo iyo dacal, meel walbo oo intii ay kareen intay ka baareen ayey iska daayeen oo waxba ka helin. In kasta oo jug badan loo duugey dadkii, hadana intaas wey ku qanacsanaayeen, ileen waxey u wada jeedeen waxa ku dhacay willka hortooda jiifa. Oo nolosha iyo geerida u dhaxeeya, dadkiina waxaa lagu war galiyey iney sii wadayaan oo jidka kusii hagayaan, labo ka mid ah maafiyadii, intii kale iyo gaarigiina dib ayey uga laabteen.

Waxaana wadadii Cagta wada saarey labadii maafiyada aheyd iyo dadkii intiisa kale, iyadoo lasii luudinayo wiilkii miskiinka ahaa ee sida xun loo diley. Labadii maafiyadana waxey isku qeybiyeen mid dadkii hor socda iyo mid gadaal marey oo dadkii socod iyo rucleys faraya, oo sidii xoolo u raacdeynayo. Waxaana loo sheegay dadkii in ruuxii daala oo hara la dili doono, oo aanan nolol looga tagi doonin, madaama hadii Booliska meesha yimaado oo uu la kulmo ruuxaas oo nool ay howshooda Tahriibinta qatar galeyso, Marka ruuxii haraayow dhimasho u tafa xeydo ayuu xaalku ahaa, qof walbaana yaan lagaa dheereyn ayaa ku jirtey, oo gadaal waxaa uga muuqdey geeri.

Labadan nin ee Rafaadka ku hayana inta isugu tagaan ma dili karaan, oo hadii ay is miidaamiyaan oo ay ka taqalusaan, yaa hagaya oo ku hogaaminaya halka ay doonayaan, Howshooda Tahriibkana sidaa ayey ugu dhamaaneysaa, marka waxaa dan ugu wada jirtay iney madaxa u ruxaan oo ay u mar xabeeyaan kuwan baas ee arxanka daran, sida foosha xunna kula dhaqmayo.Si kastaba ha ahaatee, iyadoo xaaladaa aadka u dhibka badan lagu wada suganyahay, oo uu barafkiina si xad dhaaf ah dadkii ugu dul socda, ayaa waxaa soo baxdey

bahashii qatarta aheyd Isbjørn ee dadka ku feynan jirtey barafka howdka dhex yaala, oo raxan raxan u socota.

Aad ayaa looga wada naxay, oo dadka qaar wadnahaaba dibada imaan rabay, waxeyna maafiyadii oo qudhooda aad u naxsan, dadkii ku amreen in ay halkooda Seexdaan, oo aysan shanqar ka yeerin. Sidii ayaana la wada sameeyey, bahalihii oo markii horeba ku socodey wado u muuqatey, ayaan socodkoodii waxba ka badalin, dadkana shanqartooda dareemin, halkeediina sii gunuf gunufleeyey.

Dadkii oo neef weyn kasoo wada fuqdey baa in cabaar ah goobtii ka nuuxsan, ilaa ay ka miriqaan bahalaha, dabadeedna maafiyadii ayaa hogaankii sii qabatey oo socodkii halkiisa laga sii waday, iyadoo la kufaa kacayo, Waxaa la yaab aheyd in ay jireen dad ku duceysanayey may mar kale bahashii soo baxdo, maxaa yeelay saacado badan ayaa socod rucleys ah, oo baraf ku da'ayo lagu dhex lugeysiinayaa, aad ayeyna u daaleen, waxaana nasasho ugu horeeysay uguna dambeysay markii ay Uuleyda soo baxdey, Daalka iyo rafaadka ka muuqdey dhamaantood waa mid aan la qiyaasi karin, qofkii aan yara nasto yiraahdana, xabad ayaa sugeysa oo looga taqalusayaa.

Marka dhankaa ayey wax ka eegayeen, waxa lasoo guureysiiyaba waxaa dushooda ku dilaacay waagii, waxaana la farey dhamaantood iney howdka isku kala qeybiyaan, oo ay ku nastaan. Halkii ayaana Nasiib wanaag waxey ku nasteen Nasasho ay aad ugu baah naayeen, wixii wax cunayey ama cabayeyna meeshooda barxadeen, oo Barafka gog ladeen, Waxaana lagu wargaliyey in ay goobtaan howdka ah joogi doonaan, ilaa uu gabalka ka dhaco, Iyadoo lagu yiri waad seexan kartaan, qofkiise quuradiisa la maqlo ha iska Jiro.

Taasina waxey ku dhalisay dadkii isku ogaa iyo kuwii isaga shaki qabey quurida, ineysan laba indhoodba isku geeynin, oo ay hurdadii heysay la dagaalameen iskana celiyeen, Maadaama loo sheegay iney naftooda halis ku jirto, oo laga taqalusayo hadii quuridooda la maqlo, ruuxii is iloowa ee ay la tagtana, hadii ay neef quuri u dhow kasoo baxdo, waxaaba wab siinayey oo jugta ku hayey ruuxa u dhow, si aysan shanqartiisa u maqlin maafiyada. Maalintaa ma jirin ruux Tahriibayaasha kamid ah oo hurdey, hurdo wanaagsan in kastoo aad loo wada daalanaa, oo aan labo habeen iyo labo maalin indho leysku geeynin, hadana difaac baa nafta darteed loogu jirey, Iyadoo uu xaalku sidaa u cakiranyahay, baa galabakii korkooda ku dhacay, loona tafa xeytey socodkii dhibka badnaa, ee marna 10-jeer buurta barafka dul saaranyahay ee la korayo laga soo dhacayey, Marna geed loo dar darayey, marna geed barafku duugey loogu dul dhacayey, waxa dil diloomayo ee rafanayo hadaad arki laheyd waa yaabi laheyd. Mana jirin qof aan jug soo gaarin, dhamaanba dadka wada Tahriibayey, miskiintii Sahan aheyd ee markii horaba lugta la dhutuneysay, iyada kuma sii jirin dadka oo markey toban iska daba dhacaan, iyada labaatan ayey dhaceysay, oo weyba ka jug badneyd dadka kale.

Waxeyse isku qancineysay, adigaa wadadaan soo aadeye, haka shalaaynin oo midii saxaraha ee hortaada lagu qur baxayeyba waad usoo joogtee, oo midaan aan wali qofba idinka dhiman, maaha mid loo jixin jixo, dhabarka ayeyna u xiratey, dhibka meesha yaal oo idil. Waxey soo kufaa kacaanba, oo daalkiina sii balaarto ayuu gabalkiii Maalintii 3-aad u dhacay, waxaana salka lawada dhigtey barafkii oo ciid u ah. Qof walibana wuxuu xaar xaartey halkii uu is lahaa waad kaga nasan kartaa howdkaan, mana jirin cid ka fikirtey armey masas iyo bahalo kaleba howdkaan idinkaga soo baxaan, Waxaana la galay in

meeshii lagu cuno wixii yaraa ee la watey, laguna cabo cabitaankii la sitey, halkii ayaana lagu wada gambadey, oo shanqar ilaalis lagu galay.

Maadaama habeenkii oo dhan la soconayo maalintiina la dhuumaaleysanayo si aan loo arkin, oo uu Booliiska uu raadkooda u soo helin, Waxaana markaan Looga naxsaday In labadii maafiyo ee hageysay ay ka tagayaan, oo ay gawaari u doonayaan, halkaana laga sii qaadayo, oo ay lugeyntii dhamaatey, dad badan ayaa ku farxey horta marka ay maqleen lugeyntii waa dhamaatey, oo si kal ah usoo dhaweeyey.

Waxeyse aheyd waxa ay ka naxeen, maafiyada hogaamineysay oo uga tageyso cidladaan, oo uusan ku jirin qof xitaa waligiis riyo ku arkey goobta la joogo iyo meesha lagu wajahanyahay, Waxaana Sahan oo uusan Tahriibka ku cusbeyn markiiba u soo baxdey, in arintu taagantahay iska dhuumaashaal, Waxayna soo xasuusatay, wixii iyada iyo dadkii la socdey ku qabsadey saxarihii u dhaxeeyey Libiya iyo Sudan, Oo kuwii Tahriibinayey ku yiraaheen waan idiin soo laabaneynaa, dib dambane aan ugu soo laaban, oo ay dad badani ku naf waayeen halkii, iyagoo sugayo kuwa keenay meesha,

Sahan arintaan aad bey uga naxday, oo dadka intiisa kale aad bey uga wal wal badneyd, ugana murugo badneyd, waxeyna isku dayeysay iney qarsato murugadaa baaxada weyn iyo wal walkaa hayo, si aysan dadka u sii murjin, oo ay rajo xumo u galinin. Ma yara xowliga uu barafku ku da'ayo iyo qabowga meesha ka jira, waxaana lagu faataxeystey in maafiyadan laga war sugo, oo meeshaas la iska joogo, qof walibana waxaa ku furnaa guux aad u weyn oo u gaar ah. Intii is dabaalin karteyna waxey xogga saareen sidii ay isku moogeysiin

lahaayeen, oo ay naftooda fikir iyo wal wal uga mashquulin lahaayeen.

Waxeyna galeen sheeko, madadaalo, su'aalo iyo hal xiraale isweydiin, waxaana kuwa fikirka u go'ay ka soo yeereysay marka ay maqlaan qosolka iyo kaftanka, oo ka qasayey xisaabaadkii fikirkooda ay isaga dhufanayeen, war naga aamusa oo yaan nalagu soo bixin, oo nala qab qabanine. Taane waxey keeneysay mar kasta oo la is ilooba, oo hadalka kor loo dhigo, in haddana la qaboojiyo oo hoos loo dhigo, Sahan iyo Istarba dadkaa kaftamaya ee sheekeysanaya ayey dhankooda kaga jireen, inkastoo ay jireen gruub 3-aad oo daalka intuu ka batey hurdo meeshan la dhacay.

Sidii uu xaalku sidaa u ahaa, oo marna koox gam'eysay, marna koox soo jeedeysay, marna loo cunayey loona cabayey kistii la watey, ayaa waxaa ku dul dhacay gabalkii maalintii 4-aad. Oo ah intii ay meesha looga tagay joogaan, waxaana gabi ahaanba ka dhamaadey raashinkii yaraa iyo Biyihii ay wateen. Iyagoo xaaladaa xanuunka badan ku sugan, baa waxaa meel walba iska soo xirey kii Roob ahaa, oo dadkii qabowga hayey ka sii qar-qariyey, waxaana goobtii laga waayey qof aan gowsaha isku garaaceynin Qar qaryo darteed.

Dadkiina wal wal baqdin iyo gaajo uu qabow u dheeryahay, ayaa isku kaashatey, nasiib darana waxaa meeshii ku ruux baxay miskiinkii Xaashi ahaa, ee ay maafiyada sida xun u soo jir dileen. Waxaana isugu darsamay xanuunkii hayey, cuno la'aan, cabitaan yari iyo qabow aad u xoogan, oo uu roob u sii raacey, misna wada qooyey, oo dharkiiba ay ku qabaneyso ma iska siibtaa, haddana koleyba barafkaa kaaga darane iska heyso ay naftu ku leedahay. Waxey dadkii oo aad u murugsan, aadna u ar-gagaxsan garan waayeen si ay yeelaan meydka, in kasta oo

markaan aysan ka cabsi qabin inuu ku uro, maadaama jawigu aad u qabowyahay, waxaana dhamaan ku dhalatey cabsi aad u balaaran, oo aan horey u heynin.

Qof walibana wuxuu is lahaa, koley adigana sida wiilkan ayaad howdkan barafka badan ku ruux baxeysaaye iska sugo, ileen balaayadii idiin soo wadey waa idinka dhuunteen, meel aad afka aadisaana ma garaneysaan.Waxeyna hadii ay dhaqaaq is yiraahdaan ka cabsanayeen bahalihii baas, oo kuwii hubeysnaa sidii la ogaa ay uga jareynaayeen, oo wuxuu xaalku ahaa dadkaadaa isaga dhex dhimo, intaad kaligaa cidlo ku dhiman laheyd, koley wixii noolaadaa reerkiina geeridaada u sheegi doona.

Ma yareyn murugada iyo quusta ka muuqatey dadkii goobtaa wada joogey, iyadoo uu xaalku sidaa u cakiranyahay maalintii labaadna meydkii meesha u yaalo, waxa la cunayo ee la cabayana uu yahay barafka meesha daadsan. Sahana waxey soo xasuusatay in hada ka hor ay kaadi biyo ka dhigteen, marka barafkan waa i qarso hadii loo eego xaaladii ay Sahan kala soo kulantey Saxarihii, Iyadoo xaalkoodu yahay Quus Quus lagu darey, ayaa waxaa nasiib wanaag u yimid maafiyadii, waxaana dadkii oo idil kasoo wada go'day neef weyn, oo waxaaba lagu qayaasi karaa caruur waalidoodu ka maqnaa oo usoo laabtay.

Ma jirin qof ku dhiiratey iney Maafiyadii weydiiso waxa ay sidaan ugu galeen, maxaa yeelay qoryaha ay wataan iyo sida ay u naxariis daranyihiin ayey dadku wada ogaayeen, Waxeyna si dagan ugu sheegeen wiilkii dhintey una tuseen meydkiisii, maafiyadiina inta meeshii wax xoogaa u qod qodeen, ayey ku Aaseen. Waxeyna dadkii intiisa kale u qabteen hogaanka iyagoo u lugeysiiyey meel cabaar u jirta, kana saarey gaari

weyn oo kuwa xamuulka ah, halkii ayeyna ka soo dhaqaajiyeen, waxaana dadkii la siiyey cabitaan iyo Rooti ay nafta ku ceshtaan, Dadkii oo sidaa ku qanacsan, ayaa goobtii laga soo wadey, mana jirin laba isla hadashay, oo qof waliba meel intuu madaxa la galay, ayuu hurdo tii aheyd, oo uu u hamuunqabey biliq la yiri.

Gaarigiina wuxuu soo guuxa oo soo guureeyaba, markii uu soo socdey in ka badan 24 saacadood oo aan kala go' laheyn, ayuu soo gaarey magaalada Kharkove ee dalka Ukrania, Waxaana dadkii oo badi wali hurdaya laga toosiyey hurdadii, loona sheegay iney si koox koox ah u galaan guri markaa uu gaariga hor taagnaa.

War laguma soo celinine sidii ayey dhamaan wada faleen, waxaana loo qeybiyey guriga oo markaa ka koobnaa dhowr qeybood, oo qolaba meel laga dajiyey, Iyadoo nasiib wanaag hal guri la iskugu geeyey Somalidii, waxaana loo keenay xoogaa raashin ah, halkiina iska Seexda oo ku nastana lagu yiri, Waa la daalnaaye inta kistii loo keenay la daliiqdey, baa halkeedii tii hurda aheyd laga sii laba lisay, markan sidii hore wey dhaamaan, oo xoogaa raashin ahna waa loo keenay, meel gabaad leh ayeyna ku jiraan oo misna diiran, Qof walibana wuxuu bilaabay inuu kasoo yara kabsado diiftii ka muuqatey, oo uu xoogaa xayi soo noqdo, maadaama lawada luudayey, waxeyna dadka bilaabeen iney dharkii ku qoyey ee kusoo wasakhoobey iska dhaqaan, halkii ayeyna salaadooda iyo rabbi ku shukrin ku galeen.

Si kastaba xalku ha ahaadee, waxey Sahan iyo Asxaabteeda hoygii la dajiyey ku sugnaayeen mudo labo Todobaad ah, oo ay ka war sugayeen kooxda maafiyada ah ee la wareegtey, maadaama ay kuwii hore ku soo kala hareen xadkii Ruushka

iyo Ukrian, Magaalada Kharkove waa magaalo bilicsan, waxaana ku yaala jaamacado fara badan, iyo xarumo Taariikhi ah, cimila ahaan waa qabow, sida dhuwloyga Raashia, oo ayba Ukraniaba ka go'dey.

Waxaana inbadan oo ay Sahan ka mid aheyd, aad uga yaabinayey markii ay arkeen meel wabi aheyd, oo inta barafowdey dusheeda sida wadooyinka la iskaga soconayo, misina lagu dul cayaarayo, oo lagu cayaarayo, Waxaa ku badan laaluushka iyo is daba marinta, Ukrania waa dal marka loo eego dalalkii ay horey usoo mareen Sahan iyo Asxaabteeda aad u bilacsan, misna baraf iyo maafiyo badan, dhanka kale waxaa fiidnimo Sabdi ah lagu wargaliyey, inuu safarkooda halkiisii kasii wadan doonaan. Iyadoo loogu bishaareeyey in caawa 1-da habeenimo uu gaari ka qaadi doono aqalka ay joogaan hortiisa, ayna isku sii diyaariyaan, qof walibana wuxuu u tafa xeytey diyaargrowga safarkii uu maalmahanba sugayey.

Waxaana saacadii la balamay soo caga dhigtey gaarigii xamuulka ahaa, ee la sugayey oo dadkii lagu daad gureeyey, wadahiina halkii ayuu sheelarihii u qabtey, oo lasoo beegsadey halkii ay ka xigtey Magaalada kiev ee caasimada dalka Ukrian, Wuxuu gaarigii xawaare heerkiisu sareeyo kusoo xoomaba, wuxuu waagi markuu xuub dilaacsadey soo xero galay magaaladii ujeedka ahaa ee kiev, Nasiib darase waxaa dhacdey magaalada oo xiligaa Aroor hore aheyd, dadkuna u kala xoomayeen shaqooyinkooda, aadna saxmad u aheyd oo gawaaridana ku fara badnaayeen.

In ciriirigaa dartii darawalkii hogaanka u hayey gaariga ay saarnaayeen Tahriibayaasha uu gaari kale afka daro oo uu halkaa shil ku galo. In kastoo ay jirtey jug soo gaartey dadka sida xoolaha gadaal ugu raran, iskuna dul saaran, hadana

nasiib wanaag ma jirin dhaawac muuqda oo soo gaarey dhamaan inta gaariga saaran, oo uu waduhu ugu horeeyo, Markii uu xaalku halkaa marayo ayey wadihii iyo kuwii la socdey ee maafiyada ahaa, is tuseen in xaalku uu aad u xunyahay oo hadii lagu qabto dadkan ay sharci darada ku wadaan arintooda ay halis ku jirto, Sidaa daraadeedna waxey ku heshiiyeen in ay meesha isaga cararaan, oo uusan Booliiska ku soo gaarin, sidii ayeyna faleen.

In cabaar ah markii meeshii la tubnaa, kuwii Tahriibka ahaan ay is dul jiifaan, misna xitaa aysan nuuxsaneynin, ayaa waxaa soo gaarey Booliiskii, oo waayey cid ay kala hadlaan gaarigan shilka galay, Waxeyna gaarigii ku bilaabeen baaritaan xoogan, waxeyna yaab iyo amakaag ku dhacdey Police-kii, markii ay fureen qeybta dambe ee xamuulka, oo ay ku arkeen dad aad u fara badan, oo sidii xoolihii la isku dul saarey.

Dadkiina markii indhahooda ku dhaceen kuwii Booliiska, qaarkood warkii baaba ku dhagay, kuwana wadnahaaba istaagi gaarey naxdin darteed, maadaama ay ka dhuumanayeen Booliiska, Waxaana kasoo wada haray indha taag taag, wuxuuna qof waliba hoosta iska lahaa, maantey kuu dhamaatey hadiiba ay gacanta kugu dhigeen Booliiskii aad ka gambaneysay. Haddii aad xabsigooda u gashana waa ay kuu dhamaatey, dhididka dhibcaha waa weyn ee ka hoorayey, hadii aad arki laheyd adigaaba nixi lahaa.

Nasiib darada heshayna waxaa ugu weyneyd, iyagoo aanba la socon halkuu xaalku marayo iyo in kaligood meesha looga cararey, oo kuwii wadey ay ka dhuunteen, buuqa iyo Bulxanka meesha ka baxayaa, maahan mid lasoo koobi karo. Boliskiina waa uu isku habar wacdey oo meesha ayey soo wada dhoobteen, oo mucjisadan ayeyba aad ula wada yaabanyihiin,

dadkii wadooyinka marayeyna anfariir ayaaba ku dhacay, oo meeshooda ayey ka dhaqaaqi waayeen.

Durbadiina Boliiskii waxey bilaabeen iney dadkii ku guraan gawaari shabaqla yaal ah, oo ay meesha soo dhoobteen, markii ay dadkii oo wada argagaxsan, kuwada rareen bey halkii ka dhaqaajiyeen, oo la beegsadeen saldhigooda weyn ee magaalada ku dhex yiilay, Markii meeshaa la isugu geeyey, ayaa la wareystey dhamaantoodna wax laga weydiiyey, waxa meesha keenay iyo sida ay ku yimaadeen, aad ayaa loo wada naxsanaa oo qof is og waxa uu ku hadlayo iyo waxa lagala hadlayaa ma jirin, Mana ku jirin qof sheegi karta, waxa la weydiiyey iyo waxa uu ku jawaabay, oo aad ayaa loo wada shoogsanaa, waxaana qof walbaa u bidhaamayey mustaqbal madow, oo mugdi ah, oo u bilowdey, aadna u dhib badan, wuxuu ku dhamaan doonana aan la ogeyn.

In Xogaa markii meesha lagu hayey, baa hadana laga sii daad gureeyey, oo Booliiskii isla garteen maadaama dadkan dambiilayaal yihiin la dhigo xabsiga, waxaana lala beegsadey xabsi weyn oo ku yaalay meel ugu yaraan magaalada Keiv u jirta 100-KM, Waxaana gaarigii oo dhowr saacadood la soo socdey keenay Xabsiga Weyn ee OMOKASHAVO, oo ahaa xabsiga ugu xun ee ku yaala dalkaas, uguna dhibaateynta badan dadka, waxaana gacanta ku haya oo maamula Askar aad Ajnabiga u neceb oo cunsuriyaal u badan, Waxeyna Sahan iyo qaar kamid ah Asxaabteeda warbixin kasii heysteen Xabsigan oo Somali badan aad loogu wax yeeleeyey, dadkii oo wada anfariirsan baa lagu amrey iney ku soo Xaroodaan Xabsiga Weyn ee OMOKASHAVO.

Cid hadal ka soo celisayna ma jirin, oo jugta iyo Tatoonyada lagu bilaabay, adigaaba yaabi lahaa isla markiiba, oo sidii xoolo

xeradooda Ul lagula xareynayo ayaa iyagiina xabsiga loogu xareyey. Waxaana erayadii ka soo yeerayey Askarta kamid ahaa " Bejna buu biriyaakhi sodaa" oo macnaheeda lagu sheegey " Adigaagan Madow maxaa dalkeena ku keenay"?. Dadkii oo jug ka carar wada ah, ayaa lagu wada xareeyey meel la moodo bakhaar aad u weyn, oo ay baakado daadsanaayeen, waxaana lagu yiri qof walbaa baakadahaa sariir haka dhigto, oo ha isku toosisto, bustooyin aad yaabeyso boorka ka baxaya iyo shiirkoodana waa lagu soo tuurey, iyagiina waa kala dafeen.

Qabowga meesha ka jirey iyo dhar la'ida dadka wada heysay hadii aad goob joog u ahaan laheyd waad jiriracoon laheyd, oo boorkaa iyo shiirkaa ka baxaya butooyinka baaba boolbaro iyo u dgoon barafuun kaaga qiimo badnaan lahaa.Dadkii meesha lagu soo gureyna waxey bilaabeen in ay meelaha xaar xaartaan, maadaama meesha ay aad u wasaq badneyd, misna u boor badneyd, mana ahan mid la qiyaasi karo ama la sifeyn karo, qabowga meesha ka jirey, oo heer kulku wuxuu xiligaa ahaa Meynis -35 Digree. Qof bani'aadam ah oo hawoon kartey iney Baakad dhul u seexato ma jirin, masaakiintii baakadaha farta loogu fiiqey waxey sameeyaan ayey garan waayeen, oo hadii ay hadli maagaana, kii hadla waxa ku dhacayo waa la ogaa, waxeyna ka fursan waayeen iney baakadahooda isku duub duubaan oo maciinbidaan, Waxaana dhamaan dadkii u bilowdey nolol xabsi oo aad u xun, misna aad u xanuun badan, una xakaar badan, qabowga meesha ka jiraa, waxaa uga darnaa cuno xumo soo wajahdey, oo habeen ka habeen ayaa waxaa loo keenayaa jab rooti ah iyo koob biyo kulul, la oo aan wax kale wehlinin.

Waxaana cuno xumadaa u dheereed nadaafad daro tii ugu xumeyd, oo waxaa musqul iyo meel ay ku xaajo gutaan u aheyd god yar oo uga dhex qodaan meesha ay ku

xareysanyihiin, mana laheyn biyo iyo waraaq la isaga nadiifiyo, Urta meesha ka baxeyso waad yaabeysaa, neeftana isku dhajineysaa. Jirdilku waa iska caadi, oo ma jirin qof aan firito ka muuqan, oo aan dhaawac lasoo garsiinin, miskiintii Sahan aheyd oo markii horeba lug ka hitineysay, ma jirin cid u tureysay oo dhankeeda ayaa laga jugeynayey, barafkana lagu xaaqayey, Wuxuuna xaalkeedu ahaa mar ay ku kufto barafka ay xaaqeyso iyo tatoonyo xooga oo lagu dhuftey ay la dhacdo, cuno xumadiina waa ay u dheereyd.

Dadkii muuqaalka bilicsanaa maalmo ka hor, hadii aad arki laheyd waadba inkiri laheyd, aqoonsi aad aqoonsato iska daaye, waxaa maalmo yar gudahood is wada badalay oogada jirkooda. Waxey Sahan soo xasuusatey cagabararkii iyo calool bararkii soo marey 92-dii iyo dadkii lafaha taag taagnaa, gaajada darteed oo horteeda ku naf baxayey iyo kuwan ay lafuhu maalmu kusoo wada taag taagmeen, oo uu qabowna u dheeryahay, Waxeyna dadkii qaar gaareen heer ay istaaga ka dhacaan, tabar yari iyo dhiig yari darteed, sidaas oo ay tahayna aan loogu turin oo lagu xamaalanayey, si xoog ahna loogu shaqeysanayey. Askarta oo xiran jaakado aad u cul culus misna qabowgii ay ka gambanayaan, ayaa masaakiintaan calalo yar xiran bey barafka ku dal dashaan.

Mana jirin dhamaan dadka qof aan xanuun la taaheynin, nasiib darase cid Uga gar gaareysay ma jirin, cid uga sii dareysay mooyee, Sahanna waxaa meesha kula dhacay xanuun aad u daran, Ka gadaale markii ay isku kaashadeen cuno yari, dhiig yari, tabar daro, shaqo badan, garaacis aan xad laheyn iyo barafkaa aysan dhar u wadan, ee lagu dal dalayo, iyadoo uu qabowgu gaarsiisanyahay meynis - 36, waxaana miskiinta galay biyo, oo iyadoo idil isku soo laabay, Taaha iyo Ashahaada ka baxeyso meesha hadii aad arki laheyd, waad ilmeyn laheyd,

sida aan loogu tureynin ee inta badiilka loo dhiibo, iyadoo kufaa kaceyso barafka lagu xaaqayo, markii ay miirbeesho oo ay barafka ku dhex dhacdana, ay askartii garaacayaan.

Waxaana arintaa u adkeysan weydey Istar oo maagtey maalintii dambe, markii ay is heyn weyday iney Sahan oo barafka ku dhex suuxdey caawiso, maxaase ka raacay, tii dheereyd ayaa lagu dhigay, Waxaan Istar ku dhacday mid aan laga faa loon karin, oo sidii Kubadii ayey Askartii arxan laawayaasha ahaa isugu gameen, oo midba barafka dhexdiisa dhankiisa laad kaga soo tuurey, Oo jugta gaartey qiyaas beel ayey noqotey, qar qaryo iyo barafna waa u dheereyd, oo sidii Diinka ayey isku kaduuday isuna dhex gashay, Waxaana markii ay Arxan laawayaashii ka daaleen, sidii ay u garaacayeen, kusoo dhex Tuureen Hoolkii weynaa, ee ay Xabsiga kaga jireen, waxaana usoo gurmaday intii meesha kula jirtey, oo wixii Bustayaal ahaa ku duu duubay, iyadoo la yaabayo sida ay u jareyneyso.

Si walba oo ay diirimaad ugu sameyn kareen, ayey ku dadaaleen, oo sidii iyagoo subcinaya ayey ku wareegsadeen, oo inta gacmaha isku xoqaan, markey wey kululaadeen is yiraahdaan bey mar mariyaan, sida iyagoo u masaajeynayo oo kale, Wax kale oo ay tari kareen ma jirin. Iyagoo xaaladaa dhibaatada, ciilka iyo calool xumada badan ku jira, ayaa waagii Baryey, iyadoo ay markani gabdhihii ka soo yara roonaadeen sidii hore. In kasta oo Sahan ay wali Aadaareyso oo uu xanuunkii biyaha galay, qandho, gaajo iyo Oon isugu darsoomeen, oo xitaa ma heystaan biyo ay afka u saaraan, oo dhuunta ugu qooyaan.

Waxaana biyihii Kululaa iyo jabkii Rootiga ahaa ee adeegiisa ku daqrayey ugu soo horeysa caawa, waagiina haduu baryey

oo faanoole fari kama qodna, Halkii ayaa la isku dayey in gabdhihii la madadaaliyo, oo loo sheekeeyo, in kastoo ay Istar dhaantey sidii hore, hadana Sahan xaalkeeda wax weyn iskama badalin, oo xanuunkii ayaa ku sii lexaadsadey. Iyagoo xaalkoodu sidaa yahay, baa gabalkii u dhacay, waxeyna u xisaabsaneyeen saacadaha sida iney soomanyihiin oo afur Sugayaan.

Sidii caadada u aheydna waxaa loo keenay jab jabkii rootiga ahaa iyo kob koobkii biyaha la soo kululeeyey ahaa, halkii ayeyna ku kala dafeen oo aad baa loo wada haayey, Waxeyna markiiba isku dayeen ileen waa la kala daranyahee, in gabdhahan marka hore wax la cunsiiyo, haba ugu darnaato Sahan, oo kari la'eyd iney ruugto jabka rootiga, sida dhagaxa u adag ee ku soo aadey. Waxana aad u damqayey daqarka ka jeexan, ee xalay markii sidii kubadda loo soo laaley soo gaarey, gaajo aad u darana wey heysay, raashin aan isaga aheyne ma heyso. Mana u soo muuqda, oo isagaa 24-kii saac mar la helaa oo u ah raashinka ugu qiimaha badan ee ay heystaan.

Sidii ay ugu dhibtooneysay Sahan, ayaa waxaa markii dambe loo dhex dhigay biyihii kululaa oo loogu jilciyey sidaana lagu cunsiiyey, run ahaantii maahan dhibka meesha ka jira. Ciqaabta, cadaadiska iyo calool xumada mid qoraal lagu soo koobi karo ama la qiyaasi karo, waana Xaalad Xitaa aan loo Quurin Qof la necebyahay, Waxeyna xaaladaa aan laga xasdeynin, ee xanuunka badan ku jireen mudo 8 bilood ah, waxaana markii dambe xabsiga xiriir la soo sameeyey maafiyadii iyaga keenay Wadanka oo laaluush dhiibay. Sidaana keentey in lagu sii daayo dhamaan dadkii, oo mar kale Nasiib wanaag ay maafiyadii daad gureysteen, siba si bey dhaantaaye.

Waxeyna dadkii oo wada tacbaan ah, kusoo xareysteen Bakhaar weyn oo ay ugu tala galeen, halkaasa oo ay xoogaa raashin ah ugu keeneen, miskiintii Sahan aheyd oo xanuunkii uu ku sii siyaadey, aadaarkiina sii laba jibaarmey bey u keenen kaniin xanuun baabiye ah. In kastoo xanuun uu jirey, hadana sidii hore ka roon Sahan ayaa la dhihi karaa, markii ay meesha ku jireen Laba maalmood, ayaa koox maafiyadii ah inta u timid dadkii u shegeen in ay Tahriibinyaan lacagna laga doonayo, maadaama toodii hore ay kusoo madax furteen, Awalba danbey usoo deysteen iyo iney doolarka ka gurtaan, Qof walbaana waxaa lagu Amrey inuu la xiriiro Ehelkiisa, oo uu ka codsado inuu si deg deg ah lacag ugu soo diro, waxeyna u keeneen Talefon oo uu qof waliba reerkiisa kula xiriiro, waxaana dhamaan loogu hanjabay cidii lacag la imaan weyda in la qaarijinayo.

Dadkii oo wada arga gaxsan baa taleefanadii ku kala boodey, oo naftan aad wali sidaan bad baadsada is wada yiri, Sahan iyo Istarna dadkaas ayey ka mid ahaayeen, oo waxey la soo xiriireen hooyadood Dhaahiro.

Maadamada iyada waa hore ayey gabdhaha ka quusatey geerina u xisaabsatey, maadaama sanad ku dhawaad war iyo wacaal toona ay ka helin. Meel iyo cid ay kala xiriirtana weyday, si aan la qiyaasi karin ayeyna u yaabtey una anfariirtey, markii ay codkooda maqashay kuna barooratey. Istar ayaa duqdii dajisay, wax xoogaana uga sharaxdey xaalka halka uu marayo iyo wixii mudadii ay ka aamusnaayeen qabsadey oo kooban, Maamadiina waxey durba xabadka u garaacatey iney isla bari u soo direyso lacagta naftooda lagu bad baadinayo .

Qoladii Maafiyada aheydna waxey Habartii u sharxeen qaabka ay lacagta kusoo gaareyso, sidii ayaana la isku afgartey,

Tahriibayaasha dhamaana waad yaabi laheyd, cabaadka iyo calaacalka ka baxaya, marka ay Ehelkooda la hadlayaan, oo ay u sheegayan in naftooda ay lacagtaa ku xirantahay, Nasiib Wanaag Tahriibayaal badan oo dadkii meesha ku jirey ka mid ahaa oo ay Sahan iyo Istar ugu horeeyeen, waxaa loo sheegey maalmo kadib in lacagtooda soo gashay gacanta maafiyada, oo ay safar sugayaal yihiin hada wixii ka dambeeya, arintaana aad bey u farxad galisay.

Waxaase nasiib daro aheyd in dadkii aan wali lacagahooda la soo dirin, in midba mar inta lala baxo, iyadoo aan loo Eegeynin waa dumar, waa rag, waa saqiir iyo waa kabiir baa la soo celinayey, Iyagoo bugta laga soo qasay, misna dhagaha iyo farahooda gabalo laga soo jartey, looguna soo hanjabay in maalinba xubin laga jaranayo jirkooda, ilaa ay lacagtooda ka soo gaarto. Wax dhayayey oo dabiibayeyna ma jirin, oo ruux walbaa meesha laga soo jartey, ayaa inta boog weyn ku noqoto, aadaarkiisa laga joogi la'aa meesha, taasina waxey keentey in ay aad u wada murjisay Tahriibayaashii, xitaa kuwii la yiri lacagahiina waan heynaa.

Waxaana bakhaarkii ka dhex bilowdey baroor, oo dhammaan dadka waa ay wada murugsanaayeen, kuwii qeybo kamid ah jirkooda laga soo jareyna, taaha ka baxayo hadii aad maqli laheyd, waad la barooran laheyd. Waxaana loo keenayey markasta Teleefon oo lagu lahaa u sheega reerkiina, in malinba maalinta xigta oo ay lacagta naga soo daahiyaan, in idinkana ay xubin idiin maqnaan doonto, Iyagana xanuun baa hayee cabaadka ay ku cabaadayaan reerahooda waad la yaabi laheyd, oo adigaaba hortood lacagta u diri lahaa.

Iyadoo ay xaaladaa ku suganyihiin Tahriibayaashii masaakiinta ahaa, baa Aroor tii dambe, waxaa bakhaarkii dabada loo soo

galshay gaari xamuul ah oo dadan. Waxaana lagu rarey intii lacagahooda ay soo gaartey maafiyada, intii kale oo cabaadka iyo Oohinta ka baxeyso aad yaabeyso ayaa goobtii looga tagay, Nasiib Wanaag Sahan iyo Istar waxey ka mid ahaayeen, dadkii gaariga lasoo saarey, laakiin ilmada ka socoto hadii aad arki laheyd waad nixi laheyd, oo waxey aad uga calool xumaadeen, Dadkii ay bakhaarka uga soo tageen, sidii ay ahaayeen markii laga soo dhaqaajinayey, xanuunkii hayey iyo xubno ka jarista sugeyso maalinba tan xigta, Arintaana waxaa la wadaagay dhamaan intii la saarneyd gaariga, wax ay u qaban kareen ama xitaa iyaga qabsan kareen, ayaanba jirin xiligaa sida xaalku ahaa, oo aan ka aheyn iney iska baroortaan, ilmana ka balaq siiyaan, Wuxuu gaarigii la soo gab gableeyaba safar dheer oo saacado badan qaatey kadib, waxey fiidnimadii soo caga dhigteen meel barxad ah, oo la wada farey iney ku soo wada daataan, sidii ayeyna faleen, mana jirin cid wadata, Wax aan ka aheyn calalada u xiran, halkii ayaana inta dhowr koox loo qeybiyey afka jiqda loo aadiyey, oo cagahiina maala lagu yiri.

Waxaana u bilaabatey lugeyn ay ku dhex lugeynayaan, howdka buuraha iyo barafka, cidii dib isku dhigtana, waxaa yaqaaney bud, oo lalamaba hadleynin, ereyna leyskagama qasaarineynin, oo budkaas ayaa Amrayey oo ku kalifayey inuu qof waliba cagaha wax ka dayo. Sidii ay howdkii ugu lugeynayeen, oo uu barafkii dushooda ugu da'ayey, baa markii uu waagu ku dilaaci rabey lagu soo xareeyey guri weyn, oo meel cidla ah ku yaaley. Qof walbaana halkii ayuu isku ganay, oo daal aad u daran ayaa hayey, kii aadaarayey iyo kii hurdaayeyba, meeshii ayaa lagu soo wada xirey.

Waxaana loo soo laabtay galabnimadii, oo loo keenay xoogaa rooti iyo cabitaan ah, oo ay nafta ku ceshtaan, iyadoo loogu bishaareeyey in caawa marka uu gabalka dhaco, laga talaabin

doono xadka Ukrian, oo ay caawa ku hoyan doonaan dalka ugu Horeeya wadamada Midowga Yurub ee Hugaria ama Hangari, Arintaana aad ayey ugu wada riyaaqeen, oo qof waliba rajadii waxaa soo gashay hada ayaad cagaha la heli doontaa Janadii Yurub, ee aad usoo Jilbo muruxday. Qof walbaana markan, waxaa wajigiisa laga dheehan karey farxad, maadaama ay mudo calool xumo iyo murugo baroor u dheertahay kusoo jireen.

Sidii balanta aheyd markii uu gabalka dhacay, oo uu dhulka mugdi noqdey ayaa loo keenay dhowr gaari oo yar yar, Tahriibayaashiina lagu raseeyey oo la deeqsiiyey, Waxaana lagu daadiyey meel jiq ah, oo la wada fadhiisiyey, waxaa loo sharaxay marka meesha loo wado, la geeyo halka ay afka aadinayaan, oo ay beegsanayaan. Iyadoo loo sheegay in laga talaabin doono siliga ku xiran xuduuda u dhaxeya Yukareyn iyo Hangari, halkaasna ay ku Egtahay howsha maafiyada, Cagaha maala oo carara ayaa lagu yiri, marka aad ka talaabtaan xadka,.

Waxaana intaa loo raaciyey in wadada ugu soo horeysa oo u muuqan doonta ay leedahay Seddax jaho, waxaana la farey iney raacaan jihada uu wajigooda ku toosanyahay, Oo aysan raacin labada kale, oo loogu sheegay iney midi gasho dalka Romania mida kalena dalka Oslovkia gasho, madaxa ayeyna fariimihii la farayey u wada ruxeen. Socodkii ayaana la soo qabsadey, oo lagu keeney halkii lagu balamay, siligina inta loo qabtey ka talaaba la yiri, oo cagahaa wax laga dayey, waxaana kusoo wada xoomay koox Eeyo ah, oo dhan waliba uga yimid, yaase dhag jalaq u siiyey oo u istaagey Qeylidooda, oo orodkii ayaa lasii waday.

Miskiintii Sahan aheyd oo uu Orodka dhibayeyna, waxaa xambaartey oo laboodey laba wiil oo dhalin yaro ah, markii ay in cabaara cararayeen oo wadadii loo sheegay cagta saareen, misna Eeyihii ka hareen, baa howdka hala galo iyo aan wadadeena cagta ku sii heyno, lagu mur may, Waxaana lagu heshiiyey in wadadaa dheer cagta la saaro, oo aan laga leexan, maadama laga baqay in hadii howdka la galo wadadu ka lunto, oo wadamadii looga digayey ay galaan, waxaana la hareer marayey gawaarida wadada socotey, iyadoo aad loo fara badan yahay.

Waxeyna taasi keentey in gawaaridii wadada mareysay, ay markiiba Boliiska wacaan, una sheegaan waxey wadada ku arkeen, taasoo durbadiiba sababtey in afarta dhinac uu Boliis uga yimaado, waaba sidii ay doonayeene. Oo Boliiska ayeyba baadi goobayeene, gacmaha ayaa sare loo wada taagey, laguna wada dhawaaqay REFUGEE ama Qaxooti ayaan nahay, Boliiskii ayaa Tahriibayaashii durba dajiyey, oo naxariis dareensiiyey, goobtiina wax yar ku hayey, oo u dalbay Bas lagu wada qaado, waxaana in yar dabadeed soo gaarey goobtii Bas-weyn oo dhamaantood lagu soo daad gureeyey.

Waxaana lala soo beegsadey saldhig ay lahaayeen, oo ay qaxootiga ugu tala galeen, halkaasna dadkii oo aad u gaajeysnaa, una Haraadsanaa raashin iyo cabitaan, inta lagu siiyey, markii ay yara nasteena lagu baarey oo laguna wareystey, Waxaana Sahan aad uga yaabiyey dhowr nin oo dalalka Afrika ka soo jeeday oo Somali sheeganayo, waliba sita Tesaraha Somalia iyo Ducumentiyo cadeynaya Somalinimadooda, Sida Baasaboorkeenna, halka dhamaan Somalida runta ah aysan jirin cid ducument wadata, oo aan ka aheyn luuqadaas Somaliga ay ku hadlayaan.

Markii uu soo dhamaaday, wareysigii lala lahaa dhamaan Tahriibayaasha, ayaa loogu bishaareeyey in Qaxootinimo loo qaabilayo, loona sii gudbin doono xarumaha loogu talagay qaxootiga, Waxaana dhowr saacadood dabadeed loo keenay Bas ka weyn kii hore oo la soo beegsadey kaamkii loogu talagay, dadka Qaxootiga ah, Waxaana dhowr saacadood markii uu soo socdey baskii, saqdii dhexe la keenay kaamkii loo wadey, oo ahaa kaam lagu magacaabo Bijkey, oo magaalada Caaasimada ah ee Bodabest u jira saacad iyo xoogaa.

Halkii ayaa lagu wada daadiyey Qaxootigii, oo lagu soo dhaweeyey, waxeyna kala kulmeen soo dhaweyn diiran shaqaalihii xiligaa joogay, oo u badnaa kuwii xarunta waardiyeynayey. Waxaana qolal loo dajiyey laba laba, dabcan Sahan iyo Istar qol ayey wada degeen, Iyagoo halkii ku cunay hilib gasacadeysan, rooti iyo cabitaan loo keenay, Gaajo ayaa dadka wada heysaye, waa lawada cunay, oo ma jirin cid is weydiisay, ma xalaal baa mise waa xaaraan, ma doonfaar baa mise waa xoolo kale, oo waa la wada daliiqdey sariirihiina la wada beegsadey.

Ileen daal iyo rafaad badan baa la soo wada maree, tii hurda aheydna loo yeeray halkii ay cir u dhulba jirtey, oo sida la isku wada bilqay waad yaabeysaa. In kastoo Sahan uu xanuunkii ku yara dambeeyey, hadana daal fara badan oo isugu tagay, baa ka tanbadiyey, oo waxey la wadaagtey asxaabteeda hurdada dheer ee ay wada galeen, Waxaana la soo wada naaxay, iyadoo laba walbaaba albaabka loo garaacayo, oo lagu wargalinayo iney isu soo diyaariyaan quraacda, Waxaana loo qeybiyey cadayo, iyana waxey wada beegsadeen musqulihii, oo isu soo diyaariyeen quraacdii, wuxuuna ruux kasta oo kamid ahaa soo beegsadey halkii farta loogu fiiqey, oo ay quraacda ku diyaarka

aheyd, Halkii ayeyna ku cuneen quracdii, oo ay markan iska weydiinayeen, maxaa xalaal ah maxaase xaraan ah in kastoo ay xalay taa ka gaari waayeen oo ay ku tagtey waxey ahaydba.

Waxeyna halkii kuwada cuneen intii loo sheegay iney xalaal tahay, oo uu muslimku cuni karo, markii ay quraacdii u soo dhamaatey, ayaa mid mid looga yeeray xafiiska Xerada. Waxaana ruux waliba la weydiiyey su'aalo ku saabsan isaga iyo daruufaha ku kalifay inuu u soo hayaamo dalkan Hangari, oo ay aad u kala fogyihiin Somalia.Qof walibana wuxuu dur duriyey, intii uu is lahaa waa laguugu gar gaarayaa, oo magangalyo Qaxootinimo ayaa laguugu siinayaan, iyadoo aysan u kala soocneyn runta iyo beenta, ooba la dhihi karo dadka badi waxa ay sheegayeen.

Waad yaabeysaa sida ay been u wada dhoob dhoobteen, oo kaalay arag ilinta qaarkood ka baxeysa, fiq fiqleynta iyo sida loola murugoonayo, oo loo aamusinayo, iyagoo iska dhigayo in masiibo wixii dunida jirtey, dusha loo saariyey, misna uu ka soo badbaadey.

Runtii hadii aad arki laheyd dadka qaar sida ka muuqatey, misina ay ka aheyd jiliin been ah, adigaaba si deg deg ah ugu gar gaari lahaa, oo miiska sharcigooda ku siin lahaa, Waxaana dhamaan loo sheegay dadkii in aysan waxba ka halaabi doonin, oo la wada qaabilayo, waxna loo qabanayo. Waxaana loogu bishaareeyey in hada wixii ka dambeeya, aysan la kulmi doonin dhibaato, inta ay maganta u yihiin Hangari, aad ayeyna ugu wada riyaaqeen, oo isku wada marxabeeyeen, Waxaana lala sii beegsaday meel kale oo isla kaamkaa ka tirsaneyd, oo loogu sheegay iney aheyd xarunta caafimaadka, si baaritaano loogu sameeyo caafimaadkoodana loo hubiyo, maadama dadka qaarkii ay xanuuno sheegteen.

Halkii ayaana dhamaan loogu sameeyey baaritaano caafimaad, iyadoo dadkii intii markaa xunuunkooda fududaa, isla meeshaa lagu siiyey wixii daawooyin ahaa oo ay u baahnaayeen. Intii kale ee xanuunkoodu darnaa oo ay Sahan hormuudka u aheydna, waxaa loo sheegay in barito loo qaadi doono isbitaalka weyn ee caasimada Budabest, halkaana xaaladooda wax looga qabanayo.

Arrintaana aad ayey u soo dhaweeyeen in kasta oo ay jireen dad aad uga baqayey, in ay isbitaal ku galaan Yurub, maadaama ay maqli jireen waxaa lagaala baxayaa xubnaha ugu muhiimsan jirkaada, oo noloshaada qatar ayey galeysaa ama horaaba ka dhimaneysaa.

Si kastaaba arintu ha ahaatee dhamaan asxaabtii Sahan, ay isla soo Tahriibeen, jidkii rafaadka badnaana isla soo mareen, meeshana isla soo gaareen, waxaa la dhihi karaa waxey ku sugnaayeen maalintaa iyada ah xaalad ay ku diirsadeen, kuna qanceen, kana wada maqsuudisay dhamaan. Dhanka kale sidii balabtu aheyd, intii aroortii xigtey loo balamiyey isbitaalka weyn, waxaa looga qaadey meeshii gaari loogu talagalay, markii isbitaalkii oo ay warbixintooda uga sii horeeesay la geeyeyna.

Waxaa durba lagu bilaabay baaritaano dheeraad ah, waxeyna la kulmeen dhaqaatiirtii qaabilsaneyd, xanuunadooda kala duwan. Sahan oo laba xanuun la il daraneyd, waxaa meesha ugu diyaar ahaa laba dhaqtar, oo labadeeda xanuun kala qaabilsanaa, waxeyna ku bilaabeen wareysi iyo baaritaanadii ay uga baahnaayeen, iyagoo u sheegay Sahan iney u baahan tahay Labo Opretion ama labo Qaliin, Marka hore biyaha ka galay dhabarka, waa in laga soo miiraa, marka labaadna lugtaan ay ka barartey, waxay la barartey Infaction gudaha ka jira,

maadaama ay mar hore xabado uga dhaceen, marka in wax badan laga qabto gudaha ayey rabtaa.

Waxaana intaa loosii raaciyey in xitaa lafo is daba marsan ay jiraan, oo wax ka qabad u baahan, markaa labadaa Opretion, waa u muhiim, waana loo soo kala hormarinayaa, oo mar kaliya laguma sameynayo. Waxaana loo sheegay in la soo hormrinayo kan biyaha looga miirayo, iyana warba kama keenin, oo madax ruxid iyo ok, waxaan aheyn lagama heynin, waxeyna hoos iska laheyd Allow kuwan shartooda ku mooti dhankooda sanna kusoo aadi. Si kastaaba ha ahaatee Sahan, waxaa la seexiyey isbitaalkii, waxaana ku wehlisay oo ay dalbatey iney la joogto gabadhii Istar aheyd oo loo ogolaadey, waxeyna habeenkaa kamid ahaayeen dad badan oo isbitalka la jiifiyey.

Waxaana subaxii xigay Sahan abaarihii 1:00 duhurnimo xiliga magaalada Budabest lala galay, qolkii Opretionka, waxaana halkaa uga bilowdey Opretionkeedii 1aad, oo dhakhaatiirta dadaal aysan u yareysan. Istar oo wehlisayna waxey ku sugneyd albaabka qolka lala galay Sahan, iyadoo faataxa iyo intii ay quraanka ka taqiiney taruurixineyso, ducada ka baxeysana waad yaabeysaa iyo allow u fududeyda, Istar dur durineyso.

Markii qolkii lagu heystey Sahan saacad in kabadan, baa iyadoo sariir lagu sido, oo suuxsan qolkii laga soo bixiyey, waxaana Istar loogu bishaareeyey in lagu guuleystey qaliinkii, wax walbaana sidii loogu talagalay ay u dhaceen, Iyadoo Alxamdulillahda heysana waxey dhankeeda kasii raacdey, Sahantii oo sariirta Kalkaaliyaal ku wadeen, una sii wadeen xagii uu ka xigay qolkii Sahan ay isbitaalka kaga jirtey, In cabaar ah markii ay Istar dhinaceeda fadhidey bey Sahan soo

naaxdey, Istar oo madaxeeda sal salaaxeyso, weyna u dhoola cadysay, Istar oo aad u faraxdey markii ay soo jaleecdey Sahan, ayaa iyadoo qosleysa ugu bishaareysay, intii ay dhaqaatiirta u sheegeen.

Iyadoo aanan waxba u kala reebin, Sahanna Alxamdullilaah ayey laheyd, halkii ayeyna ku galeen sheekooyin, kaftan iyo madadaalo, oo Sahan waa soo yara miirsatay dawadiina waa ka baxday, oo sheekada dhankeeda ayey ka wadi kartaa, walow uu qosolku dhibayo. Sidii sheekadu ugu socotey, ayey markii dambe isla meel dhigeen, in Istar u dagato magaalada, isbitaalka hareerihiisana aysan ka fogaan, oo ay taleefan ka raadiso, xaaladana la socodsiiso Hooyo Dhaahiro, oo aan lala hadlin intii la soo caga dhigtey Hangari, In kastoo uu isbitaalka talefan lahaa, haddana waxaa jirtey baqdin ay baqayeen iyo bac ku xirneyd buufisna u dheeraa, oo waxey islahaayeen hadii aad isbitaalka reerka ka wacdaan. Armaa warkiina la daba galaa oo arinkiina fashilmaa, maadaama dadba nagama dambeeyo ay badi yiraahdeen. Oo xitaa Taleefanadii ku yiilay kaamka, ee loogu talagalay iney qof waliba inta kaar soo iibsato, ehelkiisa ka wacdo, Ma jirin dhamaan Sahan iyo asxaabteeda cid ku dhiiratey, iney talefan ehelkooda u dirsadaan oo dhamaan buufiskaa ayaa ku wada xirnaa, Waxeyna u heysteen in wax walba, oo ay ku hadlaan lala socdo, waxaana ku wada jirtey feejignaan aad u qoto dheer, Sahan iyo Istarna arintaa ayey la wadaageen lana qabeen asxaabtooda.

Waxeyse jaanis u arkeen magaaladan loo soo wadey, oo ay is dhaheen hadaad reerki wici kartaan, wax walbaana u sheegi kartaan. Istarna iyadoo fursadaa ka faa'iideysaneyso, ayey u dhaqaaqdey magaaladii oo aysan kala garaneynin, markii ay isbitaalka banaanka uga soo baxdeyna. Waxey u dhaqaajisey

halkii uu wajigeeda u jeeday, oo ay isaga nasiibsatey, nasiib wanaag markii ay socotey kudhawaad 7 daqiiqo ayey aragtey dukaan iyo Kol-box ama telfanka wadooyinka ku yaal ee kaararka ama shilimaadka lagu dirsado, oo isku dhinac yaal, Waxeyna gashay dukaankii oo ay weydiisay kaar talefan, si dhaqsa ah ayaana gacanta loogu galshay, qiimihiisina wey iska bixsay, oo la soo beegsatey halkii uu taleefanka ka xigay.

Waxeyna durbadii ka shanqarisay taleenkii gurigooda, oo ay markiiba gacanta ku dhigtey hooyadeed, oo aad uga wal walsaneyd gabdhaha, oo maalmahan aysan war ka helin. Waxaana Istar iyo hooyadeed u bilowdey sheeko iyo is wareysi dheer, waxeyna u faah faahisay xaaladooda iyo wax walba oo ay la kulmeen, safarkooda xaalada Sahanna wey u kala dhig dhigtey, rajada ay qabaana waa u sharaxday, Hoyadiina dhankeeda ayey uga warantey xaalkeeda iyo sida xamar uu xiligan yahay, wax walba oo gadaashood ku soo kordhayna u sheegtey, duca iyo dar daarana dhagaha ugu shubtey, Markii ay ku dhawaad saacad hadleyeen, bey Istar kaarkii inuu ka dhamaanayo dareentey, waxeyna halkii Istar ku macsalaameysay hooyadeed oo ay u balan qaadey in ay wax walba lasoo socodsiin doonaan.

Halkii ayeyna Istar oo aad u faraxsan ugu soo laabatey Sahan oo is leh war tii armey dhuntey, intaan Taleefan ka badane, waxeyna faraqa ugu shubtey wax walba oo dhex marey, iyada iyo Hooyo Dhaahiro.

Dardaaran iyo ducana intey soo sheegtey u daba dhigtey, waxeyna gabdhaha habeenkaa ku seexdeen, xaalad ay maqsuud ka ahaayeen, Waxaa xaaladaa farxadeed la wadaagtey Hooyadood. Dhanka kale Sahan waxey Isbitaalkii kala kulantey daryeel caafimaad kii ugu sareeyey, waxaana u

dhisantey niyada, oo aad ugu dagtey, waxeyna bilowdey iney kasoo kabsato diiftii Tahriibka, taana kuma kali aheyne, waxaa la wadaagtey Istar qudheeda, oo aad yaabeyso sida ay usoo kabsatay.

Waxaana isbitaalka si joogto ah, kusoo booqan jirey qaar kamid ah asxaabtooda Tahriibka, oo yara bartey magaalada, oo maalinba Koox cusub ayaa soo booqanayey Sahan, mana jirin cidlo ay dareemayeen gabdhaha, oo waqtiga intiisa badan Asxaabtooda ayaa bar bar taagnaa. Markii ay dhowr cesho ku sii jirtey Sahan isbitaalkii, baa maalintii dambe loo sheegay iney isu diyaariso qaliinkii labaad ee lugta, iyana markii horeba waa ay sugeysay.

Oo u diyaar beyba aheyde madaxa ayey u ruxdey, raali oo diyaar baan ahayna u raacisay, iyadoo markan uusan ku jirin buufiskii ahaa, Armaa xubnaha jirkaada lagaala baxaa, Waxaana fiidnimadii mar kale Sahan lala beegsadey Saaladii Opretionka, Istartii oo ay markaan wehliyaan laba gabdhood, oo asxaabtooda ahaa oo soo booqdey, Waxey taagnaayeen albaabkii qolka uu Opretionka ka socdey, iyagoo duco iyo quraanba intii ay kareen halkaa ku aqrinayey, aamintaana isugu ajiibayey.

Ku dhawaad saacad iyo bar dabadeed baa qolkii laga soo bixiyey Sahan oo sariir saaran, misina suuxsan, waxaana gabdhihii oo ay Istar ugu horeysay loogu bishaareeyey, in qaliinkii lagu guuleystey, wax walbaana sidii loogu Tala galay ay u dhaceen.

Waxaana intaa loo sii raaciyey looga farxiyey, in Sahan aysan mar dambe Hitin doonin, oo aysan Lug ka buluqsiin doonin, oo markan lixaadkeedu u taam yahay, Lugteediina loo hagaajiyey, oo sideedii hore loogu soo celshay, kuna laafyoon

doonto hada wixii ka dambeeyo, aad ayeyna bishaaradaa ugu wada farxeen gabdhihii. Sahan iyadoo suuxsan baa qolkeedii lagu celiyey, in ka badan saacad kadibna waa ay soo naaxdey, iyadoo ay gabdhihii hareer fadhiyaan, markii ay arkeen iney soo naaxdey bey u wada bishaareeyeen una sheegeen wax walba, oo ay dhaqaatiirta u sheegeen, Sahanna aad iyo aad ayey arintaa ugu faraxdey Allana uga mahadcelisay. Waxeyna meeshii kula wadaagtey gabdhihi kale sheeko iyo kaftan u socdey, in kastoo mararka qaar aysan u qosli karin sidooda, oo uu xanuun qabanayey.

Waxaana in cabaar ah dabadeed ka soo tagay gabdhihii, maadaama aysan intaa ka badan la sii joogi karin, oo ay dhamaatey waqtigii loogu talagalay booqashada bukaanada. Waxaana isku soo harey sidii caadada aheyd, Istar iyo Sahan oo habeenkaa, niyad sami iyo farxad ku seexdey, subixiina Istar waxey xaalkii ugu bishaareysay Hooyadood Dhaahiro, oo aad ugu faraxdey in Sahan mar kale ay ku soconeyso lugaheeda, iyadoo dabiici ah. Waxeyna halkeeda kasoo tuurtay wixii duco iyo dar daaran ahaa ee ay awooday markaas, Istarna sidii caadada u aheyd, iyadoon xarafna ka reebin bey dhagaha Sahan ku shubtey, dhammaan wixii iyada iyo Hooyo dhex marey, waana ka mqasuuday.

Dhanka kale Sahan waxey dhamaan shaqaalihii isbitaalka, ka heshay daryeel intii ay u baahneyd iyo dheeriba, waxaana maalinba tan xigta aad uga soo reyneysay xaaladeeda caafimaad, oo waxeyba bilawdey iney laba birood ku kutubto, oo kusoo dhex socoto isbitaalka gudihiisa, Waxaana si joogto ah loogu dirayey meel jimicsi, oo lugaha u qaas ah, isbitaalkana ku dhex tiilay, dadka iyadoo kalena loogu talagalay, waxaana dhamaanba ka baaba'y Sahan diiftii Tahriibka, Waxaana soo noqotey qalanjadii Sahan aheyd, oo

qumanaanta socodkeeda qiyaasta lagu larey, dhexdeeda qoran, qoorteeda dheer, bishimaheeda qadda ah, sanqaroorka dheer, dhaayaheeda lagu qanco, timaheeda qarada dheer, wax lagu qiyaasi kara aysan jirin, Dhaqaatiirtiina markii ay yaqiinsadeen xaaladeeda caafimaad iney taam tahay, dhamaan baaritaanadii ay u baahnaayeena ku sameeyeen, ayey ku wargaliyeen in howsheeda u dhamaatey, oo boorsadeeda waqtigii ay isbitaalka kala baxi laheyd la gaarey.

Waxeyna iyadoo aad ugu faraxsan xaaladeeda, misna u mahad celineyso dhaqaatiirtii u hagar baxay, bey isbitaalkii ka huleeshay, oo loo celiyey Kaamkeedii Biijkey. Waxeyna iyadoo sidii bil 15-aad iftiinkeedu baxayo, dhex gashay Asxaabteeda oo aad ula yaabey sida Sahan ay mudada gaaban, dhankasta uga soo kabatay, Dhammaan Sahan iyo Asxaabteeda waa kasoo wada kabsadeen, diiftii Tahriibka, Jawigii Hangarina waa la qabsadeen, waxeyna bilaabeen Qorshahoodii Tahriibka iney sii wataan, oo qofba halka uu Yurubta dhaqaalaha leh, u beegsan lahaa, isla rog rogay, meelna go'aansaday, Waxeyna arintii u xil saareen, kuwoodii ugu fir fircoonaa, oo la xiriirey ragii howshaa Tahriibinta ah fulin jirey ee meesha joogay, waxaana loo sheegay qiimaha qofkiiba laga doonayo iyo qaabka loo Tahriibinayo, iyana qalinka ayey ku soo duugeen, markii ay ku qanceen, Waxeyna ula soo laabteen arinkiina ku qanciyeen Asxaabtoodii kale, oo dhankooda kaga raacay, oo faatxada inoo mara, ayaa goobtii lagu wada yiri dood la'i, waxaana lasii xir xirtey boorsooyinka, waa markale iyo Tahriibkii Buuraha Barafka badan misna Bahalada halista ah dhex yuu raraan.

Maalmo kadibn waxaa qof kastaa oo kamid ah soo gaartey kistii loo soo xawilay, oo faraqa ayuu ku xirtey, in kasta oo markan Tahriib kii ay soo mareen, mid aad uga fudud uu

yahay kan sugayo, sida loo sheegay, misna lagu qanciyey, Waxaana sidii ay maalin waliba dhagta ugu taagneyd, galanimo Talaada ah loo sheegay in caawa fiidki la Tahriibin doono, oo la geyn doono sida heshiisku ahaa ilaa xuduudka dalka Austria, kadibna ay iyaga iska sii huleeli doonaan, ilaa ay Booliiska dalka Austria isku dhiibaan.

Waxaana sidii balanta aheyd fiidkii koox koox looga baxay kaamkii albaabkiisa, iyadoo la iska ilaalinayo in shaqaalaha kaamka ay arinta dareemaan. Waxaana xaadir lagu wada noqdey saacadii la balanmay goobtii lagu balasanaa, oo ayba u sii taagnaayeen gawaaridii ka qaadi laheyd, waxaana durba lala beegsadey halkii uu ka xigay Xadka dalka Austria. In cabaar ah markii la soo wadeyna, waxaa gawaaridii lagu damiyey meel howd ah oo uu barafku buux dhaafiyey, waxaana lagu war galiyey iney ka soo daataan gawaaridii ay saarnaayeen.

Iyadoo farta loogu fiiqey jihadii ay abaari lahaayeen, iyagiina wadadii la faray ee farta loogu fiiqay ayey cagta wada saareen, Juuq iyo Jabaq la'aan, Waxaana Sahan iyo Asxaabteeda u bilaabatey socod dheer, oo aysan jirin qof garaneysa meesha uu ku dhamaan doono iyo waqtiga uu dhamaan doono, waxaase kuwada jirtey rajo ah, inuusan la mid noqon doonin kii hore, ee rafaadka badnaa, Waxey soo lugeeyaanba oo buur baraf leh, howd geedo badan soo dhex jibaaxaan, waxey markii bambe ku yimaadeen meel banaan ah oo wada cad, oo ay saan ka muuqato.

Maadaama ay kusoo jireen howd, intii ay soo socdeen oo aysan qabin baqdin ah, armaa la idin arkaa, waxey is tuseen meeshan banaan, in aysan ku marin sidii hala dudaay aheyd ee ay u wada socdeen, waxeyna isla meel dhigeen iney u maraan ku 3 sedex, Waxaana dhaqaajiyey 3-dii ugu horeysay oo

wadadii cagta saarey, nasiib daro meel dhexe markii ay marayeen, bay la duntey halkii ay ku socdeen, oo markeedii horeba aheyd Wabi uu barafku daboolay, oo wado la moodo, Waxaana nasiib daro meeshii ku dhex quusay 3-dii will ee ugu horeysay, maadaama ay meesha moodayeen dhamaantood waddo caadi ah, mana jirin taxadar iyo is ilaalin ku jirtey willasha iyo dhammaan asxaabtooda kaleba, oo banaankan weyn ku duda ayaa ku jirtey.

Waxaana markiiba u soo gurmatey dhowr dhalin yaradii kamid ah, in kastoo aan meesha si toos ah markan loo soo wajihi karin, waxaa la isku xir xirey wixii calalo ahaa. Haba u badnaadeene kuwii ay gabdhaha siteen, oo lagu xirtey geed halkan ah, waxaana laba xarig dhexda ku dhuuqsadey labo wiilashii ka mid ah, si hadii ay iyaga iyo kuwa ay soo bad baadinayaan, isla quusaan loogu soo wada jiido.

Waxeyna soo abaareen halkii ay 3-da will ku quuseen, oo ay kasoo bixiyeen wiilashii oo sidii subag u xargagay, weyna soo jiideen, iyagoo, qudhooda xariga lagu soo jiiday, Waxeyna halkii ay howdka kaga jireen keeneen 3-dii will oo nasiib daro midkoodna aysan nafi ku jirin, maadaama qabowgii darnaa, ay biyo kasii qabow u sii dhex galeen, asxaabtoodana aysan isla markii kasoo gaarin, oo ay waqti qaadatey intey xargaha isku xer xeranayeen.

Arrintaasna murugo aad u baaxad weyn ayey dhamaanba intii meesha joogtey ku abuurtey, oo waa la wada ilmeeyey, waxeyna garan la'aayeen. Si ay ku sameeyaan meydadkan meesha u yaalo, in kasta oo markii hore la niyad samaaa hadana markaan waa la niyad jabay, oo Tahriib waa un

Tahriib mana kala dhib yaro, Madaama uu xiligu ahaa habeen saq dhexe, waxey ku qasbanaadeen in ay meeshooda ku sugaan, inta uu waaga ka baryayo, barafkii ayaana la wada dhex yuurarsadey, Oo qof waliba isagoo murugsan meel isku kaduudey, oo is dhex galay qabow dartii, markii lawada qar qarey ayaa qaar dhalintii kamid ah, inta geedo iyo caleemo soo u ruuriyeen bey isku dayeen iney shitaan, si ay ugu diirsadaan.

Waxeyna ku guuleysteen dadaal badan, kadib iney dabkii shitaan oo ay sida iyagoo subcinaya kusoo wareegsadaan, oo ruux waliba gacmaha ku diirsado. Holaca dabka ka baxaya, dabadeedna jirkiisa meeshuu ka gaaro kaga sii qandaciyo, sida isagoo is subkaayo, oo diirimaadka gacantiisa ugu gudbinayo inta kale ee jirkiisa, Iyagoo xaaladaa ku sugan ayaa waxaa dabkii soo arkey dad deegaanka ah, oo uu dabka meel dheer uga muuqday, waxeyna markiiba arintii ka yaabisay ku wargaliyeen Booliiska, oo isna usoo qalab qaatay halka loogu sheegay iney wax ka jiraa.

Waxaana iyagoo meeshii wada Yuurara Tahriibayaashii u yimid, oo afarta jiho kasoo hareereyey Booliiskii, iyagana waa intii ay rabeene, gacmaha ayey kor u wada taagteen. Oo ku qeyliyeen Rufuge ama Qaxooti baanu nahay, waxaana lagu qabtey wajiyadooda tooshash waayen oo ay askartii wateen, Waxayna Booliiskii tuseen meydka 3-da wiil ee wabiga barafoobay ku dhintey, Booliiskii waxey isku dayeen iney dajiyaan xaalada murugsan ee ka muuqatay Tahriibayaasha.

Waxeyna durba u dalbeen Gawaari lagu qaado, dadkan sidan u dhiban, ee waliba meydka iska dhinac fadhiya, Waxaana wax laga weydiiyey sida ay wiilasha u dhinteen, iyana waa ay ka faaleeyeen, askartiina meydadkii gooni ayey u qaadeen, dadkii intiisii kalena gooni ayey u kaxeeyeen, Waxaana la geeyey

xarun uu Booliiska lahaa, oo inta waaga ka ka harsan lagu haynayey, Xaruntii ayaana lagu wada baaray, oo dharka looga wada dhigay.

Waxaana markii uu waaga xuub siibtey, loo keenay Turjubaan si loo xog wareysto, Qof walibana gooni ayaa loo wareystey, sidii caadada aheydne intii horey loo soo turuurixiyey iyo dheeriba waa la sheegay, waxaana markii uu wareysigii u dhamaadey, loo keenay quraac, oo halkooda ay ku dagsadeen, Waxaana loo gudbiyey qoraacdii dabadeed, xabsi loogu tala galay in lagu sii hayo dadka qaangaarka ah, inta laga xaqiiqsanayo ujeedkooda iyo waxa ay yihiinba.

Waxaana inbadan oo iyagii kamid ah lala beegsadey xabsiga, marka laga reebo dhowr ruux oo da'yar isku dhiibtey, oo toos Kaam caadi ah loogu gudbiyey sidaana lagu qaabilay, Sahan, Istar iyo Asxaabtooda intooda badan, waxaa lala beegsadey magaalada Lenis ee dalka Austria, oo uu ku yaalay xabsi kaamka loo wado.

Waana magaaladii uu ku dhashay sida la sheego Hittler, waxeyna u dhowdahay oo ay soo xigtaa xadka wadanka Jarmalka uu la wadaago dalka Austaria, Wuxuu gaarigii la soo saarey la soo xawaareeyaba, ugu dambeyntii waxaa la keenay halkii loo wadey, waxaana kaam xabsigii kusoo dhaweeyey Somali badan, Oo uga horeysay iyo maamulayaashii kaam xabsiga, waxaana sidii waayadanba caadada u aheyd koox waliba loo tilmaamey halkii ay ka dagi lahaayeen, Kaamka. In kastoo horey ay laba laba isula dagi jireen, hadana markaan aad bey uga duwaneyd oo 6 -lex baa la isula dajiyey, walibana sariiro is dul saaran oo jaran jaro leh baa lagu seexanayaa, Waxaana u sahlanaatey iney si fudud kula qabsadaan jawiga meesha, maadaama ay horey u soo mareen kaamam kale.

Dhamaan marka aad eegto wajiyadooda Sahan iyo Asxaabteeda, waxaad ka dheehan kartaa iney aad ugu faraxsanyihiin noloshan u bilaabatey, maadaama ay cagta la soo heleen ciidii Yurubta barwaaqada loogu sheegayey, Waxaana u muuqatay in hada wixii ka dambeeyaa, waxa sugayaa ay tahay oo kaliya iney gaari yar si raaxo ah ugu safraan, oo halkii ay Yurubta ka doonaan ka beegsadaan, waxaana qof walba laga dheehan karey yididiilo iyo rajo aad u heer sareyso. Qosolka, farxada iyo kaftanka goobta ka socdaa hadii aad arki laheyd waad yaabi laheyd, ismana dhahdeen dadkaan ayaaba maalin rafaad Tahriib la yiraah soo marey.

Wuxuuna ruux kasta ka sii hadlayey marka uu cagaha la helo halka uu Yurubta ka doonayo, waxa uu qabsan doono, reerkiisana u qaban doono, waxaana jirtey xisaabaad badan oo ay isku dhufanayeen dadkii goobtaa joogay, ee aan wali xaalka Yurub xogta fiican ka heysan, Waxeyna u qeybsanaayeen labo qeyb, qeyb waxey ku fikireysay iney markey wax qabsadaan dalkii hooyo iney ku laabtaan, dadkoodana wax u qabtaan iyo qeyb kale oo yareyd oo ku fikireysay ineysan dib dambe Somalia ugu laaban doonin, oo ay iska noqonyaan black Eurupian, Waa sida ay la aheyd inta maan gaabka ah, oo inta aysan caga dhiganba Yurub bilaabay iney ku hadlaan afarti ay ka yaqaaneen luuqdaha qalaad. Haba ugu badnaadee Ingiriisiga oo kaalay arag sida la isga doon doonayo, oo la isaga dhigayo Yurubiyan, waxaa aad kaaga yaabin lahaa sida ay qarkood socodkii uba badasheen, oo aad moodo iney curyaan dhutineysa wada yihiin.

Waase dhaqan shisheeye iska doon doon, iyo waxaan dhug miir qabto lagu sameyneynin, waxeyse xaqiiqdu tahay oo ay moog yihiin ineysan waligood hureynin Asalkooda iyo halka uu sinjigooda kasoo jeedo oo ah Somalida qurxoon, ee iyada

la iska doon doono, asaageedna iskala sareyso. Si kastaaba ha ahaatee, qolo waliba iyadaa isla qumaneyd, oo kuwan baas ee dhaqankii iyo Somalinimadii iney inkiraan bilaabay, waxey kula doodayeen war hadeydan dadkiina Yurubiyanka aad soo dhex gasheen dhankiina ka raaceynin, maxaa rafaad kaad aragteen idin soo mariyey, Waxeyna lahaayeen, oo dhaqanka aad ku dhagantihiin ee aad sheegaysaan, maxaa dalkiina ula joogi weydeen,' waxeyse qolada kale uga jawaabayeen meel kasta oo aan tagno.

Waxaan nahay oo aan aheyn waligeena ahaan doonaa Somali, taa ayaana ku faraxsanahay oo waa lama huraan. Kuwiinanan iska yeel yeelayo qolookinkan gaalada, wallee idinkama aqristaan, ee dhexda haku dhumina oo hadhow meel cidla ah hasoo istaagina, ayey ku waaninayeen.Si kastaba ha ahaatee, ma yareyn dooda iyo kala aragti duwanaashaha goobta ka jirtey iyo qolo waliba sida ay ugu faraxsantahay, sida iyada la quman.

Waana tii hore loo yiri 'Qof walbaaba Qumanihiisa ayaa Qoorta ugu jira' marka qolo walbaaba qumanaheeda ayaa qoorta ugu jirey, oo ay Qiil u raadsaneysay, Dhanka kale waxey goobtii ku jireen Sahan iyo Asxaabteeda in ka badan 3 Todobaad, mar walbaana Koox ayaa ka baxayey meesha, oo si dhuumashaal ah loo Tahriibinayey, inkastoo markii hore ay qolooyin Ajnabi ah u badnaayeen kuwa wax Tahriibiya. Haddana markan waxaa kusoo biirey Somali wax tahriibinaysa, oo si fiican la isku af gara karo, waxaana meesha ay ku jiraan u joogay rag howsha, kala shaqeeya oo xoogaagooda loo laabo, inta bixitaanka rabtana u gudbiya, si ay ugu soo tala galaan gaarigii ay ku qaadi lahaayeen. Waxaana badi dadka loo Tahriibinayey 4 afar, maadaama lagu wadayey gawari yar yar, oo kuwa raaxada iyo xarakada ah, Sahan iyo Istarna

dadkoodaa ayey ka mid ahaayeen. Oo Maamadii inta la hadleen baa xoogaagii ay ku gali lahaayeen safarkii Tahriib ugu dambeeyey u soo xawishay.

Waxeyna Sahan iyo Walaasheed Istar oo ay wehliyaan qaar kamid ah Asxaabteed, bilaabeen iney isu diyaariyaan safarkooda ugu dambeeyey. Waxeyna beegsadeen Magaadalii caasimada u aheyd Austria ee viena si ay lacagtooda uga soo qataan, dabadeedna ay ugu safraan halka ay doonayeen oo aheyd dalka Norway, Waxaana fiidnimo khamiis ah isla soo dhuuntey Sahan, Istar iyo labo will oo dhalinyaro ah, oo dhamaantood ujeedkoodu ahaa xagaa iyo dalka Norway, sidoo kalena ay lacagta ka wada taaley Magaalada caasimada ah ee Viena. Waxeyna markii ay kaam xabsigii ka soo dhuunteen, soo Qaateen Tareen kusoo wajahnaa magaalada Viena, oo ay dhowr saacadood usoo socdeen ugu dambeybtiina soo caga dhigteen, magaaladii oo aad yaabeyso quruxdeeda, iyo sida ay u camirantahay.

Waxaana goobta ay Tareenka kaga dageen, ku sugayey dhalin yaro Soomaaliyeed, oo ay muqalasiintii ay la heshiiyeen u soo direen, si diiran oo marxabeyn leh ayaa halkii loogu soo dhaweeyey. Waxaana lala beegsadey markiiba halkii uu ku yiiley xafiiska Xawaalada lacagta loogu soo xawilay, oo durbadiiba faraqaa loogu soo shubey kistoodii, Waxaana loogu bishaareeyey in habeen dambe la Tahriibin doono, caawana la sii geynayo kaamka weyn oo Somali badani ay ku jiraan, halkaasna ay iska seexan doonaan, kuna nasan doonaa, iyana warba kama aysan celinine, halkii afka loo aadiyey ayey iyaguna soo beegsadeen.

Waxaana lagu soo xareeyey kaamkii, iyagoo halkaas soo dhaweyn kaga helay Somali badan oo rag iyo dumarba lahaa,

kuwaasoo qudhooda u wada xir xirnaa Tahriibkii ay kusoo gali lahaayeen Yurubta Barwaaqada bilqantahay, ee adiga lee yeysan Boorsada kaa buuxsaminta lagu sheego.Sahan iyo Asxaabteedana, wixii war lagu shubi karey laa lagu shubay, wadada ay marayaana, waa looga sii sheekeeyey, dadkii hortood ku baxayna mid mid baa loogu soo tusaale qaatay.

Iyagana waa ka koobiyeen, waxeyna markaii dambe codsadeen in ay seexdaan, maadaama ay aad u daalanyihiin, waana laga aqbalay. Wuxuuna ruux waliba oo kamid ahaa uu baadi goobtey meel uu madaxa la galo, si uu hurdada heysaa uga caano maalo, waana uu la helay oo tii hurda aheyd bey miirka ka ceshadeen, oo waxba uma reeban. Waxaana aroortii soo toosiyey dhalintii Kaamka ka tirsaneyd ee soo dhaweysay, waxaana loo sheegay iney isu soo diyaariyaan quraacda, sidii ayeyna sameeyeen, oo hoolkii quraacda ayey dhankooda kasoo galeen, Quraacna isku diyaariyeen. In kasta oo aysan kaamka ka tirsaneyn, hadana waxaa loo wada qeybiyey kaarar dhalin yaro hortood Tahriibtey oo meesha yiilay, sidii ayeyna dadkooda uga mid noqdeen, oo dhankooda kaga soo quraacdeen, sidoo kalena kaga soo qadeeyeen, waqtigii qadada.

Waxaana Sahan iyo Asxaabteeda layaab iyo dhabana heysi ku noqotey, Cashadii kadib markii ruux walbaaba la soo hor dhigay labo xabo oo Bar-barooni ah, xabad Yaanyo ama Tamaatim ah iyo koob biya ah, laguna yiri casho wacan. Sahan iyo intii la socotey, oo anfariir iyo fajac ku dhacay, baa lagu yiri hortiin anagaa yaabnaye, nala yaaba bal, hadaad cuni kartaana iska cuna oo isku dhiba, Hadii kalena iska tuur, dhamaana intii Sahan la socotey ma jirin qof cunay, oo waxaa aad ugu wada adkaadey sida Bar-barooni ku dayaya loo ruugayo iyo Yaanyo ceeriin ah.

Dhanka kale sidii balantu aheyd abaarihii 10-kii fiidnimo ama 4-saac habeenimo xiliga magaalada Viena ayey soo caga dhigteen wiilashii Tahriibin lahaa, waxaana lagu wargaliyey iney si dhuumashaal ah mid-mid banaanka ugu soo baxaan. Sidii ayey sameeyeen, lamana sii daahine gaarigii ayaa sheelaraha loo qabtey, oo diyaar baa la wada ahaa, waxeyna soo mareen goob ay ka iibsadeen casho fudud, halki ayeyna ka sii sharaacdeen, oo dhankii uu dalka Jarmalka ka xigay bey afka soo aadiyeen. Qof walibana waxaa farta laga saarey, dukuminti qof Yurub jooga oo Somali ah uu leeyahay, oo sawir ku dhagan, waxaana loo sheegay in hadii dukuminti la weydiiyo inta wadada lagu jiro uu la soo baxo.

Isagoo iska dhigayo inuuba yahay ruuxa meesha ku sawiran, oo aanan arga gax laga dareemin, Sidaa ayaana la isla meel dhigay. Waxeyna sidii uu gaariga u xiimayey sama kaga soo baxeen dalkii Austaria, oo ahaa runtii dal aad u bilicsan, misna dalalka kale ee dariskiisa la wadaago barafka iyo qabowga, Waana dal dadkiisu ay aqoon leeyihiin, ahna dad fur furan oo soo dhaweyn badan, qof kastaana uu la macaamilo karo.

Waxaana jooga oo ku nool dad badan oo ajnabi ah, oo iyana la dhihi karo waa dad wanaagsan, in kasta oo ay aad ugu yar Yihiin Somalida, oo badi iney safar sidan oo kale ah kusoo dhex jibaaxaan, mooyee aan dagin, in kastoo xoogaa Somali ah ay deegaan ahaan ku noolyihiin, Wuxuu gaarigii Sahan iyo Asxaabteeda lasoo guuxa, oo uu marba xawaare ku dhex maro mid kamid ah maagaalooyinkii waaweeyn ee dalka Jarmalka.

Oo run ahaantii aad bilicdooda usoo jiitey, waxaana la oran karaa Jarmalka waa dalka ugu bilcdasan Yurub marka dhismo ahaan iyo wadooyinba loo eego. In kastoo dalka Jarmalka

dadkiisu soo dhaweyn badneyn oo ay Ajnabiga sida la sheego necebyihiin, hadana waxaa jira dad fur furan, oo soo dhaweyn badan, sidoo kale Askartooda ama Booliiskooda waa kuwa ugu dhaq dhaqaaqa badan, ayaa la dhihi karaan Yurub.

Waana halka inta badan lagu qabto kuwa sida Sahan Tahriibka kusoo galayo Yurub, maxaa yeelay baaritaankooda ayaa badan, habeen iyo maalin waxey u socdaan xeyn xeyn, iyagoo beegsanayo wax walba oo ay ka shakiyaan. Si kastaaba xaalku ha ahaadee, waxey soo guureeyaanba waxey ugu dambeyntii soo caga dhigteen dalkii Holand ahaa, oo runtii aad u soo jiidatey bilicsamidiisa iyo quruxda wadooyinkiisa, dhirta noocyadeeda kala duwan ay ka baxayaan.

Waxaana dadka qaarkii ka yaabineysay, sida wadooyinka loo haaneediyey, oo kaalay arag baaskiilada, baabuurta iyo dadka sida ay u kala hagayaan Samaafarayaasha iyo sidey wadooyinka u kala leeyihiin, waxaana kasoo hartey Sahan iyo asxaabteeda, dhabana heysi, Waxeyna lahaayeen, Alla dalku qurux badanaa, oo qaab samaa, waxeyna Sahan mararka qaar laheyd, war dalkan anaga ma lihin, keena aan ka fikirno, sidii aan sidan oo kale ugu dhisi laheyn, misna bilicdan ugu yeeli laheyn.

Waa runtaa oo afkaada caano macaan lagu qabay, baa lagu lahaa, walow qaar kamid ah lahaayeen anaga Somali hadaan nahay, waxaan naqaan sida wax loo bur buriyo, ee ma naqan sida wax loo dhiso waxna loo qaabeysto.

Dhinaca kale waxey wiilashii wadey, Sahan iyo Asxaabteeda ku war galiyeen in ay lama huraan tahay, in ay Nederland sii joogaan, ugu yaraan habeen iyo maalin oo ay ku nastaan, Waxaana la is weydiiyey hadii ay jirto cid ehel ay ujoogaan halkan, si loogu geeyo, inta safarka ka harsana ay ula sii joogaan, Waxaana Ehel meesha u daganaa Mursal oo ahaa wiil

kamida labadii will ee wehliyey Sahan iyo Istar, waxaana lala beegsadey gurigii markii la wacey reerkii kadib, Si diiran ayaana loogu soo wada dhaweeyey afartooda, oo loo diyaariyey meel ay seexdaan, walibana la soo hor dhigey raashin si deg deg ah loogu habeeyey.

Markii ay raashnkii cuneen baa qolalkii, iney jiiftaan loogu talagalay ay beegsadeen, oo sheeko dheer ma gali karin daal baa hayee, halkii ku kala dhaceen oo tii hurda aheyd durbadiiba la galay, Waxaana goor dambe oo ay Sahan us oo toostey musqusha ama suulida, iyadoo ku soo jeeda maqashay, canaan xoog badan oo ay reerkii canaananayaan wiilkii Mursal ahaa oo ay ku lahaayeen.

'War ma kaam qaxooti baa gurigayaga, maxaad dadkan ugu soo hogaamineysaa, adigaaba tabar aan kugu qaabilna, kuu heynin markaas ayaad dad kale nagu soo hogaamineysaa, war waa inaad naga saartaa dadkaan. Waaga haduu u baryo, hadii kale boorsooyinkooda ayaan banaanka u dhigeynaa, waxba nagama galin, mana naqaan qurunka Tahriibka ah waxa ay yihiin'. Ma yareyn mana lasoo koobi karo erayadii foosha xumaa ee ku dhacay dhagaha Sahan, oo dib uga laabatey suulidii ay soo aadey, iyadoo aad u xanaaqsana qolkii ay jiifeen ku laabatey.

Waagii markii uu baryey oo la soo hor dhigay quraacdii, bey meeshii ku quraacdeen, Sahanna wax walba waa ogtahay oo war moog maahan, Waxeyna Sahan ka cudur daaratey quraacdii, oo caro aad u xoogan ayaa heysay, waxeyna la yaabaneyd rerkan wajiga beenta ah dadka ugu dhoola cadeynayo iyo waxa foosha xun ee ay hoosta ka wadaan, waase xaalka Yurub iyo dadkeedee. Waxeyna gooni ula baxdey labadii Will iyo Gabadhii oo ay u sheegtey in ay tahay

lagama maarmaan, iney sida ugu dhaqsaha badan u baxaan, waxeyna weydiiyeen halkeen aadeynaa, anigaa meel idiin geynayo ee ina keena marka hore ayey tiri, iyadoo aan uga waramin xaalka.

Inkastoo wiilashii Tahriibin lahaa gurigaa ay kula balan sanaayeen caawa, hadana waxey ka dhaadhicisay iney wacayaan, oo ay heystaan talefanadooda, sidaana ay meel ugu wada balamayaan, sidii ayeyna sameeyeen, oo ay gurigii reerka laba wajiilayaasha uga soo baxeen.Sahan oo aan meel aqoon baa hogaanka u qabatey, waxeyna cagta soo saareen wado weyn, oo markii ay cabaar kusoo socdeen ay isaga nasteen meel darjiin ah, oo fadhiga loogu talagalay.

Markii ay salka dhulka la heleen, bey Sahan bilowdey iney u cudur daarato, wiilkii Mursal ahaa, wax walba oo madaxooda kusoo gaareyna ka raali galiso, Isna waa caadi abaayo buu lahaa, wuxuuse aad ula yaabanaa waxa Sahan xaalka la socodsiiyey, waxaana dhanka kale kasoo wada qeyliyey Canshuur iyo Istar, oo war moogayaal ahaa, waxa la sheegayana aan waxba ka fahmin.

Sahanna halkii ayey wax walbaaba ugu sharaxdey, dhamaana aad ayaa looga wada xumaadey, waxa ay reerka ku kaceen, waxeyna is weydiinayeen ma sidaan baa Somaliada Yurub iyo su'aalo kale, Waxeyna wacdeen wiilashii keenay oo ay xaalka la socodsiiyeen.

Waxeyna u tilmaameen halka ay joogaan, iyadoo la isku wareeray, Wiilashiina waxey kusoo wareeraan, oo marba wado ka eegaan, ugu dambeyntii goobtii ayey ugu yimaadeen, waxaana Sahan iyo Asxaabteeda la geeyey Guriga mid kamid ah wilashii tahriibinayey, Waxaana loo sheegay iney halkooda isaga nastaan, halkii ayeyna raashin ku karsadeen, oo sheeko

iyo baashaal ku galeen, iyagoo dareemay, xasilooni iyo iney joogaan meel ay isku maamuli karaan, Waxeyna is xusuusinayeen in wax walbaaba ay dunidan macquul yihiin, loona baahanayahay in mar walbaaba samirka la kaashado, oo dulqaad la lahaado.

Waxaana waanadaa iyo dar daarankaa hogaanka u heysay Sahan oo aheyd qofka ugu khibrad badan intooda, Tahriib badan iyo Rafaadna goob joog u soo aheyd.Waxeyna Asxaabteeda siisay talooyin badan, oo wax ku ool ah iyo tusaalooyin maskax walba oo adag ka daa dagayo, oo si caqliyeysan oo misna xigmadeysan, ayey dhamaan wax uga dhaadhicisay, iyadoo adeegsaneysa caqliga saafiga ah iyo garaadka sare ee uu guule ku maneystey.

Waxaa fiidnimadii lagu soo wargaliyey, iney isu soo diyaariyaan safarkooda ku wajahnaa dalka Norway, oo gaarigii qaadi lahaa ayaaba albaabka loo soo dhigey. Iyagana waa diyaarsanaayeen, oo uma baahneyn is diyaaris kalee, gaargii beyba soo wada beegsadeen, oo ay kuraastiisii salka la heleen, Wadahiina maba sii sugine, inta furaha ku rogay buu wadada cagta saarey, oo ula soo jiheystey halkii ay Norway ka soo xigtey, qof kasta oo kamid ah Sahan iyo saaxiibadeeda.

Mar kale ayaa gacanta loo galiyey Dukuminti aysan laheyn, si hadii inta wadada lagu jiro la qabto, ay u taagtaan, isagana dhigaan dadka iska leh dukumintiga.

Qof walbaana isagoo ku faraxsan, safarkaan uu u arko inuu yahay kii gunaanadka u ahaa safaradii dhibaatada badnaa ee lasoo marey, buu Asxaabtiisa farxad iyo sheekooyin xiiso badan la wadaagayey, Wadihiina gaarigii ayuu sheelaraha u hayey, isagoo waliba dhankiisa kaga qeyb qaadanayo sheekada meesha ka socoto. Sida la isku wada fahmay oo sheekada loo

wada lisayo, loona wada qoslayo, oo loo wada faraxsanyahay, lama sifeyn karo lagamana sheekeyn karo, waxaase lagu til maami karaa maqsuud maqsuud lagu darey.Waxey soo gab gableeyaanba, oo gaarigii soo guuxaba, waxey kasoo baxeen xadkii wadanka Holand, iyagoo usoo talaabay kii dalka Jarmalka mar labaad.

Waxeyna dal weynaha Jalrmaka dhex Jibaaxayeen saacado badan, iyagoo marna aan ka dagin wadadii misna aan xitaa bal nasta is dhihin.Waxeyna socod aan kala go' laheyn, misna nasasho la'aan ah, dabadeed soo galeen xadkii Wadanka Denmark, mana la hakin Gaarigii ilaa laga soo gaarey caasimadii dalka Denmark ee Kophenhegen, halkaasoo uu wadahii fariinka ku qabtey, Waxaana la geeyey Sahan iyo Asxaabteeda Guri senterka Magaalada Kophenhegen u dhow, halkaasoo ay ku nasteen, kuna cunteeyeen, Waxaana dabadeed lala soo beegsadey Afartoodii Bus Stationkii, si looga soo saaro Buss ku soo wajahnaa dalka ay ku socdaan ee Norway taasoo markii horeba lagu soo heshiiyey.

Wixii intaa ka horeeyey waa la hogaaminaayey Sahan iyo Asxaabteeda, hayeeshee markan wixii ka dambeeya iyaga ayaa is hogaaminaya. Waxaana durbadiiba goobta looga jarey Tikidhadii Buss-kii ay Rakaabkiisa kamidka noqon lahaayeen ee ku wajahnaa caasimada dalka Norway ee Oslo.

Halkii ayeyna Wiilashii iyo Tahriibayaashiiba isku macsalaameeyeen, Sahan iyo Asxaabteedana Baskii bey salka la heleen, oo 30 daqiiqo kadib bartii ka dhaqaajiyey, Waxaana Sahan iyo Inta la socoto loo soo sharxay qaabka iyo sida la isku dhiibo, marka ay caga dhigtaan Norwayda ay ku wajahan yihiin, ee ay usoo jilbo murxeen, Sidoo kalena xoogaa raashin fudud ayey meeshii ka soo iibsadeen, maadaama safarku

saacado badan qaadanayo, misna aysan ka dagi karin baska, oo ay markani bilaa dukuminti yihiin, kaligoodna socdaan, meeshi lagu qabtana ay gacmaha ka taagan doonaan.

Wadihii Baskana wuxuu si wacan isaga xajiyey Isteerinkii, isagoo sheelarihiina cagta ku xoojiyey, ayuu wadadii kusoo dhex daayey Baskii oo aad yaabeyso xowliga uu ku Xiimayo, iyo sida darawalku u xarakoonayo oo ayba uga qasneen. Sahan iyo Asxaabteeda safarkan marna aad ayey ugu faraxsanyihiin, marna aad ayey u wal walayaan, oo waxey ka baqayaan in Askar baastan meelaha dhooban, ay dhex ku qabtaan, hadii xitaa ay kuwa Denmark ka gudbaan, waxaa kaloo sugayo kuwii dalka Sweden, oo iyagana mixnad kale ah.

Marka Allow na mooti ayuu xaalkooda ahaa, baskiina wuxuu soo guureeyo, oo uu soo gab gableeyaba, wuxuu soo gaarey magaaladii Stockhlom aheyd ee caasimada wadanka Sweden, oo uu ku yara hakaday si loogu nasto, maadaama saacado badan lasoo socday, Dadkiina wixii uu u baahnaa ayuu dukaamadii ka soo iibsaday, si safarka wajigiisa labaad oo aan ka yareyn kii hore, la isugu diyaariyo, Sahan iyo Intii la socotey, iyagu baskaba ma rabin iney ka dagaan, oo aad ayey uga baqayeen in la qabto.

Laakiin looma ogolaan iney baska kusii dhex jiraan, wuxuuna wadihii oo arkey iney baska isku dhajinayaan amar kusiiyey iney ugu yaraan hawo soo qaataan, oo baska kasoo dagaan, iyagana sidii ayey yeeleen, oo meel dheerba ma aadine, meel halkan ah oo ay kuraasi tiiley bey salka la heleen. Markii ay goobtii ku sugnaayeen qadar 30 daqiiqo ah, ayey baskii kusoo wada laabteen intii saarneyd iyo in cusub oo kusoo biirtey, wadihiina baskii ayuu halkii ka soo dhaqaajiyey, wuxuuna soo dhex jibaaxay magaalooyinka waaweyn ee dalka Sweden.

Marka aad eegtana aad bey isugu dhow yihiin, dhismo ahaan iyo muuqaal ahaan dadkooda iyo luuqad ahaanba dadka daga Denmark iyo Sweden, oo wax sidaa ah kalama duwana, sida ay u arkayeen Sahan iyo asxaabteeda, oo aragtidaa ka wada sinnaa, Wuxuu wadaihii marba marka xigta uu xawaaraha sii kordhiyaba, waxaa 7-saacadood oo aan kala go' iyo nasasho laheyn dabadeed, dadkii oo baskii isaga dhex hurda badidood.

Sahan iyo qaar asxaabteeda kamidana, ayba quurinayaan ku baraarugeen darawalkii oo ugu bishaareynaya iney soo galeen magaaladii u jeedku ahaa ee OSLO caasimadana u aheyd dalka Norway, Mar kaliya ayaana la wada baraarugey, oo la galay isu diyaarinta sidii baska looga dagi lahaa, maadaama daqiiqado yar dabadeed uu ku beeganyahay Oslo Senter oo ah halkii looga wada dagi lahaa. Sahan iyo Kooxdeeda waa isku soo dhawaadeen, waxeyna galeen iney iskula dar daarmaan, in uu mowqifkooda mid noqdo, misna aysan tar tarin, ama kala hadlin. Marka ay baska ka dagtaan, maadaama horey loogu soo sheegay in Booliiska ku qaban karo, isla goobta ay baska kaga daadagaan.

Waxeyna bilaabeen u diyaar garoobida Booliiska Norway ee gacanta ku dhigi doona, oo ay isku dhiibi doonaan, iyagoo isu dar daarankii uu wali u socdo, ayuu wadihii baska, ku soo xerey halkii loogu talagay ee aheyd OSLO BUSSTATION CENETER.

Dhamaana dadkii waxey bilaabeen iney baskii kasoo daadagaan, Sahan iyo Kooxdeeda, iyagu waxey go'aansadeen iney dadka ugu dambeeyaan, oo aysan u hor marin, maadaama dadkan yihiin kuwo danahooda u socda oo dalka kala yaqaan, Waxeyna isku arkayeen dad aan aqoon hadii ay baska ka dagaan, meel ay u jiheystaan, ama afka aadiyaan,

waxeyna ku xisaabtamayeen oo kaliya in uu Police-ka qaban doono, sidaana ay ku nabad gali doonaan, wareer badan iyo iska daba wareegna uga bad baadayaan, Waxey dib isku dhigaanba, oo ay is daa daahiyaan, markii ay iyaga oo kaliya kusoo hareen Baskii, ayey kasoo daadageen, oo boorsooyinkii yar yaraa ee ay wateen gacmaha kusoo qabsadeen, iyagoo marba gees eegayo, oo baadi goobayo Booliiska, si ay isugu dhiibaan.

Waa yaab Alleylehe oo waxaa la arki jirey Booliis laga cararo, waxaase markaan la hayaa Booliis la raadsanayo, oo lagu cararayo, iyagoo aan wax badan meeshoodii ka dhaqaaqin, oo marba dhan isla eegayo. Baa waxaa ku yimid haweeney iyo nin wada socda oo labisan dharka Booliiska oo ka shakiyey dadkan indhaha taag taagaya ee fiigsan.

Waxeyna weydiiyeen dukumintigooda, iyagana waa sidii ayba sugayeene, af labadii ayey yeereen, oo yiraahdeen mar qura afartooda sidii koox fanaanniin ah oo hees isla jiibineysa "We Are Somali Refugee' waxbaa meesha ka dhacay, magacii Somalina helay, Waxaanu nahay qaxooti Somali ah, ayey ku cel celiyeen, Booliiskii oo markii horeba arinkaa uga shakisanaa dadkan, meelaha eeg eegayo, baa inta waraaq weyn usoo bixiyey.

Qalin ugu xar xariiqey, oo u sheegay iney beegsadaan xaruntan, oo ah halka uu joogo Booliiska qaxootiga qaabilsan.

Arintaasne aad ayey uga yaabisay Sahan iyo intii la socotey, oo waxey sugayeen in meesha iyagoo la kool koolinayo laga qaado, oo sidii aroos loogu galbiyo, xaruntii qaxootiga ee lagu qaabili lahaa. Mursal oo xoogaa English ah yaqiiney, uguna roonaa asxaabtiisa ayaa maagay inuu ku doodo, war anaga meel ma naqaano, mana keeni karno meeshan aad inoo xar

xariiqdeen ee ina geeya, idinkaa Booliiska ahe, oo aan isku kiin dhiibnaye, Waxaase loogu jawaabay, waxaad ka timid qaaradii Afrika iyo waliba geeskii shishe ee Somalia ku tiilay, ilaa halkan oo ah Norway, kuna taal geeska aduunka, ma anagaa ku soo wadney, oo ku keenay, sow adiga isma keenin, oo isma soo dabarin.

Hadaba hadda oo aad Norway joogtidna isasii dabar, intaas oo qaaradoodba waad isasoo dabareyseye' war cad ayaa dhagaha loogu dhib ciyey, Labadii Police-ka ahaana halkii ayeyba uga dhaqaaqeen, waxaana goobtii isugu soo harey Afartii ku hamineysay in goobta, marka ay iska dhiibaan sidii aroos gawaari loogu galbin doono, oo la kool koolin doono, sidaana lagu qaabili doono, Waxeyna markii dambe talo ku goosteen, iney iyaga is dabaraan oo ay bal raadsadaan Somali caawisa, Koley sida loo soo sheegay Somali badan baa OSLO ku nool.

Waxeyna afka soo aadiyeen halkii ay dadka badi u yaacayeen, oo ay is lahaayeen dhankaas ayuu dadka u badan yahay oo aad Somali, idiin caawiso ka heleysaan, Waxaase fajaciso iyo lay aab aysan waligood fileynin ku noqotey, markii ayba inkireen dadkii Somaliyeed ee meesha socdey, oo ay doonayeen iney caawimaad weydiistaan, Waxaana la yaab ku noqotey, sida ruux walba oo Somali ah, markii ay arkaan uu sida dad uu dagaal kala dhaxeeyo uu ganfuurka ugu taagayo, una muujinayo cara aad u baaxad weyn.

Waa ay wada amakaageen oo anfariireen, waxeyna la yaabeen sida ay Somalidan wax ka yihiin iyo waxa hayo oo sidan foosha xun u badaley, Iyagoo sidii u yaaban baa markii dambe waxey haleen will dhalinyaro ah, oo intii ay arkaayeen ugu wanaagsanaa, kuna soo leexdey markii uu dareemay iney

caawimaad u baahanyihiin, halkii Somalidii kale ayba ka sii cararayeen, Wuxeyna ugu horeyntii, willkii weydiiyeen waxa ku dhacay Somalidan oo sidaan u galay iyo waxa ay iyaga ka galabsadeen, ee ay ganfuurka ugu wada taagayaan, Wuxuuna u sheegay willkii in dadka Soomaaliyeed ay badiba sidan iska yihiin, oo aysan layaabin, waana xaalka Yurub iyo xanuunada dadka ahyee ha is raacinina buu ku yiri.

Wuxuuna weydiiyey waxa uu u qaban karo, iyagiina waxey u sheegeen ujeedkooda iyo caawinaada ay doonayaan nooca ay tahay, iyagoo ay ka daadagi la'dahay Somalidan kala dideysa oo dirirtu ka dhaxeyso, oo aan is dooneynin, Wiilkiina waxba kama uusan hagrane, markiiba wuxuu la beegsadey halkii ay u baahnaayeen, oo aheyd xarunta Booliiska, dadka qaxootiga qaabila, Markuu xaruntii u dhaweeyeyna waa uu ka soo laabtey, oo ku yiri Guul ayaan idiin rajeynayaa, oo xaruntaa gala halkaas ayaa la idinka qaabilayaa, isna dajiya ayuu u dar daarmay.

Iyagiina waa u mahadceliyeen waxeyna durbadiiba kusoo xaroodeen xaruntii loo tilmaamey, oo markiiba haweeney fadhidey xafiis meesha ku dhex yiiley, arinkooda u sheegeen, waxeyna ku amartey iney fadhiistaan, kuraas meesha taalay, oo ay markiiba salka la heleen, Markii ay in cabaar ah meeshii fadhiyeen, ayaa marba mid loo yeeray, oo baaritaan lagu wada bilaabay iyo wareysi midba goonidiis ah, waa dad kusoo talagalee wax walba sidii loo weydiiyo oo turxaan baxsan, misna lagu qanci karo, ayey uga jawaabeen.

Wax dukuminti ah iyo wax raad raac ku yeelan kara, halkii ay ka yimaadeen Yurubta kalena maba wataan, oo xitaa calaamadihii kuleetiyada ugu dhaganaa, wey iska jareen, oo meel wax looga sheegan karo ama looga soo heli karaaba la

waa, Waxaana halkii looga qaadey faro, iyadoo loo gudbiyey xero si kumeel gaar ah Qaxootiga loo dajiyo, oo lagu magacaabo Tanum, oo ku taalo duleedka magaalada Oslo ee caasimada dalka Norway, Markii la geeyey xeradii Tanum aheyd, waxey kala kulmeen soo dhaweyn diiran, shaqaalaha xarunta ka sokow dad badan oo Somali ah meeshana uga soo horeeyey, ayaa si diiran usoo dhaweeyey.

Waxaana looga war bixiyey xaalka meesha sida ay tahay, qof walboo iyaga kamid ahna waxaa la dajiyey halkii loo sii qoondeeyey, Istar iyo Sahana waxey nasiib u yeesheen in ay wada dagaan qol u gooni ah, marka aad dheehato Sahan iyo asxaabteeda wajiyadooda, waxaa kuusoo baxaya iney aad u faraxsanyihiin, maadaama ay joogaan halkii uu ujeedkoodu ahaa. Waxey wado dhib badan soo jibaaxaana, ay ugu dambeyntii ka guul gaareen, oo kusoo xirteen halkii ay gogosha, iney dhigtaan isla garteen, waxeyna is lahaayeen waa uu dhamaadey Tahriib iyo rafaadkiisa, hada wixii ka dambeeyana waa idinka iyo Yurub waxaad kala heshaan.

Waxeyna xeradii Tanum ku sugnaayeen mudo saddex Todobaad ah, halkaasna waxaa looga qaadey dhiig, waxaana lagu sameeyey baaritaano caafimaad. Sida iyagoo mid waliba sakiin lagu sar sarey gacmaha , sidii in dhajis laga gooynayo, kaasoo ahaa baaritaankii ugu yaabka badnaa oo ay abid arkaan. Mana diidi karin oo waxey ahaayeen dad is dhiibay, oo u soo diyaar garoobey in wax walbaaba laga sameysto, oo xuriyadoodii iyo sharaftoodii meel kusoo tiirsadey, marxaba mooyee mayaba aan Laga maqleynin, waxaana Sariinkaa looga baarayey cudurka Tiibishada.

Waxaana maalmo dabadeed loo wareejeyey, kaam kale oo ku yaala magaalada caasimada ah ee Oslo, si halkaa ay ugu sugaan

wareysiga rasmiga ah, ee ruux walbaaba lala yeelan doono, kaasoo ku xiran masiirkiisa, kusii noolaasho ee dalka Norway. Waxaana galabnimo Talaada ah, la soo dhoobey kaamkii Løren hortiisa, waxaana halkaa kusoo dhaweeyey dadkii howshooda qaabilsanaa, sidii caadada in mudo ahba u aheydna Sahan iyo asxaabteeda loo qeybiyey qololkii ay ka dagi lahaayeen kaamka Løren ee la keenay, Waxaana mar kale nasiib isu yeeshay Sahan Istar iyo 3 gabdhood oo kale iney qol wada dagaan, markaana qol caadi ah maahee waa qol ay sariiraha is dul saaranyihiin, oo qofkii sariirta kore ay kusoo aado waa jaran jarada ha koro, si uu sariirtiisa u seexdo.

Mana ahan markii ugu horeysey inta badan oo qibrad ayey u leeyihiin, oo horey ayey usoo arkeen, halkii ayeyna ku dhiilo furteen, oo ay dageen Sahan iyo asxaabteeda, Waxaana runtii la moodaa Sahan iyo asxaabteeda dad walaalo ah, oo wada dhashay, misina saaxiibo ah, sida ay dadka intiisa kale isaga xigsanayaan, ileen wadadii dhibka badneyd ayey soo wada mareen, oo dantaa walaaleysa oo waligoodna wanaag isu fareyso, Waxaana si fudud ugu suura gashay, iney la qabsadaan kaamkii ku cusbaa ee Løran iyo magaaladii Oslo aheyd, oo ay markaan awoodaan iney kasoo adeegtaan. Waxaana aad uga fajiacinayey marka ay adeega u doontaan, magaalada sida Somalida xaalkoodu yahay run iyo qaab daradooda.

Waxeyna is tusinayeen ineyba isaga daranyihiin, oo iska necebyihiin ciidan isugu jira furunta hore ee dagaalka, oo midba kan kale inuu ka taqaluso doonayo, maxaa yeelay waxaa uga muuqatay cadaawad guud oo aysan micnaheeda fahmin, Somalidana u gaar ah.

Dadka qaar ayaa Asxaab hore ku lahaa magaalada Oslo, waxaana Sahan iyo qaar kooxdeeda kamid ah kasii yaabisay, markii ay arkeen dadkii ay wada socdeen oo markii ay salaamaan. Kuwii ay horey u garanayeen, oo aanba dan ka laheyn dadkan la socda, kana soo qaadayo wax aanba jirin, Maxaa yeelay waxaa badi noo caado aheyd, dhaqan ahaan iyo diin ahaanba in marka laba ruux oo isla socoto, aad kasoo hor baxdo, misna aad midkood aqoonsato, in aad midka kalena salaanto, oo aadan salaanta ku koobin kan aad taqaano oo kaliya.

Ha yeeshee halkani taa mataalo, oo xitaa hadii ruuxa kula socda yahay odey dhaqameed 80 jir ah, cid salaameysaanan jirin, oo qofka adiga ku aqoonsada, adiga oo kaliya ayuu ku salaamayaa, damiir iyo dadnimo ma jirto, doqonnimana xaalku waa dhaafay oo damanaan ayuu marayaa. Waxaana kasii daran in Kan kula socda, sidii inuu dagaal sooyaal ah ka dhaxeyn jirey, inta caro loo muujiyo baaba ganfuurka loo sii taagayaa, Si xitaa uusan isaga qudhiisa u hawoonin, inuu wax salaamo, danleey meeshii ay joogtay waa isu habar wacataa la dhihi karaa, dabeecadaaba ah, maxaa dan ii ah.

Waxaana wax yaabaha kale ee sida aadka ah uga yaabiyey ka mid ahaa Sahan iyo Asxaabteeda,, gabdhihii Soomaaliyeed oo qaarkood soo wada xirtey saraawill, madaxiina soo baneystey, oo iska yeel yeelayo, isna raac raacsiinaya, dhaqanka bulshada gaalada ah, ee ay soo dhex galeen, Waxaana aad Sahan kasii yaabisay, oo fajaciso lama iloobaan ah ku noqtey, markii ay magaalada Oslo ku aragtey gabar Soomaaliyeed, oo surwaal jenis ah xiran, misana buuran, oo baruurtu cabeysay.

Waxaana la kaftami maagay willkii Mursal ahaa ee ay Sahan asxaabta ahaayeen oo ku yiri 'jirta dib weyn ayaa kugu yaalo waa jirtaa runtii'.

Waxaase u xigtey kab loo siibtey iyo candhuuf lala beegsadey, goobtiina waxaa ka dhacay buuq aad u fara badan, oo in cabaar ah socdey, gabadhiina mudadaa la raali gareynayey, oo si walba loo dajinayey. Markii sidii loo maslaxeynayey ay degtey, ayaa waxaa isla goobtii iyagoon wali ka dhaqaaqin soo marey will Ajnabi ah,

Oo inta gabadhii indhaha la raacay ku yiri "Hey You Have a Big Bag" oo ah waxaad leedahay Dabo weyn, waxeyna markan ku jawaabtey Gabadhii oo la is lahaa ugu yaraab labada kabood ayey u siiban doontaa " Thank You Very Much" Taasoo aad fajaciso ula noqotey intii goobta joogtey oo ay Sahan iyo asxaabteeda kamid ahaayeen, maadaama wiilkii Soomaaliyeed oo ay isku isirka ahaayeen, isla intaa yiri oo saacad dhan laga cel celinayey.

kan Ajnabiga ahna inta u dhoola cadeysay ku tiri, aad baad u mahadsantahay, waxeyna arintaa Sahan ku noqotey wax aysan waligeed ilaawin oo laabteeda ku qorma, Ma yareyn runtii wax yaabihii aadka uga wada yaabinayey dadka ku cusub Norway, ee lama ilaawaanka ku noqdey mana lasoo koobi karo, Waxaana markii dambe timid iney iyagii isla sii yaabaan, oo qaarkood yiraahdaan ma anaga oo kaliyaa, markii Somalinimadeena naloo aqoosado ay Somalida sanka iyo ganfuurka noo taagayaan.

Anagana waa inaan u taagnaa, maadaama salaamu caleykumta xitaa leyska qaadi waayey, waxeyna Sahan ku boorisey ineysan wanaagsaneyn, in laga tago dhaqankeenii suubanaa ee Somalinimo, iyo keenii Islaanimo, waliba sidan dhaqsaha

badan, Waxeyna asxaabteeda ku waanisay, iney ku dhaganaadaan wanaaga oo hadii dadkoodu badi xumaadeen aysan la xumaan, oo inta wanaagsan dhankooda ka raacaan.

Inta xumaateyna la isku dayo sidii wanaaga loogu soo celin lahaa, oo waxey mar walbaaba ku cel celineysay, yaan leysla wada xumaanin. Dhanka kale waxey aad ula yaabanaayeen sida ay tahay Norwaydii ay usoo qarda jeexayeen, buuraha dhinac walbaaba kaa xigaa, guryahan la wada moodo carshaantii Somalia ee Al-waaxa u badan iyo wadooyinkan yar yar ee gawaaridu isku ciriirineyso.

Waxeyna aad ula yaabanaayeen sidii ay aheyd Yurubtii lagu sheegayey faqriga iyo bilicda ka muuqatey dalalkooda iyo dalkan lagu sheegayo dhaqaalaha oo dhismihiisu gaarin kuwaa, Sidoo kalena waxaa la yaab ku sii noqotey, dadkan wada cararaya ee ha nasanina lagu wada yiri, oo wadooyinka markaad mareyso waa un wax wada cararayo, oo ma jirin wax si dagan u socdey, oo qof walibaa wuxuu ku xisaabtamayey sekenka ku socda.

Markii aad dhamaan dadkaa si dagan u wada eegto, waxaa kuu soo baxeysa in dunidii oo idil, sanka dushiisa loo saarey, oo ay aduun wada burinayaan misna gaari la'yihiin. Waxaana ka sii fajicisay markii haweeney kaamka ku soo booqatey, oo Somaliyad ah u sheegtey, in dadka oo idil wada waalanyihiin, oo wax fiyowba aysan ku nooleyn Norway. Xitaa iyadaa warka u sheegeyso ay dhankeeda ka waalantahay waalantahay oo aysan fiyoobeen iyagana ay wada waalan doonaan oo dadkooda dhan ka raaci doonaan.

Waxeyna Arintaa badi ku beertey Wal wal aad u baaxad weyn, oo xitaa kuwii lahaa ma anagaa ka xun, hadey sanka noo taagaan waan u taageynaa, waxey isku arkeen in waalida la

sheegayo ay dhankooda dhaqso kaga biireen. Arin macquul ah ayey la noqotey, maadaama dadkan Somaliyeed, ay arkeen in wax si ka yihiin, markii waalidooda loo sheegayna, waxey is yiraahdeen Alleylehe shakigiinii yaqiinsamay, oo xaalka meesha lama mahdin.

Dhanka kale waxaa wax walbaaba uga sii yaab badnaa dadkeena, Soomaaliyeed ee Uuba ka dhintey damiirkii dadnimo iyo damqashadii diin iyo dhaqameed, oo un badi noqdey kuwo ka fekira cunaha. Oo caqliga iyo maskaxdoodu howl gabtay, oo aysanba shaqeyn, danna ka laheyn diin dhaqan iyo dadnimo toona, Waxaad arkeysaa gabdho iyo willal Soomaaliyeed oo safka hore kaga jira goobaha lagu caweeyo ama diskowga, qamrigana sidii biyo u dhamayo, oo wadooyninka Booliiska ka aruurinayo.

Iyagoo miirba aan laheyn, waxaana jira rag iyaga dunida iyo halka ay mareysaba aan la socon, oo dhowr Sano ka hor galay miqaayad lagu qayilo, halkaana iska dagay. Nolashiisana ka dhigtay maruu qayilaayo, maruu meesha wax ka cunayo iyo maruu jiifo, waxii lacag ee u soo dhacdana waxaaba iska lahaadey ninka ay maqaayada u furantahay. Isna banaanba shaqo kuma lahan, mana dhaamo ruux xabsi ku jira, diintiisii iyo dhaqankiisiina goor horuu iska ilaabay, oo aduunyadiisa oo idilna meeshaas ayuu ku soo koobey.

Waxaa iyana jira, kuwo kale oo kaalay arag dumarka xijaabka la wato iyo heybada diineed ee raga ka muuqato, nasiib darase diintoodii iyo dhaqankoodii iibsadey, Oo ka sii daran kuwaa aan soo xusnay, oo inta si hoose oo xaal mastuurnimo isu guursadaan, bey dowladii ku leeyihiin saaxiibo wada noolaasho ka dhaxeeyso ayaan nahay, Qaarkoodna waxba uma sheegaan dowlada, oo markii ay Uur Gabadha qaado,

inta u tagto ayey leedahay, aniga nin ima qabo ee hal habeen oo aan is celin waayey ayaan baashaalay. Sidaana Uurka ku qaadey, oo ubadkeedii ku xaarintinimeyso, Single Mother-nimana ku faaneyso, dhuub iyo dhaqaale doon darteed.

Nasiib darase marka aad u eegto, dadka iyagaa ugu faqrisan, dhaqaalo meel u dhigmana ha sheegin, oo aan cadaab aduun iyo mid Aakhiro ka ahey, Qaar baa iyaguna leh waan isku caroonay, sidaana howshooda ku wata, oo cara uusan Eebe dhex dhigin, iney dhex taalo sheega, si ay wax un ugu helaan, Taasina waxey sababtaa in dhamaan ilmahooda si fudud loogala wareego oo ay meel cidla ah ku baroortaan, balaayada ay dhoob dhoobteena miraheeda gurtaan. Maxaa yeelay waxaa u qoran, in ilmaha Hooyo iyo Aababa ay u tahay haweeneyda, hadaba hadii ay xanuunsato ama ilamaha mid ka mid ah wax soo gaaraan.

Waxaa lagu leeyahay maadaama aad hooyo kaliya tahay, ma qaadi kartid mas'uuliyada, dowladaa waajibkeeda gudaneyso, Ma yara inta hooyo kali ee aan ninkeeda, isa sheegan ee horteeda inta ubadkeeda looga qaatay, wadooyinka ku barooraneyso, oo ba'ayeydaa heysaa.

Waxaase hubaal ah in baroor taa ka weyn ay u wada harsantahay, iyada iyo kan ubadkaa ka dhalay, ee gaalada u wada gacan galiyey ubadkooda, aduun ku iibsadey, Aakhiradooda, diintooda, damiirkooda, dhaqankooda iyo dadnimadoodaba, Ceyr yar dhaafsaday, Waxaa isweydiin mudan diinteenu ma qabtaa, oo ma baneysay Zinada mase baneysay in Zino ubad la isaga dhalo, jawaabtu waa maya, oo cid dood ka keeni kartaa ma jirto.

Hadaba waxaa muhiim ah iney kuwa nolosha ka dhacay, isweydiiyaan waxa ay diintooda ku iibsanayaa ilaa intee, anfac

aduun iyo mid Aakhiro ugu jiraa, Waxaa aad uga yaabisay Sahan iyo asxaabteeda markii ay maqleen haweeney Soomaaliyeed oo aad isu xijaabta, Ahlu diina la moodo, oo tagtey halka laga bixiyo ceyrta-ama lacagta dowlada dadka ka siiso.

Waxaana qaabilay oo salaan u soo taagey ninkii Norwejiga ahaa ee xafiiska fadhiyey, kiiskeedana qaabilsanaa, markaas ayey inta gacata ka laabatey ku tiri, Muslim baannahay Ragga gacanta kama salaano, Ninkii xog ogaalka u ahaa dhamaan arimaheeda, ayaa lasoo booday, 'War adigaan sida kuu qoran 6-da caruurta ah, Saaxiibtinimo ku dhalay, oo habeenba nin aan ku qabin hoos seexda, maa salaan aan ku salaamo, wax kaa dhibeysaa, oo diintaadu kuu diideysaa'.

Marka kuwa noocaas ah aad weydiiso, waxa ku kalifayo iney Alle, Rasuulkiisa iyo Diinta uu inoo soo dajiyey, ka been abuurtaan, oo meel uga dhacaan, waxa ku xambaaraya, Waxey kuu sheegayaan dhaqaale ay reerihii u dirayaan ay u baahanyihiin, Haddii aysan beentaa ka sheegin diintooda, oo aysan masa bidan, waxey iska dhaadhiciyeen, iney qadayaan reeraha ay hada xaaraantaas ku biilaan.

Waxaana wax aad loola fajaco ah, waalidiin fara badan iyo ehelo aan tiro yareyn, oo dalkii ku nool oo aanan ubadkooda ka wareysan, waxa ay usoo dirayaan, halka iyo sida ay u kasbadaan, oo hadalkooda waa un soo dir, Waxaadna arkeysaa xajkii nala farey in laga ilaaliyo, maalka xaraanta ah, in waalidiin badani ku aadaan, lacagtaa lagu soo kasbadey, diinteenii muqadaska aheyd oo lamasabitey, lagana been sheegay, oo la yiri Ziney noo baneysay ubadna isaga dhalnaa.

Waxaa isweydiin mudan, ma xalaal baa lacag kugu soo gashay, adigoo ka been abuurtey Illaahi ku abuurey, oo adigoon jirin

wax jira kaa dhigay. Nabigii uu kuu soo direy SCW ee dadka dunida ugu qiimo badnaa, xaqiina isagoo qoraxda ka cad ku soo gaarsiiyey iyo Kitaabkii uu inoo soo dajiyey Eebe oo xalaal iyo xaaraan noogu kala cad yihiin.

Waxaa kaloo mudan in la ogaado in bulshada lagu dhex nool yahay, In ay yihiin gaalo, diinteenana aan waxba ka aqoon badi, oo la doonayo in la gaarsiiyo Nuurka Islaamka. Nasiib daraduse waxeyba tahay in la gaarsiiyo, iska daaye in dariiqii ay diinta usoo mari lahaayeen laga xerto. Iyadoo ficil ahaan loogu muujinayo inaan waxba la dhaamin, oo sidooda, Zino iyo saaxiibtinimo ubad la isaga dhalo, oo anagaaba idinka been badan idinkana qayaano badan, Musllinimana sheeganeyno. Bal qofkaadan ficilkaa ku dhex suganow, waxaad marka hore ogaataa in dunidan tahay tareen lawada saaranyahay, oo meeshuu istaagaba ay dad uga dagayaan, qaar kalena ka soo fuulayaan.

Kuwa ka dagayo waa kuwa geeriyoonaya, kuwa kasoo raacayana waa kuwa dhalanaya, bal hadii naftan lagaa Oofsado, oo qabrigii yaraa lagaaga soo kala tago, su'aalaha ugu horeeya ee lagu weydiinayo waa. 'Waa kee Nabigaada, waana tee Diintaada' hadaba adiga sow ma tihid qofka jawaabahaa laga doonayo, maxeyse jawaabtaada noqon kartaa, maxaa yeelay allaah waa uu xaarintinimeeyey Zinada iyo in ubad la isaga dhalaaba. Rasuulkiisana sidoo kale diinteena muqadaska ahna lamid, marka ka waran hadii lagu yiraah bal noo sheeg rabigga iyo diinta iyo rasuulka zinada kuu baneeyey, Jawaabtaada maxay noqon doontaa.

Cidna kuma hoojin oo kuma halaagin ee ogow, adigaa is hoojiyey oo is halaagay, mida kale reerahan aad ku mar marsiyooneysid, inaad lacagtaa ku biisho. Miyuusan alle balan

qaadin, inuu quraanshada yar ku hoos quudinayo qolafka geedaha ka hoose, bal kawaran qofkaa bani'aadamka ah, ee uu alle sharfay siduu i ilaabayaa, oo uu u qadinayaa. Waxaa xaqiiq ah ineysan qofi dhiman doonin ilaa ay cunto inta loo qorey, qofna sii noolaan doonin hadii ay cuntey inta loo qorey, si walba oo aad wax ka badi isu tiraah, adigaa daalayee intii laguu qorey ka badin kama heleysid dunidan.

Dhanka kale waxey mas'uuliyad dhankooda ka saarantahay waalidkan soo dir iska leh iyo qaraabadan, oo xaalada qofkaba aan weydiineyn, oo hadalkooda ku soo koobay, daqiiqadaa igu socdee, muxuu biilka la soo daahay. Ma xanuunsanyahay qofka aad soo waceyso, ma fiyowyahay, ma dhibanyahay, wax ma hayaa mise maba hayo, adigoo intaaba ogeyn, ayaad u soo qeylo dhaamineysaa. Waxaad ogaataa in adiga qudhaada aadan quudan doonin, inta laguu qorey ka badan, marka ma ahan inaad ubadkaada haligto, adigana is haligto, oo xaaraanta noo soo badi, hal hees ka dhigato, kuna booriso, ee waa inaad xalaal haba yaraatee ku dhiirigalisa ubadkaada.

Si aduunkiina iyo Aakhiradiina u wanaagsanaato, waxaa laga yaabaa in dad badani isweydiiyaan, maxaa ducada nalooga aqbali la'yahay, maadaama aan soono oo salaadno, samana falno, waxaa xaqiiq ah inaan qof cabitaankiisa, cunadiisa, labiskiisa ay xaaraan yihiin, inaan duco laga aqbaleynin, Haddaba ma is weydiisaa lacagtaan aad ubadkaada soo dal dala leedahay, ma xalaalbaa mise waa xaaraan, waxaaba laga yaabaa inaad ku dhiiri galiso ubadkaada, iney kuu soo daldalaan xaaraanta, oo kaaga soo badiyaan.

Waxaa mararka qaar la arkaa waalid leh, war ilamaha idiin dhashay, lacagtooda igu soo xawila, miyuusan canugaa laheyn xuquuq, Waxaaba dhacda badi inta ay dowlada ugu tala

gashayna ineyba isaga ku filneyn. Si kastaaba ha ahaatee, waxaa jira dhibaatooyin aad u fara badan oo u baahan in la saxo, wax badana laga qabto, hadaan la sixin, oo laga gaarina waa hubaal in lasii hoogi doono, Har iyo Habeena Hoogayey lagu heyn doono.

Wax badan ayaa naga qaldan Somali ahaan, oo nalooga baahanyahay inaan saxno, waalidiinta waxaa looga baahan yahay iney ubadkooda ogaadaan. Misna culeyska ka yareyaan, waxaa laga rabaa iney ku dadaalaan raali galinta Eeebe, oo ay xalaasha iyo xaaraanta u kala soocnaato. Sahan iyo asxaabteeda waxey Norway kala kulmeen, wax yaabo badan oo aanan qalinka lagu soo koobi karin, oo ummadeena ka qaldan. Waxaana ka sii yaabisey markii gabar Soomaaliyeed oo Hooyadeed inta toorey u soo qadatey, si naxariis daro ah uga taqalustey, tasoo ay aad uga naxeen, oo dadka qaar iyagaaba is dal dala.

Waxaa aad u yar isu naxariisashada iyo is jaceylka, ka dhaxeeya waalidka, caruurtooda iyo dhamaan dadka intiisa kale, aad baana loo kala mashquuliyey, oo mid walbaaba hamigiisa ayaa qoorta loo surey. Oo is Aragooda iyo isla jooga ayaaba yar, ubadkana waxey baari noqdaan marka ay walidooka ka helaan naxariista iyo kalgaceylka waalidnimo, Ha yeeshee halkan waxaa u badan dad marka horeba isu guursadey, isku daneysi, iyo kala daneysi, oo dhaqaalaha un ku kala xisaabtamaya.

Waxaadna wadooyinka ku arkeysaa haweeney iyo seygeeda ku doodaya oo isku heysta kala qoondeynta dhaqaalaha, la isugu daray, Hadaba dad xaalkoodu sidaa yahay, ubadkooda ma u helayaan wax yaabihii ay uga baahnaayeen, maxaa yeelay iyagaaba har iyo habeen xisaabtan ku jira, oo dhaqaale isku heysta.Waxaana arkeysaa ubad badan oo ku haminaya, iney

mar un isaga tagaan waalidkood, waana nasiib darada taala qaaradan Yurub.

Dhanka kale dadka loo yimid ee Norwejiga, waa dad iyaga qudhooda aad u cadiban, oo ay noloshu ku adagtahay, waxaadna marar badan maqleysaa dad is diley, oo noloshii ay ka hortimid.

Marka aad si dhab ah ugu kuurgasho dadkan, waxaad dareemeysaa iney ku wada jiraan nolol aad u adag. Maxaa yeelay canuga marka uu dhasho, waxey dowlada siisaa lacag ay ugu tala gashay wax yaabaha uu u baahanyahay canuga, taasoo la dhihi karo waa lacagtii lagu iibsanayey canugaada. Waana lagu koontaroolaa, waxaana canuga isagoo yar la geeyaa meelo loogu tala galay in caruurta lagu xanaaneeyo, inta waalidkood shaqooyinka ku maqan yihiin. Waxaana halkaa ku xaneeneeya ragg iyo haween loo tababarey xanaaneynta caruurta, Waxeyna ubadka halkaa kala kulmaan dhibaatooyin aan yareyn, maadaama ay ku jiraan marxaladii ay ugu baahi badnaayeen waalidkooda, waqtiga intiisa ugu badana iney la qaataan ay aheyd.

Waxaana mararka qaar soo gaara dhawacyo, ha yeeshee inta badan looma qabsado kuwa howshaa ku shaqada leh, haddiise uu waalidkiis canuga isagoo la joogo uu dhaawac yar soo gaaro. Waa lagula xisaabtamayaa, amaba si fudud looga qaadanayaa, iyadoo lagu eedeynayo mas'uuliyad daro oo ubadkoodaba in iyaga laga xigo, waardiye oo kaliyana ka yihiin baa la dareensiinayaa waalidka.

Sida caadada u ahna marka ay shaqada ka soo laabtaan waalidkii, dhalay iyagoo daalan ayey ka soo wadaan caruurta meeshaa iyada ah, iyagoo aad udaalan caruurtiina, una baahan iney nastaan oo seexdaan. Waxaana halkaa fursad isku waaya

waalidkii iyo caruurtooda, taasina waxey sababtaa in waalidka iyo caruurta xiriirkoodu koobnaado, oo uunan saa usii balaaran, una sii baaxad weynaanin, balse laga yaababa iney is karhaan, oo is kahsadaan, sidaana ku kala tagaan. Haddaba canugaa sidaa kusoo koray marka uu soo hana qaado, oo uu wax barasho bilaabo, una talaabo dugsiga sare, waxaa qasab ku ah inuu lacag deyn ah dowlada ka qaato.

Marka uu qaato oo uu wax barashadiisa dhameysto, oo uu shaqo helo, waalidkiina mar haruu ka soo guuraye, waxey shaqadii fartaa inuu gaari la yimaado, isna ma diidee deyn ayuu ku soo qaataa gaari cusub, Waxaana labada dhan uga socda deyntii dowlada ku laheyd iyo midan cusub, waxaana mudo kadib la faraa inuu guri deyn ku qaato, waxaana loo diidaan inuu guri ijaara oo dowladu leedahay kusii noolaado, Taasoo ku qasbeysa inuu qaato guri deyn ah, halkaasna loogu sii yeesho deymo fara badan, oo qasab kaga dhigeyso inuusan maalin shaqada ka fadhiisan.

Maadaama isagoo dhami deen yahay, waxa uu cararo oo uu madaxa meel walbaaba ku garaacdo, isagoo xaalkaa ku sugan ayuu gabar saaxiibtinmo nolol kula wadaagaa.Maadaama uusan guurba maaro u heli karin, uusan awoodin taag iyo tabarna u laheyn, sidaana ubad baa ugu dhasho, noloshuu soo marey ayna ubadkiisa sii maraan, markii uu 60-ka kor u dhaafo ayey deyntii ka dhamaataa oo uu helaa mushaar joogto ah oo aan shaqo uga baahneyn.

Waxaane mudo dabadeed lagu xareeyaa meelaha loogu talagalay, in lagu xanaaneeyo dadka da'da ah ama duqoobay, maadaama ubadkiisa ay iyaguna danahooda ka raacdeen, oo uu kali soo noqdey, Marka waa dad noloshooda sidaa tahay, aadkana ugu adagtahay, waxaase loogu yeeraa iney yihiin

dalalka dunida ugu qanisan uguna dhaqaalaha badan. Sahan iyo asxaabteeda waxaa aad uga sii yaabiyey dadkan wada maahsan, oo nasashada loo diiday har iyo habeena huqdaa haya, sida ay iyagana uga heli doonaan nolol wanaagsan, maadaama dadkii u dhashayba uu sidaan xaalkoodu yahay.

Waxeysa ku isla meel dhigeen iney iskala qabsadaan noloshaan, maadaama ay u soo mareen Tahriibkii dheera, ee dhimashada badnaa, asxaab badana ay ku soo waayeen, wixii ay dhankooda kaga soo saaran karaana kaga soo saartaan, xalaal quudatana ay noqdaan, Waxeyna xeradii Loren aheyd ku sugnaayeen mudo 2-bilood ah, halkaasna waxey ku mareen wareysigii weynaa ee arimahooda qaxootinimo ku saabsanaa, Waxaana Sahan iyo Istar oo xigto sheegtey loo badaley magaalo ku taalo waqooyiga shishe ee dalka Norway, una dhow xadka ay la wadaagaan dal weynaha Ruushka, ee ay Tahriibka kasoo bilaabeen. Meesha loo badalay aad ayey uga naxeen, maadaama ay aheyd meelaha ugu xun, ee dadka Qaxootiga ah loo badalo, aadkana u dhibka badan, dad badana ay kasoo laabteen, iyagoo waalanoo maqane joogayaal ah.

Wax ay sameyn kareena ma jirine, boorsooyinkooda ayey xir xirteen, maalintii xigteyna waxaa magaaladii Oslo aheyd laga saarey diyaarad, waxeyna halkaas ku kala tageen asxaabtoodii, oo midba meel laga ridey, waa cusub iyo dad cusubna ku wada waabariistey, Sahan iyo Istar baana ugu roonaa, oo wax is yaqaanay oo leysla badalay, meel qurana la geeyo ka ahaa, inta kale asxaabtooda midba meel ayaa laga ridey, waxeyna ku dhawaad 8-saacadood kadib la geeyey magaalo aad u baraf badan.

Waxaana halkaas laga sii saarey Helokobter, oo lagu geeyey meel kale halkaana laga sii saarey Eeyo fara badan oo inta xargo lagu xir xirey, loo sameeyey gaari ay dadka raaci karaan, sidaana barafkii kula dhex jibaaxeen, maadaama goobta loo wadey ay aheyd meel uusan gaadiidka gali karin.

Waxaana ugu dambeyntii iyagoo dhabana heysi ka daalay, ama kaag iyo anfariirna ku dhamaaday, la geeyey kaamkii loo wadey, oo ku yiiley meel cidla ah oo ay dhan walibana ka xigaan Buuro iyo Baraf wada cad, waxaase ku soo dhaweeyey haweeney iyo dhalin yaro Soomaaliyeed, oo kaamka kaga soo horeeyey.

Waxeyna aad uga sii naxeen Sahan iyo Istar markii loo sheegay, ineysan banaanka kaligood u bixin, oo ay meeshu leedahay bahalo dadka cuno. Aad ayeyna arintaa u sii baqdin galisay, waxeyse ku qasbanaayeen iney la qabsadaan, meesha la dajiyey oo dadkooda ayey dhan ka raceen. Waxeyna nasiib u yeesheen, iney wada dagaan qol u gooni ah labadooda, waxaana la dhihi karaa waxaa u bilaabatey Sahan iyo Istar nolol xabsi ah, maadaama aysan dibada u bixi karin, in kastoo cid u diideysaa aysan jirin. Haddana naftooda ayey u baqanayeen, marna bahalada ayey kala baqayeen, marna dadka meelahaa ka ag dhawaa oo loo sheegey iney cunsuri yihiin, ayey naftooda kala baqayeen.

Waxeyna noloshooda noqotey iney dariishadaha ka eegaan, barafka iyo buuraha dhaadheer ee ku hareereysan, waxeyna kaamkii ku sugnaayeen mudo, Waxaana dhacdey in labadii will ee dhalinyarada ahaa ay ku dhuftaan misna waashaan, markii nolosha oo idili ciriiri ku noqotey, aduunkiina uu ku soo koobmay, waxaase xigay oo dhankeeda ka sii waalatey haweeneydii 2-da caruurta ah laheyd, oo maryaha tuuratay,

Taasina waxey sababtey in si fudud caruurteeda looga qaato, oo lagala wareego, arintaana waalidii ayey ku sii kordhisay, oo keentey in markii dambe inta la wado cirbad dajisa la soo duro, iyada iyo labadii will oo wax qarbudaad iyo qaribaad Kaamkii ka bilaabay.

Waxaana la soo celiyey, iyagoo dagan oo aan gacan qaadi karin, oo haye mooyee aan wax kale laga heleyn, waxaana wajiyadooda ka dheehan kartaa iney noloshoodu baaba'dey, oo dhareerkaba aysan mararka qaar ceshan Karin. Sahan iyo Istarna waxaa ku dhashay wal wal iyo walaac aad u baaxad weyn, oo waa ayba maqli jireen Kaamamka waqooyi ee Norway, wax fiyow kama soo laabtaan, hadase iyagaaba marag u ah, oo wax walbaaba indhahooda ku arkaya.

Kumana koobneen oo kaliya intaa Somalida ah, ee waxaa jirey dad badan oo jinsiyado kala duwan ahaa, oo meesha ku waashay, misina la soo durey intii la kari waayey, oo uu kaniinkii wax ka tari waayey, Waxeyna Sahan iyo Istarba Kaamkii ku noqdeen waali sugayaal, oo wax u harsan oo ay sugayeen ma jrin, waxeyna isu arkayeen in noloshoodii ay u dhamaatay, Yurubna wax ay u soo doonteen ay tahay Waali.

Waxeyna bilaabeen iney isu dar daarmaan, oo midii hor waalataa ay mida kale ka war heyso, waxna u qabato, nasiib daro ma jirin cid ay ka yaqaaneen dalka Norway oo ay maciin bidi kareen, Dadkii kale ee Somalinimada u weheshada ay la is dhihi lahaayeena, waa kuwii cadaawada intey kuu muujiyaan ku dar darayey, in kastoo ay jireen dad wanaagsan oo dhaqankii iyo diintii wali heysta, hadana waa laga tiro badanyahay, oo kuwan xun baa meel kasta kaaga soo muuqanayo. Sahan iyo Istar wuxuu Kaamkii ku noqdey meel ay aad u dhibsadaan una kahsadaan, Sahan qudheeda horey

ayey usoo waalatey, wax badan oo dhib ahna u soo aragtey, nolol xanuun iyo xakaar badana usoo martay, mana dooneyso iney dib ugu laabato, Waxeyna mararka qaar iyada iyo Istar is tusinayeen, ineyba waalida u roontahay, maadaama wal walka hayo ee har iyo habeenba, ka fikirinayo ay ka nasan lahaayeen, dadkoodaas iska qoslayo ee aan xaalka aduun iyo xakaarkiisaba heysan isaga biiri lahaayeen.

Waxeyna ku sigteen ineyba mar iska dhaadhiciyaan, in waxa waalan ayba iyaga yihiin, oo dadka kale ay fiyow yihiin, hadana taa ma dhicin oo waa ay is qabanayeen, isna waan sanayeen, Asxaabtoodii hadii ay baadi gooban lahaayeena, la is waa oo meel la iskuma sheego, ruux walbaana meel ayuu ku go'doomay.

Iyadoo uu xaalkoodu sidaa u cakiran yahay, Kaamkiina ay ku suganyihiin mudo ku dhow 2-sano, baa waxaa soo gaartey fariin aheyd in sharcigii loo diidey, taasoo markii loo soo sheegay dad badan oo ka horeeyey ku sii waasheen. Haddana iyaga caloosha ayey u xirteen, oo shar iyo qeyrba wax walba oo ka soo baxa UDI-da arimahooda qaabilsan u diyaar ayeyba kol hore ahaayeen, oo waxaaba qanciyey silica iyo rafaadka ay ku noolyihiin, Marka Gabdhaha waa hore ayey caloosha dhuuqsadeen oo u diyaarsanaayeen, jawaab kasta, oo meesha waxa yaala waa ay arkayeen, marqaati beyna u ahaayeen.

Waxaana mar walbaa ay dareemayeen in iyaga la dareensiinayo, iney yihiin xayawaan oo aysan laheyn xuquudii bani'aadamka.Waxaana dareenkaa ku dhalisay markii ay arkeen, maamulkii kaamka oo si naxariis daro ah ugu shaqeysanayo, marrarka qaarna shirarka loogu yeero.

Oo wax loogu sheego hadii ay imaan wayaan oo ay hurdo la tagto lacago looga jarto, Iskuul iyo wax barshana haba sheegin,

oo waa halkaada iska hurud. Iyagana marka ay tagaan kulanka oo hurdadii u beerdareyaan, aan mararka qaar loo imaaneynin, oo goor dambe loo sheegayo in kulankii baaqdey, cid lacag u jareysana aysan jirin, oo mar walbaaba waxa meyniska ku jiro ee lagu tumanayo xuquuqdooda, waa iyaga.

Waxeyna Sahan is weydiineysay, mar walbaaba bani'aadannimadii lagu sheegi jirey Yurub, halkeey ka baxdey, maadaama ay markii hore moodeen in Norway ay ugu sii fiicantahay Yurubta. Marka loo eego qaabilaada qaxootinimada, sidaana ay ugu soo jiheysteen, iyagoo dalal badan oo Yurub ah soo dhex marey.

Waxaana intaa u dheereyd, oo ay is tusiyeen in Norway ay soo martey dhibka qaxootinimo, oo ay dad badan oo Norweji ah dabida qaxootinimo loogu qaabilay. Sida Mareykanka iyo Ingiriska markii ay dhibta dagaalada sokeeye ku jireen, oo aanan xitaa xiligan oo ay Norway ku jirto dalalka ugu qanisan, sida la sheego dunida aan dadkoodii loo soo celin, oo ay xur ku yihiin dalalkii lagu qaabilay. Waxeyna dad badani is tusayeen, in ay taa darteed ay wanaajinayaan qaxootiga, maadaama iyagaba hore loo wanaajiyey, taasne ma dhicin oo malahooda waa la beeniyey, lagulana dhaqmey si ka duwan sidii ay filayeen. Waxeyna Sahan isweydiineysay, halka dumuquraadiyada ay taalo, iyo nooca ay tahay, halka cadaalada ay taalo, halka sinaanta ay taalo, halka bani'aadannimada ay taalo, inkasta oo intaaba iney taalo loogu soo sheegay Norway, hadana sidii uu malaheedu ahaa wax uguma muuqdaan.

Wxaana ugu yaabbadneyd, markii ay maqashay In Dalka Fransiiska uu gabar muslimada u diidey iney xijaabkeeda wax ku barato, halka hadii ay dhar la'aan socon laheyd loogu mar xabeyn lahaa, loona sheegi lahaa iney dimuquraadi tahay, oo

ay waxey doonto sameyn karto, Waxeyna dalalka Yurub sheegaan in diimaha ay xur yihiin, Laakiin taasi waxaa beeniyey, markii hal xaas ka badan loo diidey ragii halka, dumarkiina xijaabka lagula dhagay, Waxaana Rag badan oo maagay iney 2-laba xaas guursadaan lagu war galiyey inuu sharcigu ka weyn yahay diinta ay sheegayaan.

Ma yara dhibaatookinka badan ee ay aragtey Sahan ee ka jira Yurubta, loo soo maro dhibkii ay ogeyd iyo rafaadkii baaxada lahaa iyo waxa dadka badi kala kulmaan, mana ahan mid qoraal lagu soo koobi karo.

Waxaana Sahan iyo Istar loo sii raaciyey mudo kadib markii diidmada la siiyey, in dalkooda hooyo loo celinayo, maadaama diidmo kama dambeys ah laga siiyey Norway. Taasoo ay soo dhaweyeen, halka dad badan ay aad uga nixi lahaayeen, laakiin iyaga waxey lahaayeen Rafaad Yurub intaan nooga filan, oo waxba inooma harin, ee mar kaliya inagoo Caafimaad qabna illah sama hanooga bixiyo.

Waxeyna si deg deg ah u codsadeen, in dhaqso dalkooda loogu celiyo, wax dood iyo dacwa ahna aysan ka qabin, in Somalia lagu celiyo. Waxaana sidoo kale dalabkooda dalkii Hooyo dib ugu laabashada, iney ku deg degaan ku kalifayey, markii ay maqleen in dad Soomaaliyeed si qasab ah loo qadaan qadiyey, Waxaana ugu sii yaab badnaa, markii Gabar Soomaaliyeed oo ku jirtay Kaam Aan sidaa Kooda uga fogeyn, iyana lasiiyey diidmadii kama dambeysta, loona sheegay in dalkeeda lagu celinayo.

Amakaagana iyo Anfariirkase wuxuu ahaa, in loo sheegay in Gabadheeda yar ee Naas Nuuga ah Kaamkana ay ku dhashay, Sharci la siiyey oo ay Norway joogeyso, Waa Su'aale sidee canug yar oo bilo jirta Hooyadeeda looga reebaa, misna loo

kala fogeeyaa, halkeyse kaga Qorantahay Bani'aadannimada dalalka Yurub lagu sheego, Su'aalahaa ayaa ku furnaa Gabdhaha, Marka waxey is lahaayeen, idinka oo bad qaba, miirkiinuna taam yahay, misna la idiin qasbeynin, mar kaliya masiibadan aad ku soo dhex dhacdeen isaga baxa. idinkaaba Yurub dambe la idinka maqli doonin, cidaad u naxeysaana u ogolaan doonin rafaadkan yaala meeshaJanada aduunka la Moodo.

Iyadoo uu dalabkii dib u celinta u maqanyahay, ayaa waxaa intii kaamka daganeyd lagu war galiyey, in kaamka la xerayo dadkana loo qeybin doono kamaam kala duwan, oo dalka ku kala yaalo.

Waxaana maalmo dabadeed Sahan iyo Istar, oo aan kala harin u soo baxay Kaam ku yaala gobolada galbeed ee dalka Norway, gaar ahaan magaalada Bergen ee caasimada labaad ee Norway, oo lagu magacaabo Arna Motak. Waxaana markii la keenay Kaamkii Arna Motak ahaa ay kula kulmeen xoogaa Somali ah, oo kaamka ku noolaa, waxaana jirey dad kale oo Soomaaliyeed oo ku nool magaaladaa Bergen, Waxeyn Sahan iyo Istar bilaabeen iney usoo dagtaan magaalada, oo mar mar iska soo lugo baxsadaan, Maadaama Kaamkii hore aysan dibada uga soo bixi jirin, ilaa gaari looga kaxeeyo mooyee, waxeyna soo raaceen asxaabtooda cusub, ee ay kaamka isku barteen.

Magaaladii Bergen aheyd waxey kala kulmeen Sahan iyo Istar, wax aysan waligood filan, oo waxey ku arkeen Somali dad sheegta, kuwii ugu damiir yaraa, ugu doqonsanaa, uguna diin yaraa, waxaadna moodaa in ay ku noolyihiin, baadiyaha meesha ugu qabyaalada iyo qurunka badan. Waa dad is qob qobaya, ee qabiil qabiil isku hiifaya, misna aanan horumar isku

ogoleyn, oo lug iyo laba iska jaraya, xitaa hadey yihiin kuwo dad isku xiga. Waa dad hadii aad salaanta lagu leeyahay 'War reer baadiyayahow magaalada hadaad ku cusubtahay dabeecadeeda baro' oo Salaanta Islaamka ayaaba la iska qaadin.

Taasina waxey la yaab ku sii noqotey Sahan iyo asxaabteeda, waxaana maalmaha ugu farxada badan ee islaamka, sida ciidaha la arkayaa Somalidii magaalada Bergen daganeyd oo jufo jufo u ciidaya is xaglin darteed. Waxaaba arkeysaa xaafada lagu leeyahay reer hebel ayaa ku ciidaya, oo aanan xitaa kiilo bariis ah dad dhameyn kara meesha joogin, waana dad kala jeedo oo aanan isku soo jeesan karin, misna aqoonin sababta ay u kala jeedaan, iskuna lug iyo laba goynayaan.

In kastoo magaalada Bergen Somalida ku nool badi uu xaalkoodu sidaa ahaa, hadana waxaa jirey dad wanaagsan oo wali dhaqankii iyo diintii ay ku weyntahay, Nasiib darase ma jirin wax ay ka qaban kareen, oo iyagaaba naftood bad baadinteena ka badin la'aa, oo haduuba daadkaa foosha xun qaadin ee ay ka badbaadaan nasiib lahaa. Waxaana la dhihi karaa Somalida is duleysay ee aan cidna duleyn ee magaaladaa Bergen ku nool, waxaa dhaama oo laga yaabaa iney isu soo dhawaadaan kuwa dalkii isku dagaalaya, ee xabada isaga soo horjeeda, kuwaa ayaana uga dhow iney gacmaha is qabsadaan.

Halka reer Bergen inay sii kala didaan mooyee, aan laga qabin rajo badan iney isu soo jeestaan, oo is wanaajiyaan, run ahaatiina waxey taa Sahan kusii dhalisay ineyba dhararto dib ugu celinta dalkeeda Hooyo, Maadaama ay ka yaq yaqsatey foolxumada kuwan Somalida la sheeganaya, ee sidaan u duleysan, waxeyna ku sii kordhisay naceybkii ay u sii qaadeysay, marba marka xigta Yurubtaan dadkii ka duleysay,

oo darxumada badey, Iyadoo amakaagaa iyo anfariirkaa ku sugan, ayaa maalintii dambe lagu soo wargaliyey, iney maalinta bari ah ay u duuli doonaan magaalada Oslo ee caasimada dalka Norway, halkaana ka sii raaci doonaan diyaaradii dalkooda dib ugu celin laheyd.

Sahan iyo Istarna arintaa aad ayey ugu wada farxeen, una soo dhaweeyeen, waxeyna bilaabeen diyaar garowgeeda, sidii balanta aheydna. Waxey subixii xigay ka duuleen Gegidii diyaaradaha magaalada Somalideedu hoogtey, isna hoojisay ee Bergen, iyagoo ku wajahan magaalada Oslo.

Waxeyna Gegidii diyaaradaha Oslo ee Gardermoen ku sugnaayeen dhowr saacadood, iyagoo dabadeed kaga sii duulay diyaarad kale, oo waxey la sii duushaba la caga dhigatay Gegidii diyaaradaha magaalada Istanbul ee Ataturk.

Waxaana lagu wargaliyey Rakaabkii ay kamidka ahaayeen Sahan iyo Istar ee kusii jeeday Magaalada Muqdisho in caawa ay dhaxayaan Magaalada Istanbul, bari aroortiina ay kaga sii duulayaan magaalada Muqdisho ee caasimada dalkeena Hooyo, Sahan iyo Istar waxey aad ula tacajubeen quruxda iyo iftiinka ka baxayo magaalada Istanbul, iyo ileyska quruxda badan ee minaaradaha masaajida meel kasta ka muuqdo, waxeyna is tusiyeen in magaaladan loo dhameeyey wax walba oo qurux lagu sheegi karo.

Sidii balantu aheyd markii uu Waagi baryey, ayey Sahan iyo intii kula wajahneyd Magaaladii Muqdisho aheyd, iska soo xaadiriyeen, Gate-kii ay diyaarada ka duuli laheyd, Diyaaradiina markii ay hubsatay iney dhamaan rakaabkii xaadir kuwada yihiin bey cagaha laabatay, oo hawada sare abaartey, iyadoo isu soo jiheysay halkii ay ka xigtay caasimada ummada Soomaaliyeeed ee Muqdisho.

Waxey Diyaaradii lasoo hab hableysaba, dhowr saacadood dabadeed, waxey soo caga dhigata Gegidii diyaaradaha caalamiga ahaa ee Aadan Cadde ee magaalada Muqdisho, Oo aad yaabeyso bilicdiisa, iyo bidhaanta qurxoon ee ka baxeyso, misna kula baratamayo dhamaan Garoomada Caalamiga ah ee Caalamka, marka dhan kasta laga eego.

Rakaabkii diyaaradii ayey kasoo wada dagteen, waxaana qof waliba halkaa ku sugayey, cidii soo dhaweyn laheyd, Sahan iyo Istarna waxaa halkaa xaadir ugu ahaa oo ku sugayey Hooyadood Dhaahiro iyo Odeyga ay gadaashood guursatey ee shuuriye, Halkii ayaana la iskula baroortey, oo xisihii jireyna leyskula xaraarugey, waxeyna gudaha Gegidii diyaaradaha Aadan Cadde ku jireen in cabaar ah, oo ay arimahooda iy alaabadooda, kala habeysanyeen.

Markani waad yaabeysaa sida Gegidii diyaaradaha Aadan Cadde uu mashquul u yahay, diyaaradaha sii duulaya iyo kuwa soo dagayo tiro malahan. Waxaana dalkii kusoo qul qulayo qurbo joogtii, maadaama nadii kasoo bidhaantey caasimadii dalka, magaaladii Muqdisho aheydna ay lasoo noqotey maqaamkeedii, mudnaanta lagu siin jirey, Waxaana dhacdey in uu Sahan ka shakiyo Wiil dhalin yaro ahaa oo ka duulayey Garoonka, siina raaci lahaa diyaarad ku sii jeedey magaalada Dubia ee dalka Isutaga Imaaraadka Carabta, Wuxuuna soo abaarey halkii ay Sahan kula sugneyd Istar, Maama Dhaahiro iyo Odey Shuuriye, Markii uu usoo dhawaaday oo uu is yiri Alleylehe waa qof aad taqaano, bay Istar xaqiijisay kadib markey ugu yeertey magaceeda, iyadoo ku leh, Sahan Dhangaagey na keen ciideena waan nimid, mar dambana kama baxeyno,

Wuxuuna Wiilkii isagoo aan dhag la qabto laheyn, isa soo dul taagey Sahan oo markaa usii dhaqaaqeyso halkii ay Istar uga yeertay, waxaana isla markiiba isku dhacay indhihii Sahan iyo Wiilka dul taagan, waxaana meeshii ka dhacdey Sahan..!!!!!!...Sugule.

Waxaana xigtey in la isku soo boodo, la iskuna baroorto, oo barxadii marba dhan la iskula ciiro, waxeyna isku dhaganaayeen in cabaar ah, iyagoo aanan war u heynin dadka meesha dhooban ee la yaaban, Waxaana kamid ahaa dadkii la yaabay Istar iyo hooyadeed, waxeyna markiiba Sahan Isbartey Sugulihii, Hooyo Dhaahira, Istar iyo Adeerkooda cusub ee Shuuriye. Isbarasho dabadeedna, waxaa la isla gartey in la isla laabto, oo la wada beegsado hoyga ay ku socdeen reerka ay Sahan hormuudka u tahay.

Maadaama uu Sugule saacadaa la taaganyahay uu diyaarada ku qornaa, wuxuu isak baajiyey safarkiisa, maxaa yeelay waxaa wax walba uga qiimo badnaa in uu helay Sahantii uu ku waalnaa. Muddana baadi goobayey, in kasta oo loo soo jeediyey inuu safarkiisa sii wato, oo arimihiisa soo dhameysto, hadana wuu diidey oo wuxuu la soo noqdey Sahan iyo reerkeeda. Markii ay yimaadeen xaafadii, oo qolkii fadhiga salka lala helay, ayaa gabadhii guriga ka shaqeyneysay la soo gaartey cabitaan, ay horey usii diyaarisay, halkiina lagu yara qabowsadey, waxaana in cabaara markii halkii lagu kaftamay laguna sheekeystey, Baa waxaa miiskii lagu soo xardhay tii qado aheyd, oo nuuc walba leh, aragtideedana aadba ku dhargeyso, Halkii ayaana lagu wada qadeeyey, iyadoo aad loo wada faraxsanyahay, Waxaana qadadii kadib qol halkaan ah isu soo xirtey Sahan iyo Sugule oo ahaa lamaanihii dhabta isku jeclaa oo xalaasha isu guursadey oo aan war iyo wacaal iska helin mudo aad u dheer.

Waxaana Sahan iyo Sugule u bilaabatey sheeko aad dheer iyo is wareysi aad u baaxad weyn, qof walbaana wuxuu qofka kale kaga war bixiyey, waliba si xeel dheer oo faah faahsan, wax walba oo uu ku sugnaa mudadii la is moogaa ee masiibada soo kala dhex gashay, Wuxuuna Sugule u sheegay Sahan in reerkiisa ay mar walbaaba, kula dagaalami jireen inuu guursado, isna uu ku lahaa aniga xaas baan leeyahay, oo aan waliba aad u jeclahay Sahan baana la yiraah, hadii aan waayana naag kale hawo igama heyso, umana hanqal taagayo, Wuxuuna u xaqiijiyey inuusan dabadeed xitaa hawoonin inuu la haasaawo Gabar kale, oo uu jaceylkeeda sidii Ukun ka jabeysa u ilaashanayey, meel uusan ka raadinina aysan jirin, dalkana uu dhowr jeer darteed u yimid.

Maadaama uu deggan yahay isaga Mareykanka, xitaa uu tagay magaaladii Kismaayo, wax uga waramana uu kasoo waayey, wuxuuse u sheegay inuu ku haminayey iney mar un is heli doonaan, oo uu jaceylkooda dhab ahaa.

Sahan qudheedana waxey uga faalootey wax walba oo soo marey, noloshii rafaadka iyo dhibka badneyd ee soo wajahdey, wax la isku reebtey ma jirin, oo marna waa la isku barooranayey, marna la isku qoslayey, marna la isku duubmayey, oo dunida la iska weheshanayey, Waxaana la is lahaa Allow ii kaa daa, Allaana lagu mahdinayey, oo iyagoo quus jooga is haleeshiiyey, waxaana laga wada hadlay arimo badan, oo aanan soo koobi karin. Waxeyna isla garteen qalinkana iskula duugeen in qurbaha wax yaala aysan jirin, dalkooda hooyo meel u dhaantana aan dunida laga heleynin.

Sugulena wuxuu uga waramay dhibaatada faraha badan ee ku heysata Somalida Mareykanka iyo nolosha adag ee ay ku nool yihiin, Sahanna Yurub waxey ku soo aragtey ayey u taana

taaneysay, oo uma hambeynin, dhibka Somalida ku heysta Yurubta Janada La moodo, Waxaana laga hadlay arimaha mustaqbalkooda, maadaama ay mudo dheer is moogaayeen, waxaana si farxad leh qalinka loogu wada xariiqay ineysan dib dambe is waayin, misna kala dheeraanin, oo midigta la is qabsado meena aan lagu kala harin.

Waxeyna is tusiyeen in meel u dhaanta wadankooda hooyo oo ay raaxo iyo xornimo ku helayaan ineysan dunida jirin, sax iyo waa saa buuna xaalkoodu ahaa. Waxaana qalinka lagu wada duugtey in meherkii mudada dheer ka soo wareegatey, la cusbooneysiiyo oo nin iyo xaaskii xero kuwada nool la noqdo, xaajada sida ugu wacan laga dhigto.

Waxaana la wacay reerkii Sugule oo Mareykanka ku noolaa, oo wax walbaaba si deggan loogu sheegay, loogana dhaadhiciyey, waxaana is helay Sahan iyo saaxiibteedii qaaliga aheyd ee Keyf, oo sheeko dheer u bilaabatey.

Sidoo kale hooyada reerka iyo Sahan, ayaa iyaga qudhooda sheeko dheer galay, Odeygana dabcan sidoo kale oo dhamaantood aad ayey u qadarin jireen walina u qadariyaan, Sahan, Waayaha Aduun unbaa kala qariyey. Sahan oo ah runtii qof hadii wanaag jiro, wada xambaaratey, oo aan waxba ka tagin, ayaa dhankeeda reerkii, asluubtii iyo Akhlaaqdii lagu yaqiinay kula hadashay, Iyadoo sidii loo sheekeysanayo, ayaa waagii ku baryey, Reer Muqdisha, in kastoo reer Miniaplis ay habeen isaga aheyd, waxaana waagii markuu baryey lagu kala tagay is nabadeyn iyo in la iska war heyn doono. Waxaana halkaas bid loogu wada yag leelay xiriirkii qotada dheeraa, Sahan iyo Sugule dhafar bey ahaayeene, waa la kala dhacay, oo galabnimadii la soo kacay.

Waxaana habeenkaa is wada bartey, oo is wada fahmay dhamaan labada Reer oo aan wanaag isku reeban, Ehel iyo qaraabo dhab ahna isu noqdey. Markii galabnimadii la qadeeyey, ayaaba waxaa yimid Odey Shuuriye, oo banaanka ku maqnaa saddex wadaadna hor kacaya, halkiina waxaa Meher labaad, loo wada riyaaqey, la iskula Mehriyey lamaanihii, sida dhabta ahaa isku jeclaa, ee aan kala dhicin oo ay u bilaabatay nolol tii ugu farxada badneyd.

Magaaladii Muqdisho aheyd, markani waa xasiloontahay, xaalkeeduna waa halkii ugu wanaagsanaa, nabada ka jirta, iyo sida dadka habeen iyo maalin isku dhex mushaaxayaan waad yaabeysaa. Wadooyinkii Caasimada waxaa lagu sameeyey dib u dhis Xoogan, waxaana taa bar bar socotey, nadaafad guud, oo dadkii iska wax u qabso ugu guntadeen.

Waxaa dib u habeyn lagu sameeyey adeegyadii bulshada, sida Isbitaalada, Iskuulada, iyo Xarumaha dowlada, sidoo kale Daaraha dhaa dheer ee ka dhismay Muqdisho waad yaabeysaa.

Waxaana intaa usii dheeraa, in Wadooyinkii lagu wada rakibay Nalalka Cad Ceeda ku shaqeeya, oo habeenkii waad yaabeysaa sida Caasimada u iftiimeyso. Muqdhiso mudnaanteedii Caasimad ahaan, waa lasoo laabatay, meel kastana waxaa laga furey Hotelo waa weyn, iyo Carwooyin Casri ah. Qurba joogtiina waxay bilaabeen iney dalkooda maal gashadaan, oo kaalay arag, Warshadaha, iyo Shirkadaha lagu baratamayo, ee bulshada ka haqab tirayo baahiyahooda kala duwan.

Sahan iyo Intii sideeda Qurbo dhibkiisa, soo aragtay waxey lahaayeen, Walle Muqdishooy, maqaamkaada lama gaaro, mudnaantaadana, lama soo koobi karo, ee Mowle hakuu kordhiyo Horumarka, aad Hiigsaneyso. Muddo bil dabadeedna, Sugule waxa uu u dhoofay Mareykanka si

howlihiisa uu halkaa uga soo laab laabto, sidoo kalena reerkooda oo idil meeshaa ay ku dhibaatoodeen uga soo wado.

Waxaana degmada Howl-wadaag uu ka iibiyey guri weyn, oo qoyska ku wada filan, aadna u bilicsan indhahana soo jiidanayo, isagoo xaaskiisana, halkaa kula galay bishii malabka, dhagahana ugu shubey xiisaha inuusan xad laheyn, oo uu dhaqso ugu soo laaban doono, Sugule sal dhul ma dhigin, markii uu Mareykanka ku laabtey, oo wuxuu u howlgalay, sidii uu waqtiga ugu yar, ugu soo dhameysan lahaa, dhamaan howlaha u yaalo.

Wuxuuna ku guuleystay, dadaal badan oo aan nasasho laheyn kadib, inuu mudo bil ah dabadeed magaaladii Muqdisho ka soo dajiyo, dhamaan reer Rooble, oo runtii aad ugu wada faraxsanaa kusoo laabashada wadankooda, oo ay xiiso badan u qabeen.

Waxaana gurigii weynaa ee degmada Howl Wadaag loogu diyaariyey wada degay Keyf, Odeygeeda Keyse iyo Caruurtooda, Sahan iyo Odeygeeda Sugule iyo Labadiisa Waalid ee Odey Rooble iyo Maama Rooda, Wuxuuna hoygooda uu noqdey hoygii farxada iyo baraaraha, oo kaalay arag is qadarinta, is qiimeynta iyo isla qosolka reerka ka dhaxeeyo, sida ay isugu faraxsanyihiin, oo dhamaan u wada maqsuudsanyihiin lama soo koobi karo, lagamana sheekeyn karo, Waxaana la dhihi karaa, waa reerkii ugu farxada badnaa, ugu wada jirka badnaa, ugu wanaaga badnaa, isuna wehishiga badnaa, waxaana saqiir iyo kabiirba, la wada ahaa dad is qadariya, oo is qiimeeya, isuna wada qalma, oo qaabkii nolasha ugu qiimaha sareysay isla qeybsadey.

Waxeyna Sahan mudo 9-bilood ah dabadeed dunida ku soo biirisey Mataano Wiil iyo Gabar ah, oo loo kala bixiyey

SAABIR iyo SAABIRIIN, waxeyna magacyadan Sahan oo u bixisay ka laheyd ujeedo, qoto dheer. Mana ahan markii ugu horeysay Sahan ay ubadkeeda u bixiso magac ay ujeedo ka leedahay, oo horeyba magac sidaan oo kale ayey ula baxdey wiilkeedii ka saqiirey ee Dhibana ahaa, iyadoo ula jeedey dhibkii uu ku dhashay iyo dhibkii ay la soo martey, Markana labadeedan canug waxey magacyadan ula baxdey, iyadoo Dunidan soo Sahmisay, oo bad, bari, buuro, baraf, saxaro, iyo silac intii noole soo mari lahaa soo martey, Kuna soo aragtey, Casharka ay ka baratayna uu Aahaa SABARKA in dhibkasta oo Noolaha soo wajahaa uu uga samata bixi karo.

Farxadii reerkana cirkaa ayey isku sii shareertey, oo qofkii reerkaa soo booqda ma jecleysan, laheyn inuu ka soo dhex baxo.

Oo waxaa dhex taala faraxad oo idil iyo xushmad dhamaanteed, qoys sidooda isugu faraxsana dunidan waaba ku yar yahay ayaan dhihi karaa. Waxeyna Sahan galab galbaha ka mid ah, iyadoo fadhida darjiin ku dhex yiilay gurigooda, bilicdasan gudihiisa misna ubaxyo aad u qurux badani ay ka baxayeen hareeraheeda, gashay fikir dheer oo Taariikhdii soo martey ah iyo maanta halka ay ku sugan tahay. Waxaana marba maskaxdeeda sidii filim ugu soo dhacayey, dhacdooyinkii faraha badnaa ee soo marey, waxey soo aragtey oo Sahan soo sahmisay nolosha oo idil, waxa ay tahay iyo dunidan aan ku nool nahay waxa ay ku fadhido oo uu qiimaheedu yahay.

Waxey soo aragtey, waxa ay tahay indho la'aan, oo ay dunida ku soo nooleyd, iyadoo aan indho laheyn, waxeyna nasiib u yeelan weyday in ay mar kaliya xitaa aragto hooyadeed macaan, oo ay ilaa maanta muuqeeda aqoon. Waxey sidoo kale

aqoonin walaalkeed macaan muuqiisa, sidaa daraadeed Sahan, waxey sifa buuxa ka bixin kartaa, xaalka uu ku sugan yahay ruuxa indhahala', maadaama ay iyada soo aheyd indhoole.

Waxey soo martey oo ay soo sahmisay, waxa ay tahay Eedo xun oo uu aabe guursado, waxey soo sahmisay oo ay soo aragtey, waxa ay tahay ciqaab iyo xanuunka ay leedahay. Waxey soo sahmisay oo ay soo martey sifana ka bixin kartaa, Aabo ka soo riday ubad caloosheeda ku jirey xanuunka uu leeyahay iyo xanaaqaas, oo uu u dhintey isagoo u careysnaa, oo indho raxariis daran ku eegaya. Waxey soo sahmisay sifana ka bixin kartaa, waxa ay tahay waali iyo sida ay u fool xun tahay, waxey soo sahmisay oo ay soo martey.

Iyadoo aanan garaneynin canuga ay Uurka ku sito goor ay qaadey, cida ay u qaadey iyo naxariis darada raga damiirka aan laheyn, ee xitaa u hawooda dumarka waalan. Waxey soo sahmisay oo soo martey, waxa ay gaajo tahay oo ay u soo bar barartey, waliba iyadoo Uur leh, waxey soo sahmisay waxa socod dantu ku bado yahay, Oo waxey socod ku soo martey inta u dhaxeysa Muqdisho ilaa iyo Baydhaba, iyadoo cuneysa qobka mooska, qaraha la feyntey iyo caleenta geedaha, quud kalena aan heysan. Waxey soo sahmisay nolosha waxa ay tahay, marka aadan waxba heysan oo aad Eber ka bilaabeyso, oo buush qabow badan roobkuna kugu kor da'ayo, waxa ay tahay ku noolaanshihiisa.

Waxey soo sahmisay waxa uu yahay tuugsi iyo aadmi gacanta loo hoorsado iyo dhibkiisa, waxey soo sahmisay dhibka uu leeyahay hooyo canugeeda horteeda ku ruux baxay. Waxey soo sahmisay dhibka ay leedahay hooyo dhashay, oo hadana horey ka soconeyso, quud raadsaneyso cid caawisaana jirin,

caanaha canugeedana ay ku qasbantahay iney u cararto, iyadoo Umul ah.

Waxey soo sahmisay dhadhanka ay leedahay xabada, oo lexaadkeeda wax u dhintey, Waxey soo sahmisay naxariis darada burcada aan damiirka iyo diintaba laheyn, ee qoriga caaradiisa aaminsan. Waxey soo sahmisay nolosha Tahriibka bada oo ay dad badani ku dhinteen, oo waliba qaar si naxariis daro ah bada loogu daadiyey, si kas ahna loo diley. Waxey soo sahmisay waxa ay tahay qadaamad ama adeegto carab u shaqeysa iyo dhibka ay leedahay, waxey soo sahmisay waxa uu yahay iyo dhibka uu leeyahay qafaalka ama Tarxiilka aan loo meel dayin ee sacuudiga ka jira. Waxey soo sahmisay waxa uu yahay Tahriibka Saxaraha dheer iyo sida loogu baaba'ay, oo ay dad badani horteeda ku qur baxeen.

Waxey soo sahmisay waxa dhab ahaan yaala dalalka Tahriibka lagu maro iyo sida arxan darada ah, ee ay dadka ula dhaqmaan. Waxey soo sahmisay oo ay soo aragtey, waxa uu yahay Tahriibka lagu maro barafka iyo buuraha iyo sida dad badani ugu dhinteen, qabow dartiina la qumbabeen. Waxey soo sahmisay oo indhaheeda ku soo aragtey, sida maafiyada wax Tahriibisa ay dadka u galaan, oo marba cad u goostaan, xubnaha jirkana meeshey doonaan dadka ka jartaan, Waxey soo sahmisay waxa yaala ee lagala kulma Yurubtan, loo soo dhinto ee loo soo baaba'o, waxey soo sahmisay soona ragatey sida ay u bahdilan yihiin Somalida ku dhaqan Yurub, oo la moodo iney ku jiraan janadii aduunka. Waxey soo sahmisay sida dhaqankii, diintii iyo damiirkii ay dad badan oo Soomaaliyeed kaga tageen qurbaha, waxey soo sahmisay bani'aadannimada laga sheego Yurub, dimuquraadiyada iyo sinaanta waxa ay dhab ahaan tahay.

Waxey soo sahmisay halka Janada aduun laga heli karo, tii Aakhirana lagu diyaarsan karo, iney tahay oo kaliya dalkaaga hooyo, wixii ka soo harana ay tahay, wax aan jirin. Waxey soo sahmisay waxa qurbo yahay iyo nolosha dhab ahaan taala, ma yareyn marba waxa soo galayey oo sidii filim ugu shidmayey Sahan maskaxdeeda.

Waxeyna markii dambe ku hadaaqdey 'Alleylehe Sahmiyey Aduunka oo si walbaaba u soo arkey, Silic iyo Dhibkiisa, Samaan iyo Xumaantiisoo, waa su'aal iyo xujiyo, imtixaan soo taagan. Waxaana looga Samata bixi karaa, Samir iyo Dulqaad, halkaas Markey mareyso xusuustii Sahan, ayaa waxaa si lama filaan ah, albaabka uga soo galey gacaliyaheeda Sugule, markiiba inta fadhigii ka kacdey oo si xiiso leh u soo dhaweysay, dhexdana iska qabsadeen bey fadhigii usii galbisay, iyagoo Qosolka ka baxaya aad yaabeyso.

Fiiro Gar Ah:

Iska Qor Sheeko Maahan Qorshe Bey Rabtaa, Qeexaya U Jeedada, Halkudhigeeda Qisadan SAHAN, Qaabka Aan U Qoondeeyey, Adinkiiba Qaayibi Doonee, Qeybtiina Ka Qaata, Hadii Aad U Qushuuci Weydaana Qalinkaba Waan Dhigi Oo U Qalab Qaadan Maayo Qiso Kale iyo Qoraalkeeda"

Wixii Talo, Tusaaleyn iyo Toosin ahba, Waxey Akhristayaasha Sharafta leh Iigu Soo Gudbin Karaan Cinwaanada kala ah:

dankahadalcom@hotmail.com
dankahadalcom@gmail.com

DHAMMAAD- END

SAHAN

RECONNAISSANCE

Qoraaga da'da yar
Abdullhai Noor Hassan (Shiino)

Wuxuu bulshada Soomaaliyeed u soo bandhigay ilaa iyo 12 buug oo kala duwan oo wax ka iftiiminaya qaybaha ay ka mid yihiin, murtida, Maadda, Madaddaalada, Waddaniyadda, Maansooyin, Riwaayado, sheekooyin gaagaaban, qoraallo ka hadlaya dhaqanka, suugaanta, waxbarashada, iyo diinta. Qoraalladaas waxay ku soo baxeen qaybaha kala duwan ee warbaahinta.

SAHAN waa sheeko aad u xiiso badan oo xambaarsan xikmadda nolosha iyo xaqiiqada jacaylka dhabta ah, waxayna si xeeldheeri uga hadlaysaaa xaaladihii dalkeenna, dadkeenna, dawladnimadeenna, dibad iyo gudaba inna soo maray.Waa mid cashar lagu cibro qaato u dhigaysa dhallinteenna gaar ahaan kuwa uu si ba'an u madaxmaray cudurka Tahriibka iyo Janno moodka qaaradda Yurub oo iyaduba dhibkeed la daalaadhacaysa oo ku jirta halgan joogto ah.

Haddaba qoraaga sheekadan (Shiino) wuxuu idin leeyahay:
"Iska qor sheeko maahan, qorshe ayey rabtaa, qeexaya ujeeddada, halku-dheggeedu qisadan Sahan, qaabka aan u qoondeeyey, idinkaaba qaayibi doonee, qunyar qaybtiinna ka qaata. Haddii aad u qushuuci weydaan, qalinkaba waan dhigi, oo u qalab qaadan maayo qiso kale iyo qoraalkeeda. Akhris wacan , oo shifo ku af-saar".

A thrilling Novel deserved to be read over and over again!...

THE PUBLISHER

ISBN 978-91-85945-53-5
9 789185 945535 >

Published by:
SCANSOM PUBLISHERS
BOX 6118, 17506 JÄRFÄLLA. STOCKHOLM, SWEDEN
www.scansom.com